# HAWAALE WARRAN

Qalinkii
**Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"**

Habayntii iyo Tifaftirkii
**Maxamed Saleebaan Cumar**

**2021**

# TUSMO

**HIBEYN** .......... VII

**MAHADNAQ** .......... VIII

**EREYGA TIFAFTIRAHA** .......... IX

**ODHAAHDA AQOONYAHANKA** .......... XIV

**ARAR** .......... 1

NOLOSHA IYO QALINKA .......... 1

**GOGOLDHIG** .......... 5

**CUTUBKA I** .......... 15

NOLOSHII AAN SOO GAADHAY .......... 15

Garsoorka .......... 37

Sababaha Dagaallada .......... 41

**CUTUBKA II** .......... 43

SOOMAALIDA IYO XOOLAHA .......... 43

Ka Hadlin .......... 48

Qaybsiga Dhaqaalaha .......... 57

Geela .......... 60

**CUTUBKA III** .......... 65

GUUR IYO GEEDDI NOLOLEED .......... 65

Wiilka .......... 68

Gabadha .......... 77

Inan iyo Hooyo .......... 86

Sababaha Guurka Badan .......... 88

Dumaasha .......... 88

Dir iyo Daabaan .......... 89

Heerin .......... 91

Hinaase .......... 93

**CUTUBKA IV** .......... 95

XAALADDA MAANTA .......... 95

Soo Rogaalcelintii Gumeysiga .......... 98

Haweenkeenna .......... 101

Ubadka iyo Qurbaha .......... 107

Maxaa Cusub? .......... 113

Kudaal iyo Suudal .......... 120

**CUTUBKA V** .......... 129

ABUURTA IYO IBLIISKA .......... 129

Diinta iyo Culimada .......... 136

martay, duullaankii lagu burburiyay geeddigaas iyo xaaladda dhaqan, dhaqaale, bulsheed iyo siyaasadeed ee maanta lagu sugan yahay.

Qoraallada kala dambeeyay ee Abwaanka oo ay adkayd sida loo fahmi karo farta uu ku qoray, waxa ay ahaayeen kuwo ujeeddo ahaan qubane ah oo ka turjumaya xusuustiisa marba wixii uu ka soo tuujin karayay. Tusaale ahaan way yarayd in toban bog oo isku xigaa ay ujeeddo xidhiidhsan ka hadlaan. Sidaas darteed, waxa hawl badani iga qabsatay sidii aan isugu xigsiin lahaa sida ay isku ujeeddo u yihiin ama aan ugu habayn lahaa sida ugu habboon ay isku raaci karaan.

3dii Jeeniweri 2013kii ayaan u ambabaxay dalka Uganda, waxaanan halkaa ka bilaabay waxbarashada heerka labaad ee jaamacadda, iyada oo aan geeddigaas aqooneed ku foognaa tan iyo 24kii Juun 2014kii. Muddadii aan halkaas joogay waxa aan fursad u helay in aan dhammeeyo qabyo qoraalka 1aad ee diiwaankan, kaas oo aan 8dii Feebarweri 2013kii Email ugu soo diray Abwaanka.

Dalka markii aan ku soo laabtay, marar door ah ayaan arrintan buuggan kala kulmay Xaaji Hadraawi. Xaajigu waxa uu dhawr jeer ii sheegay in aan anigu xilka tifaftirka iyo habaynta buugga kala wareego, isaga oo ku doodaya in uu daallan yahay oo aanay tamar kale oo uu buugga kaga sii shaqeeyaa ku hadhin. Arrintaas waxa aan u arkay masuuliyad culus oo aan degdeg loogu dhiirran karin. Laakiin aakhirkii waxa ay ka fursan weyday in aan dusha u rito habaynta iyo iskudubbaridka buuggan.

In aan dareensanaa culayska masuuliyaddaas ka sokow, waxa xusid leh in ay taa ii weheliyeen hawlaha adduunyo iyo waayaha nololeed ee marar badan qofka dabra. Ficilka aadamaha waxa hoggaamiya waafajinta Rabbi oo suurtagal ka dhigta in qofku hawshaa hor taalla haleelo, una heellanaado. Waxa Ilaahay mahaddii ah in buuggani daabacmo maanta oo in ka badan toban gu' laga joogo waqtigii uu abwaanku buugga igu wareejiyay.

*********

Inkasta oo ay jireen waqtiyo ummadda Soomaaliyeed lagu naanaysi jiray *"bulshadii gabayaaga"*, marka lagu xisaabtamo waayaha, wadciga iyo waaqaca maanta geyiga ka aloosan, waxa ay u badan tahay in aan badiba bulshadu wada fahmi karin abbaarta iyo nuxurka suugaan midho ahaan u rib ah, murti ahaanna u xeel dheer, sida tan Hadraawi. Sidaas darteed, ayay bulshada inteeda badan ee aan hawraarta wax ku fahmini ugu baahan

karaan hab iyo hannaan fudud oo loogu tebiyo farriintii iyo nuxurkii ay tixdu xanbaarsanayd.

Maxamed Ibraahin Hadraawi waxa lagu bartay tixo dhaadheer oo xanbaarsan kalgacal, halgan ama aragti kale oo nololeed. Buuggani tixahaas abwaanka looga bartay ma aha, kumana saabsana. Waa buug sidiisa uga madaxbannaan suugaanta Hadraawi. Laakiin si kasta oo uu uga madaxbannaan yahay, marnaba kama taggana aragtidii, falsafaddii iyo mabaadii'dii sawraca gaarka ah lahaa ee looga bartay Hadraawi.

Buuggan *HAWAALE WARRAN* waxa uu ku bilaabmayaa Arar kooban oo daarran aragti nololeed oo kugu xidhaysa sababaha uu abwaanku buuggan u qoray iyo gogoldhig uu abwaanku kaga warramayo noloshiisii, hanaqaadkiisii, bilawgii halabuurkiisa ee horraantii 1970naadkii qarnigii tagay iyo noloshiisii xabsiga ee Qansaxdheere.

Intaa ka sokow, buuggu waxa uu ka kooban yahay lix cutub oo u kala duwan sidan hoos ku xusan:

Cutubka 1aad waxa uu qoruhu kaga warramayaa noloshii uu soo gaadhay iyo waayadii ay Soomaalidu ahayd xooladhaqato reerguuraa ah.

Cutubka 2aad waxa uu qoruhu si xeeldheer ugu talaxtagayaa xoolaha ay Soomaalidii hore dhaqan jirtay iyo sida ay noloshaas u faaqideen, ulana falgaleen.

Cutubka 3aad waxa uu kaga warramayaa habdhaqameedka guurka ee Soomaalidii hore iyo meertada geeddigii nolosha.

Cutubka 4aad waxa uu qoruhu isku dul taagayaa soo rogaalcelinta gumeysiga cusub iyo xaaladaha bulsheed ee Soomaalida maanta: haweenka, ubadka, qurbaha, ragga, qaadka, tahriibta ama sibiqdhaqaaqa, i.q.k.

Cutubka 5aad waxa uu qoruhu kaga warbixinayaa xaqiiqooyin diineed: moogganaanta aadamaha, halisaha Ibliiska, doorka culimada, tawbadda, aakhiro iyo qiyaamaha iyo guud ahaan addoonnimada.

Cutubka 6aad waxa uu kaga hadlayaa sooyaalka dawladnimada Soomaalida: gumeysigii, gobannimadii, dawladnimadii rayidka, inqilaabkii askarta iyo waayaha nolol-siyaasadeed ee hadda lagu sugan yahay.

*HAWAALE WARRAN* waa xusuusqor, waayo'aragnimo iyo hogatusaale uu abwaanku inooga dhiteeyay wixii uu ka xusuusan karayay waayihii nololeed

ee Soomaalidu soo martay tan iyo waayadii ay ahayd xooladhaqato reerguuraa ah.

Buuggan waxa ka faa'iidaysan doona guud ahaan ummadda Soomaaliyeed iyo gaar ahaan dadka aan helin fursad iyo faham ay ku furfurtaan maansada Hadraawi.

Inta aan ka warqabo, diiwaankani waxa uu noqonayaa kii ugu horreeyay ee tiraab ah ee uu dhaabbadeeyo halabuur Soomaaliyeed oo maansadiisu u tisqaadday sida tan Hadraawi oo kale. Sidaas darteed, buuggani waa majare waxku-ool ah oo ay kaga dayan karaan halabuurka maanta nool iyo kuwa soo fool leh labaduba.

Ugu dambayn, buuggani waa waxqabad cuddoon oo waayo'aragga Soomaalida ku dhiirrigalinaya in ay weeleeyaan waayahoodii nololeed, si ay dhaxal iyo duug wax laga baran karo ugaga tagaan da'yarta mustaqbalka.

*********

Wixii qaladaad ah ee ku aaddan higgaadda, habqoraalka, sargoynta iyo tayada daabacaadda buugga, waxa loo nisbaynayaa aniga oo qoraaga ka kaalinayay farsamada garaacista, tifaftirka iyo daabacaadda intaba.

Wixii qadaf ah ama si uun loo qoonsado ee la xidhiidha fikradda iyo aragtida uu buuggu gudbinayo waxa loo nisbaynayaa qoraaga buugga, Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi".

**Maxamed Saleebaan Cumar**
Tifaftiraha
Jeeniwari, 2021.

# ODHAAHDA AQOONYAHANKA

Haddii hayaankii hore ee Hadraawi ku xidhmay tixdiisii Gudgude, buuggani fikir, han iyo hiyiba, waxa uu soo gebagebaynayaa hayaankiisa labaad ee ay tixdiisa Dabahuwan ballaynsintay. Waa adduun-araggii Hadraawi ee ka biyadiiday horumarka adduunka casrigan ee ay hormoodka ka yahiin dawladaha reer galbeed.

Intiisa badan, aragtida buuggu weelaynayaa waxa ay ka soo fufaysaa ruuxa maansayahanka iyo fantasiyaha male'awaalkiisa ee dul lalaya waaqica jiraalka ah ee ka baxsan asaga iyo deexashooyinkiisa. Waa maansayahankii Maxamed Ibraahim Warsame oo tiraab dareersan ku soo gudbinaya waxa duunkiisu jecel yahay iyo waxa uu naceb yahay. Waxa ku wada jira si-arag iyo baaq qurxinaya bulshadii xooladhaqatada reerguuraaga Soomaalida iyo dhaqankeedii oo uu samo iyo wanaag u dhammaynayo.

Luqadiisii maanseed ayuu tiisa ku cabbirayaa oo waxa aad la kulmaysaa maansayahankii Hadraawi ahaa; la ma se kulmaysid cilmibaadhe hor leh. Ka ma se wada madhna oo waxa buugga qaayo gaar ah u yeelaya hawraar-murtiyeeddii hiddaha bulshada xooladhaqatada Soomaaliyeed oo uu buuggani, in badan diiwaangeliyay.

**Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Rashiid-Gadhweyne"**

*********

Buuggan la magac-baxay *Hawaale-warran*, Abwaankeenna weyn, *Maxamed Ibraahin Warsame "Hadraawi"* wuxuu na maggawsiinayaa mugucii ka soo maaxdey maskaxdiisa Eebbe ku mannaystay hibada halabuurnimo iyo hilaadinta fogaan-aragga ah.

Hadraawi haddii hore looga bartay in uu falsafaddiisa iyo fekerkiisa xuma-diidka ah noogu soo tebiyo tix loo wada qushuuco, maanta wuxuu noogu soo tebinayaa tiraab xambaarsan isla aragtidiisii falsafadeed iyo iftiimintiisii samataliska ahayd; adduun-araggiisii ku salaysnaa ku dhaadashada dhaqan-ummadeedkeennii hore iyo dhuuxa qiyamka Islaamiga ah.

Sida caadada u ah halabuurka hormuudka ah, Hadraawi buuggan wuxuu diiradda ku saarayaa, digniin kululna ka bixinayaa xuma-falka iyo dhaliilaha maanta jira, xag dhaqan, xag bulsho iyo siyaasadeedba. Dawadaas dhadhankeeda dadka qaar dhibsanayaan wuxuu nugu

*"Hormuud jamaloo dir jaawe ah*
*Ma jabe lagu guur jidaal dheer*
*Jalbeebtuna gobo' ku soo jaran*
*Xurmadu ka jil roon jarraysimo*
*Dadkana wax ku jira dun jawhara*
*Jarreexada guurti laga jiro.*

*Anaa la jid maray nin jawr neceb*
*Jinsiga Ina Walanwal jeer hore*
*Galool ku jinjimiyay jimicsaday*
*Gob waaya jirtuu ka joogaa."*

**Faarax Axmed Cali "Gamuute"**

liqsiinayaa, ama noogu barxayaa dheegag ka mid ah suugaantiisii macaanayd iyo taariikh-nololeed shakhsi ahaan soo martay; wuxuu noogu liqsiinayaa sida biyaha macaan loogu liqo kiniinka dhadhankiisa dadku dhibsado.

Buuggani waa buug akhristaha siinaya cashar nolosha haga, fartana ugu fiiqaya wax badan oo qaldan, qaladaad haddaan la sixin laga qoomamayn doono goor xeedho iyo fandhaal kala dhaceen.

**Dr. Maxamed Daahir Afrax, PhD.**

*********

Hadraawi waxa aannu saaxiibbo ahayn muddo afartan sanno ah, muddadaas kahorna, maansadiisa waan la socday. Waxa uu ka mid yahay, haddii aanu ugu baar fiiqnayn, dhawrkii maansayahan ee ugu waaweynaa ee geyiga Soomaalida soo maray. Waa, geesi, deeqsi, waddani iyo indheergarad mu'min ah oo gobannimo badan. Waa nin ka hufan dhaqannada musuqa iyo dulmiga.

Hadraawi fikirkiisu kuma koobna arlada iyo nolosha Soomaalida oo qudha, waxa uu se ku taxan yahay waayaha adduunka iyo aadamaha oo idil. Maansadiisuna, waxa ay si xeeldheeri iyo xiise leh u taabataa nolosha dhinacyadeeda kala duwan.

*HAWAALE WARRAN,* sida ka muuqata, waxa uu Abwaanku ugu talagalay in uu ummadda Soomaaliyeed u noqdo muraayad ay ka dheehdaan tagtadoodii shalay iyo tan maanta. Buuggani waxa uu xanbaarsan yahay digniin, dardaaran iyo dhaxal ummadeed oo qoto fog.

**Cumar Salaad Cilmi**

*********

Waxa aan ku faraxsanahay in aan fursad u helay in aan soo aqriyo buuggan oo ah da'reebka Abwaan Maxamed Ibraahin Warsame. Waa buug qaali ah, qoto dheer, oo si mug leh u cabbiraya baaxadda halabuurnimo ee abwaan Hadraawi. Waxa aan aad u bogaadinayaa Maxammad Saleebaan oo juhdi qayralxad ah ku bixiyay isku dubbaridka tacabkan, isla markaasna si weyn u bilay buugga. Hambalyo!

**Cabdillaahi Maxamed Shirwac**

*********

# ARAR

## NOLOSHA IYO QALINKA

Baahida qofka iyo baadidoonkiisu way is celiyaan. Waxa ku abuuran in marba marka ka danbaysa noloshiisa isbeddal ku yimaaddo. Waxa uu doonayaa in maalinba maalinta ka danbaysa uu guul tii shalay ka xeeldheer soo hooyo. Waxa uu doonayaa in maalinba maalinta ka danbaysa aqoontiisu sii durugto, isku-kalsoonidiisuna cirka isku sii shareerto. Waxa uu doonayaa in maalinba maalinta ka danbaysa uu caddeeyo in uu yahay sayidkii iyo mudanihii dhulka. Waxa hagaysa sii soco iyo sed dhan walba ah korodhso. Waxa hore u riixaya damaciisa iyo doonistiisa. Waxa uu doonayaa wax maalin walba dareenkiisa iyo hankiisa kor u qaada, si uu u daboolo cabsida ka haysa nolosha dhinaceeda sharka ah.

Baadidoonka qofku xuduud ma leh. Ma aha ka haqab beelka inta lagama-maarmaanka ah. Ma aha caloosha oo wax la siiyo. Waa hiyiga iyo hanka oo la quudiyo. Waa inta kasha iyo dareenku raalli ku noqonayo. Waa waagii beryaba tallaabooyin hor leh qaad. Waa maalin walba nolosha guul ka soo hoy. Taasina, waa ta qofka werwerka iyo cabsidu kaga hadhayso. Ujeeddadu waxa ay u dhacaysaa in naftu raalli noqoto marka ay nolosha la walaalowdo oo si fiican oo aqooni ku jirto nolosha kheyrkeeda iyo sharkeeda u kala saarto, oo ay isku kalsooni buuxda gacanta ku dhigto.

Noloshu qofka way ka xeeldheer tahay. Si kasta oo uu garashadeeda ugu fogaadaa, waxa ay la mid tahay isaga oo aan tin ka jarin. Waxa ay u abuuran tahay in aan bini'aadam gunteeda gaadhin. Nolosha sharciyaddeedu waa in qofku dhinto isaga oo aan weli gunteeda gaadhin. Waxa ay taasi waafaqsan tahay xeerka nolosha ee odhanaya: noloshu waa hir qofka u baaqaya oo ku leh *'soo soco'* qofkuna hiigsi ayuu ku daba joogaa. Qof kasta isaga oo hiigsigaas ku foogan ayay wedka kulmayaan. Waxa la diidayaa in qofku shaqo beelo, noloshana soo gebagebeeyo. Waxa ay u abuuran tahay in ay qofka waagii beryaba war cusub u hayso, ilaa maalinta geerida. Sirteeda iyo dulucdeeda, cid aan Ilaahay ahayn oo soo duubtaa ma jirto.

Qofku ma jecla oo dani uguma jirto in baadidoonku ka xidhmo oo mar walba waa in wax u hadhsan yihiin oo tijaabooyinku joogto u noqdaan, si aanu u shaqo beelin ama werwer quus ahi ugu dhalan. Runtu waa in

nolosha qofka waagii beryaba isbeddal ku yimaaddo si uu u helo muraayad uu isku daawado.

U danbayn, waxa aynnu garanaynaa in noloshu u abuuran tahay ama tahay macallin waagii beryaba qofka war cusub iyo cashar xiiso leh u haya. Sidaas ayaan aadamuhu dulucdeeda iyo sirteeda u soo gebogebayn karin.

*Way ka ood shishaysaa,*
*Ardaygeeda waagiyo,*
*Nin aroorta sugayoo,*
*Nin aflaxay tin kama jarin,*
*Nin irmaanta qaadiyo,*
*Axad jiraba waa been,*
*Afartiisa weedhood.*[1]

Marka la tixraaco xeerka noloshu leedahay, waxa aynnu ogaanaynaa in dardar kastaa ku danbayso dabar. Geeddi kasta oo nololeed waxa u astaan ah in uu yeesho meel uu ka bilaabmo iyo meel uu ku dhammaado. Waxa noloshu leedahay waddo waafaqsan qofka iyo majaraha noloshiisa. Da' kasta ba ha gaadho e, ma jiro qof nolosha ka faraxasha oo hadhka uga dhaca, xataa haddii maankiisu qoomman yahay ama uu gaadho cimriga asaasaqa. Marka uu ugu liito waxa uu dhegaystaa wararka adduunka iyo dhacdooyinka nolosha ku saabsan. Waayo, waxa uu doonayaa in uu ka jawaabo baahi naftiisu leedahay iyo dareen ku abuuran.

*Nin hadaafa lama odhan*
*Haybta noloshu kaa xidhan.*
*Nin habsadayna kama tagin*
*Himilada adduunyada.*
*Nin la hago xil kama dhicin.*[2]

Xubnaha qofka xubinta ugu nolol danbaysaa waa hiyiga. Waxa uu hiyiga iishaa marka qofka naftu ka baxdo ee xubnaha oo dhami shaqada joojiyaan. Qofka waxa ku beeran himilo, hawo iyo hadalhayn adduun. Dulucda weedhani waxa weeye, inta mud nololeed ku hadhsan tahay qofku waxa uu hadalhayaa hawaale adduun. Marka ugu danbaysa ee uu hawaarsadana, waxa afkiisa ku hadha *maxaa la yidhi* iyo *maxaa soo kordhay?*

---

[1] Afkusiran, 1997.

[2] Deyn maayo heesaha, 1973.

nolosha qofka waagii beryaba isbeddal ku yimaaddo si uu u helo muraayad uu isku daawado.

U danbayn, waxa aynnu garanaynaa in noloshu u abuuran tahay ama tahay macallin waagii beryaba qofka war cusub iyo cashar xiiso leh u haya. Sidaas ayaan aadamuhu dulucdeeda iyo sirteeda u soo gebogebayn karin.

*Way ka ood shishaysaa,*
*Ardaygeeda waagiyo,*
*Nin aroorta sugayoo,*
*Nin aflaxay tin kama jarin,*
*Nin irmaanta qaadiyo,*
*Axad jiraba waa been,*
*Afartiisa weedhood.*[1]

Marka la tixraaco xeerka noloshu leedahay, waxa aynnu ogaanaynaa in dardar kastaa ku danbayso dabar. Geeddi kasta oo nololeed waxa u astaan ah in uu yeesho meel uu ka bilaabmo iyo meel uu ku dhammaado. Waxa noloshu leedahay waddo waafaqsan qofka iyo majaraha noloshiisa. Da' kasta ba ha gaadho e, ma jiro qof nolosha ka faraxasha oo hadhka uga dhaca, xataa haddii maankiisu qoomman yahay ama uu gaadho cimriga asaasaqa. Marka uu ugu liito waxa uu dhegaystaa wararka adduunka iyo dhacdooyinka nolosha ku saabsan. Waayo, waxa uu doonayaa in uu ka jawaabo baahi naftiisu leedahay iyo dareen ku abuuran.

*Nin hadaafa lama odhan*
*Haybta noloshu kaa xidhan.*
*Nin habsadayna kama tagin*
*Himilada adduunyada.*
*Nin la hago xil kama dhicin.*[2]

Xubnaha qofka xubinta ugu nolol danbaysaa waa hiyiga. Waxa uu hiyigu iishaa marka qofka naftu ka baxdo ee xubnaha oo dhami shaqada joojiyaan. Qofka waxa ku beeran himilo, hawo iyo hadalhayn adduun. Dulucda weedhani waxa weeye, inta mud nololeed ku hadhsan tahay qofku waxa uu hadalhayaa hawaale adduun. Marka ugu danbaysa ee uu hawaarsadana, waxa afkiisa ku hadha *maxaa la yidhi* iyo *maxaa soo kordhay?*

---

[1] Afkusiran, 1997.

[2] Deyn maayo heesaha, 1973.

Cimriga qofka bani'aadamka ah waxa hor socda hir, isagana waxa ku heeran shay la yidhaahdo hiigsi. Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa: laba way ku hor ordaysaa, laba way ku hareer socotaa, labana way ku daba ordayaan. Hammo iyo hunguri way ku hor ordayaan, faa'iido iyo khasaare way ku hareera socdaan, gabow iyo geerina way ku daba ordayaan.

Qofku waxa uu ka jawaabi karaa arrin xiise galisa oo uu hibo u leeyahay. Noloshiisa iyo cimrigiisa marba meel ayuu ku fooggan yahay oo meel baa u cad. Mar walba waxa uu hayaa hawl cimrigiisa iyo hibadiisa waafaqsan. Waa sida keli ah ee qofku hawsha uu hibada u leeyahay ku hanan karo.

Wax uu arrintaas dhadhankeeda iyo sii qurxinteeda ku sii durkaba, wax farshaxannimadiisu ku sii talaxtagtaba, wax arrintaasi marba hankiisa sii kordhisaba, wax marba qaybta bulshada ee arrintaas la dareenwadaagtaa u sii-dhaadhaceeda iyo dabajooggeeda ku guubaabiyaanba, wax uu marba dardar aloosan kaga jibba keenaba, waajibkaas iyo xilkaas; u danbaynta waxa uu gaadhsiiyaa figta ugu sarraysa iyo meel aanay dhaafi karin. Marka uu ogaado in aanu figta sii dhaafi karin, ku celcelinta figtuna aanay macno badan samaynayn, ayuu arrinta ka hadhaa.

Waxa uu uga wareegaa dhinac iyo waddo kale oo ka xeeldheer xilka uu muddada ummadda u hayay ee uu ku hantiyay quluubta dadka. Kulammo iyo goobo la isugu yimid oo isdabajoog ah ayuu ku soo bandhigaa waayo'aragnimadiisa, waddadii uu u maray gudashada xilkaas ummadeed iyo kaalintii uu kaga beegnaa bulshadiisa. Waddo kale ma jeexdo ee waddadii uu muddada dheer hayay ayuu si kale u dhalanrogaa.

Waxa uu u baydhaa in uu dulucda geeddigiisii dheeraa kaga warramo qoraallo iyo hannaan ka tayo roon hababkiisii hore, laakiin weli salka ku haya kaalintiisii nololeed. Qoraalladiisaa danbe waxa uu ku soo bandhigaa geeddigii iyo waayihii nololeed ee ummaddu soo martay. Waxa uu kaga warramaa dhacdooyinka nolosha iyo sidii uu uga falcelin jiray. Waxa uu adeegsadaa luqad ka fudud tii looga bartay, laakiin ujeeddo ahaan ka ballaadhan. Waxa uu abbaaraa in uu ka sheekeeyo guurguurkii nolosha iyo geeddigii ummadda. Waxa uu dib u raacaa raadkii taxanaha ahaa iyo waayihii marba lagu hakaday. Iyo marka ugu danbaysa, halka awrka lagu furay iyo weliba sababaha.

*"Nin hadduu gabooboo wax badan, guudka ka cirroobo,*

*Gadaal waa ka haasaawi jiray, geeddiguu maray."*[3]

Isaga oo xilkaas waayo'aragnimo ku dhex jira oo waraaqda iyo cimrigiisu isku dhammaadeen ayuu la kulmaa geerida. Maalintaas ayaa hebel kaalintii uu ku beegnaa iyo sidii uu u hantay qiraal lagu caddeeyaa. Waayo, waa maalin isaga iyo cadawgiisii ama ciddii ay is hayeen aanay waxba kala riixanayn oo aan muraaddo iyo mabaadii' la isku hayn.

Hadal iyo dan, arartaa dheer ee laga yaabo in ay ila durugtay waxa aan uga gol leeyahay bal in aan ku muujiyo sababaha igu kallifay in aan buuggan qoro waqtigan xaadirka ah, waxaanan rejaynayaa in aad sidaa iila fahmi karto.

Buuggan oo ay hawl badani iga qabsatay waxa aan uga jeedaa ha la daba qabto taariikhdii, aqoontii iyo aftahammadii Soomaalidu lahaan jirtay tan iyo waayadii ay beeshu ku sugnayd xooladhaqato reerguuraa ah.

Akhris wanaagsan.

[3] Waxa curiyay Abwaan Xaaji Maxamed Guuleed "Dallaayad" (AHN).

# GOGOLDHIG

Salaamullaahi calaykum mar kale. Magacayga waxa la yidhaahdaa Maxamed Ibraahim Warsame. Waxa aan ku magac dheerahay Hadraawi. Waxa aan ka mid ahay halabuurka Soomaaliyeed ee waqtigan nool. Waxa aan ku dhashay miyi waqtigii noloshu miyirka ku sugnayd ee ay bac, daasad, saxaro, guddaafad, qaad, sigaar iyo xumo kale oo weheliyaba ka daahirka ahayd.

Waxa la ii sheegay in aan ku dhashay meel magaceeda la yidhaahdo Yeyle oo ku taalla bariga Burco. Garan maayo taariikhdii aan dhashay, waayo, waqtigaas qoraal ma jirin oo bulshadu waxa ay ahayd xooladhaqato reerguuraa ah. Waxa aan dhashay waqtigii aqoonta, aftahammada, anshaxa iyo asluubta. Waxa aan dhashay waqtigii tacabka iyo tusmaynta.

Waxa aan ka dhashay qoys sabool ah oo hantidiisu gaaban tahay. Laakiin noloshayda waxa xoojinayay ehelka nagu xeeran. Kaalintaydii miyiga waxa aan ka bilaabay dhexjoogga maqasha. Ku sii soco; adhiga iyo geela. Aniga oo kuray ah ayaa la ii dhoofiyay magaalada Cadan ee caalamka Carabta inoo soo xigta. Halkaas waxa ku noolaa adeerkay Axmed Warsame Siciid oo ka mid ahaa Booliska Cadmeed.

Waxbarashada waxa aan ka bilaabay malcaamad ku taallay degmada Tawaahi. Halkaas ayaan kula baxay naanaysta *Hadraawi*, waayo, waxa aan ahaa ruux sheeko badan. Nolosha miyiga, dacawada, waraabaha iyo libaaxa ayaan uga sheekayn jiray carruurta malcaamadda.

Waxa aan uga gudbay iskuul magaciisa la odhan jiray St. Anthony High School oo ku yaallay meel aan malcaamadda ka fogayn. Waxa aan uga gudbay oo aan macallin ka noqday iskuul hoose-dhexe oo ku yaal isla degmada Tawaahi. Intii aan iskuulkaas macallinka ka ahaa waxa aan ku guulaystay in aan soo bandhigo riwaayad magaceeda la odhan jiray *Hadimo*. Waxa aan iska lahaa hibada halabuurka.

Riwaayaddaas *Hadimo* way meelmartay, waayo, Cadan waxa ku noolaa jaaliyad badan oo Soomaali ah. Riwaayaddaasi waxa ay igu dhiirrigalisay in aan halabuurka ku sii socdo, kadib markii aan hubiyay in aan hibada halabuurka leeyahay. Intii riwaayaddaas ka horraysay wax aan sii ridnayn

oo da'dayda waafaqsan ayaan tuurtuuri jiray. Afarray kooban ayaannu dhallinta da'dayda ah isku beejin jirnay.

Iyada oo halkaas maraysa ayuu qarxay dagaal u dhexeeya Ingiriiskii Yemen gumaysanayay iyo shacabkii dalka lahaa. Jaaliyaddii ballaadhnayd ee Soomaalida ahayd waxa ay istuseen in aanay ag joogin xabbadda isdhaafaysa ee labada dhinac u dhexaysa. Waxa ay goosteen in ay dalkaas ka soo baxaan oo ay ku soo noqdaan dalka hooyo. Waxa aan ka mid ahaa geeddigaas oo la baxay *Xabbadi-keentay*. Waqtigaasi waa 1967kii.

Muddo lix bilood ah ayaan ka hawlgalayay Idaacaddii Raadiyow Muqdisho oo aan barnaamij daaddihiye ka ahaa (narrator). Waxa aan uga gudbay Kulliyaddii Waxbarashada Lafoole oo aan in muddo ah wax ku baranayay, kadibna waxa aan macallin ka noqday dugsi hoose-dhexe-sare oo Lafoole ku yaallay. Intii aanan Lafoole u gudbin, waxa aan soo bandhigay riwaayad magaceeda la odhan jiray *Reer ba'aw yaa ku leh* oo sii xoojisay sumcaddayda.

Ilaa 1973kii ayay aftahammadaydu sii ballaadhatay. Lafoole riwaayad la magacbaxday *'Aqoon iyo Afgarad'* oo ku saabsan in waxbarashada lagu dhigto dalka gudihiisa, kana soo hor jeedda waxbarashada dibadeed ayaannu ka abaabulnay, aniga, Siciid Saalax Axmed iyo Allaah labadoodaba ha u naxariistee Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye" iyo Prof. Muuse Cabdi Cilmi. Waa waqtigii Maxamed Siyaad Barre.

Riwaayaddaasi waxa ay keentay in maalin maalmaha ka mid ah Maxamed Siyaad Barre ii soo diray nimankii la magacbaxay koofiyadcasta. Nimankaasi waxa ay i geeyeen xeradii Afisyooni. Halkaas waxa aan kula kulmay Maxamed Siyaad Barre oo geed hoos fadhiya.

Macallinkii kacaanka ayaa hadalka qaatay. Waxa uu yidhi *"Hadraawi, waan ogahay in aanad Kacaanka ka soo horjeedin, laakiin maxaa wax kasta oo aad tiriso annaga na loogu adeegsadaa?"*

Waxa aan isku dayay in aan macallinka qanciyo. Waxa aan uga warramay marinka iyo sharciga ay suugaantu leedahay. Kow. Waxa aan raaciyay in suugaanta ama maansada marka ninka halabuurka ahi tiriyo ay u gudubto bulshada oo ay shacabku la doontaan halka ay u buuxinayso. Iyaga (shacabka) ayaa ku daweeya meesha bugta iyo halka u daran. Annaga (abwaannada) waxa noogu danbaysa marka ay gacantayada ka baxdo. Sidaas darteed, annagu xaq uma lihin *eraygaa halkaas ka daaya*.

Waxa aan intaas ugu daray *"Jaalle Madaxwayne halabuurka ama suugaantu waa iidaanka nolosha. Suugaantu waxa ay mar kasta ka hadashaa waayaha jira."*

Bal u fiirso tuducyadan markhaatiga ah ee ka warramaya inta waddo ee halabuurka u bannaan.

*Halabuurku waa awr*
*Sita heeryadiisiyo*
*Hirar kala shisheeyoo,*
*Waa hilib mergiyahoo*
*Isagoo hal keliyaa*
*Dadku harag shabeel iyo*
*Ka dhigaan hariiryoo,*
*Qof kastaa hab gaaruu*
*U higgaadsadaayoo,*
*Waxay ugu habboon tahay*
*Sida uu u haystiyo*
*Halka uu la doonto.*[4]

Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre waxa uu hadalkii ku soo gebagabeeyay *"waxa aad doonto i weyddii, laakiin maanta wixii ka danbeeya yaanan maqlin wax suugaan ah oo aad leedahay oo annaga na loo adeegsaday."* Waxa aan ku idhi "sidii Alle ka dhigo ayay noqonaysaa."

Iyada oo halkaa maraysa ayaa gabadh la yidhaahdo Caasha Jaamac Diiriye oo Siinleyda ka qaybgashay ay Jabbuuti iiga soo dirtay calankii shanta gees lahaa, seef qurux badan, gabay weheliya iyo alaabo kale oo subeeciyadi ku jirto. Warqadda gabaygu ku qoran yahay waxa ku dul sawiran seef. Hadiyaddaas ayaa la iigu keenay Lafoole.

Warka hadiyaddaasi waxa uu gaadhay bulshadii wardhawrka ahayd, kadibna waxa lala maray halkii lala mari jiray. Waxa la yidhi ujeeddada gabaygu xanbaarsan yahay waxa weeye: *seefta odayga ku dil, calankana adiga ayaa ilaalin kara ee hay.* Warkaas waxa qoray wargeyskii shacabka ee madaxa bannaanaa, iyada oo seeftiina bogga hore ee jariiraddaas lagu soo sawiray. Sida aan sheegay, xilligaa waxa aan degganaa Kulliyaddii Waxbarashada ee Lafoole.

---

[4] Halabuur, 1975.

Markii warkaasi faafay ayuu goor duhur ah macallinkii kacaanku ii soo diray koofiyadcastiisii. Waxa uu ii soo faray alaabtii Jabbuuti lagaaga soo diray soo dhiib. Calankii iyo seeftii ayaan u dhiibay. Waxa aan u raaciyay alaabtaasi waa amaano ee hay.

Isla waqtigaas waxa aan abaabulay riwaayaddii *Tawaawac*. Tawaawac heesaheeda waxa ka mid ahaa *Hal la qalay* oo si qotadheer u qaawinaysay sidii loo kala boobay ee la isugu hirdiyay midhihii laga dheefsan lahaa gobannimadii iyo dawladnimadii 1960kii la hantay. *Hal la qalay* waxa kale oo ay sii tilmaamaysay layaabka iyo wacdaraha ka soo muuqda saraakiishii ciidamada ee talada dalka afgenbiga ku qabsaday.

*Qalwadii mas baa galay*
*Qodax baa se hoos taal,*
*Fule quudhsigii diid,*
*Geesi qoorta soo dhigay,*
*Faras qaayihiisii*
*Qurux buu ku doorsaday,*
*Qab qab dhaafay baa yimid,*
*Qosol qoonsimaad noqoy,*
*Qabyo waa halkeedii.*[5]

Maxamed Siyaad Barre waxa uu si gaar ah u qoonsaday oo hoosta uga xarriiqay tuducyadan[6]:

*Weligay cad quudheed*
*Anna qaadan maayoo,*
*Qalanjadan faraha dheer*
*Wax la qaybsan maayee...*

Tuducyadaas sare waxa uu Maxamed Siyaad u macnaystay in aan kaga jawaabayo hadalkii uu kulankayagii hore iiga sheegay ee ahaa *wixii aad doonto i weyddii.*

Heesihii riwaayaddaas *Tawaawac* waxa suuqa ku duubay oo wada qaaday Alle ha u naxariistee fannaankii Muuse Ismaaciil Qalinle. Heesaha kale ee riwaayaddaa ku jiray waxa ka mid ahaa heesta *Ceel Walwaaleed* oo

---

[5] Heesta *Hal la qalay*, 1973.

[6] Riwaayaddii *Tawaawac* ama sida loo yaqaanno *Hal la qalay*.

tilmaamaysay sida uu dalku isbeddal ugu baahnaa iyo sida aanu inqilaabka askartu u noqonnin isbeddalkii loo baahnaa.

*Haddaan weel gun laga tolin*
*Waayaha adduunyada*
*Xogogaal la weyddiin,*
*Ruuxii gu' kaa weyn*
*Lagu odhan wax ii sheeg,*
*Taladaadu wiilooy*
*Dalab waayi maysee;*
*Mudanaha walaalkaa*
*Haddii weerar lagu dilo*
*Isha lalama waabtee*
*Weerkiyo baroorta*
*Dadka lala wadaagaa.*[7]

Isla habeennadaas waxa baadhitaan la mariyay riwaayaddii *Tawaawac,* waxaana dadkii ka qaybqaatay ka mid ahaa Madaxweyne-kuxigeen iyo saddex wasiir. Goor fiid ah ayuu baadhitaanka riwaayaddaasi ka bilaabmay Lafoole, waxaanu socday ilaa waaberigii. Intaas oo dhan waxa la isku haystay wax ka beddel, aniguna waxa aan ku adkaystay in aanan waxba ka beddelayn.

Maalmo kadib waxa la ii keenay warqad nuxurkeedu yahay in aan riwaayaddaas oo ka soo hor jeedda Kacaanka la dhigi karin. Warqaddaas waxa sidoo kale lagu xusay in aan *Kacaandiid (Anti-revolutionary)* ahay.

Goor habeen ah, abbaaro sagaalkii, ayaan rooti la mariyay saliid macsaro iyo koob shaah ah ka soo amaahday makhaayad dhuuqdhuuq ah oo meel deyrka Lafoole ka baxsan ku taallay. Gurigii aan degganaa ayaan soo galay. Sariirtii ayaan ku jiifsaday. Waxa aan la soo baxay warqad uu ii soo diray nin aannu saaxiibbo nahay oo magaciisa la yidhaahdo Rashiid Maxamed Shabeelle[8]. Gurigu waxa uu lahaa daaqad weyn oo muraayad leh, daahna aan lahayn. Anigu isma ogi oo war ma hayo. Ciidan nabadsugid ah ayaa muraayadda daaqadda iga daawanaya.

---

7 Ceel Walwaaleed, 1973.

8 Hooyadii waa Hodan Cabdille Walanwal. Waa gabadhii uu Cilmi-Boodhari sheekadeeda iyo jacaylkeeda ku talaxtagay.

Ninkii ciidanka watay waxa uu amar ku bixiyay oo uu ciidanka faray in ay wareegaan oo albaabka guriga garaacaan. Isagu waxa uu ku hadhay daaqaddii si marka albaabka la furo uu u ogaado meesha aan warqadda dhigo. Warqadda aan akhriyayo waxa uu u macnaystay in ay tahay tii kama danbaysta ahayd ee laga heli lahaa warkayga iyo cidda aan ku xidhanahay.

Albaabkii ayaan furay. Ciidankii ayaa soo galay. Waa ciidan abaabulan. Taliyihii oo lalaya ayaa ciidankiisii soo jiidhay. Warqaddii oo aan barkimada hoosteeda galiyay ayuu la booday. Qiyaastii waxa uu u qaatay in uu sir weyn gacanta ku dhigay. Ma uu akhriyin ee jeebka shaadhka ayuu ku hubsaday.

Aqalkii ayaa lagu foofay. Waxa ay siteen tooshash iyo sallaan. Khaanado qolka dhanka sare kaga yaallay ayay sallaankii ku fuuleen. Wixii buug, waraaq ama cajelad taallay ayaa sariirtii aan ku jiifay lagu soo ururiyay. Xaalka baadhis qudh ah ayaan u haystay ilaa ay ii sheegeen in la i xidhayo.

Katiinad ayaa labada gacmood la igaga jebiyay. Gaadhi dibadda taagnaa ayaa la i saaray, dhinacyadana laba nin ayaa la iga fadhiisiyay. Nin sarkaal ah ayaa dhinaca midig iga fadhiya, bidixdana waxa iga xiga darawalka gaadhiga. Deetana baabuurkii wuu dhaqaaqay. Intaas waxa aan isweyddiinayaa meesha la igu wado. Afgooye markii aannu dhaafnay waxa aan u qaatay in la igu wado meel ay rag kale hore ugu xidhnaan jireen oo la yidhaahdo Waajid.

Xoogaa markii aannu sii soconnay ayuu sarkaalkii soo saaray qaad Miiroo ah oo inta uu mijin ii dhiibay igu yidhi cabbaar ayaynnu sii guurayn doonnaa ee mijintaas iskaga madadaalo. Habeenkii oo dhan fool ayaannu u sii jeednay. Waaberigii ayaannu galnay magaalada Baydhabo. Xagga Jubbada sare ayaannu Baydhabo uga baxnay.

Ma jirin dariiq hagaagsan oo la maraa, qolyaha i wada laftooduna aqoon badan uma lahayn dhulka aannu maraynno. Dhawr saacadood markii aannu sii soconnay, ayaa sarkaalkii weyddiiyay qolo beer falanaysa jidka Qansaxdheere. Waxa ay ahayd markii u horreysay ee aan ogaado meesha la igu wado. Waxa ay ahayd markii iigu horreysay ee aan maqlo magaca Qansaxdheere.

Barqadii ayaannu gaadhnay Qansaxdheere. Sarkaalkii i waday waxa uu la kulmay guddoomiyihii degmada, waxaanu u dhiibay warqad ku saabsan

arrintayda. Guddoomiyihii waxa uu u sheegay sarkaalka in inta uu ii soo gacanbaxayo la i geeyo halkii la iigu talagalay.

Waxa la iga furay katiinaddii, markaas ayaana nefis iigu horraysay, waayo, mushkiladda xadhigga igaga darani waxa ay ahayd katiinadda oo ilaa markii Lafoole la igaga soo jebiyay si ba'an iigaga roorsanayd gacmaha midkood. Cabbaar ayaan seexday. Nuur-Bidaar oo ah sarkaalkii u xilsaarnaa in uu i geeyo Qansaxdheere, ayaa ila yeeshay waraysi dheer isla gelinkii danbe ee maalintaas. Waxa uu soo qaatay teebkii wax lagu garaaci jiray iyo rikoodh cajaledo heeso ahi la socdaan.

Hadba waxa uu i dhegaysiiyaa hees. Waxa uu i weyddiiyaa in aan anigu tiriyay iyo in kale iyo haddii aan tiriyay waxa aan uga jeeday. Waxa uu iga buuxiyay 13 warqadood oo daabacan. Subaxii xigay ayuu Muqdisho ku laabtay. Waxa la igu wareejiyay guddoomiyihii degmada Qansaxdheere Cabdiqaadir Sheekh Axmed Cali.

Waxa aan halkaas ka bilaabay nolol cusub oo ku xaddidan xabsigii aan maalintaas galay. Waxa aan la shawray naftayda. Waxa aan yiqiinsaday in xabsigu nolosha ka mid noqon karo. Waxa aan fidsaday gogoshayda, aniga oo ku talagalaya in aan xidhnaan karo intii ay gaadhi karto. Waxa kale oo aan go'aansaday in aan iska ilaaliyo caloolnugayl, calaacal, fudayd iwm. Taas ayaa Allena igu hanuuniyay.

Talisku waxa uu xadhigga ka lahaa laba ujeeddo midkood: in qofku ku waasho ama in uu isdhiibo. Isdhiibiddu waa nooc kale oo dhimasho ah. Aniga oo taas maskaxda ku haya ayaan aqbalay qol yar oo la i siiyay, kuna yaallay daartii la igu xidhay oo lahayd deyr weyn.

Xabsi kama aan dhigan gurigaas iyo maqsinkaas yar ee waxa uu ii noqday caalamkaygii oo dhan. Waa markii iigu horreysay ee aan joogteeyo in aan salaadda tukado, in aan u soomo si ka xeeldheer sidii hore iyo in aan qur'aanka akhriskiisa badsado.

Waxa la ii oggolaa in aan dhaqdhaqaaq ama jimicsi ku samayn karo gudaha deyrka weyn ee guriga ama hadhqoodaalkiisa. Waxa aan deyrkii ku dhaqay digaag, waxaanan ka beeray galley, xabxab, tamaandho, basbaas i.w.m. Maalin oo dhan, marna digaaggaas ayaan kala horaa, marna beerta ayaan waraabiyaa. Qansaxdheere waxa ay ugu wanaagsanayd meel qof lagu xidho, wax belaayo ahna Alle ilama kulansiin.

Intii aan xabsiga ku jiray waxa aan isku taxallujiyay in aan wax hadal ahi dibadda iiga soo bixin, in aan wax fudayd ah la iga dareemin iyo in aanay fulin ujeeddadii xadhiggayga laga lahaa oo ahayd baraqjabin, maandhufaanid, isdhiibid iwm. Lama oggolayn in xabsiga la igu soo booqdo, waxa se la iigu keeni jiray waraaqaha iyo buugaagta oo la soo baadhi jiray inta aan la ii keenin.

Dad badan ayaa dedaal u galay in ay dawladda ku qanciyaan in xabsiga la iga sii daayo. Waxa berigaas caado ahayd in dadka xidhani si loo sii daayo ay waraaqo cafisdoon ah u diran jireen madaxweynaha. Dhawr jeer ayaa xabsiga la iigu keenay in aan buuxiyo codsiyadaas cafiska, laakiin diidmo qayaxan ayaan mar kasta kala hor imanayay.

Maalin danbe ayaa waxa Muqdisho farriin iiga soo diray nin aannu saaxiibbo nahay oo la yidhaahdo Cabdiqaadir Xasan Faarax. Cabdiqaadir waxa uu ii soo bandhigay in haddii aanan codsiga cafiska soo dalban la ii qaadi doono xabsiga weyn ee Labaatan-jirow[9]. Cabdiqaadir Xasan waxa aan ugu jawaabceliyay in uu saddex midkood igu ogaado: *xabsi, xorriyad ama xabaal.*

Xabsigu waxa uu ii noqday meel aannu aniga iyo naftaydu isku keliyaysannay, fursadna ii siisay in aan dib isugu noqdo oo aan wax ka beddelo habnololeedkaygii hore. Wax uu qofku qaayibo waxa ugu daran fadhiga. Sidaas darteed, dhaqashadii digaagga iyo falashadii beerta ayaa waxtar weyn ii noqday.

Lama oggolayn in aan xabsiga suugaan ku sameeyo. Laftaydu, diyaar uma ahayn in hadal la iga maqlo oo dareenkayga cidi akhrido. Haseyeeshee, intii u dhexaysay sannadihii 1974kii – 1977kii, waxa aan xabsiga dhexdiisa ku curiyay sagaal maanso: *Tuke baal cad, Halabuur, Hablaha Geeska Afrika, Xamareey ma nabad baa, Shan-ubaxlay, Ina Suldaan, Mulliya, Daryeel* iyo *Jeegaanta dhalatay.*

Aniga oo shan sannadood ku dhowaad xidhan ayuu maalintii danbe madaxweyne Maxamed Siyaad la hadlay Axmed Saleebaan Dafle oo nabadsugidda u qaabilsanaa oo uu sida la sheegay ku amray in si degdeg ah Muqdisho la iigu soo dhaadhiciyo. Axmed Saleebaan waxa uu la soo xidhiidhay nabadsugiddii Baydhabo oo uu markaas madax ka ahaa nin la

[9] Waxa uu ahaa xabsi aan qofka la geeyaa dhayal uga soo noqon.

odhan jiray Xasan-Jabbaan iyo Guddoomiyihii gobolka oo ahaa Cabdiraxmaan-Baydaani.

Goor galab ah abbaara shantii galabnimo ayuu guriga hortiisii isa soo taagay gaadhi ay la socdaan niman nabadsugidda gobolka ka tirsan. Nimanka qaar waxa aannu is barannay intii aan xabsiga ku jiray. Waxa ay ii sheegeen in ay aniga ii socdaan oo i qaadayaan, sidaa darteedna aan guriga ka soo urursado waxa alaab iga taalla. Alaabtaydii baan soo urursaday, baabuurkii ayaanan soo fuulay. Waxa aan jeclaa in aan sii nabadgalyeeyo dadkii reer Qansaxdheere, nasiibdarro taasi iima suurtagalin.

Cagta ayuu baabuurkii waddada saaray, saqbadhkiina waxaannu gaadhnay magaalada Baydhabo. Waxa uu gaadhigii is hortaagay xafiiskii nabadsugidda ee gobolka oo uu diyaar ku sii ahaa gaadhi kale oo Landrover ah oo nabadsugiddu leedahay.

Aroortii ayaa gaadhigii la dhaqaajiyay, waxaanu afka saaray waddadii Baydhabo uga bixi jirtay Muqdisho. Laba iyo tobankii duhurnimo ayuu gaadhigu is hortaagay xaruntii nabadsugidda ee Muqdisho. Dabadeedna waxa la i geeyay huteelka Bulsho, waxaana la i dejiyay qol gaar u ahaa nabadsugidda oo huteelkaas ku yaallay.

Saddex cisho kadib ayaa madaxweyne Maxamed Siyaad ii yeedhay. Toddobadii fiidnimo ayaa huteel Bulsho la iga qaaday oo madaxweynaha la iigu geeyay xeradii Afisyooni. Waxa ila socday Shariif Saalax oo golaha sare wakiil uga ahaa gobolka Bay iyo Xasan-Jabbaan oo ahaa taliyaha nabadsugidda Bay. Shariif Saalax dibadda ayuu nagaga hadhay. Aniga iyo Xasan-Jabbaanna waxa aannu u galnay madaxweynaha. Waxa la fadhiyay nin kornayl ah oo xoghayn u ahaa. Muddo ayaannu wada sheekaysannay madaxweynaha. Hadalkiisii waxa aan ka xusuustaa:

*"Hadraawi, Kacaanku kuma necba, taana waxa daliil u ah adiga oo og halka uu rag ku danbeeyay iyo halka uu ku jiro, ayaannu nidhi Hadraawi ha la geeyo Qansaxdheere, hana loo goglo sariir foormiiko ah, halkaas ha lagu ilaaliyo, waxa uu doono ha la siiyo, ujeeddada xadhigguna waxa ay ahayd bal taladu way ka boodsanayd ee dib ha isugu noqdo oo ha qiimeeyo waxa uu ku hadlayo, xaaladaha iyo kacaanka."*

Hadalka madaxweynuhu waxa uu ku soo ururay in aan hadda sheegto waxa aan doonayo. Waxa caado ahayd in dadka xabsiyada siyaasadeed laga soo daayo lagu sabirsiin jiray xilal, derejooyin, adduun ama lacag i.w.m. Laakiin

habeenkaa waxa aan madaxweyne Siyaad ka codsaday in la i siiyo gaadhi iyo darawal aan ku soo eego dadkii reer Qansaxdheere ee aan shanta sanno la noolaa, aniga oo aan sagootiyinna sida kedisada ah la iiga soo qaaday. Madaxweynuhu ma jeclaysan jawaabtaas, waayo ma uu filayn. Cabbaar ayuu aamusay, deetana waxa uu amray xoghayntiisii in la i siiyo gaadhi iyo darawal i geeya Qansaxdheere.

Habeenkii 9kii Abril 1978 waxa waa-soodhowaadkii dhacay inqilaabkii dhicisoobay ee cutubyo ciidamada ka tirsani iskugu dayeen in ay xukunka kula wareegaan. Dariiqa waxa tubnaa ciidamo uu hubkoodii u dhammaa oo goobyaal ku jira. Haseyeeshee, maadaama aannu sidannay warqad madaxweyne arrintaasi nama baajinnin. Galabnimadii maalintaas ayaannu gaadhnay Qansaxdheere.

Qansaxdheere waxa aan ka soo maqnaa afar maalmood. Afartaas maalmood, huteelka Bulsho ee la i dejiyay iyo xerada Afisyooni oo aan Madaxweynaha kula kulmay mooyee, meel kale cag ma dhigin. Dhawr casho oo danbe ayaan aniga oo xor ah joogay Qansaxdheere oo aan bulshadii degganayd kula qaatay xaflado sagootis ah oo ay ii sameeyeen. Qansaxdheere waxa aan ku xidhnaa 11kii Noofembar 1973 ilaa 6dii Abril 1978.

Marka la soo ururiyo, xadhiggayga waxa dhaliyay sababo dhawr ah oo isbiirsaday, kuwaas oo laga xusi karo riwaayaddii *Aqoon iyo Afgarad* (1972), riwaayaddii *Tawaawac* (1973) iyo hadiyadda aan kor kaga hadlay ee Jabbuuti la iiga soo diray.

# CUTUBKA I

## NOLOSHII AAN SOO GAADHAY

*"Haddii anshaxu lumo waxa yimaaddajahli sababa in qofka dareenka dadnimadu ka guuro."*

Guud ahaan noloshu waxa ay lahayd jaangooyo qorshaysan iyo qaabdhismeed waafaqsan ujeeddooyinka iyo danaha laga leeyahay iyo halhays odhanaya, *barbarkay ka baxdaa waa bakaylo qaleen*. Tacab, dardar iyo xiise joogto ah oo ka soo jeeda anshaxa, agabaynta, aqoonta, aftahammada iyo aloosnaanta ayaa cimrigeeda dheereeyay. Muddo dheer ayaa geeddigaasi tub aloosan ku jiray oo nolosha xeer ilaalinayay.

Waxa ay ahayd bulsho caanadhan ah oo labada caanamaal calafkoodu caano yahay. Waxa ay ahayd bulsho neefka la foofta, la soo hoyata, daaqa iyo sabadana u sahamisa. Dheri dab saarani habaar buu ahaa. Albaabka hilibcunka ee aadamuhu dugaagga la wadaago ayay iska xidheen. Cunista hilibka sharci baa ka yaallay. Waa tadcaar, Allabari, marti soo hoyata xilliga jiilaalka, xer iyo culimo soo hoyata, ama xidid sooryo hilib ku jiro lagu maamuuso. Waxa aan soo gaadhay bulsho caanadhan ah oo maalintii oo dhan afka caday ku haya. Waxa aan soo gaadhay bulsho sagaashan jirkeeda ilkihiisu dayaxa ka cad yihiin.

Waxa aan soo gaadhay bulsho dhiibsan, aloosan oo heellan; oo halabuurku halqabsi iyo cunto u yahay. Waxa aan soo gaadhay bulsho hanka iyo hiddaha ku abtirsata, oo hunguriga xadhkaysay, gobannimadana xaslatay; bulsho tacab leh oo toodimo leh. Waxa aan soo gaadhay bulsho baahida ugu culus ee ay leedahay Alle-kacabsi yahay.

Waxa aan soo gaadhay ummad xishmad iyo xishood hu' u yahay oo aan baryada aqoon, bal se adeegsata, *"saxaro ul dheer baa la isaga tiraa"* iyo *"nin soori kaa qaadday waa nin seefi kaa qaadday."*

Waxa la sheegay in ninkii la odhan jiray Ina Sanwayne goor subax ah wiilashiisii u yeedhay. Meel saxaro taallo ayuu ku yidhi halkan soo fadhiista cashar baan idin siinayaaye. Wiilashii waa anfariireen oo waxa ay u qaateen in aanu aabbuhu waxa meesha yaalla arkayn. Waxa ay ugu halceliyeen, "Aabbe dugsiga saxaraa taaltaalla ee dugsi kale ina gee." Waxa uu aabbuhu

ku jawaabay, "waan arkaa in meesha saxaro taaltaallo ee waxa aan uga gol lahaa in aan idinku baraarujiyo in cunto sidaas ku danbayso."

Bulshadaasi waxa ay raadiyeen oo faaqideen habka iyo hannaanka ay xilka iyo waajibaadka xoolaha u gudan karaan. Baadhistaas iyo baadidoonkaas dheer way ku guulaysteen. Aragtidii iyo aqoontii waafaqday sidii ay xoolaha u daryeeli lahaayeen ayaa sidoo kale waafaqday aragtida diinta Islaamka. Mar haddii aragtidii daryeelka xooluhu noqotay in xumo oo dhan laga saahido, waxa ay waafaqday aragtidii Islaamka ee dhawroosnaanta iyo xalaal miiradnimada ku suntanayd.

Haddii aad doonayso in aad wax ka ogaato xaaladda ay ku sugnayd bulsho xooladhaqato iyo reerguuraa ah oo aan waxba qorin, marinka iyo majaraha nolosheeda waxa laga raadiyaa suugaanteeda iyo wixii ay waayaheeda ka tidhi. Waxa aynnu haynaa caddaymo muujinaya in bulshadaasi ay xumaha ka saahidday oo aanay guud ahaan shar iyo khayr isku mili jirin. Waxa aynnu haynnaa raad iyo astaamo caddaynaya in bulshada aynnu ka hadlaynaa ahayd bulsho Islaam ah, weliba Islaam ku xeeldheer oo ku dhaqma Islaamnimada. Tusaalayaal door ah ayaynnu arrintaas ku xaqiiqsan doonnaa.

Waxa ay ku dhaqmi jireen sifooyinka Islaamnimadu leedahay. Islaamnimadu waa in xumo laga saahido, ama aan la isku milin xumo iyo samo. Waxba ma ay qori jirin, mana ay aqoon afka Carabiga ee diinta Islaamku ku soo aroortay. Laakiin waxa ay yaqiinneen ujeeddooyinka Qur'aanku ku saabsan yahay.

Ujeeddada nolosha laga leeyahay waxa lagu saleeyay sharci qeexaya in falka, ficilka iyo falaadka bulshadu leedahay la waafajiyo diinta Islaamka. Inkasta oo sidashada kitaabka Qur'aanka ahi koobnayd, bulshadu Islaamnimada qalbiga ayay ku sidatay. Islaamnimada ay bulshadaasi dooratay in ay ku dhaqantaa waa ta u kala sheegtay xumaha iyo samaha ee ay masuuliyadda iyo xilka saaran ku gudatay.

Ficilkooda iyo habdhaqankoodaba waxa aad moodaysay in ay diinta Islaamka ku fogaadeen. Islaamnimadu waxa ay si cad uga muuqataa garsoorkeeda, martisoorkeeda, hogatusaalaheeda, waanadeeda iyo webinteeda. Waxa ay ka muuqataa dardaarankeeda.

Hawraaraha, halhaysyada iyo maahmaahaha soo socda ayaa caddaynaya sida labada aragtiyood isku waafaqeen iyo in bulshadaasi Islaam ahayd:

*Indho laga baqaa Ilaahay bay ku yaallaan.*
*Ninkii uurka dabaya, Ilaah baa arkaya;*
*Ninkii isha dabana aadmigiisaa arkaya.*
*Sida ay u indho xun tahay uma Alle la'a.*
*Iimaan Allaa uur buuxsha.*
*Alle ka yaab ma iisho.*
*Run ma yaqaan Alle ma yaqaan.*
*Gari Alle ayay taqaan.*
*Dhiig soo hoo dhaar se ha soo hoyn.*
*Rabbi waa talo haye, dadna waa taawe haye – wax malamaleeye.*
*Sir ma qabe Allaa u sahan ah.*
*Ilaahow aqoonna ha nagu cadaabin eexna ha nagaga tagin.*
*Markaan Ilaahay eegana waxaan is idhaa aalayso, markaan aadmiga eegana waxaan is idhaa aargooso.*

*Wixii rag u kaco*
*Rabbina aqbalo*
*waa rumoobaan.*

Saddex saddex baa lagu kabaa:
*Aqal xun ardaa wanaagsan baa lagu kabaa,*
*Aqoon yar aamus baa lagu kabaa,*
*Adduun yar iimaan baa lagu kabaa.*

Saddex kuma deyso:
*Gaajo guri og,*
*Gardarro garab og,*
*Cudur geeri og.*

Saddex lalama heshiiyo:
*Nin hawl fadhi ka yaqaan,*
*Hadalna faq ka yaqaan,*
*Talana fidno ka yaqaan.*

Waxa ay yidhaahdeen:
*Agoon looma dan sheegto,*
*Cirka ruuxna ma oolo,*
*Alle looma badheedho.*

Ujeeddooyinkaas iyo Islaamnimada ayaa eraygooda summad looga dhigay, waxaanay noqotay habka iyo hannaanka hoggaaminaya ujeeddada ay nolosha ka leeyihiin iyo qaabdhismeedkooda nololeed.

Tacabka iyo daryeelka dhaqaalahooda (xoolahooda) waxa ay u cuskadeen qaabdhismeedka noloshooda. Xeerka dhex yaallay waxa uu ahaa xeer waafaqsan badbaadadooda iyo waayahooda taxanaha ah. Waxa ay ahaayeen xooladhaqato reerguuraa ah oo daba jooga waayaha iyo waajibaadka noloshu farayso. Waxa ay meel dhigteen xeer waafaqsan muraaddada ay nolosha ka leeyahiin iyo ilaalinta karaamada.

Waxa ay xadhigga u jiideen albaabkii hunguriga cadowga u ah ee ujeeddada ay nolosha ka leeyihiin duminaya. Waxa ay xeer ka dhigteen baahi yar iyo tacab aan xad lahayn oo habeen iyo maalin joogto ah. Waa geeddi, galabcarrow, aroor, hayaan, heegan iyo hawl aan nasasho lahayn oo dadka raaxo iyo ragannimo u noqday. Waajibaadka hor yaallay, qaabka noloshoodu u dhisan tahay iyo majaraha badbaadadooda ayaa sidaas farayay.

Waxa ay is tuseen in ay ka fogaadaan wax alla wixii noloshooda dhaawacaya ama aayahooda naafaynaya. Waxa ay isla qaateen tacab tayadooda ilaaliya habeen iyo maalin. Waxa ay ka saahideen fadhiga iyo dan la'aanta. Waxa ay cuskadeen fardafuul waa faro ku hayn. Waxa ay iska xidheen fidno dhaawacda dedaalkooda. Waxa ay mabda' ka dhigteen tacab baahida ka badan. Waxa ay jideeyeen in ay dhammaantood – yar iyo weyn, rag iyo dumar – qof waliba nolosha kaalin muuqata yeesho. Qof waliba waxa uu xaq u leeyahay hadba sida uu u guto waajibaadka uu nolosha ku leeyahay.

Waxa reebban in qofku fadhi iyo bilaash wax ku helo, si aanay u iman in qof waliba odhan karo maxaa aniga i luraya. Waxa dhab ah in qofku haddii aanu camal hayn ibliis ama shaydaan shaqo fidno ah u sameeyo, oo u qofku falaaddo danta iyo dhaqanka ka soo hor jeeda ku dhaqaaqo. Waxa saddex ah in fidnadu aanay qofkaas ku koobmayn oo uu hawl ka dhigan doono in uu dadka hawshooda ka jeediyo si aan kalidii fadhiga loogu nacin.

Waxa ay goosteen in ay dhaqankooda waafajiyaan dhaqaalahooda oo ay noqdaan bulsho caanadhan ah, si aan waqti loogu lumin calaalis, qalliin iyo hilibcun, isla markaana ay ka caagganaadaan meesha qudh ah ee bini'aadamku dugaagga la wadaago. Waxa ay iska reebeen fadhiga,

sheekada iyo haasaawaha macne la'aanta keena. Qof waliba waxa uu gutay waajib waafaqsan da'diisa marka laga bilaabo ilmaha saddex jirka ah, taas oo horseedday nolol dallacaad iyo yididiilo leh. Inkasta oo dhaqaalaha loo qaybiyay rag iyo dumar, haddana, isla qabasho, is kaalmayn iyo wadajir ayaan meesha ka maqnayn. Taasi waxa ay keentay in cid waliba – rag iyo dumar; yar iyo weyn – nolosha kaalin muuqata ku yeelato.

Qofka xadka ka baxay waxa uu keenayaa falaad bulshada guud ahaan saameeya. Waa ta kale e, waxa fursad helaya cadawgii nolosha sida dulinka iyo dugaagga. Waxa burburaysa sharciyaddii, habkii iyo majarahii noloshu ku socotay. Waxa dabcaya hannaankii geeddisocodka. Waxa imanaya shar iyo shoocad fadhigu keeno oo marba nolosha ku soo durugta. Waxa lumaya anshaxii iyo asluubtii nolosha ilaalinayay. Dabadeedna, qofku waxa uu goynayaa xadhkihii ilaalinayay.

Waxa imanaysa waddo qalloocan iyo jahwareer dabciya mayalkii adkaa ee nolosha. Waxa lumaya isku hanweynidii iyo xishoodkii bulshada ka dhexeeyay. Waxa imanaysa ba'daye ha la ba'o. Waxa imanaysa kala furfuran iyo qof iyo tiisa. Waxa dumaya xaqsoorkii iyo xeerkii nolosha hagayay. Waxa tagaysa gobannimadii oo hunguriga ayaa loo gumoobayaa. Waxa suulaya dhadhankii nolosha, adkaysankii lagu maamulayay iyo ragannimadii dhacdooyinka waayaha lagu maaraynayay. Waxa soo kordhaya dabeecado iyo dhaqammo nolosha naafeeya.

Haddii la is dhex galo oo xadkii, xuduudkii, deyrkii iyo dhacantii ragga iyo dumarka dhex taallay burburto, macsi iyo murugo ayaa imanaysa. Waa la kala dhimanayaa oo waa la isku dhimanayaa. Haddii noloshaasi dunto meel adduunka looga dhaqaaqayaa ma jirto, waayo, noloshu ma lahayn kadin laga baxo iyo marin laga soo galo. Waxa fududaanaysa in lala dagaallamo anshaxa iyo dhaqanka suubban.

Sida aanu majaraha wanaaggu xuduud u lahayn ayaan majaraha xumaantuna xad iyo xayndaab celiya u lahayn. Haddii anshaxu lumo waxa lagu kacayaa falal keena cadho Rabbi. Waxa imanaya jahli iyo in qofku ayaandarrooyinka waaweyn sahashado oo dareenku ka maydhmo. Waxa imanaya in kalgacalka iyo wanaagga dadnimadu guuro. Waxa tarmaya fusuqa iyo faasiqa aan waxba xeerin. Waxa badanaya tuugada, dhaca iyo ficillada laga yaxyaxo. Waxa guuraysa sadadii iyo nimcadii tacabka iyo hufnaantu xayndaabka u ahayd. Dhaqanxumadu waxa ay burburinaysaa dhaqaalihii ay guusha iyo tacabku ilaalinayeen. Waxa lumaya hannaankii

noloshu ku socotay oo dhan. Ugu danbaynna, waxa imanaysa ta aynnu maanta dhex joogno oo kale.

Bulshadaasi waxa ay ahayd bulsho isku nool oo wada nool, dhaqaalihii ay haysatay xaqiisa siisay, kadibna iyadu mahadisay oo tacabkii ay galisay uga ayday. Waxa ay ahayd oo bulsho asturan, iyaduna is asturtay. Waxa ay lahayd heegan iyo heellanaan ay mabda' ka dhigatay.

Waxa ay ahayd nolol dallacaad iyo korusocoto leh oo aan meel taagnayn, waajibaadka qofka loo diraana waxa uu ahaa mid ku sargo'an da'diisa ilaa uu ta u xigta u gudbayo. Qofku isaga oo heerka uu u gudbayo xiisaynaya ayuu ta uu markaas hayo hanan jiray.

Dadku ma sinnayn. La iskuma dhex dhuuman jirin oo tartanka nolosha ka jiray ayaa lagu kala hadhi jiray. Qof waliba waxa uu la yimaaddo ama kaalinta uu tartanka ka galo ayaa wax lagu siin jiray ama lagu qiimayn jiray. Qof waliba kaalinta uu bulshada ku leeyahay iyo halka uu is dhigo ayuu ku sed qaadan jiray. Salaanta, hadalhaynta, martisoorka, kalgacalka, gogosha xariirta ah, heellanaanta iyo u-hanweynida waxa lahaa qof tiisa tu kale ku dara.

Nolosha waxa ka jiray nin ama qof la yidhaahdo *bartii yaqaan*. Waxa la odhan jiray, *"bartii yaqaan bari uma korodho."* Waxa magacaas lahaan jiray qofka tiisa ku eg ee aan ku darin danta guud. Waxa ragannimadu ku jirtay in qofku marka hore ka shaqeeyo ta guud, kadibna ta guud ta gaar laga diiro. Suurtagal ma aha in ay noloshu noqoto qof iyo tiisa, oo isku xidhnaan, wadajir, wadar iyo nololwadaag jiri waayo.

Waxa kale oo nolosha ka jiray nin la odhan jiray *geedsarewaab* oo dadka qaar ku macneeyaan qofka danta guud ka hor mariya tiisa gaar ahaaneed. Waayo, noloshu waxa ay ka kooban tahay wax la wada leeyahay iyo wax la kala leeyahay. Maangaabku magacaas *geedsarewaab* ayuu nacasnimo u yiqiinnay.

Qofku deeqaha Ilaahay siiyay keligii kuma shaqaysan jirin ee waxa uu ugu shaqayn jiray nolosha iyo noolaha. Aqoontiisa iyo lexaadkiisuba waxa ay ahaayeen kuwo ka badan wax uu isagu ku shaqaysto. Da'yarta ayuu kudayasho u ahaa oo ka dabqaadan jirtay. Hungurigu ma laha awood uu cid kale wax ku taro, laakiin hanku waa qalab danta guud iyo danta gaar labadaba loogu shaqeeyo oo aan calool kali ah u noolayn. Ujeeddooyinka

loo abuuray ayuu qofku gudan jiray. Waxa uu adeegsan jiray halhayska odhanaya:

*"Ama waa la muuqdaa,*
*Ama waa la maqan yahay."*

Bulshada aynnu ka hadlaynaa waxa ay ku guulaysatay in ay xumaanta ka fogeeyaan dhexdooda. Waxa ay dhexdooda ka reebeen fadhiga, sheeko baraleyda, beenta, wax-isdhaafinta, iskudirka, xinka, xasadka, digdig-waxkudoonka, afnacas iyo in allaale intii hunguriga la xidhiidha ama samaha, hufnaanta, tacabka, wadajirka, fayaqabka iyo dadnimada ka soo hor jeedda. Waxa ay garteen in intaas oo dhammi ay dhaawacayso caadooyinka toosan ee loo adeegsado nolosha iyo dhaqanka suubban ee in noloshu fayaqabto suurtagal ka dhigaya. Intaas oo dhan iyo in la hal ah ayay dayro ka dhigeen.

Fursadda iyo guusha waxa ay u daayeen ragannimada, tacabka, sabirka, dulqaadka, miyirka, hubsiinada, runta, iimaanka, aqoonta, adkaysanka, aamuska, xishoodka, gobannimada iyo dhaqanka ilaalinaya dhaqaalaha.

Maahmaaho, halhaysyo iyo murti maguuraan ah ayay arrintaas dhaabbad uga dhigeen. Waxa ay yidhaahdeen:

*Saxaro ul dheer baa layskaga tiraa.*

Ujeeddo: sida saxarada korkaaga iyo jidhkaaga looga ilaaliyo ayaa wax kasta oo xunna la isaga ilaaliyaa.

*Nin soori kaa qaadday waa nin seefi kaa qaadday.*

Ujeeddo: nin ama qof hunguri qaatay waxa uu la mid yahay qof isaga oo nool geeriyooday. Dulucda hoose waxa ay ina baraysaa in qofku haddii uu karaamo iyo hufnaan waayo uu la mid yahay qof aan jirin ama seef nafta lagaga jaray.

*Waan baahanahay looma bahallo cuno.*

Ujeeddo: hunguriga lagama taliyo oo sida uu doonayo looma yeelo – caloosha addoon looma noqdo.

*Hunguri wed ma arko.*

Ujeeddo: hunguri wax ka weyn la marshaa wuu dillaacaa; ka fiirso wixii hungurigaaga maraya.

*Calooshaada ceedhin looma qariyo.*

Ujeeddo: sharafkaaga wax caloosha tagaya lama dhaafsado.

*Waa la doogiye yaan la dacaroon.*

Ujeeddo: waqtiyada adadag karaamada lama iibiyo. Waayo, xumaanta samaan ayaa lagu sugaa.

*Wax aanad helayn, wax aanad u baahnayn baa laga dhigaa.*

Ujeeddo: wax aanad helayn la iskama daba rido.

*Hubsiimo hal baa la siistaa.*

Ujeeddo: miyirka iyo runta ayaa wax walba ka qaalisan.

*Iimaan Allaa uur buuxsha.*

Ujeeddo: iimaan baa lagu dhergaa.

*Nin hal baa deeqda ninna hoo baa deeqda.*

Ujeeddo: qof waxa uu kaaga raalli noqonayaa erey san oo aad ku tidhaahdid, qofna waxa uu kaaga raalli noqonayaa caloosha oo aad u buuxisid.

*Haddaan af xumaan addin ma xumaado.*

Ujeeddo: haddii waxa aad tidhaahdaa toosan yihin, gacan ama dagaal ma yimaaddo.

*Run iyo ilko ba waa la caddeeyaa.*

Ujeeddo: ilkaha waxa lagu caddeeyaa caday, hadalkana waxa lagu caddeeyaa run.

*Hadal waa run kama rays.*

Ujeeddo: hadal run ka raac.

*Hadal run baa lagu caddeeyaa mindina raawis baa lagu caddeeyaa.*

Ujeeddo: mindida lisin baa lagu caddeeyaa ama lagu afeeyaa, hadalna run.

*Qunyar socde qodaxi ma muddo.*

Ujeeddo: wax walba miyirka u adeegso.

*Hu'gaaguna wuu kula baryo tagaa.*

Ujeeddo: ninka ay maryihiisu nadiifta yihiin ee martida ah waa la jecel yahay, marka loo eego ka ay maryihiisu uskagga yihiin.

*Intii calooshu buki lahayd caytu ha bugto.*

Ujeeddo: hanbadaada feejignaan iyo fiiro ku ilaali si aan baadidoonkeedu hadhow u dheeraan.

*Haddii degdegsiinyo door dhalaan, kaadsiinyuhuna kiish lacag ah ayuu dhalaa.*

Ujeeddo: miyirka ayaa ka xeeldheer degdegga.

*Gari laba nin kama wada qosliso*

Ujeeddo: laba nin oo garramay mid uun baa garta leh.

*Booraan hadimo ha qodin ku dhici doontaana mooyee.*

Ujeeddo: haddii aad xumaan dhaqan ka dhigatid, adiguna kama badbaadaysid.

*Arrad dan baa leh uskagna doqonniimo ayaa leh.*

Ujeeddo: arradku ceeb maaha ee waxa uu ku xidhan yahay haynta, laakiin uskagga hugaaga, hoygaaga iyo korkaaguba waa doqonniimo.

*Waa la i caayay ceeb baa kaa raacda.*

Ujeeddo: afxumo ka aamus baa fiican.

*Tiisaba daryeelaa tu kalena ku dara.*

Ujeeddo: qofka tiisa hanta ayaa ta guudna u dhaafa.

*Haddaan la rogrogin rag baan helin.*

Ujeeddo: arrin waxa lagaga gun gaadhaa u kuurgal, faaqidaad dheer iyo rogrogid.

*Belaayada looma yeedho, biyaa layskaga shubaa, bisinkaa la qabsadaa.*

Ujeeddo: belaayo bisinka ka qabso ayaa fiican.

*Nin maalin ma gaadhid – ninka kaa faras fiican,*
*Ninna sannad ma gaadhid – ninka kaa gaadiid fiican,*
*Ninna weligaa ma gaadhid – ninka kaa oori fiican.*

*Hadalkaan farshaxannimo*
*Ama fiiro loo odhan;*
*Caanahaan fal qurux badan*
*Ama fiiqsi loo dhamin;*
*Wuxu yidhi nin faaqiday*
*Feedhahay wax yeelaan.*

*Hunguri wax ka weyn la marshaa wuu dillaacaa.*
*Haddii hunguri ku qaado talo ayaa lagu daraa.*
*Lax waliba shilalka ay is dhigto ayaa lagu qalaa.*
*Nin habeen ogi maalin ma hadhsado.*
*Nin aan waxa jooga garani waxa soo socda ma garto.*
*Nin fadhigaaga arka looma sare joogsado.*
*Nin weyni goor waa' beryay waa og yahay.*
*Nin reer u weyn iyo naag naag ka ummulisay midina sida uu wax u og yahay uma sheego.*
*Rag hortaada ha ka eegin, gadaashaana ha ka eegin, ee garabkaaga ka eeg.*
*Haween u sabir ama ka sabir.*
*Nin waliba kaskiisa ayuu kor tagaa.*
*Kor waayeel waa wada indho.*
*Haddaad madal timaaddo mooyaale lama noqdo.*
*Afxumo nabadna way kaa geysaa colaadna wax kaagama tarto.*
*Fari fool ma dhaqdo.*

Saddex baa rag u liita:
*Ma toshe.*
*Ma tashiishe.*
*Ma tashade.*

Saddex lalama colloobo:
*Nin caadadaada yaqaan.*
*Maalintii cagtaada yaqaan.*
*Habeenkiina codkaaga yaqaan.*

Saddex waa saddex:
*Geel xeradii waa rag ha lahaado.*
*Garow iidaankii waa gaajo ku cun.*

*Rag gogoshii waa nabad ha ku seexdo.*

Saddex waa saddex:
*Rag abaartii waa arrin la'aan.*
*Dumar abaartii waa ubad la'aan.*
*Xoolo abaartood waa ilko la'aan.*

Saddex baa rag ugu liita:
*Nin maqan oo aan la tebin.*
*Nin jooga oo aan la tirin.*
*Nin tegaya oo aan la celin.*

Saddex waa mahlako, saddex baa se u maaro ah, saddex baa se ka macaan:
*Abaari waa mahlako, caws baa u maaro ah, doog baa se ka macaan.*
*Colaadi waa mahlako, waanwaan baa u maaro ah, nabad baa se ka macaan.*
*Gudcur waa mahlako, dayax baa u maaro ah, cadceed baa se ka macaan.*

Saddex saboolnimaa leh:
*Taladaada oo aan la maqlin.*
*Tarantaada oo aan lagu farxin.*
*Tamootidaada oo aan laga nixin.*

Intaas oo murti ahi waxa ay xoojisaa ficilka iyo waxqabadka. Waxa loo kaashadaa marinka toosan iyo tubta sugan. Waa murti loo kuurgalay oo laga tuujiyay nolosha. Waxa ay dhammaantood ina tusayaan dhaqanka iyo anshaxa hufan ee karaamada, milgaha iyo maamuuska nafta lagu ilaaliyo. Haddii ay calooshu cunto u baahan tahay, naftu waxa ay u baahan tahay murti ay rogrogiddeeda ku fogaato oo ay ka dhigato qalab nafta lagu ilaaliyo, laguna guubaabiyo.

Waxa la wariyay in waqtiyadaas aynnu ka warramaynno ay habeen rag marti ahi reer u soo hoydeen. Reerka rag uma joogo ama aqalka rag ma joogo. Neef riyo ah ayaa loo qalay. Gabadh aftahammo ku jookhan ayaa hilibkii loo soo dhiibay oo waxa la faray in ay martida u geyso. Iyaga oo jiifa ayay toosisay, deetana waxa ay tidhi, *"hilibku waa riyo oo ido la'aan baa leh, waa solay oo biyo la'aan baa leh, dumar baa sida oo rag la'aan baa leh."*

Sida la sheegay, nin ayaa waagii aqoonta raadinteeda dhulalka fogfog loogu kicitimi jiray maqlay in nin Ilaahay xikmad iyo aftahammo ku mannaystay uu meel Nugaal ka mid ah ku nool yahay. Waxa dhacday in ninkii u tacjiilay uu ninkii iyo reerkiisii muddo haybinayay. Wax uu socdaba, maalin danbe ayuu ninkii helay. Waxa uu u yimid isaga oo meel xaraar ah fadhiya oo dhulka xarxarriiqaya. Garo oo, waayadii hore haddii la arko ninka oo dhulka xarxarriiqaya, waxa la odhan jiray ama talo ayuu ka deyayaa ama aqoon ayuu faaqidayaa. Ninkii oo dhulka ku foorara ayuu isa soo dul taagay. Hal cabbaar ah ayuu ninkii meeshii taagnaa, iyada oo ninkii loo yimidna aanu dareensanayn in cidi dul taagan tahay oo maankiisuba meel ku maqan yahay.

Mar danbe ayuu ninkii socotada ahaa la hadlay ninkii uu u soo safray. Wuu salaamay. Salaantii ayuu kii kalana ka qaaday. "Soo fadhiiso," ayuu ku yidhi. Sidii buu yeelay. Cabbaar baa la is waraystay. Mar danbe ayaa ninkii socotada ahaa yidhi, "sow ninka caynkaas iyo caynkaas ah ma tihid?" "Haa, waan ahay," ayuu ku jawaabay. "Meel dheer ayaan ka soo kicitimay, warkaaga iyo magacaaga ayaa la igu daaliyay," ayuu ku yidhi. Wuu ka guray.

Wax uu hadalku socdaba, ninkii socotada ahaa waxa uu ninkii kale ku yidhi, "saddex iiga warran: dal halkee ugu wanaagsan, duunyo tee ugu fiican, dadna yaa ugu roon?" Ninkii jawaabo ayuu bixiyay. Waxa uu yidhi, "Dal Nugaal baa ugu fiican, duunyo geel baa ugu roon, dadna tolkaa baa u wanaagsan." Ninkii socotada ahaa ayaa ku qancay jawaabaha laga siiyay su'aalihiisii, ninkiina u mahadnaqay. Waxa uu raaciyay, "awelba sidaas ayaan filayay." Wuu ka kacay, kadibna wuu dhaqaaqay.

Markii uu ninkii socotada ahaa dhawr tallaabo qaaday ayuu ninkii xidaarka ahaa u yeedhay. Waxa uu ku yidhi, "soo noqo, soo yara fadhiiso. Waxa aan beejinayay ama bilkeedayay caqligaaga. Wax lama aad kicin e, bal mar kale i dhegayso: *Dal waxa ugu fiican halkii Alle kugu badbaado yeelo, duunyo waxa u fiican tii Alle kuu barakeeyo, dadna waxa ugu fiican kii Alle kuu sakhiro.*" Garasho waa taas. Waa cashar mudan in maalmo shaqo laga dhigto, maanka iyo maskaxdana, qado iyo cunto looga dhigo.

Sheekadaas xeesha dheer bal aan raaciyo mid u dhiganta oo ka turjumaysa noloshii aan soo gaadhay. Sebaanno hore waxa la sheegay in nin la odhan jiray Ganbool oo u dhashay gobollada Buntlaand uu markhaati u haystay in uu ahaa ninka la yidhi Soomaali wuu ugu run badnaa.

Soomaalidu waa dad layaab leh. Ninkaa is caddeeyay ee runta looga maragfuray ayay warka runsheegnimadiisa ku qanci weyday oo waxa ay yidhaahdeen aynnu xujaynno oo sii hubsanno in uu yahay ninka Soomaalida ugu runta badan iyo in kale.

Meel Buntlaand ka mid ah ayaa waqti gaar ah loo ballamay si runtiisa loo bilkeedo. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa goob ku habboon ujeeddada waxa laga shiday dab oog ah. Dusuud waaweyn ayaa la dhigay, dibi gool ahna waa lagu xidhay. Goobta ama jidku waa mid Ganbool caado u leeyahay in uu soo maro marka uu subaxdii gurigiisa ka yimaaddo.

Ganbool waqti la isla og yahay ayuu meeshii soo maray. Waxa uu arkay dibiga meesha ku xidhan, dabka shidan iyo dadka tuban ee mindiyaha lisanaya. Waxa uu isha ku dhuftay abaabulka meesha ka jira, wuuna soo dhaafay.

Meeshii loogu tashaday in runtiisa lagu bogdooxo ayuu isa soo taagay. Kulankii ayuu salaamay. Waa laga qaaday, waxaana lagu casuumay in uu goobta soo fadhiisto. Markii uu si fiican salka u dhigay ayaa su'aal loola kacay Ganbool. Waxa la su'aalay halka uu ka yimid. Waxa loo raaciyay jidka aad soo martay meel ka mid ah ayaannu maqalnay in Allabari ka jiro ee bal ka warran.

Ganbool waxa uu hadal ku soo koobay, "meesha aad sheegaysaan ee aan soo maray, dibi waa xidhnaa, dabna waa shidnaa, dadna waa tubnaa." Ganbool tubtii lagu yiqiinnay ayuu maray, runtii looga bartay ayaanu ku jawaabay. Malaha ninka ama qofka aan isaga ahayni waxa uu odhan lahaa meeshaas Allabari ayaa ka jiray marka loo eego abaabulka iyo dheryaha dabka saaran iyo mindiyaha la lisanayo.

Dhinaca kale, waxa la sheegay in nin waayadaas noolaa uu ka seexan waayay nin magaciisa la dhigi waayay oo aad looga warrami jiray geesinnimadiisa iyo sabirkiisa. Ninkaasi waxa uu ku noolaa meel ka durugsan beesha had iyo goor lagu hadalhayo. Waa nin daaliyay dhegaha dadka, laakiin cid shishe u garanaysaa ay iska yar tahay.

Nin ka mid ah dadkii uu ninkaas warkiisu ku batay ayaa waxa ku cuslaatay kahadalka ninkaas. Dabadeedna maalin maalmaha ka mid ah ayuu goostay in uu ninkaas ka wardoono, waayo, ma uu filayn in arlada nin isaga la mid ahi ku nool yahay.

Subaxdii danbe ayuu halo dhalay soocday si uu ugu sii jidmaro. Waxa uu is tusay in uu beesha ninka lagu sheegay u kicitimo, ninkaas soo arko, in muddo ah la soo noolaado, soona shirrabo geesinnimada iyo astaamaha kale ee lagu sheegay.

Maalmo kadib ayuu ninkii beeshii dhex yimid. Waxa uu toyday ninkii uu u socday. Gurigiisii ayaa loo tilmaamay, ugu danbayntiina ninkii la sheegayay ayay kulmeen. Waxa uu u sheegay in uu meel durugsan ka soo kicitimay. Waxa kale oo uu u sheegay in uu u socday bal in uu wax ka korodhsado. Waxa uu ugu daray in uu halo dhalay wato, muraadkiisuna yahay in uu in muddo ah la joogo, si uu ragannimada ninkan lagu sheegay ugu kuurgalo.

Intaas kadib ayuu ninkii loo socday yidhi, "adeer, waxba geel dhalay ha igu dul maaline, si fudud baan kuu qancinayaa. Farahaaga, farta murdisada la yidhaahdo ii dhiib, adna tayda hoo. Taada waan raamsanayaaye, adna tayda waxba ha ula hadhin."

Hawshii ayaa la bilaabay. Nin kasta fartiisu ninka kale afkiisa ayay ku jirtaa. Waa la is ruugayaa, indhahana waa la isku gubayaa. In muddo ah haddii la isku maqnaa oo nin walba malaha xaaladda uu ku jiraa ay adag tahay, laakiin nin waliba libta doonayo oo uu intii karaankiisa ah adkaysanayo, ayaa mar danbe ninkii socotada ahaa qaylo oodda ka qaaday. Waxa xigtay, "waar i sii daa... waar i sii daa."

Wuu sii daayay. Waxa uu u raaciyay, "xilahay furan, haddii aad waqti yar oo kooban sii adkaysan lahayd, aniga ayaa qaylin lahaa." Haddii aad ragannimo maqasho waa intaas. Waa iyada oo uu qofku adkaysi kaga guulaysto qof kale. Waa guul laba dhinac dhex taal, waxaana jabay, hadba dhinaca qaylada ku horreeya. Waayo, waxa Ilaaheennu ina faray in aynnu sabirka weheshanno, xaalad kasta oo aynnu ku sugan nahay.

Ducaale Dhagaxey[10], Alle ha u naxariistee, waxa uu ka mid yahay kolleyba aniga inta uu murtidooda maankayga iyo miyirkayguba qaadi waayo. Waxa uu ahaa nin suugaanta iyo aftahammada ku caan ah oo ay aftahammadiisu laacdo. Been ma aha! Murtida raggaas uu Ducaale ka midka yahay awgeed, mar mar baan dhabanka gacanta ku illaawaa.

[10] Ducaale (AHN) waxa uu ahaa aabbihii dhalay Alle ha u naxariistee fannaanad caan ahayd oo magaceeda la odhan jiray Saafi Ducaale.

Murtidiisa caanbaxday waxa ka mid ah heesta la magacbaxday *Toban toban hal baa dilay*. Bal aynnu soo bandhigno, faallana raacinno:

**1.** *Hurdo doonyahaa dilay.*

Waa arrin dhab ah. Doonnida safarkeedu raaxo ma laha. Waayo, laguma gamo' guradeeda oo mawjadaha badda ayaa marba dhinac u ruxa.

**2.** *Faras nimaan hundo aqoonoo,*
*Heensihiisa garanaynoo,*
*Kolba hees u qaadaynoo,*
*Iska halabsadaa dilay.*

Farasku waxa uu leeyahay hab iyo hannaan loo fuulo. Dhoorka ayaa la taataabtaa, waa lala hadlaa oo waa loo heesaa. Ul iyo jeedal lama taabsiiyo oo dhexdiisa lama dhacadiidsado. Labada rakaar ayaa fardafuulku isku taagaa.

**3.** *Lo'da nimanka hawd geeyee,*
*Ku harraadiyaa dilay.*

Lo'du waa nugul oo meel aan biyo lahayn kuma gasho.

**4.** *Hilibkana Buraanliyo,*
*Tuug haayiraa dilay.*

Hilibku waayadii hore waxa uu ahaan jiray xubno waaweyn, sida leg, jeenni, awlal, lug iyo wixii la mid ah. Waqtigii magaalagalka waxa soo baxay nin Buraanle la odhan jiray oo xubnihii waaweynaa ee sidaas aynnu soo sheegnay ahaan jiray googgooyay oo ka dhigay waslado aan magac lahayn. Tuuggu na, haddii uu neef xado oo uu buuro dhexdood la galo, inta uu is leeyahay yaan lagu soo gaadhin ayuu haragga iyo cadka isku jarayaa.

**5.** *Hayin aqal xun baa dilay.*

Awrku waayadii hore ama gurgurshaa buu ahaa ama surrad. Ka hayinka ah, gurgurka (weelka), ubadka iyo maqashaa la saari jiray. Awrka kale surrad buu ahaa oo duubashada iyo hararadaa la saari jiray. Laakiin sida maanta jirta, haddii baco, kilaadhi iyo caagado la saaro oo uu nin caqaar cunayaa hoggaamiyo, awrku wuu dhimanayaa.

**6.** *Geela hud iyo gawraar,*
*Ragga ku haya baa dilay.*

Waa arrin dhab ah oo geelu meel aan bannaan ahayn oo geed san lahayn oo buuro dhexdood ah kuma galo.

*7. Hanbo sii hudh baa dilay.*

Sooryada si xarrago leh oo hufan ayaa loo cunaa. Lama wada farafareeyo. Dhinacyada ayaa laga galaa. Laakiin haddii dhan walba ay faruhu gaadhaan oo marba aad dhinac u tallawdo ama aad is tidhaahdo bal intanna ruji, sooryadii way dhimanaysaa.

**8.** *Hablo nimaan ku toosaynoo,*
*Casarkii isu hunbula'oo,*
*U hagoogta laba suuf oo,*
*Haasaawiyaa dilay.*

Habluhu waqtigii hore inta badan waxa ay ku mashquuli jireen hawlo ku saabsan mustaqbalkooda. Geedka galoolka la yidhaahdo ayay diiran jireen, si ay xadhko rarada lagu sameeyo uga soohaan. Habluhu dhinaca kale waa calafdoon. Laakiin haddii aad u timaaddo oo hadal u godasho waxa laga yaabaa in ay waqti yar ku dhegaystaan si ay ujeeddada u helaan. Haddii se aad kala dhammaan weydo diin god gal, god goray gal; maalinta danbe hadal kaa guri maayaan.

*9. Hadalna sii dheh baa dilay.*

Hadalka waa loo baxaa, waa laga bogtaa, kadibna waa la dhigaa. Laakiin haddii aad marba tidhaahdo, iminkana mid aan illaaway baan ku darayaa oo aad soo noqnoqoto, ujeeddadu way dhimanaysaa. Intaas oo dhan iyo hawraarahaasiba waxa ay dhaliilayaan hadalka aan sida quruxda badan loo odhan iyo hawsha aan sida quruxda badan loo qaban ee looga jawaabo si aan run ama xaq ahayn. Waa muraaddo aan sidii ku habboonayd loo fulin ama meeshii ku habboonayd lagu fulin.[11]

Noloshaasi ma ahayn nolol curyaan ah oo fadhiid ah. Ma ahayn [illegible] waagii beryaaba kii hore la mid yahay oo aan marba xiise cusub iyo dhadhan kii hore ka xeeldheer la soo baxayn. Waagii beryaba arrin baa kordhaysay, aragtida ayaana sii ballaadhanaysay. Ereyo murti leh ayaa dhalanayay. Nolosha ayaa marba marba ka danbaysa sidii hore ka sii xeeldheeraanaysay, kana sii qurux badanaysay. Seben walba ged iyo awaal

[11] Ta tobnaad ma sheego sababo anshax oo jira awgood.

cusub ayaa loo gudbayay. Xeeldheerida nolosha iyo sureerkeeda ayaa qofka hammo cusub iyo dardar sii galinayay. Maalin walba aftahammada iyo awaasha dhalanaysay ayaa qofka indhihiisa hor kacayay. Marka uu tii hore ka xiise dhacaba waxa ay noloshu ku lahayd tan cusubna hoo!

Wararka noloshii shalay ee miyigii iyo ummaddaas xooladhaqatada ahayd laga weriyaa waa kuwo waafaqsan karaamadii Ilaahay bini'aadamka ku galladay ama ku mannaystay. Waxa laga yaabaa dhacdo waayadaas ah haddii laga sheekeeyo in qofka goobjoogga ka ah ay maalmo, bilo iyo sannado sheekadaasi ka hor dhaqaaqi weydo oo uu marba dhinac iska taago, kadibna uu la yaabo ummaddaasi sidii ay nolosheeda u qaybisay ee u kala dhigdhigtay. Dhacdo kasta iyo miilo kasta waxa ay u qaabaysay si aqoonta iyo awaasha waafaqsan.

Waxa ay ahayd nolol horumar iyo dallacaad ku salaysan oo qofku u kala gudbo heerar is daba yaalla. Waxa ay ahayd nolol aanu qofku afartan jir gaadhin isaga oo taagan halkii uu labaatan jirkiisii joogay. Waagii beryaaba waayo leh ayay noloshu ahayd. Xilli walba qofku da'diisa ayuu u ekaa oo waxa uu u gudbayay xil cusub. Ummadda aan ka sheekaynayaa waxa ay ahayd ummad noloshu u qorshaysan tahay oo xilli walba summad u yeesha. Quruxda qofka iyo mar walba sawirka uu yeelanayo ayay murti ku sheegeen. Da'da ayay qaybiyeen. Waxa ay u qaybiyeen si xeeldheer oo aan hortood cidi u qaybin. Waxa ay yidhaahdeen:

- Laba jirka ilaa labaatan jirka haddii aad qalqaallinimo ka weydo, ka sabir: Waxa ay sheegeen in qalqaallinimada xilligeedu yahay da'daas aynnu sheegnay, si aanu qofku isaga oo weyn qalqaalli u noqon ama aanu fudayd iyo duulduul ula iman. Marka uu da'daa yahay waa in uu lahaadaa dardar, diirdiirranaan, iyo qalqaallinimo; waa in uu wax jebiyaa, wax jiidhaa, wax dakhraa, oo laga soo cawdaa. Waa in uu jiidhjiidhka iyo boodboodka da'daas ku dhammaystaa.
- Soddon jirka haddii aad xarrago ka weydo ka sabir: Xilligaasi waa xilliga quruxdu tahay xarragada, is cajabinta iyo is daawashada. Waa waqtiga uu hablaha isku soo bandhigayo. Laakiin, isaga oo soddon jir ah haddii uu naftiisa iyo korkiisaba ilaalin waayo oo uu bawdyaha duufka marsado, macne ma laha ee ka sabir.
- Afartan jirka ilaa konton jirka haddii aad xoog ka weydo ka sabir: Xilligaasi waa xilliga ay quruxdu tahay xoogga ee uu qofka xooggiisu

buuxsamo. Marka uu da'dan yahay waa in uu ninku waraabka laliyaa wadaan saan biciid ah. Kontonka marka uu qofku dhaafo waxa loo yaqaan xilliga uu faganka xooggu bilaabmo. Waa xilliga xoogga qofku daaddego, is dhimo ee aan wax ka dhaca mooyaan e waxba ku soo kordhin.

- Lixdan jirka ilaa toddobaatan jirka haddii aad geed ka weydo ka sabir: Quruxdu xilligan waxa ay ku jirtaa aqoonta, waayo'aragnimada, sabirka iyo dulqaadka. Marka uu ninku da'dan joogo haddii uu noqon waayo waxgarad garyaqaan ah oo geedka loogu yimaaddo; haddii uu dadka is qabta aqoon iyo sabir ku kala saari waayo, haddii marka uu joogo lagu soo xoomi waayo, wax laga korodhsan waayo, oo wax laga gunti waayo, haddii uu taariikhayn waayo oo da'diisa faca weyn aqoontiisu u dhigmi weydo, oo uu aftahammo, odhaaho, halhaysyo iyo meexaane lala yaabo soo bandhigi waayo, haddii marka uu tegayo la celin waayo oo la odhan waayo waxa jira muraaddo aan kaa maarmayn; haddii marka uu maqan yahay la tebi waayo, la xusuusan waayo, lana hadalhayn waayo, oo uu geyiga caan ka noqon waayo, isaguna naf ma laha ee ka sabir.

Bidaarta, cirrada iyo gadhka weyni da' keli ah ma sheegaan. Waxa ay astaan u yihiin aqoon iyo waayo'aragnimo. Waxa la sheegay in magaalada Burco waqti waqtiyada ka mid ah ay laba nin isku qabsadeen. Waxa ay isku sheeganayeen lacag. Inta badan labada qof ee wax isku sheeganayaa ma kala baxaan haddii la waayo dhinac saddexaad oo kala saara ama arrinta soo dhex gala.

Labadii nin markii ay kala bixi waayeen ayaa waxa ay arkeen nin gadh weyn oo derbi ka soo hor jeeda taagan. Waxa ay go'aansadeen in ay ninkaas u tagaan oo ay aqoontiisa iyo waayo'aragnimadiisa ku kala baxaan. Ninku intii ay labada nin murmayeen wuu dhegaysanayay. Laakiin ma hayo shuruudihii lagu kala saari lahaa, sidaas ayaanu isugu dayin inuu u tago oo aanu u kala saarin.

Si kastaba ha noqoto e, markii ay xaggiisii u soo dhaqaaqeen ayuu ku yidhi, "*gadhku gadhkaad mooddeen ma aha ee iskaga jooga.*" Sidaas darteed, waxa la diidayaa in ninku isaga oo da'daas ah oo aan nolosha aan waxba ka guntin uu ummadda bilaa macne ku dhex joogo.

- Toddobaatan jirka ilaa siddeetan jirka haddii aad tusbax ka weydo, isaguna naf ma laha ee ka sabir: Waqtigaasi waa waqtiga ninku inta uu wax dhalo, waxna dhaqo, uu cibaadada u gacanbixi jiray. Waxa uu odhan jiray *mugga hor Allaan u jeedsanayaaye waydinkaa.* Waayo, ubadkii uu dhalay ayuu u tababaray in ay kaalintooda iyo xilka ay la wareegi doonaan hanashadiisa ku filnaadaan. Da'daas waxa lagu yaqaan Alle-kacabsi, werdi, waano iyo kahadalka aakhiro iyo axwaasha ka jirta. Waxa lagu yaqaan duco, dardaaran iyo in uu dadka geerida xusuusiyo. Haddii isaga oo da'daas jira uu hor Alle u jeedsan waayo, oo aad gacantiisa tusbax ka weydo, garabkiisa masallaha lagu tukado ka weydo, gacantiisana weyso ka weydo – isaguna, *dhulku la go'* macno ma laha ee ka sabir. Haddii isaga oo da'daas jira lagu arko ficilkii iyo falaadkii lix jirka, naf ma laha ee ka sabir.

Waxa aynnu ka sheekaynaynaa cimriga dadka iyo in mar walba hawsha ama xilka uu qabanayaa waafaqsanaato da'diisa.

Bulshadaasi waxa ay ahayd bulsho wax la cuno ka hanweyn oo ku raaxaysata hawsha, tacabka, socodka, orodka iyo tabantaabada. Intaasi waxa ay hor taagnayd werwerka, murugada, cabsida, baryada iyo quudhsiga.

Xoolihii ay dhaqanayeen markii birta bahalnimada ee gawraca laga daayay, tarantoodii dhulka iyo xeryaha ayay cammirtay. Carradaa qaadi weyday, kadibna taranta, tayada iyo bilicda xoolaha ayaa hiyiga iyo indhaha deeqay (indhaha ayaa lagaga dhergey) oo iimaanka xasiliyay. Markaas ayay yidhaahdeen:

*"Allow na astur iimaanku waa, aragga xoolaha e."*

Tirada iyo taranta xoolaha waxa ka hor jeeday taranta dadka. Mar haddii dadku dhinacooda iska xidhay albaabkii hunguriga oo maalin oo dhan tuban yahay, taagan yahay, kuna fooggan yahay xoolaha tirada badan ee birta laga ilaaliyay, goor danbe oo caweys ah ayay dadku xoolaha soo xarayn jireen (gaar ahaan geela), iyaga oo gataatidhac ah, aadna ugu baahan in ay dhabarka dhulka la helaan. Sidaas darteed ayay u dhici jirtay in aan la isba haleelin oo cidiba aanay is hungurayn. Arrimahaasi waxa ay keeneen in ay galmada u kaltiriyaan oo sababo u cuskadaan.

Dhinaca kale, ujeeddada ugu weyn ee galmadu ma ahayn hunguri ee waxa ay daarranayd: in nolosha loo helo ubad xoojiya oo waxa la qabanayo kaalin ka qaata, in aan la iska illaawin oo aanay hammaduba sidaas ku dhiman, iyo in aan beerta iyo tarantu gabaabsi noqon.

Sidaas darteed waxa ay galmada u yeeleen sababo la cuskado: ugu horrayn, waa in ay sababta koowaad noqoto oorida oo caado ama dhiig ka maydhatay.

**Xiddig:** habeenka la baxay xiddiggu waa habeen amran oo la sheego in qofka calool galaa noqdo qof bili iyo burji leh. Haddii uu wiil yahay, waxa uu noqdaa inangolyeed gaadaale ah oo badiba astaamaha ragannimada huwan.

**Xiise:** habeenkani waa habeen muddo la kala maqnaa oo uu ninku safar ama socdaal ka soo galay. Waa habeen ka mid ah habeennada amran ee ay labada ruux xiise ku kulmaan, maadaama ay muddo kala xidhnaayeen.

**Xaal:** habeenkani waxa uu yimaaddaa, marka uu ninku gabadha yara dhirbaaxo, kadibna intaas ayuu xaal uga dhigaa, si cadhadu uga jabto.

**Xurmo:** habeenkani waxa uu yimaddaa marka iyada oo gabadhu reerkoodii muddo ku maqnayd (dhibaad u doonatay) ay soo laabato ee ay timaaddo iyada oo la gelbinayo oo xoolo mood iyo noolba leh la soo siiyay.

**Xujo**: waa ooridaadii xalaaleed. Waa iyada oo habeen ku xujaysay oo kugu soo yara galgalatay.

Galmada, inkasta oo gabadhaada ama ooridaadu mar walba kuu xalaal tahay, haddana bulshadaasi arrin walba sababo iyo ujeeddooyin ayay u samayn jireen.

Sidaas ayay u gaadheen in ay xataa galmada sababo iyo xiise la isu qabo u yeelaan, si aanay u noqon hunguri, biyo batalaq iyo iskeensii. Waxa ay sidaas u yeeleen in labada qof kulmaan iyaga oo aad isugu xiisaqaba, muddo dheerna tacabku kala xakameeyay. Waxa looga jeeday in aan labada ruux kala xiisadhicin oo aanay isku ilbixin. Waxa ay uga jeedeen in labada ruux isku hanweynaadaan oo aanu hungurigu tacabka u carshacarshayn, ujeeddada noloshana u naafayn.

Arrintani waxa ay salka ku haysaa duluc xididdadeedu aroorsan yihiin. Waqtigaasi maanta ma aha ee waqtigii hanka iyo hibada. Waa waqtigii anshaxa, hufnaanta, milgaha iyo maamuuska.

Sheeko ay maadi ku jirto oo aan maqlay ayaa odhanaysa: haweenay aan sidaas u sii weynayn ayaa gabadh gashaanti ah oo ay dhashay la doonay. Ninkii inanta guursaday waxa uu doonay in uu reerka la dego oo uu inanlayaal noqdo. Habeenkii lala aqalgalay ayay inanta hooyadeed u yeedhay ninkii ay soddohda u ahayd, kuna tidhi, "aniga iyo inantaydu laba kildhi oo biyo ah aroortii isla daba gali maynno oo keynta isku raaci maynnee, naag kale raadso."

Majaraha ay noloshu raacaysay waxa hagayay *falsami, farshaxan, xeeldheeri iyo aftahammo.* Afartaas erey haddii la macneeyo, waxa ay salka ku hayaan:

**Falsami:** in wax kasta oo la qabanayo loo qabto si qurux badan oo qofka qabanaya xiisagalinaysa. Si taasi run u noqoto, waa in qof waliba shaqada uu qabanayaa noqoto mid uu hibo gaar u leeyahay ama uu aqoon iyo waayo'aragnimo khaas ah u haysto.

**Farshaxan:** in wixii la qabanayo la dheeho, la xardho, dun iyo maydhax midabbo leh lagu qurxiyo, sida harrarka ama shaqalka qurxiye lagu taxo.

**Xeeldheeri:** in wixii la odhanayo horraanba laga fiirsado. Waa in miyir iyo si deggen loo yidhaahdo. Majaraha ay raacaysaa, waa in uu noqdaa ereyo xulan, taxan, oo dhacdooyin iska daba tagaya raacaya. Waa in si xeeldheer oo hiyikac leh loo taxo ama talantaalli la isaga daba geeyo. Waa in ay been iyo buunbuunin ka madhan yihiin. Waa in ay afgobeed iyo hawraarsan salka ku hayaan oo aan hadalka la iska odhodhan ee la abla'ableeyo ama la dhigdhigo.

**Aftahammo:** waa in waxa la odhanayo halab iyo hagoog loo yeelo. Waa in aan odhaahda la dheerayn oo aan lagu rafan. Waa in uu yahay abbaar kooban oo qofka dhegaysanayaa marba dhinac iska taago. Sida maxay? *Waayeelka hadalka waa loo saraa ee looma saafo.*

Wax kasta oo la qabanayo waa in si qurux badan loo qabtaa. Marka wax la cunayo ama caano la dhamayo, iwm, waa in si qurux badan oo digtooni huwan lagu fushadaa.

Maadh'dha oo ah xadhko roobka, cadceedda, dhaxanta iyo dabaysha laga dugsado mar baa dun lagu taxay oo uu la baxay *saddexle*. Mar buu *shanle* ahaa oo shan diillimood oo dun ah uu lahaa. Mar buu *toddobaale* ahaa. Waxa uu noqday *googgoos*. Waxa uu noqday *iskujoog*. Waxa uu noqday *waaxyaale*. Waxa uu noqday *indhadaalis*.

Markii hadal ka tagay hadal qaawan oo qayaxan waxa uu isku rogay *afgobaadsi*. Muddo kadib ayuu u guuray *sarbeeb*. Muddo ka danbaysay waxa uu noqday *sogordoh*. Muddo kadib waxa uu noqday *sandah*. Muddo kadib ayuu noqday *duurxul*. Waxa uu u gudbay *halxidhaale*.

Nolosha quruxdeeda iyo qaayaheedu waa ay wada socdeen oo waa ay isla jaanqaadayeen. *Hadalow ninba si kuu yidhi, hawraarayna ninba si kuu qaaday*. Mar walba aqoonta ayaa sii kordhaysay. Marka ay sii korodhaba, qurux ayaa u sii kordhaysay. Mar walba iyo si walba, nolosha iyo abuurta ayaa ahayd macallin bini'aadamka wax bara. Aftahammada waxa dhalinayay: xeeldheerida nolosha iyo hibada qofka ee nolosha ka hadlinaysay. Dhacdooyinka nolosha ayaa mugga waayaha samaynayay.

Marka laga reebo dagaallada oo iyana sababahooda lahaa, wax dhalliil ah bulshadaasi waxa ay lahayd mid keli ah oo la yidhaahdo saxaro. Saxaradana, marka qofku meeshii ka kaco, waxa la fuqi jiray xaarwalwaal ama waxaa cuni jirtay xuunsho. Bal cabbaar is dul taag sida bulshadaa Ilaahay u asturay.

Xeerka noloshu waxa uu ina barayaa in aanay dadku isku xigin sida ay u wada dhasheen. Waxa ay isku xigaan sida ay isugu dhaqan yihiin ama dano u wadaagaan. Sidaas darteed, bulshadaas dhaqaalahooda isku midka ah ayaa suurtagal ka dhigay in dhaqankoodu isku mid noqdo.

Hubaashii, bulshadaasi waxa ay xadhko bir ah iskaga xidhay baahida hunguriga iyo nacasayntiisa aan xuduudka lahayn ee qofka ku daaliya keen...keen...keen. Hanka iyo hanweynidu xoogga iyo quwadda ay leedahay ayay adeegsatay. Waxa ay ku adkaysatay in ay nafteeda iyo guud ahaan nolosha ku asturto is ilaalinta, dhowrsoonida iyo darbanaanta.

Qofba qofka uu ka hanweyn yahay wuu ka ragannimo badnaa, wuuna ka tacab badnaa. Qofba qofka uu ka hanweyn yahay wuu ka miigganaa, ka mayal adkaa, kana waxtar roonaa. Ereyada ay ka tidhi hanka iyo hunguriga ee aynnu soo marnay iyo xeedhyaha buuxa ee murtida iyo halhaysyada hogatusaaluhu dhaamiyay ah ayaa markhaati ka ah heerka noloshu ka

gaadhay iyo qalabka u suurtagaliyay guushaas hanku dhisay ee hunguriga ka caagganayd.

Geeddigaas abaabulan muddo dheer ayaa mayalku u dhiibsanaa oo xilliba xilliga ka danbeeya, aqoonta, ragannimada, miyirka, hubsiinada, tacabka, anshaxa, iimaanka, iyo aftahammadu sii ballaadhanayeen; oo hanka, hiyiga, iyo sureerka nolosha lagu maamulaa sii miirdillaacayay. Wax ay xeelli socoto oo tusmooyinka iyo togashadu sii tisqaaddaba, noloshaasi waxa ay gaadhay figta iyo tookha aanay dhaafi karayn. Waxa iska caado ah in noloshu marka ay gaadho heerka aanay dhaafi karayn ay soo daadegto, waayo, wax waliba waxa ay leeyahiin xad iyo xuduud hor joogsada.

Noloshaasi waxa ay u gudubtay in ay markii danbe si gaabis ah u soo daadegto, waqti dheer ayaanay qaadatay in ay timaaddo ama soo caga dhigato halka ay maanta joogto. Ilaa maalintii gumaysigu carriga yimid, maalin walba waa ay sii fagmaysay, waanay sii gurmaysay. Gumaysigu waxa uu sabab u ahaa daaddeggii nolosha.

Sharciga noloshu waxa uu odhanayaa marka taasi dhacdo waxa la filaa in noloshu muddo dheer oo ku beegan muddadii ay figta ku tagtay ay laba midkood dhacdo: in ay mar labaad melmelato oo ay figtii abbaarto. Haddii ay taas ahaan weydo ta la filaa waa in quruuntaas la rogo sidii dhici jirtay. Waayo ayaanka iyo ayaandarrada, fanashada iyo daaddegga labaduba waxa ay ka dhacaan camalka iyo ficilka bulshada.

## Garsoorka

*Gole miiggan, geed sheegan iyo, garangar muunaysan,*
*Gudban iyo cod laba gees ah iyo, guurti kala soorta,*
*Garnaqsiga mudducigoo tashiga, goonni uga shawray,*
*Geda labe maddaacaley hadloo, dhaabad ba'an geystay,*
*Kala gurasho meertiyo rogaal, la isla guurguuray,*
*Maahmaaho wada guuna iyo, gabayo raacraacay,*
*Guddoon dhacay hubaal iyo go'aan, laysku gacanqaaday,*
*Shan god oo murtidu leedihiyo, gororka suugaanta,*
*Gedda hadalka loo ruga gashiyo, marin gobaadeed dheh.*[12]

[12] Gudgude, 1990.

Ummadda aynnu ka hadlaynaa, jidka dheer ee ay nolosheeda ku sugtay si la mid ah ayaa garsoorkeeduna uga mid ahaa tiirarka isku dubbaridka iyo isku dheellitirka nolosheeda. Sidii nolosha quruxdeedu geeddi dheer u qaadatay ayuun baa garsoorkuna ula jaan qaaday. Sidii ay wax walba ugu baadidoon tagtay, ugu kuurgashay, una faaqidday, ayuun buu garsoorkeeduna u ahaa tiirka ugu culus nolosheeda, kadib markii ay dhadhamisay qadhaadhka caddaalad-darrada iyo eexda.

Waxa maqal igu ah sheeko caan ah oo ku saabsan nin beri hali ka luntay. Waqtigaas nolosha ayaa geela ku dhisnayd. Hasha daba socodkeeda iyo baadidoonkeeda ayaa dheeraan jiray oo taranteeda ayaa la mid ahayd kadin geel ah. Keligeed hashu macne weyn ma laha, haddii aan tarantu macne u yeelayn.

Ninkaasi baadidoonka hashaas sibraar ayuu caano ugu shubtay. Jiho loogu sheegay ayuu cagta saaray. Sida la sheegay beryo ayuu ninkii hashii baadidoonkeeda ahaa oo uu marba uu tibaax iyo tilmaan ka helayay. Muddo ayuu marba beel ka dhex yaboohinayay. Wax uu marba meel ku guulaba, sannado kadib ayuu dul yimid geel loo sheegay in ay hashu ku jirto iyo reerkii ay waqtiga dheer hashu maganta u ahayd.

Waa goor barqo ah. Geelii hashu ku jirtay ayuu soo dhex maray. Hashii ayuu isha ku dhuftay oo gartay. Hashu dhawr sannadood ayay baadi ahayd oo taran ayay yeelatay. Tolkii ma dhex joogo, geelana cid si fudud u bixisaa ma jirto. Intaasiba isaga kama maqna.

Soomaalidu beryahaas waxa ay ka shirtay geela iyo arrimihiisa. Waxa ay is weyddiisay su'aal odhanaysa, "Geela maxaa inooga xeer ah?" Dood dheer kadib, waxa ay beelihii waagaasi ku heshiiyeen, "*Geelu habeen walba waa ninka u xoog roon iyo xerada uu ku jiro.*" Go'aankaas waxa markhaati u ah tuducyadan hoose oo ka mid ah gabaygii caanka ahaa ee geela[13]:

*"Xulafooyinkii horaba way, kala xabbaadhaane,*
*Xasan iyo Xuseen baa ogaa, xeer uu leeyahaye,*
*Xinkii Dheeha lagu gawracaan, xiisaddii hadhine,*
*Sayidkii Xadeed iyo fadhiyay, xarun Daraawiishta,*
*Xaafidal-Qur'aan buu ahaa, soo xejiyay dhawre,*
*Isagaba xaq iyo baaddil waw, kala xarriiqnaaye,*

[13] Waxa curiyay Gabayaagii Faarax-Laanjeer (AHN).

*Xaaraan hadduu yahay fardaha, kuma xabbaadhaane,*
*Haddii laygu xidho geelu sow, xubin rageed maaha."*

Markii uu hashii indhaha saaray ayuu u yimid geela hashu ku jirto raggii lahaa. Waa wiil barbaar ah iyo aabbihii oo geed fadhiya. Salaan kadib, la is haybsay, la is waraysay, ninkii baadidoonka ahaana muraadkiisii sheegay oo lammaankii is dhalay u afbax.

Waxa uu ka sheekeeyay muddada dheer ee uu hasha daba joogay iyo inta uu ku jiray baafinta haybinteeda, hawsha socodkan ka qabsatay, in uu ka yimid dhul dheer iwm. Waxa ay ku yidhaahdeen, "hasha tilmaan." Waxa uu dhigdhigay hasha summaddeeda iyo baadisoocdeeda. Waxa uu sheegay in uu dirsoocayo oo uu hasha taranteeda farta ku fiiqayo. Waxa uu hadal ku soo gebagebeeyay, "geela aan soo dhex maray, hashayda iyo taranteeduba waa ka go'i karaan, bawdo rag maalinba mid baa qaawan. Hasha iyo taranteedaba kama maarmo." Waxa ay xusuusiyeen xeerka geela ka yaal, waxaanay si qallafsan ugu jawaabeen, "afka boodhka ka qarso."

Ninka baadidoonka ahi waxa uu warkiisa hayaa in uu reerka la joogo nin inanlayaal ah oo reerka gabadh ka qaba. Wiil yar oo aan waxba ka war hayn ayuu la kulmay, kadib markii uu labadii is dhalay faro madhan kala yimid. Waxa uu weyddiiyay meesha uu ninka reerka la yaallaa joogo. Wiilkii waxa uu u tilmaamay in uu inanlayaalku fadhiyo geed aan kaba fogayn. Ninkii ayuu dul yimid. Salaan kadib, muraadkiisii ayuu abbaaray. Waxa uu u sheegay in uu dal dheer ka yimid. Waxa uu u raaciyay hasha iyo arrinkeeda. Waxa uu uga warramay in soddoggii iyo seeddigii isku raaceen in aanu maanta halkan geel ka kaxaynayn. Waayo baadi kugu raagtay in aad leedahay ayaad mooddaa.

Ninkii inanlayaalka ahaa waxa uu u sheegay ninkii socotada ahaa in ay u fududdahay in uu soddoggii iyo seeddigii u soo fadhiisiyo, kadibna uu u garnaqo, isaga oo hasha warkeeda haya. Lammaankii is dhalay ayuu cid u dirtay. Waa soo fadhiisteen. Mudduci iyo maddaacalay.

Ninka reerka xididka la ah waxa la odhan jiray Faarax Sanwayne. Waxa uu ninkii hasha lahaa ugu jawaab celiyay adiga iyo ragga aan xididka la ahay waan idiin garnaqayaa ee soo fadhiiso. Lammaankii uu xididka la ahaa ayuu u yeedhay. Waxa uu ku yidhi, "garnaqsi u soo fadhiista."

Ina Sanwayne waa nin goostay in uu ragannimadiisa ilaashado. Hasha iyo taranteeda waa ka warhayaa. Kadib markii uu ninkii baadidoonka ahaa si

run ah uga jawaabay su'aalo uu ka weyddiiyay hasha, ayuu labadii nin ee midna soddogga u ahaa midna seeddiga, ku yidhi, *"Gari Ilaahay bay taqaan, soddog ma taqaan, seeddina ma taqaan ee ninka hasha iyo taranteeda u soo sooca."*

Yeedhow dham dheh. Lammaanka is dhalay ma ay filayn dhawaaqa iyo hadalka cad ee ninka gabadha ka qaba ka soo yeedhay. Go'a ayaa boodhka laga tuntay. Lammaankii is dhalay inta ay kaceen ayay hashii iyo taranteediiba soo tubeen. Wax yar kadib, waxa geedkii ku soo laabtay ninkii baadidoonka ahaa oo hashii iyo shan ilaa lix geel ah oo taranteedii ah dabada ka wada.

Ninkii baadidoonka ahaa waxa uu is tusay in aanu sidaa isaga tagin. Ninkii garta naqay oo weli geedkii fadhiya ayuu u yimid. Waxa uu ku yidhi, "warkaaga waan hayaa in aad reerka xidid la tahay, anigu ma filayn, xididkaaguna ma filayn go'aanka aad qaadatay. Laba kala dooro: ma hal baan ku siiyaa? Mise hal baan kuu idhaahdaa." Inanlayaalkii waxa uu ku jawaabay, "geelaaga kaxayso; in aad hal i siiso, waxa aan ka doorbiday in aad hal ii tidhaahdo."

Waxa la sheegay in ninkii baadidoonka ahaa wixii maalintaas ka danbeeyay caadaystay in uu tago gole kasta oo xeerbeegti fadhido oo cid loogu garnaqayo. Waxa uu marka hore dhegaha u raaricin jiray sida ay wax u dhacayaan iyo sida wax la isu tusayo. Marka ay murugto ee la isu maaro waayo, muranna goobta yimaaddo ayuu gacanta taagi jiray, markaas ayuu odhan jiray, "garta aad naqaysaan go'aankeedu waa sidaas." Marka lala garan waayo ayuu odhan jiray, "sida aan idhi ayuun bay ku dhan tahay, haddii aad doontaan Ina Sanweyne u geeya."

Ina Sanweyne go'aankii iyo gartii uu naqay ee ay raggii uu xididka la ahaa iyo ninkii hashu ka luntay isku soo geed fadhiisteen ayuu mahadiyay, magaciisiina meel walba kaga dhacay. Waxa caado iska noqotay in geed kasta oo la isugu yimaaddo iyo gar kasta oo furantaa marka ay kululaato ee la ismari waayo halhays laga dhigtay in la yidhaahdo "gartaasi halka ay ku gororaysaa waa sidaas iyo sidaas, haddii aad doontaanna Ina Sanweyne u geeya."

Arrinta Ina Sanweyne waxa ay ina xusuusinaysaa halhayska yidhaahda: *Ragannimo meel cidhiidhyoon baa lagala baxaa.* Waayo, ninkaasi waxa

uu u badheedhay in uu soddoggii garta ku cad ku naqo, ta Alle mooyee tu kalana ma uu xeerin.

## Sababaha Dagaallada

Markii lagu dheeraaday u hiilinta iyo dugsashada nabadda ee cidina macaanka nabadda la'aanteed ku ledi weyday ayaa la isla qaatay in qaab nabad wada noolaansho hirgaliya la isla qaato. In nabadi jirto iyo in xeer nabaddu leedahay jiraba, waxa keenay dareennada ay ka soo jeedaan halhaysyadan xeesha fog lihi:

- *Ninka aan warankaagu galin weedhaaduna ma gasho.*
- *Ina-rag walaal wax uu ku dhaamo la waa.*
- *Ina-rag hortaada ha ka eegin, gadaashaana ha ka eegin ee garabkaaga ka eeg.*
- *Qab qab dhaafay bay laba qabiil, qaran ku weydaa.*

Waxa niyadda lagu hayay goobo lagu jabay, xanuun, murugo iyo qoomammo ka dhalatay, wixii laga yidhi, iyo halabuur iyo hogatusaale fara badan oo ku soo arooray colaadda iyo nabadda. Ilaahay fadligiisa, waxa uu qalbiga halabuurkiisa ku riday ereyo loo cuskado nabadda oo wax lagu qaato.

Xilliga aynnu ka sheekaynayno, geyiga ama carriga dawladi kama jirin, xadhig iyo xabsi rasmi ahina suurtagal ma ahayn. Ninka taladu seegto ama bixisadu waddo ee amar la xumbeeya waxa askari u ahaa tolkii. Toban guurti ah, waayo'arag ah, tu walba u soo joogay, belaayo dhaxalkeed ka warqaba, oo goobo lagu jabay u soo taagnaa ayaa isaga oo labadible u xidhan la soo hor fadhiisin jiray.

Toban gabay oo iswaalka iyo kibirka ku saabsan oo Ismaaciil Mire, Salaan Carrabey, Timacadde iyo dhiggoodu laba ciidan ku kala dareeriyeen iyo soddon maahmaahood oo qofka maanka ku soo cesha ayaa lagu akhriyi jiray. Intaas ayuu ku caafimaadi jiray. Intaas ayaa dabar iyo dawaba u ahayd. Wejigiisa ayaa laga arki jiray isaga oo ereyadu damqeen oo marba soo debcaya. Marka belaayadu ka dul kacdo ee uu maanku ku soo noqdo ayaa isaga oo xasilay, lana moodo in uu hurdo ka soo toosay, xadhigga laga furi jiray. Kadibna waxa goobta laga kaxayn isaga oo miyir u tallaabsanaya.

uu u badheedhay in uu soddoggii garta ku cad ku naqo, ta Alle mooyee tu kalana ma uu xeerin.

## Sababaha Dagaallada

Markii lagu dheeraaday u hiilinta iyo dugsashada nabadda ee cidina macaanka nabadda la'aanteed ku ledi weyday ayaa la isla qaatay in qaab nabad wada noolaansho hirgaliya la isla qaato. In nabadi jirto iyo in xeer nabaddu leedahay jiraba, waxa keenay dareennada ay ka soo jeedaan halhaysyadan xeesha fog lihi:

- *Ninka aan warankaagu galin weedhaaduna ma gasho.*
- *Ina-rag walaal wax uu ku dhaamo la waa.*
- *Ina-rag hortaada ha ka eegin, gadaashaana ha ka eegin ee garabkaaga ka eeg.*
- *Qab qab dhaafay bay laba qabiil, qaran ku weydaa.*

Waxa niyadda lagu hayay goobo lagu jabay, xanuun, murugo iyo qoomammo ka dhalatay, wixii laga yidhi, iyo halabuur iyo hogatusaale fara badan oo ku soo arooray colaadda iyo nabadda. Ilaahay fadligiisa, waxa uu qalbiga halabuurkiisa ku riday ereyo loo cuskado nabadda oo wax lagu qaato.

Xilliga aynnu ka sheekaynayno, geyiga ama carriga dawladi kama jirin, xadhig iyo xabsi rasmi ahina suurtagal ma ahayn. Ninka taladu seegto ama bixisadu waddo ee amar la xumbeeya waxa askari u ahaa tolkii. Toban guurti ah, waayo'arag ah, tu walba u soo joogay, belaayo dhaxalkeed ka warqaba, oo goobo lagu jabay u soo taagnaa ayaa isaga oo labadible u xidhan la soo hor fadhiisin jiray.

Toban gabay oo iswaalka iyo kibirka ku saabsan oo Ismaaciil Mire, Salaan Carrabey, Timacadde iyo dhiggoodu laba ciidan ku kala dareeriyeen iyo soddon maahmaahood oo qofka maanka ku soo cesha ayaa lagu akhriyi jiray. Intaas ayuu ku caafimaadi jiray. Intaas ayaa dabar iyo dawaba u ahayd. Wejigiisa ayaa laga arki jiray isaga oo ereyadu damqeen oo marba soo debcaya. Marka belaayadu ka dul kacdo ee uu maanku ku soo noqdo ayaa isaga oo xasilay, lana moodo in uu hurdo ka soo toosay, xadhigga laga furi jiray. Kadibna waxa goobta laga kaxayn isaga oo miyir u tallaabsanaya.

Marka la rogmado ee dhinac walba laga baroorto, dhadhanka noloshuna salguuro ayaa qoomammo iman jirtay. Taas ayaa dabar iyo digtooni danbe dhali jirtay. Sida maxay? *Waar qabaalku kabis lahaa oo ka tagis lahaa.*

Waxa aan shaki lahayn in dagaallo culculusi mararka qaarkood beelaha dhexdooda ka dhici jireen. Waxa ay lahaayeen sababo. Waqtigooda ayay qaadan jireen, waana laga heshiin jiray. Aan is weydiinno sababaha keeni jiray dagaallada.

- Amarro Alle iyo ujeeddooyin Ilaahay.
- Arrin la xidhiidha isu dheellitiranka nolosha.
- Inta badan dagaalladu waxa ay dhici jireen xilliyada roobka iyo barwaaqada. Waa iska dabeecad bini'aadam oo ladnaanta iyo luufluufka midna lama xejiyo.

*"Ninkii koob nimcaa fuuqsadee kadin irmaan maala*
*In karuurka uu qubo horay kaafka ugu tiille."*[14]

- Geel la kala xabbaadho iyo dharaarba waa ninka u xoog roon iyo xerada uu ku jiro.
- Gabadh la isku haweeyo ama qolo dun ku xidhatay oo gabbaati ka dhiibtay oo dhinaca kale damcay inay xoog ula wareegaan. Marar kalana waxa keeni jiray quudhsi ama gabadh ha ku saabsanaado ama qoonsi kale ha jiro.
- Sabab biyo yarood, darka ceelka, dhuldaaqsimeed, dhulbeereed iyo guud ahaan dareen fudayd salka ku haya.

Marka xanuunku dhaco kadib ayaa dadka maanku ku soo noqon jiray. Waxa iman jiray dareen qoomammo, markaas ayaa heshiisiintu fududaan jirtay. Mag baa la kala qaadan jiray, gabadh godobreeb ahna waa lagu ladhi jiray. Waxa lagu kala fogaan jiray ma ahayn geela iyo xerada lagu kala madoobeeyay.

Nabaddu gabadh bay ku iman jirtay, waayo, gabadhu waxa ay dhali jirtay intii dhimatay rag lagu illaawo. Isku soo dhowaansho taam ah ayaa ka dhalan jirtay. Xaalad kasta oo timaadda oo beelaha dhex marta, dawadu gabadh bay ahayd, haddii ay qudhgooyo jirto iyo haddii ay qardoofo tahayba. Dagaallada sidoodaba marka la eedo waxa ka hadhi jiray xanuun reeba xusuus dheer iyo digtooni lagu sii xoojiyo nabadda.

---

[14] Waxa curiyay Gabayaagii Ismaaciil Mire (AHN).

# CUTUBKA II

## SOOMAALIDA IYO XOOLAHA

*"Qofka camalkiisu waxa uu qurux badan yahay marka uu hibo waafaqsan u leeyahay"*

Soomaalidu waxa ay ka mid noqotay tarantii Nebi Aadan iyo ummadihii dhulka cammiraaddiisa saamiga u yeeshay. Kadib markii laga soo gudbay kacaakufkii nololeed ee heerkii dabatada, waxa ay nolosha ka bilowday sida bini aadamka kale xooladhaqato reerguuraa ah. Soomaalidu guud ahaan waxa ay noqotay bulsho xooladhaqato ah. Sidaas ayay ku caan ahayd ama ku caan tahay ilaa maanta.

Marka laga hadlayo nolosha asalka ah iyo aqoonta ku saabsan abuurta (the nature), waxa la yidhaahdaa bini'aadamka cidda ugu nasiibka badan ee aqoonta macnawiga ah ugu xeesha dheeri waa bulshada xooladhaqatada ah ee weliba reerguuraaga ah. Ku darso oo weliba ta ugu xeeldheeri waa ta xoolaha ay dhaqataa ka kooban yihiin dhawr meesin, isir, ama sinji oo kala taggan. Waxa aan u jeedaa nolosha asalka ah iyo aqoonta ku saabsan abuurta.

Inkasta oo isirrada xoolaha baahidoodu guud ahaan midaysan tahay, haddana wax bay ku kala duwan yihiin; ama sida loo dhaqo iyo meesha u fiican in lagu dhaqaa wax bay ku kala duwan tahay. Meesin waliba sidiisa ayuu macno u leeyahay. Sidiisa ayuu meel u buuxiyaa. Dabadeedna, waxa uu u baahday dhaqan waafaqsan daryeelka xoolaha.

Si kastaba ha ahaato e, guud ahaan Soomaalidu waxa ay ku caanbaxday xooladhaqato reerguuraa ah oo Ilaah ku galladaystay xoolo nool – walow ay maanta badda, beeraha iyo beeyaduba ka mid yihiin dhaqaalaheeda. Magaceedii caanka ahaa ee xooladhaqato reerguuraa ah waxa naafeeyay magaalagalkii. Dhaqaalaheedu waxa uu ka kooban yahay dhawr meesin: geel, adhi, lo' iyo gammaan. Dhawrka meesin waxna way ku kala duwan yihiin, waxna waa iskaga mid. Laakiin waxa ay leeyihiin baahi midaysan.

Waa lix meesi oo isku dhigma oo mid waliba leeyahay sawir iyo sawrac ka duwan kuwa kale. Mid waliba waxa uu nolosha ku leeyahay kaalin kuwa kale wax kaga duwan. Waxa u astaan ah in ay u qaybsan yihiin saddex

lammaane oo isku dheellitiran. Waxa ay ku kala duwan yihiin caadooyinka uu mid waliba leeyahay. Lixdaas, laba waliba waa isku bah, marka loo eego xilliga ay qooqaan. Waxa ay ku kala duwan yihiin sida tan:

*Awrka iyo orgiga – xilli ku qooq.*
*Wanka iyo dameerka – xilli walba qooq.*
*Dibiga iyo faraska – calool ku qooq.*

Dhinaca kale, geelu waxa uu jecel yahay in lagu dhaqo meel geed sare leh oo dalsan ah oo ka durugsan dhulalka ay adhiga iyo lo'du ku dhaqmaan. Idaha waxa loo dhaqaa si ka duwan sida riyaha loo dhaqo. Iduhu waxa ay jecel yihiin in lagu dhaqo bannaan iyo dhul beereed furan. Riyuhu waxa ay jecel yihiin cal iyo buur ama meel caleen ama geed dhexe leh. Lo'du waxa ay jeceshahay in lagu dhaqo dooxooyin iyo sabo biyo leh.

Sababahaas kala duwan ee dhaqidda ku saabsani waxa ay keenayaan in xooluhu waxa ay cunaan raalli ku noqdaan. Waxa ay u baahan yihiin daaq, biyo, caafimaad, nabadgalyo iyo daryeel guud. Waxa ay u baahan yihiin rarid, furid iyo sahamin maalintii ah. Waxa ay u baahan yihiin soojeed habeenkii ah. Afarta meesin ama afarta isir ee xoolahaasi waxa ay khasab ka dhigeen in laga jawaabo baahidooda, weliba si xeeldheer looga jawaabo. Maxaa yeelay, ninka xoolaha leh noloshiisu waxay ku xidhan tahay daryeelka xoolaha.

Waqtigaas nolosha Soomaalidu waxa ay ahayd mid miyi ku kooban oo aan lahayn albaab laga baxo iyo mid laga soo galo toona. Waxa aan u jeedaa ma jirin meel kale oo loo dhaqaaqaa, haddii aan baahida xoolahaas laga jawaabin, waayo, ninka mahadda xoolaha ku nool aayihiisu meel kale oo uu saarnaa ama si ka fudud oo uu nolol kale u helayay ma jirin. Ku darso oo, magaalo iyo il magaalana ma jirin. Guud ahaanna, nolosha kama jirin meel kale oo loo kallaho iyo meherad kale oo lagu talagalaa.

Sidaas darteed, baahida xooluhu waxa ay dadka ku beertay werwer joogto ah, mar haddii aan la'aantood waanwaani jirin, noloshuna aanay lahayn meel laga baxo iyo baro loo baxsado toona. Xaqiiqadaas ayay dadku u hoggaansameen. Dabadeedna waxa ay go'aansadeen in ay hantaan ta ay hayaan oo ay heellanaan kaga jawaabaan. Waxa lagama maarmaan noqotay in qofka iyo neefku noqdaan laba noloshoodu isku xidhan tahay oo aan kala maarmin. Waa in labada baahiyoodba la iswaafajiyo oo sida labada dhinacba raalli ku noqonayaan la guddoonsado. Labada waajib waxa

horreeya in qofku waajibka xoolaha ka soo baxo, si taasi u horraysana waa in qofku dhexda marada ku giijiyo. Mar haddii baahida xooluhu guud ahaan tahay afartii aynnu sheegnay – cunno, biyo, nabadgalyo iyo caafimaad – waxa sugnaatay in xoolaha si aqoon, xeeldheeri iyo hagarla'aani ku jirto loo daryeelo. Waa in neefku isaga oo raalli ah loo yeedhyeedhaa marka la maalayo oo daryeelkiisa laga garto sida uu u mahadsan yahay.

Xoolaha haddii sirtooda la helo waa mahad. Sidaas darteed, xooluhu waxa ay u baahnaayeen cid mar walba u gacan bannaan oo aan muraaddo kale kaga mashquulin. Baahida xooluhu waxa ay dadka bartay adkaysan. Waxa kale oo ay bartay iimaan, heellanaan, hawlkarnimo joogto ah iyo karti labanlaaban.

Ummaddu waxa ay ka saahidday wixii aan dani ugu jirin, iyaga oo ka ambabaxaya: *fadhi iyo fuud yicibeed la isla waa; dani waa seeto; nin habeen ogi maalin ma hadhsado; iyo, xaglo laaban xoolo kuma yimaaddaan.*

Baahida ballaadhan ee xooluhu waxa ay noqotay macallin dhaliya in ay dadku nolosha dhex galaan oo ay u abtiriyaan. Baadidoon iyo baadhis dheer kadib, dhirta ayay u abtiriyeen. Waxa ay koobeen dhirta geyiga ku taal iyo geed waliba inta faa'iido ee uu leeyahay. Waxa ay barteen sida uu baahidooda u waafaqsan yahay ama sida uu baahidooda iyo baahida xoolaha waxyeello ugu leeyahay. Waxa ay faaqideen oo fiiro dheer ku xaqiijiyeen inta tayada iyo tisqaadka leh iyo inta geedmadheedhka ah ee aan waxtar weyn u lahayn noloshooda. Waxa ay ka jibbo keeneen dhirta inta gobta ah iyo inta gunta ah. Waxa ay baadidooneen inta baahiyood ee geed waliba daboolo. Waxa ay sii faaqideen dhirtu sida ay tayo ahaan u kala roon tahay.

Dhirta ayay u abtiriyeen si ay u gartaan geed waliba halka uu ka buuxinayo noloshooda. Marka hore dhirta waxa ay u kala saareen saddex: geed hoose, geed sare iyo geed dhexe. Waxa ay u sii kala saareen: geedsan iyo geedxun. Waa ay u sii abtiriyeen oo waxa ay ka dhigeen: geedquwaax, geedxadhaadh, geedmadaw, geedqadhaab iyo geedqodxeed.

Waxa ay kala dhigdhigeen geed waliba waxa uu ku fiican yahay iyo halka uu nolosha ka buuxiyo. Waxa ay derseen inta ood laga sameeyo, inta aqal laga sameeyo iyo inta agab laga sameeyo. Waxa ay faaqideen inta dawada leh iyo

inta sunta leh. Waxa ay ka baaraandegeen sida dhulku dhirta u kala leeyahay iyo deegaan kasta dhirta ku taal, si ay sabo walba u ogaadaan wixii ay kaga talagali lahaayeen. Waxa ay derseen geed kasta iyo cimilada uu ku baxo.

Waxa ay koobeen inta cudur ee xoolaha ku dhaca iyo waxa u maaro ah iyo inta cudur ee dadka ku dhaca iyo waxa u maaro ah. Waxa kale oo ay faaqideen inta naftooda iyo nafta xoolaha cadowga u ah ee dulin iyo dugaagba leh iyo mid walba tabahiisa. Qaar ka mid ah waxa ay kaga daydeen geesinnimada, sida libaaxa. Waxa ay yidhaahdeen libaaxu ninna waa la xirrib (tab), boqol ninna waa la xoog. Ujeeddadu waxa weeye libaaxu waxa uu wax ku dilaa waa tab. Libaaxu waxa uu sii kordhiyay geesinnimadooda iyo tabahooda, si ay suurtagal u noqoto in la iska caabbiyaa, mar haddii aan la is hurayn oo dugaaggu dadka la wadaago nolosha iyo xoolahaba.

Waxa ay halkaas u dhaafeen sabada ama ciidda iyo abtirsiinteeda. Waxa ay xaqiijiyeen sida sabada ama ciiddu u kala tayo fiican tahay ee ay u kala caafimaad badan tahay. Isirkeeda waxa ay u kala saareen: *gaaroodi ama cadduur, suubaan ama carramadow, carraseel, jaan iyo bataax.* Waxa ay sii furfureen ciidda ta dulin ka dhalan karo, ta boodh ka dillaaco iyo ta carrasanka ah, iyaga oo ka eegaya xagga sabada ama xerada iyo hadhsiga xoolaha.

Waxa ay faaqideen biyaha iyo sida ay u kala nafaqo roon yihiin ama caafimaad badan yihiin. Waxa ay meel ku hubsadeen biyaha macaadinta leh, culus ama nafaqo ku jirto iyo ta xooluhu ku dhaxmoodaan. Dabadeedna waxa ay xoolaha u dooreen biyaha dhanada ah ee macdanuhu ku jiraan. Waxa ay yidhaahdeen: *biyuhu mar waa subag, mar waa soor, marna waa sun.*

Salaadda hore haddii haanta qabada ah biyaha ku jira galaanka la darsado labeen bay leeyihiin – waa subag oo waxa ku ladhan caafimaad. Marna waa soor oo adiga oo xoolo la soo joogay haddii aad hadhimadii aqalka soo gasho oo haan dhaymo cusub qabta aad biyaha ku jira darsato, waxa ay kuula mid tahay adiga oo si fiican u qadeeyay. Hadda malaha sarbeebina way ku jirtaa loo gol leeyahay hadhimadii (qado) haddii aad wax kale weydo haan dhaymo cusub qabta oo labeen leh ayaad galaanka darsanaysaa. Waxa ay raaciyeen habeenkii marka dhinaca hurdada naftu

jamato biyaha la cabbaa waa sun. Arrimahan oo dhammi sida runtooda lagu caddeeyay waa tijaabooyin.

Waxa ay koobeen deegaan walba inta dugaag joogta iyo inta haad iyo haanraawe ku dhaqan ee la bah ah. Waxa ay derseen sinji walba halisihiisa, sida xoolaha looga ilaaliyo iyo tabaha loola dagaallamo. Waxa ay faaqideen inta dharaartii wax weerarta iyo inta habeenkii dhacda; inta dadka nafihiisa u cadawga ah – in bog ku socota iyo in baabbaco ku socota labadaba.

Bulshadu waxa ay u dhaaftay meelo kale oo naftooda iyo maalkooda wax kaga xidhan yihiin. Cimilada, gaar ahaan hawada ama xilliyada, waxa kaga xidhan arrimo lagama maarmaan ah. Xilliyadu waxa ay ku arooraan xaalado kala duwan. Waa gu', xagaa, dayr iyo jiilaal. Mid waliba waxa uu leeyahay xaalado goonni u ah oo loogu talagalay, si loo waafajiyo nolosha oo xilli walba caadadiisa loogula dhaqmo.

Labada xilli ee aan roobku jirin, hawsha ayaa labanlaabanta. Waxa bata aroorka, geeddiga iyo guurguurka, si daryeelka xoolaha loo sii kordhiyo. Waxa dhaca tabo bulshadu kaga baxdo jiilaalka iyo xilliyada adag. Waxa lagu dhowaadaa dhulalka biyaha leh, si aroorku u fududaado. Waxa la diyaariyaa yeelka waraabka iyo qorshe sebenxumaadka lagaga baxo. Kolka ugu danbeeya ee waraabka, waxa ceelka jiilaalka laga cabbo lagu nabadgalyeeyaa ereyadan oo tilmaamaya in xilli roobaad dhow yahay ama la rejaynayo.

*"Darka ceelkow,*
*Maanta dabadeed,*
*Lagaa durugyoo,*
*Lagaa doog raac."*

Xilliga roobku waa xilli debacsan oo afka la saaro ladnaanta, nasashada, madadaalada iyo hindisaha intaba. Macnuhu ma aha xilligaasi waa xilli fadhiga lagu raago, waxa se la diyaarin jiray saadkii jiilaalka lagaga gudbi lahaa. Waxa la badin jiray digarogga iyo meesha daaqeedu tayada leeyahay. Si aanu jiilaalku wax u yeelin ama aanu u naafayn, xoolaha xilliyadaas waa loo roonaan jiray.

## Ka Hadlin

Waxa aynnu ku raagnay dhacdooyinka nolosha dhinaca dadka ee bal aynnu inta dadka la nool iyagana ka war doonno. Dadku dugaagga la deriska ah wuu tab bartaa si uu sharkooda uga badbaado ama xoolihiisa uga badbaadiyo. Dugaagga, sinjiga xidhiidhka ugu ballaadhan dadka la lihi waa waraabaha, haddii ay degelka tahay iyo haddii ay dibjirka tahay labadaba. Waraabuhu dadka ayuu la nool yahay. Nolosha ayaa ka dhexaysa oo xoolaha ayaa ka dhexeeya. Sidaas darteed, siyaabo badan ayay dadku dabeecadihiisa u cabbiraan. Waraabuhu waxa uu leeyahay sheekooyin badan oo damaciisa iyo doqonnimadiisa labadaba ku saabsan.

Bulshadaasi isir kasta meel ayay ku tiiriyeen oo waxa ay barteen sida loola dagaallamo ama looga digtoonaado. Xidhiidhka ugu weyn waxa ay la lahaayeen dhurwaaga iyo dacawada. Waayo, waa laba xilli walba dhibtoodu taagan tahay, kana mid ah dugaagga kuwa ugu faraha badan. Waa casar weerar, habeenkiina xerada ayay u soo dhacaan.

Noolaha dadka nolosha la wadaaga intooda badan way ka hadliyeen, kadib markii ay aqoon ballaadhan u yeesheen ama ay sugnaatay in ay daaqa iyo xerada labadaba ku kulmaan iyo kadib markii ay dhaqankiisa u fiirsadeen. Waxa ay ka weriyeen sheekooyin badan.

Waxa ay weriyeen in waraabuhu marka uu nin arko uu ka baqo oo uu cagaha wax ka dayo, marka uu gabadh yar oo casar adhi la joogto arkana uu farxo, adhiga ku soo dhiirrado, oo hilbo kala hadho.

*Aniga iyo baadi Islaameed is eednay:* Waxa ay yidhaahdeen ama ay waraabe ka weriyeen in uu ka calaacalay xoolaha Islaameed ee uu cunayo oo uu yidhi, "marka baadida xooluhu muuqayga aragto ayay cagaha wax ka daydaa oo ay iga carartaa. Markaas ayaan baacsadaa oo aan idhaahdaa aad qabatid oo aad u haysid ciddii lahayd inta laguugu imanayo. Dabadeedna meesha aan qabtaaba waa ay ii soo ruqdaa, waayo, gacmo ma lihi oo waxa aan wax ku qabtaa ilkaha."

*Maqal waxan ku haystaa*
*Muslinkiyo waraabaha*
*Madmadowga tuhunkiyo*
*Mashaqada dhex taallaa*
*Inay tahay is maandhaaf.*

*Muudaaga xooluhu*
*Marka ay la kulantee*
*Muuqiisa aragtay*
*Lugaheeda maashaa,*
*Isna wuxu majiiraha*
*Uga daba maleegtaa*
*Celi maganta baadida,*
*Is maqiiqiddiisiyo*
*Mintidkiyo dedaalkaa*
*Hadba muruq u siibmaa,*
*Dee muxu sameeyaa*
*Micidaa u gacanoo*
*Ilkahaa u midigee!* [15]

Waxa kale oo ay waraabaha ka weriyeen in uu habeen helay hal gool ah oo baadi ah. Hashii ayuu muruqyo jaray, dabadeedna isaga oo hoosta kaga jira ayay hashii ku soo dul dhacday. Habeenkii oo dhan ayuu hoosteeda ka qaylinayay. Hasha waxa magaceeda la odhan jiray Caweer. Waxa uu Caweer... Caweer... Caweer guraba, goor danbe oo waagii soo dhow yahay ayuu quustay. Waxa uu ka baqay in waagu beryo oo meesha loogu yimaaddo. Markaas ayuu calaacalay oo yidhi *"waxba yuu cunine, cawo waxa leh nin ay Caweer ka toostaa."* U fiirso oo waxa uu la hadlayaa waa hal bakhti ah.

Waxa ay yidhaahdeen; habeen iyo dhaxan jiilaal ayuu soo galay guri markaas laga dareeray oo dab ka oogan yahay. Dabkii ayuu soo dul joogsaday oo isku kala bixiyay. Markii dhaxantii ka duushay ayuu yidhi *"dab ay naar ku sheegaan Ilaahow aniga iyo waalidkayba ku camcami."*

Waraabaha waxa u caado ah in marka uu maqlo cabaadka awrta iyo hugunka reerguuraaga uu ku soo dhowaado guriga, si marka guriga laga dareero, uu guriga u baadho oo raq iyo wax ka daydaydo ama uu dabkaba u kulaalo. Waxa la sheegay in beri lax indho la' guri lagaga guuray. Waraabahu waxa uu isku maqiiqay gurigii isaga oo ujeeddadiisu tahay bal in uu laf uu feento iyo xumays wax uun ka helo. Laxdii indhaha la'ayd oo

[15] Kala maan, 1982.

iyada oo yaabban meel duleedka ah taagan ayuu isha ku dhuftay. Dhankeedii ayuu isaga oo faraxsan u soo dhaqaaqay.

Laxdii markii ay sanqadhii maqashay ayay u qaadatay in meesha adhigii ka dhow yahay. Dhinacii sanqadhu ka baxday ayay u soo afarqaadday. Waraabihii markii uu arkay laxdii oo maqiiqan ayuu nafta u yaabay, markaas ayuu cagaha wax ka deyay. Qoobka ayay qoobka u saartay iyada ci'deedii cirka ku shareertay. Waraabihii isaga oo ordaya ayuu marba gadaal jalleecayaa, mise waaba iyadii oo ku soo dhow. Markaas ayuu yidhi *"naftu waa malliyee laxdu sow na cuntee."* Waayo, waraabaha waxa lagu xantaa in uu fulay yahay.

Fulaynimada ka sokow, waraabuhu waxa uu caan ku yahay nacasnimo iyo axmaqnimo. Waxa ay sheegeen in waraabe habeen hal baadi ah dilay. Isaga oo raqdii dul fadhiya ayay jaalladii dacawo ugu timid. Habeenkii oo dhan ayuu raqdii dul fadhiyay oo marka calooshu debecdaba cad ka goosanayay. Gabadhii ay dugaagga isugu dhawaaayeen ee dacawo oo iyada lagu sheegay in ay digtooni badan tahay waxa ay garanaysay in la is qabqabanayo oo marka waagu beryo baadidoon meesha imanayo. Sidaas darteed, iyadu hilibkii may badsan oo waxa ay filaysay in lagu soo kedinayo.

Waa sidii ay filaysay e, markii waagu beryay ayaa ninkii hasha lahaa oo waran la haliilayaa soo muuqday. Waraabihii iyo dacawadii ayaa is barbar orday. Waraabaha isaga orod badani kuma jiro oo caloosha ayaa u dhaansan. Marba dib ayuu waraabuhu eegaa, mise waa ninkii oo ku daba jira. Dacawadii waraabaha way ka faanno horraysay oo iyadu way fududdahay, hilibkana kuma talaxtagin. Iyada oo ku diganaysa ayay marba waraabihii oo hiirdeys ah dib u jeedaalinaysaa. Markaas ayay odhanaysaa *"oo haddaan la ordi karayn maxaa xoolaha xaqannaas loo cunayay."* Goor danbe oo la isla beercaddaaday oo waraabihii ku dhow yahay in la qabto, ayuu si quusi ku jirto u odhanayaa:

*"Awelba waannu cunaynoo*
*Waa ku caato la'ayne,*
*Candhadeeda la goo*
*Ma caydh baa dhaqatay?"*

Waxa waraabihii yaabku ka keenay, caydh baannu ahayn oo weligayaba xoolaha dadka waannu cunaynnay, laakiin mararkii hore inta cabbaar na la

eryado ayaa na laga hadhi jiray. Haddaba candhadeeda la goo, hashan ninka lihi ma keligeed ayuu lahaa!

Waxa kale oo ay yidhaahdeen; waraabuhu waa hilibcun oo caano shaqo kuma laha. Habeenkii duleedka reerka ayuu kollayba isa soo taagaa kolka haweenku xerada adhiga ku jiro ee irmaanta lisayo. Waxa uu arkaa hadhuubka habeenkii la isu dhiibayo. Dadka sheekadan laga weriyay waxa ay og yihiin in haddii waraabuhu hal dhashay cidla' ka helo oo nasiibku siiyo, sida qudha ee lagu yaqaannaa waa in uu dilo kadibna hilibkeeda cuno, waayo, isagu caanadhan ma aha.

Iyaga oo ina tusaya in aan waraabuhu cad mooyee weligii caano shaqo ku lahayn ayay su'aal weyddiiyeen. Waxa ay ku yidhaahdeen, "waraabow, weligaa caano ma aragtay?" Waxa uu ku jawaabay "haa." Waxa lagu yidhi "xaggee ayaad ku aragtay?" Waxa uu yidhi "waa waxa madow ee habeenkii muska laysaga dhiibo ee la yidhaahdo, heblaayooy, caanaha qabo." Waraabuhu hadhuubkaas uu arko ayuu caano moodayaa.

Waxa kale oo ay weriyeen in waraabuhu yahay dugaagga ka ugu hilibka jecel. Iyaga oo sidaas og ayay maalin su'aal weyddiiyeen. Waxa ay yidhaahdeen "waraabow goorma ayaad hilibka ka dheregtaa?" Waxa uu ku jawaabay "waxa aan hilibka ka dhergaa marka: mud la igu heeryeeyo ee kurus la igu haameeyo ee mandharaari la igu hoggaamiyo ee raq la iga sii wado, raq kalana la igu sii wado."

Waxa kale oo la sheegay in maalin maalmaha ka mid ah la yidhi "waraabow, adhi maad raaci?" iyada oo la muujinayo sida aanu waraabuhu xoolo ugu shaqo lahayn. Waxa uu ku jawaabay "adhiga aad sheegayso aan raacee wanan ma ku jiraan?"

Waxa la weriyay in beri laba waraabe heleen lax weyd ah oo guri lagaga guuray. Waxa ay is tuseen in ay xoolaha Islaameed iska daayaan oo ay xoolo dhaqdaan. Waxa ay ku heshiiyeen in ay laxdaas dhaqdaan oo ay xoolo kalana ku baadidoonaan si ay caydhnimada uga baxaan. Si ay heshiiska u dhaqangaliyaan, waxa ay labadii waraabe ku heshiiyeen in laxda midkoodba maalin raaco oo daaq geeyo, ka kalana qadhaab iyo cunto u raadiyo.

In muddo ah haddii arrintu sidaas ahayd ayaa laxdii Galaalo naaxday oo gool shilis noqotay. Maalinba ka raaca ayaa laxda hilibka saaran hunguri u qabtaa. Hadba ka la joogaa wuu ku dhowaadaa oo badhideeda ayuu

leefleefaa. Hadba farowga ku dhigay ayuu indhaha la raacraacaa. Mid waliba waxa uu jeclaystay in uu ka kale u soo jeediyo in ay laxda cunaan. Maalin danbe ayaa kii qadhaabka doonay soo laabtay isaga oo faro madhan. Markii cabbaar laxdii oo daaqaysa la ag fadhiyay ayaa midkood kii kale ku yidhi, "walaal anigu Galaalo waan soo nacnacayaa." Kii kale ayaa soo booday oo yidhi, "anigu adiga ayuun baan kaa xishoonayee, Galaalo beri hore ayaan shuufay." Waxa xigtay, "innagu kici" iyo "innagu kici." Waxa xigtay hilibkii laxda oo waqti yar kadib laga findhicisho.

Waxa ay yidhaahdeen goor caweys ah ayuu dhurwaa reer dul yimid. Guriga ilme yar ayaa wax uu tabanayo mooyee ka dhex ooyaya. Hooyadii dhashay ayaa ilmaha sasabaysa oo hadba u heesaysa. Markii uu aamusi waayay ayay hooyadii tidhi, "wiilkii waa kaa aamusi waayay ee waraabow hoo cun." Waxa ay weriyeen in waraabihii yidhi, "wiilkaas yar anna waan doonayaa, hooyadiina way ila doonaysaa, ee maxaa na kala haya?"

Waxa ay sheegeen in waraabe guri madhan uu ugu yimid wan badhi la kici waayay oo shansho jaban. Waraabuhu waxa uu rumaysan waayay in aan wanka cid ku haysataa jirin. Cabbaar ayuu ku warwareegay. Goor danbe ayuu weyddiiyay su'aal ku saabsan in wanka cidi meesha dhigatay iyo in kale. Wankii waxa uu u sheegay in uu madaxbannaan yahay oo aanay cidi lahayn.

Waraabuhu waxa uu rumaysan waayay in wanku baylah yahay. Waxa uu bilaabay qosol uu ka daali waayay, waayo, boqolkiiba boqol ayuu isa siiyay wanka. Goor ay duhur gaadhay oo waraabihiina qosol iyo rayrayn ku jiro ayuu ku baraarugay nin waran sita oo soo socda oo leh, "tollaay... tollaay." Halkii ayuu ka kuday isaga oo qosolkii qoomammo uga danbaysay.

Waxa kale oo ay yidhaahdeen waraabe ayaa maalin su'aal la weyddiiyay. Waxa lagu yidhi, "waraabow fool xumidaa!" Waxa uu ku jawaabay, "Wallee haddii aad aragtaan mid iga yar oo dhidar la yidhaahdo, quruxboob ayaad ii bixin lahaydeen."

Sheekooyinka waraabaha ku soo arooray waa ay badan yihiin. Haddii aynnu dhinacan intaas ku daynno, waxa ay weriyeen in ay jireen dad habeenkii ci'da waraabaha tiriya oo hadba inta jeer ee uu codka is daba dhigo yidhaahda waxaas iyo waxaas ayay ci'daasi daarran tahay. Waxa iyana badan inta odhaahood ama maahmaahood ee waraabaha u baxay.

Dacawada waxa had iyo jeer lagu lammaaneeyaa waraabaha. Waxa jira sheekooyin badan oo ku saabsan sida dacawadu waraabaha u khatasho. Sidaas si la mid ah ayay bulshadaasi haadda waaweyn u faaqideen. Shinbiruhu waa la mid. Mid walba deraasad ayay ka sameeyeen dhaqankiisa, waxaanay asteeyeen kaalinta uu nolosha ku leeyahay.

Bal aynnu daboolka ka qaadno sheeko la magac baxday libaax iyo tab dacawo. Waxa la sheegay in beri libaax gaboobay ay talo u run sheegtay oo uu waayay awood uu godkiisii kaga baxo oo uu ku ugaadhsado. Maalin maalmaha ka mid ah ayay dacawo godkiisii ku soo booqatay. Waxa uu uga warramay xaaladda uu ku sugan yahay, da'diisa weyn iyo bukaan dhulka jilbaha u dhigay. Dacawadii godka afkiisa ayay faal la fadhiisatay. Way rogtay oo haddana rogtay.

Faalkii dacawada waxa ka soo baxay in libaaxa xanuunka haya dawadiisu tahay maskax dameer. Boqorkii dugaaggu waxa uu yidhi, "awood aan godka kaga baxo oo aan ku ugaadhsado ma hayo." Dacawadii dabajeedal waxa ay ka fekartay sida maskaxda dameerka lagu helayo. Waxa ay xusuusatay dameer gaamuray oo kelidii meel ban ah daaqa. Dacawadii libaaxii ayay warkaas siisay, waxaanay ballanqaadday in ay dameerkaas tabaheeda ku keeni doonto godka libaaxa. Halkii ayay durduro ka qabsatay. Waxa ay isa soo taagtay meel dameerkii u dhow.

Dayo waxa ay dameerkii ku kordhisay in duulkii habardugaag iyo habarduurjoog shireen, kadibna ay soo saareen go'aan odhanaya in ay adiga (dameer) boqor kuu caleema saaraan, maadaama boqorkii xayawaanku (libaax) gaboobay oo uu xilkii iska casilay.

Dameerku sida lagu yaqaan waa doqon dhegweyn ah. Arrintaas waxa uu ugu farxay si aan la malayn karin. Dannaani iyo boodbood ayuu is daba dhigay, kadibna waxa ay ku tidhi, "waa aynnu is raacaynaa oo boqorkii iscasilay ee libaax ayaan kuu geynayaa, isna taashkii boqornimada ayuu madaxa kuu galinayaa. Berrina waxa dhici doonta xaflad weyn oo dugaag iyo duurjoogba loogu dabbaaldegi doono caleema saarkaaga."

Dacawadii dameerkii oo laafyoonaya ayay godka afkiisii soo taagtay. Waxa ay ku tidhi, "godka hore u gal si libaaxu taashka madaxa kuugu galiyo." Dameerkii oo faajafaajoonaya ayaa godkii isu daruuray. Libaaxii waqtiba iskama lumin ee dameerkii ayuu labada dhegood goostay. Dameerkii waxa uu arkay halista jirta oo godkii ayuu dib uga soo booday, kadibna dacawadii

ayuu ku yidhi, "maxaad shirqoolka iigu samaysay, aaway dhegahaygii?" Dacawadii intay qososhay ayay tidhi, "illeen dameer waa dameer! Waar taajku miyuu kuu galayaa haddii aan dhegaha lagaa goyn. Waar godka hore u gal hadda ayaa taajka lagu saarayaaye."

Dameerkii waxa uu yidhi, "waa runtaa hadda ayaa taashkuna madaxayga galayaa." Libaaxii ayuu si fiican u hor fadhiistay, kadibna libaaxii cunaha ayuu ku dhegay. Markii u horraysayba madaxii ayuu jaray oo dacawadii ayuu ku yidhi, "madax hoo oo maskaxda ii soo saar inta aan hilibka cunayo."

Gabadhii dabajeedal madaxii ayay laba dhagax isku barkisay, maskaxdii oo ceegaagta ayay la soo baxday, kadibna way is dhaafisay. Libaaxii markii uu hilibkii ka dhergay ayuu dacawadii ku yidhi, "dayooy hilibkii ka dhergaye, maskaxdii aan ku dawoobayay ii keen." Dacawadii inta ay mashxarad ku dhufatay ayay tidhi, "siddiqabax, awoowgay nacasaysanaa, dameerku haddii uu maskax leeyahay miyuu kuu iman lahaa." Dacawadii, dameerkiina khiyaamaysay, libaaxiina khiyaamaysay. Layaab ma laha oo waa tab lagu yaqaan.

Galaydhka iyo baqayaha waxa ay sheegeen in ay haadda ugu weerar kulul yihiin. Waxa ay si gaar ah u sheegeen in galaydhku hoodo iyo burji leeyahay. Coommaaddaha xagga nasiibka ka day, xuunshada xagga dhegweynnimada ka day, tukahana xagga feejignaanta ka day. Waxa ay ku ladheen in ci'da shinbirdharabtu weriso libaax. Shinbirlibaaxda ama guumaysta, waxa ay sheegeen in ay ku astaysan tahay faal xun. Sida dadka qaar leeyihiinna, shinbircaanoodka iyo cirsankayeedhku waxa ay tebiyaan saadaal wacan.

Waxa ay daba galeen bahalaha hoose. Waxa ay barteen inta waabayda leh, sida ay u kala halisaysan yihiin iyo weliba dhirta loo adeegsado bogsiinta qaniinyada inta halista ah.

Shinbiraha qaar waxa ay ku suntadeen dhismaha iyo dhabeelnimada. Shinnida, qudhaanjada iyo aboorka waxa ay u qaateen halhays ka turjumaya tacabka, midnimada iyo agaasinka. Jinacduullaanka waxa ay kaga daydeen abaabulka iyo alalooska. Dabagaallaha waxa ay ka qaateen keydinta. Cawsha, diinka iyo masacagalaydu waxa ay u qaabilsanaayeen saadaasha roobka.

Dhammaan noloshii ay muraaddadu ku xidhnaayeen markii ay kala qaleen ee ay shay walba meel ku tiiriyeen, ayna hubiyeen noolaha mid waliba kaalinta uu nolosha ku leeyahay iyo xilka uu hayo ayay inta samaha leh soo dhoweysteen, inta sharka ahna belaayaxijaab ka yeesheen. Markaas ayay nolosha ku xasileen.

Waxa ay heleen isku kalsooni markii ay mashkilad kasta wixii lagu furdaamin lahaa meel ku ogaadeen. Noloshii ayay gacal ka dhigteen, waa la walaaloobeen, waa mahadiyeen, kalgacal faro badan ayaana u galay. Waxa ay ka dhigteen dugsi iyo duggaal; waxa ay ka dhigteen walaal mudane ah. Markaas ayay ilaaliyeen, dhawrteen, dhaqaaleeyeen oo quruxdeedii iyo bilicdeedii qurux kale ku sii dareen.

Mar haddii xoolaha iyo dadku yihiin laba isku nool oo aan kala maarmi karin, mar haddii noloshu tahay mid xidhxidhan oo aanay jirin meel laga soo galo iyo meel laga baxaa toona, mar haddii noloshan mid ka hawl yar oo looga guuraa jirin; waxa lagama maarmaan noqotay in ay samaystaan xeerar dhaqanka iyo dhaqaalaha waafaqsan.

Si kastaba ha ahaato e, dadku waxa ay si hagarla'aani ku jirto uga jawaabeen baahida xoolahooda. Baahida xooluhu waxa ay dadka bartay aqoontii ay kaga jawaabi lahaayeen baahidaas. Haddii ay tahay aqoon, dedaal, iyo daryeel; iyo haddii ay tahay iimaan iyo sabir aan daal aqoon oo lagaga jawaabo waajibka culus ee xooluhu u baahan yihiin inta ba. Taasi waxa ay keentay in dadkuna xoolaha abaalcelin ka helo oo ay mahadiyaan kheyraadka xoolaha ku jira.

Dadku waxa ay lahaayeen baahi la mid ah ta xoolaha. Waxa ay u baahdeen hoy, caafimaad iyo nabadgalyo. Intaas oo dhan ka libkeenkeedu waxa ay u baahatay hawldhabeennimo iyo karaan joogto ah. Markii xoolaha tacabkii dadku raalligaliyay, ayay xoolihiina dadkii ku nuuxnuuxsaday tacabkooda ku abaalmariyeen cad iyo caano caafimaadqaba oo ay weheliyaan mahad iyo gallado badan oo hu'gii dhuugga la odhan jiray ee dadku maryaha ka dhigteen ka mid ahaa. Dadkii iyo xoolihii waxa ay noqdeen laba isku nool oo nolosha dhib iyo dheefba wadaaga oo aan kala maarmin oo midba midka kale ku dhaqan yahay oo ku dhisan yahay.

Bulshadaasi mar haddii ay waqtiga oo dhan siisay daryeelka xoolaha – dhaqaalaha ay ku dhaqan yihiin – isla markaasna hawshoodu tahay mid hadh iyo habeenba taagan, waxa ay jidaysteen in ay dhaqaalaha ku

ilaaliyaan dhaqan waafaqsan. Sidaas darteed, waxa ay goosteen in ay labadible u xidhaan hungurigii ka mashquulin lahaa daryeelka xoolaha. Xeerarka ay nolosha waafajiyeen waxa ka mid ah in ay noqdaan bulsho caanadhan ah oo aan waqti ku lumin dheri dab saaran. Waxa lagama maarmaan noqotay in aan dheri dab saaran iyo qalliin waqti dheer qaata la sugin, si aan hunguri isugu gudbin daryeelka iyo danta xoolaha.

Waxa ay guddoonsatay bulshadaasi in ay dibudhaca iyo albaabka hunguriga iska xidho oo ay baahideedu ku koobto neef xerada looga yeedhyeedho, la godlo oo xerada ku noqda. Waxa ay sidoo kale garatay in ay heybadda iyo milgaha hanka adeegsato, si ay uga jawaabto waajibaadka xooluhu u baahan yihiin. Hanka macnihiisu waa: baahi kooban iyo tacab ballaadhan. Waa in qofku si kooban u cuno in kooban oo aanu isku furin boqol baahiyood oo hunguri leeyahay oo aanu ka jawaabi karin. Macnihiisa ballaadhanina waa: xishoodka, miyirka, is ururinta, ilaalinta karaamada iyo magaca, xeerinta dhegta, huwashada sharafka iyo dhawrsoonaanta, iyo, fogaynta: beenta, lahashada, hammada, hubsiino la'aanta, eexda, xanta, damaca iyo intii la hal maasha.

Intaas oo dhammi waxa ay fursad kuu siinaysaa in aad noqoto qof bulshadu jeceshahay iyo in aad fursad u hesho gudashada waajib xalaal ah. Waxa kale oo ay kuu horseedaysaa in aad samayso tacab ku astura oo aad baryo, hungo iyo wax isdhaafin kaga maaranto. Waxa ay suurtagal ka dhigaysaa in dadku wanaagga qofnimadaada iyo kaalinta aad nolosha ku yeelato kugu jeclaadaan. Intaas oo dhammi waxa ay fududaynaysaa wixii aad bulshada dhexdeeda ka yeelato iyo in Ilaahay fadligiisa muraaddadaada if iyo aakhiraba fududaadaan. Intaas kadibna, waxa imanaysa in aad naftaada jeclaato oo aad is mahadiso.

Dhinaca kale, haddii lagugu naco duulduulka hungurigaaga, adiguna naftaada waad nacaysaa. Taasi waxa ay dhalinaysaa in nolosha oo dhammi kaa xidhanto ama wax waliba ay mashkilad kugu noqdaan. Dulucda sii shishaysaana waa, wanaaggaaga iyo hufnaantaadu waxa ay kuu xoojiyaan gudashada waajibaadka waxtarka leh. Nolosha iyo kaalinta aad ka qaadanayso waxa xukuma hiyiga iyo hilinka – taas oo ah maskaxda iyo kasha ama qalbiga. Sidaas ayaa albaabka hunguriga la isaga xidhaa marka aad doonayso in aad nolosha guul ka soo hoyso.

Hunguriga sharcigiisu waa in waqti badan wax la cuno, waqti yarna wax la qabto. Taasi waxa ay keenaysaa in baahidu ka badato dhaqaalaha, kadibna

dhaqaaluhu burburo. Dabadeedna, iimaanka iyo karaamada loo xaraasho ka jawaabidda baahida hunguriga. Sidaas darteed, waxa ay goosteen in ay iska xidhaan oo ay quful adag ku jebiyaan albaabka bahalnimada ee ay hilib quudatada la wadaagaan.

Taas beddalkeeda, waxa ay go'aansadeen in ay adeegsadaan aragtida la baxday hanka, taas oo mabda'eedu yahay in waqti yar wax la quuto, waqti dheerna wax la qabto. Taasi waxa ay keenaysaa in dhaqaaluhu ka bato baahida. Dabadeedna, iimaanka iyo karaamada la hanto oo qofku mashkiladaha xor ka noqdo.

## Qaybsiga Dhaqaalaha

Sidii aynnu soo xusnay, Soomaalidu waxa ay ku sugnayd nolol xidhxidhan oo aan lahayn meel laga baxo iyo meel laga soo galo, ilaa laga gaadhayay qaybsigii Afrika iyo markii gumeysigu Afrika cagaha soo dhigay. Waa xilligii dhuugga iyo qayraanta ee aanay dadku maryaba xidhan jirin. Xilliyadaas, waxa ay taabka ku dhigeen dhawr meesin oo xoolo ah oo ka kooban geel, lo', adhi, iyo haddii lagu daro, gammaan. Inkasta oo uu gammaanku nolosha bilo oo uu kaalin xarrago, sahan ama duullaan ka qaato, haddana, meesinnada kale ayaa ka baahi weyn.

Lo'du waa dhaqaale ka dhaxayn kara ragga iyo dumarka oo labadooda midba dhinac ka soo galo. Waxa loo baahday dhaqaale ragga iyo dumarka kala sooca oo xad u kala yeela, sababo lagama maarmaan ah dartood. Dhaqaalaha labada kala kaalin kara ama kala duwi karaa waxa uu noqday adhi iyo geel.

Adhiga waxa ay dhaqistiisu u fududdahay haweenka; iyaga ayaa dhiqi kara, iyaga ayaana hawshiisa hanan kara, waayo, daaqa adhiga hawshiisu way fududdahay. Si kastaba ha ahaato e, haweenka iyo adhigu waa laba isku qurux badan oo la isku abuuray.

Geelu waxa uu ku qurux badan yahay in rag dhaqo, maxaa yeelay, waa ka amar weyn yahay haweenka. Geelu waa ka hawl badan yahay, waana ka waxtar weyn yahay adhiga. Geela ragga ayaa waraabin kara, daaqa ku kaalin kara, oodi kara, qali kara, lisi kara, isla markaasna dhicin kara.

Geelu waa ka heybad weyn yahay, kana hanweyn yahay adhiga. Sidoo kale, waa ka adkaysi badan yahay, ka caano badan yahay, ka cad badan yahay, kana waxtar roon yahay adhiga. Intaas waxa dheer, geela awrkiisu waa ka qaad weyn yahay xoolaha kale.

Inkasta oo hadh iyo habeen dhaqaalaha guud ahaan hareeraha laga joogay, haddana waxa jiray waajib iyo wadajir guud oo xeer ka dhigay in aan ilaalinta xoolaha loo kala sokayn. Waxa kale oo muuqatay in xilalka iyo hawlaha dhaqaaluhu qaybsanaayeen oo cid walba lagu ogaa xilka ay ku habboon tahay. Waxa ay u kala baxeen oo isu kala saareen rag iyo dumar; yar iyo weyn. Kala duwanaanta iyo kala tagganaanta xoolahooda ayaa keenay in ay dhaqaalaha qaybsadaan. Qorshuhu waxa uu u dhacay sida tan: ragga waa ku geela, dumarka waa ku adhiga, lo'duna waa dhaqaale labada dhinacba soo gala.

Taasi waxa ay keentay in labada dhinac kala baadaan, kala durkaan, oo ay xad iyo xuduud dhex yaalla ku kala aadaan. Arrintaas ummuuraha ka dhashay waxa u mudan in dhinac waliba dhinaca kale u hiloobo, u heellanaado oo u xiisoodo bal in ay daqiiqado eray ama ereyo is dhaafsadaan. Mid kasta midka kale ayaa waslad dheemman ah ku noqday. Barbaarka waxa guul, hoodo, iyo ayaan u noqotay in uu mar uun is hor taago gabadh timo tidcan. Waa kala laba xero, waa kala laba hawlood, waana kala laba jinsi. Waxa ku kala gudban sharci Islaamnimo, asluub iyo anshax.

Waxa isku keeni kara tacab iyo ragannimo mid waliba dhiniciisa ku dhaqaaqo. Gabadhu geel bay ku xidhan tahay, waliba geel faro badan oo mararka qaarkood boqol halaad oo yarad ah gaadha ayay ku xidhan tahay. Haddii dhinaca kale la iska taago waa nin magtii. Boqolkaas halaad sida la isugu keenaa way adag tahay. Hashu ilmaha waxa ay uurka ku siddaa laba iyo toban bilood iyo labaatan habeen.

*Saddex boqol iyo*
*Sagaashan habeen*
*Oo sidkaa yahay,*
*Sabool sugi waa*
*Oo ku soo saar;*
*An se kugu simay.*

Dhaqaalahaasi waxa uu suurtagal ka dhigay in ragga iyo dumarku xad iyo xeer kala yeeshaan, dhinac kastaana hanto ama ku qaybo hawsha uu hibada u leeyahay. Mashkilad weyn ayaa dhici lahayd haddii dhaqaaluhu yahay geel keli ah oo rag iyo dumar golaha iyo geela hortiisa la isugu keeno. Aad ayay u fool xun tahay qof dumar ah oo geel la joogta, lisaysa, libaax kula dagaallamaysa ama dhicinaysa. Sidoo kale, aad ayuu u fool xun yahay nin adhi lisaya iwm.

Noloshu waxa ay dhadhan leedahay marka ay is buuxiso ee cid waliba soo bandhigayso waxa ay hibada u leedahay. Gabadh caano lulaysaa aad bay u qurux badan tahay oo haddii qofka ag joogaa lab yahay ashqaraar buu la dhacayaa. Laakiin nin gadh weyn oo caano lulaya ama ilmo yar xanbaarsan oo u heesayaa aad buu u fool xun yahay. Qofka camalkiisu waxa uu qurux badan yahay marka uu hibo waafaqsan u leeyahay.

Waxa la sheegay in reer degay. Dabadeedna, raggii reerka nin ka mid ahi inta uu ood gooyay, jiiday. Haweenkii waxa ay ku foogan yihiin hawl culus. Waxa ay dhisayaan aqalladii. Ninkii oodda soo jiiday ayay haweenay ku qososhay oo ku tidhi, "waar oodda ha jiidin ee sare u qaad." Waxa uu ugu jawaabay odhaahda aad maqasheen, "ood qaadis iyo jiidis, waa isla guryo geyn." Isla guryo geyn ma aha ee ood jiidista waxa ku qurux badan qof dumar ah oo marka ay jiidayso waad daawanaysaa. Ninkuna marka uu garabka soo saaro ayuu ku qurux badan yahay, waayo, hannaankaas iyo habkaas ayuu hibo u leeyahay. Dumarka ayaaba daawada oo ay sidaasi cajabisaa. Aan idhaahdo, qof waliba waxa uu qurux badan yahay marka hawsha uu qabanayo uu hibo u leeyahay.

*"Waxa caynba cayn looga dhigay, hays cajabiyeen."*[16]

Ragga iyo dumarka, mid waliba hawl ayuu qabashadeeda u abuuran yahay. Sidaas darteed, geela dhiqiddiisa waxa hibo u leh ragga, adhiga dhiqiddiisana waxa hibo u leh haweenka. Bulshadaasi sidaas ayay dhaqaalaha u qaybsadeen.

Xeerarka kale ee dadkii sebankaasi nolosha u samaysteen waxa ka mid ahaa: dadku waa rag iyo dumar, marka xiga waa yar iyo weyn, qof kastaana nolosha waxa uu ku leeyahay kaalin waafaqsan da'diisa iyo hibadiisa. Qof kasta gudashada waajibaadka iyo kaalinta uu nolosha ku leeyahay ayaa lagu

[16] Waxa curiyay Gabyaagii Cilmi Ismaaciil Liibaan "Boodhari" (AHN).

abaalmarinayaa ama uu kaga tirsanaanayaa beeshaas xooladhaqatada ah. Qof waliba wixii uu la soo baxo ayuu nolosha ku leeyahay.

Waxa ay guddoonsadeen in ay guud ahaan nolosha wadaagaan oo dhaqanka iyo dhaqaaluhu ka dhexeeyo ama dhurka iyo dhaqanku ka dhexeeyo. Baadida waxa leh habeenba ninka ay maganta u tahay ee ay ag joogto, waana in uu xerada iyo daaqa ku ilaaliyo. Xoolihiisa ayay ka mid tahay ilaa maalinta loogu imanayo. Martidu waa habeenba ninka ay dul joogto iyo haynta. Ceelka iyo meeshii biyo leh ama daaq leh waa la wada leeyahay. Hawsha waraabku waa dhex iyo hadba ciddii ay ka fursan weydo. Dadku ama waa tol ama waa xidid.

## Geela

Dhaqaale qaybsigii aynnu sheegnay, waajibaadka iyo kaalinta labku waxa ay noqotay geela. Waqtigaas ummadda dhaqaalaheeda waxa ugu mudnaa geela.

*"Nin ragoo la gawracay baan*
*Gashigiisu kuu iman e,*
*Geelu xoolo kuma jiro"*[17]

Waxa aynnu u baahan nahay tusaale markhaati u noqda Geelu xoolo kuma jiro.

Geelu xoolaha kale waa ka adkaysan iyo hilib badan yahay. Waa ka caano badan yahay, ka qaad weyn yahay, kana muuq dheer yahay. Cadkiisa iyo caanihiisu xoolaha kale waa ka caafimaad badan yihiin. Waa ka hayalsan yahay, ka gobsan yahay, kana heybad weyn yahay. Si taas la mid ah, geelu xoolaha kale waa ka xeeldheer yahay, waana ka caansan yahay oo Qur'aanka ayaa sheegay. Waa ka udgoon yahay, kana heemaal wacan yahay. Xoolaha kale, geelu waa ka deggen yahay kana dul iyo sabir badan yahay.

Geela haddii col qaado rag baa dhicin kara. Magta iyo dhimashada ayaa lagu gudaa. Soddon ayuu biyaha ka qadaa. Sida uu dhaqaalaha kale uga waxtar badan yahay ayuu uga ammaan iyo suugaan badan yahay.

[17] Waxa curisay halabuurka caanka ah ee Canbaro Nuux Maxamed.

Geelu waxa uu leeyahay so' iyo saan. Waxa uu leeyahay laf iyo lud. Waxa uu leeyahay sar iyo seed. Waxa uu leeyahay jiidh iyo jibaadh.

Geelu waxa uu leeyahay kurayo maraqa, hadhuubka iyo maqaarka u sida, u maraq roga, soo godla, kuna gaagixiya. Haddii ilmahu ka baxo oo maqaarku lumo, waxa uu leeyahay kuray foolkeeda istaaga oo uu ku godlado. Suugaanta geelu leeyahay ayaa markhaati ka ah in geelu yahay foolaadka iyo mudanka meesinnada aynnu dhaqanno ama aynnu dhaqan jirnay.

Caanihiisu in ka badan sagaal jeer ayay is beddelaan oo ay mar walba sameeyaan dhadhan goonni ah. Waa *ganuun, galax, ilqaad, maydhanaan, karuur, jinowxoorre, qanjegooye, waraabeqandhis, iyo galmulux.*

Raggu waxa uu duunyada kale uga jecel yahay; marka hore, geelu waa dhaqaale waafaqsan ragga. Waa ka aftahammo badan yahay, waana ka ammaan badan yahay. Intaas oo dhammi waa astaan geelu xoolaha kale dheer yahay. Haddana waxa aan been ahayn in geelu dhaqaalaha kale ka hawl badan yahay marka loo eego qaadka biyaha, cunnada, xerada iyo cadowgiisa.

Geelu waa heybadda xoolaha oo cid waliba isha ayay ku haysaa. Cidda gacanta ku haysaa waa ka hanweyn tahay cidda aan geel xerada ugu jirin. Magtii baa ku xidhan, gabadhii baa ku xidhan, martidii baa ku xidhan, geeddigii, dhaankii, sahankii iyo muraaddo kale oo badan oo noloshu leedahay ayaa ku xidhan.

Waxa la sheegay in waqtigaas aynnu ka sheekaynaynno hal geela ka mid ahi qaadday cudur la yidhaahdo *gawsdheero* – gaws baa ka dheeraaday gawsihii kale. Hashii waxa ay joojisay daaqii, waayo, hashu daaqa cawska ma calaalin karto mar haddii aan gawsaheedu sinnayn. Dhallinyaradii geela la joogtay hashii ayay fadhiisiyeen. Waxa ay u qalab qaateen in ay hasha gawska dheeraaday gawsaha kale la simaan.

Waxa ay soo gooyeen qori farraarro leh. Hashii ayay afkii u kala qabteen. Afkii hasha ayay qorigii udubka u ekaa fuqii hoose ku qotomiyeen, gawsihii sarana waxa ay ku caabbiyeen farraarradii qoriga, si ay gawska dheer u qoraan oo ay gawsaha kale ula simaan. Waxa ay la soo baxeen gudin la yidhaahdo gudin-quraar oo ay geela koorta ugu qoraan. Waa gudin aad u yar oo qorka yaryar koorta lagaga dhammeeyo.

Kuraydii iyaga oo gawskii qoraya ayaa qorigii labada fuq kala hayay liicay, dhexdana ka jabay. Markii ay hashii afkii isku qabatay ayay gudintii ay gawsaha ku qorayeen oo hasha carrabkeeda hoos taallayna ku siibatay oo inta ay dhuunta raacday caloosha fadhiisatay. Gudintu daxal ayay lahayd oo hashii waa ku bukootay. Ragga geela la joogaa waa dhallinyaro oo aqoontoodu ma gaadhsiisna in ay helaan talo hasha lagu daweeyo.

Hasha cudurrada geela ku dhacaa ma hayo ee mashkiladdu waa gudinta daxalka leh ee caloosheeda ku jirta. Goor subax ah, iyada oo dhallintii hashii oo sidii u bugta ag joogaan, wax xal ahna aanay hayn, ayaa waxa ay halacsadeen nin cudurrada geela ku dhaca ku caan ah oo dhankooda u soo socda. Dhallinyaradii waxa ay ku faqeen in Axmed Wacays – ninkii cudurrada geela ku talaxtagay – uu maanta lib ku helayo ama uu ku guuldarraysanayo in uu sheego waxa hasha haya. In yar haddii la joogay ayuu Axmed geeljirihii isla soo taagay, iyaga oo meel hashii agteeda ah kadallooba.

Salaan kadib ayuu hashii indhaha ku dhuftay. Hashu durba ganka (dhogorta) ayay ka madoobaatay. Waxa uu gartay in ay hashu bugto. Waxa uu dhallinyaradii weyddiiyay waxa hasha ku dhacay. Waxa ay ugu warceliyeen, "hasha cudurka hayaa annaga waa naga da' weyn yahay, ee waa adigii cudurrada geela ku dhaca buxuurka ku ahaaye, bal noo sheeg cudurka hasha haya."

Axmed Wacays, ninkii cudurrada geela ku talaxtagay, isaga oo baadidoon u ah bal in uu garto hasha cudurka haya ayuu dhinicii hasha u dhaqaaqay. Waxa uu u kuurgalay hasha indhaheedii iyo dhogorteedii. Dhinac walba wuu kaga wareegay. Wuu dhaqaajiyay oo wuu fadhiisiyay. Dabada ayuu ka ursaday. Marba gees ayuu kaga yimid, laakiin suurtagal way noqon weyday in uu garto eelka hasha ku yuurura.

Hasha cudur ka mid ah cudurrada geela ku dhacaa ma hayo. Gudin ay liqday. Maartii gudinta iyo daxalkii ayay la madawdahay. Dhallintu intaas way isku iljebinaysaa oo waxa ay doonayaan in ay maanta Axmed ka lib helaan, si ay u beenawdo in Axmed cudurrada geela ku dhaca caalin 'professor' ku yahay. Baadidoon iyo baadhis dheer kadib, Axmed markii uu ogaaday in hasha cudurka hayaa aanu ahayn cudurradii geela ku dhici jiray ayuu qoslay. Dabadeedna waxa uu yidhi, *"waar hashu maankayga gaddaye, ma maasaar bay liqday!"*

Dhallintii yaab iyo shaamarreer ayay u soo baxeen oo inta ay is wada eegeen ayay qosleen. Waxa ay u sheegeen in hashu maasaar liqday, bal se waxa ay weyddiiyeen sida uu ku gartay. Jawaabta meel dheer kama doondoonin oo waxa uu yidhi, "korkeeda iyo dhogorta madoobaatay ayaan ka gartay." Axmed weli waa macallin cudurrada geela ku fogaaday, mar haddii malihiisu noqday in hashu maasaar ama gudin-quraar liqday.

Mar kale waxa ay weriyeen in goor caweys ah uu nin hal soo godlay. Inta uu hadhuub la hoos galay ayuu markii uu hasha kala hoos baxay hadhuubkii hoos u eegay. Kadibna waxa uu yidhi, "ma saddex dhal baad tahay, ma saddex qumis baa ku dhalay, ma saddex waddo ayaan kaa tallaabiyay, ma saddex jeer baan kuu maraqrogay, ma bil saddex ayaan ku riday, Wallee caanaha aan caawa kaa waayay dib kaagama sugo." Bulshadaasi hasha raadkeeda ayay yaqaanneen, dhirta ay maalintaas daaqdayna waxa ay ka garan jireen dhadhanka caanaheeda.

Waxa ay yidhaahdeen, geelu afar jeer ayuu ololaa: mar dhib haysa ayuu ka cabanayaa oo waa marka la gebagebeeyo ama la rarayo; mar bahal, gaar ahaan waraabe ayuu ka ololayaa; marna waa karreeb oo gabantii yarayd ama boqortooyadiisii ayuu tebayaa. Haddii hashu oogta waaberi oodda caasha saarto oo reenka kala goyn weydo, ninka lihi waxa uu odhan jiray, "tolow ma iyada ayaa dhimanaysa, mise aniga ayaa dhimanaya!"

Waxa ay yidhaahdeen, habeenkii marka uu geelu xerada ku jiro haddii uu dibadda eego oo uu markiiba ka soo jeesto, qof ayuu arkay. Haddii uu dibadda eego oo uu raamsiga joojiyo, waraabe ayuu arkay. Haddii uu raamsiga joojiyo oo uu istaagana, libaax buu arkay.

Geelu waxa uu iska leeyahay boqortooyo ay ku kulmaan isaga (geela), ugaadha iyo libaaxu. Waxa uu jecel yahay geed sare iyo meel dugsi ah. Dhir gaar ah ayuu jecel yahay inuu daaqo. Meel koortiisa mooyee aan koor kale ka baxayn iyo sabo aan lo' iyo adhi ka dhoweyn ayaa xero looga dhigaa.

Hadalhaynta, jamashada iyo jacaylka geela loo qabo ayaa magaciisu ku dhisan yahay. Aftahammada iyo hawraaraha aynnu ku dhaadanno geelu badh ama ka badan ayuu leeyahay. Waxa uu leeyahay gabayo iyo hees hawleedyo badan oo ay ka mid yihiin:

*"Ragga laxaha sii dhawrayow, dhaqasho waa geel."*[18]

[18] Waxa curiyay Gabayaagii Cumar Maxamed Ustraaliya (AHN).

*"Hadduu duudka simo geelu waa, dowlad goonni ah."*[19]

*"Aakhiro nin aan geel lahayn, lama ammaanayn."*[20]

*"Hadduu xero galo,*
*Xaawalaydiyo,*
*Xabaabuurradu,*
*Iiga xoog roon,*
*Xarbigeedana,*
*Anuun baw xidhan."*

*"Maxaa dumarkiyo,*
*Danbas jiifyadu,*
*Kuu danbariyaan,*
*Maxaa doobkuna,*
*Maalin duullaan,*
*Kuugu diriraa?"*

*"Ninna dhuunuu,*
*Kuu dhex joogaa,*
*Ninna dhaqashuu,*
*Kuugu dhaadhacay (kuugu dhabarjabay).*

Intaas iyo in faro badan oo aynnu mar kale iyo meelo kale ku xusi doonno ayaa geela laga yidhi. Intaasiba waa in uu mudan yahay oo aan male'awaal iyo iidheh ahayn.

---

19 Waxa curiyay Gabayaagii Cabdillaahi Suldaan Timacadde (AHN).

20 Waxa curiyay Gabayaagii Cabdi Warsame Baanje "Cabdi-Gahayr" (AHN).

# CUTUBKA III

## GUUR IYO GEEDDI NOLOLEED

*"Si nololwadaaggu u fududaado, waa in wax isu-ahaani jirto, dadkuna yeesho xeer iyo xadhig wax ka dhexaysiiya."*

Noloshu tacab iyo hawl ayay ku dhisnayd. Ma jirin qof bilaash wax ku helaa, waayo, haddii ay taasi dhacdo cidiba isma lurteen oo dhib uma maryo faydateen. Qofku inta uu geed iska seexdo ayuu wax aanu ku hawshoon cuni lahaa. Nolosha waxa ugu mudan ee ugu miisaanka weyni waxa uu ahaa guurka.

Si aan gogoldhaaf iyo gacandhaaf u dhicin, labada qof ee is guursanaya waxa lagu xidhay in mid waliba kaalintiisa guur ka soo baxo. Waxa marka horaba la dhex dhigay derbi adag iyo deyr sharci ah oo ay u hoggaansamaan. Deyrkaasi waxa uu ahaa xeerarkii iyo habdhaqankii bulshadu dhigatay ee ay dooratay in ay ku dhaqanto, si aanay noloshu u dumin ama u dhaawacmin. Wiilka waxa lagu xidhay geel tiro badan oo gabbaati, yarad iyo guri-kuhadh saddexdaba leh. Gabadha waxa lagu xidhay in ay guurka kahor hanato guri iyo inta kaalin dumarku nolosha ku leeyahay oo dhan.

Kudhowaad afartan sannadood ayuu wiilku ku sugnaanayaa xaalad dayro la yidhaahdo, oo uu hurdo, haasaawe iyo gabadh araggeedba ka saahidayaa. Dhinaciisa iyo ciidda waxba uma dhexaynayaan. Jidhif ayaa fuulaysa. Waxa uu noqonayaa bir finiin ka hadhay oo waxa uu qaayibayaa oonka iyo harraadka. Waxa uu quudanayaa hal caanaheed labada xilli ee subaxdii iyo habeenkii. Wehelkiisu waa hasha iyo libaaxa oo ay hasha isku haystaan.

Waqtigiisu waa: oodid, aroor, guluf iyo weerar geeldoon ah oo laga yaabo in lagu dilo ama uu wax ku dilo oo yaradkii iyo dhaqaalihii uu boodhka afartanka sannadood u raxanraaday jiho iyo xero kale loo ambaqaado. Gacmihiisu gaatir ayay yeesheen sababna waxa u ah shubaasha iyo darka ceelka. Guurka gabadhu waxa ka sokeeya intaas oo mashkiladood iyo intaas oo lama arag ah oo xaaladda lagu soo hooyaa sheegan tahay oo shareeran tahay.

Haddii uu intaas ka jawaabiddooda ku guulaysto, sida uu gabadh isku hor taagaa way adag tahay. Haddii uu is hor taago rejada ayaa sii fogaanaysa, waayo, mararka qaarkood gabadhu uma gacanbannaana oo mar walba waxa ay gudanaysaa kaalintii ay nolosha ku lahayd. Inta wiilku geela ku maqan yahay waxa ay ku fooggan tahay aqalkii, harrarkii, kebaddii, dhigtii, udubkii, iwm.

Haddii wiilka iyo gabadhu kulmaan, waxa ay ku wada hadlaan waa sarbeeb, sogordoh iyo halxidhaale. Waqtiga ay labada qoys guur dhex mara wiilka iyo gabadha ku kulmaan waa dheer oo dhib leh. Waa fursad iyo biyo gu' ah, sareedo iyo nin u nool, iyo sebaan iyo nin ka baxa.

Barbaarka waxa sed u ah habeen goobcayaareed lagu kulmo xilliga barwaaqada ee uu gu'gu magacyo yeesho; kolka rarka, aroorka iyo geeddigaba laga nasto. Waxa barbaarka liibaan u ah haddii reer hablo joogaan la soo ilaaleeyo, caways la dul yimaaddo, jaanta dhulka lagu dhufto, jalleecada iyo jeedaalada dhinaca hablaha laga filayaa badato, oo nafta lagu maaweeliyo hawraar iyo halabuur odhanaya:

*"Waa gabadh Suldaan dhalay,*
*Saxarli' hooyadeed tahay,*
*Waa la soo sasabayaa*
*Ha u sabir darraanina."*

*"Waa dhul oo wax dhacay ma ogee,*
*Waa dheg oo war kama dheragtee,*
*Reerku nabad ma soo dhaxay?"*

Waxa la joogaa goob aftahammo. Hawraarta iyo halabuurka la isku dhiibdhiibayaa waa halkaraan goobta ka dhalanaya. Barbaarka habeenkaas waxa u cawo iyo nasiibwanaag ah haddii gabadha cayaarta boodaysa ay maradeedu maradiisa taabato. Barbaarka waxa u caado ahayd in uu maradiisa ay gabadha maradeedu taabatay laablaabo oo inta uu soo saaro, marba ur ursado, deetana uu dareen shidan la seexan waayo.

Jeelka iyo hilowga barbaarka kashiisa habeenkaas buuxiyaa waxa uu ka soo jeeday xeerka adag iyo dhaqanka suubban ee bulshadu lahayd oo qeexayay in aan la isku dhex daadsanaan, si hilowga la isu qabaa u keeno in wiilku guto waajibkiisii, taas oo ah qaabdhismeedka noloshu ku dhisan tahay iyo wax diinta Islaamku ina farayso. Haddii aan la kala xishoon oo la isku

milmo waxa lumaya dhadhankii nolosha, waxaana burburaya hufnaantii, gobannimadii, hankii, xishoodkii iyo isu hanweynaantii.

Waxa loo jeedaa in guurku milge yeesho oo aan lammaanuhu weligood kala xiisadhicin. Waxa loo jeedaa in qofba qofka kale ragannimo iyo hufnaan ku cajabiyo. Waxa loo jeedaa in aan hunguri la isku guursan ee han iyo isku dhaadasho la isku guursado. Waxa loo jeedaa in aanay iman foolxumo iyo fawaaxish dila karaamada, dhaqanka iyo tacabka intaba. In la isku dhex daadsanaadaa waxa ay luminaysaa ixtiraamka, isku hanweynida, wadajirka iyo hannaankii noloshu ku socotay. Waxa ay luminaysaa guud ahaanba dhadhankii iyo xiisihii nolosha.

Ballamada guurka waxa astaan u ahayd biyo gu' iyo in xoolaha usha laga dhigo, wadaantana tiir la sudho. Wiilka ama barbaarka hawooday waxa uu gacanta ku hayaa shuruudihii albaabbada guurka ballaqayay. Yaradka waxa xukuma: gabadha warka laga hayaa waa maxay, aabbaheed waa kuma, hooyadeed waa tuma, iyo taf ayeeyo ka day, iwm.

Mar iyo laba ayuu isla taagay, wuu docadoceeyay, waxaanu isugu daray sarbeeb iyo sogordoh. Murti hannaan san oo duurxul ah ayuu xaggaas iyo xaggaasba ka dhigay. Mar kale intii waa ka soo dhowaaday, oo harrar qabyo ah oo ay samaynaysay ayuu dacal kaga fadhiistay. Mar kalana madaxa ayay darro (malaas) u marisay.

Geelii gabadha laga bixin lahaa gacanta ayuu ku hayaa, tolkuna talo ayuu ku leeyahay arrinta. Guurka waxa gacanta ku haya labada qoys iyo gurdanraac.

Geesta gabadha, sahankii ay dirtay ayaa wiilka ka warbixiyay. Waxa ay gacanta ku haysaa waxii ay geela dhaafsanaysay. *Soddon baaro, saablay gingiman, sarabo ceegaagta*. Iyo intii gacalku ku ladhi jiray.

Degdeg ma jiro. Hawlo ayaa la galayaa, hubsiinana way jirtaa. Inta aan la is gudagalin ayaa arrimaha la baaqbaaqayaa oo la bilkeedayaa. Waxa dhacaya oddoros, awaale day iyo bal in heshiiskii wax ka soo noqdaan. Intaas kadib wixii la filaaba waa geed iyo guurtidii labada dhinac.

Murti la isdhaafsado, meexaane, maahmaaho iyo arrinta oo loo kuurgalo, halka ay uga guurtaa waa gabbaati hordhac ah, isgacanqaad, gabadha oo loo abla'ableeyo iyo hurin haween ah oo hooyadeed ku jirto oo baanaha isdhaafaya dhegta u raariciya, meel dadabta dibaddeeda ahna taagan. Waxa

la isku gacanqaadayaa in lagu xidido hannaan gobannimo iyo guri dhisma. Goosh danbe iyo goob kale iyo wiilkii oo hurin ilmaadeerradiis ahi gelbinayaan iyo gole ballaadhan oo loo dhan yahay. Guddoonkii yaradka iyo gabadha iyo wiilka oo la is tuso. Ballan iyo dardaaran guud ayaa xaajada lagu gebagebaynayaa.

Waxa la dhawraaba waa goosh danbe, aroos, giblo, mashxarad iyo geeddigii qoyska cusub. Duco lagu taartaaro oo foolaadku yahay *wiil iyo caano*, dabbaaldeg, hambalyo, iyo inanta oo hagoogta laga rogo.

## Wiilka

*"Wacays bay soo siddaa; waa wiil"*

Foosha, wiilku marka uu madaxa keeno, hooyo hufan la baxday oo aan turxaan lahayn ayaa sacabsan jirtay oo sacabbada u dhigi jirtay. Marka uu ifka yimaaddo ee uu uurka hooyadii ka soo baxo farxad iyo dareen aloosan ayaa lagu soo dhoweyn jiray. Waxa la hubin jiray in uu caafimaad qabo. Jirjirka ayaa loo jiifin jiray si aanu hadhow badhi weyn u yeelan. Kadibna waxa lagu canqarin jiray caano lis ah oo haddii ay yaalliin caano geel ah. Caanahaasi waxa ay noqon jireen quudka ugu horreeya ee lagu sooro ama lagu habo.

Labada sannadood ee hore ayay hooyadu u heesi jirtay oo abla'ablayn jirtay. Waa ay xambaari jirtay, markaas ayay kalgacal iyo dareen shidan ugu heesi jirtay. Codka naxariista leh ayay ku seexin jirtay. Waxa ay xusi jirtay ka ay jeceshahay in uu noqdo:

*"Dhammow dhammow dhammow wa',*
*Dhashii Nebi Muxammadow wa',*
*Dhallaankii Faadumow wa',*
*Dhabtaydu ku diidi mayso,*
*Dhardhaar adag laguma saaro.*

*Dal dheer laga haybiyow wa',*
*Dermada loo sii hayow wa',*
*Sidii doog la higsayow wa',*
*Sidii damal la hadhsayow wa',*
*Dad iyo duunyo ba dhergow wa',*
*Ducada loo ururiyow wa',*

*Guntiga feedhaha gashow wa',*
*Gadh weyni ka soo baxyow wa',*
*Guddida geed ula baxyow wa',*
*Nugaal godan goonyaheeda,*
*Guddoonka ka yeedhiyow wa'.*

*Adoo laba go' iyo shaal leh,*
*Adoo geel dhalay dhex jooga,*
*Ayaan guri kaaga yeedhay,*
*Gabdhiyo wiil kuba duceeyay!"*

Sidaas ayay hooyadu wiilkeedu ugu halqaban jirtay. Marka hore, in uu Ilaahay cimridherer siiyo si uu fursad ugu helo in uu kaalin nolasha uga guto oo weliba guto kaalin uu ragannimo iyo waxtar ummadeed ku caanbaxo oo magaciisa meel dheer iyo meel dhowba lagu hayo. Hooyo waliba waxa ay jeceshahay in ubadkeeda la yidhaahdo waa hebel ama heblaayo oo hooyo dhashay.

Wax ay hooyadu u heedhaheedhaysaba, wax ay sida ay ugu hanweyn tahay hawraar ku astaysaba, wax ay koolkoolisaba, wax uu dhabarkeeda ku seexdaba, wax ay habtaba, maalinta uu saddex jir gaadho ayaa koolkoolinta ugu danbayn jirtay. Lama oggolayn in naxariista hooyadu nuglayso, lamana oggolayn in uu haweenka ku dhex koro oo uu ayeeyo korisay iyo habarladaaq noqdo. Ujeeddooyin waaweyn ayaa arrimahaas laga lahaa.

Saddex ilaa afar sannadood ayuu wiilku dugsan jiray naxariista hooyada iyo heedhaheedhaynteeda. Muddadaas kadib ayuu ka xidhiidhfuran jiray tafta hooyada. Maalintaas ayaa ugu danbayn jirtay koolkoolin, hoo caanaha iyo hooyo halkan soo seexo intaba. Maalintaas ayaa ugu danbayn jirtay oohin iyo qodax mudday ka calaacalkeeda.

Naxariistii hooyada naxariis ka duwan oo ka xeeldheer ayuu u gudbi jiray. Waxa uu kow odhan jiray cashar layli ah oo ku saabsan sidii uu nolosha kaalin uga qaadan lahaa, si aanay noloshu mashkilad ugu noqon ama aanu isagu nolosha mashkilad ugu noqon.

Yaraantiisaba waxa loo carbin jiray in uu xerta geela ka mid noqdo. Tuurta ayaa lagu qaadi jiray, iyada oo geel horweyn ah lala raacayo. Geeljire ay naxariis kala dhaqaaqeen oo bir finiin ka hadhay noqday ayaa taladiisa la wareegi jiray. Adadkaanta iyo gudashada xilka da'diisa ah ayaa lagu

barbaarin jiray. Iyada oo aan caano la waayin ayaa gaajada la bari jiray. Harraadka iyo dhaxanta u-adkaysigooda in uu qaayibo ayaa lagu tababari jiray. Socodka dheer iyo sabirka ayaa la bari jiray. Guuraha iyo galabcarrawga ayaa lagu ababin jiray.

Tabaha ultanka, legdanka iyo mintidnimada ayaa lagu barbaarin jiray: in laba lix jir ahi isku baxaan oo ay legdan ku kala sedqaadaan ama laba ulood oo madheedh dubayoobay ah loo dhiibo oo lagu amro in aanay isu tudhin.

Habeenkii marka geelu xerada yimaaddo ayaa wiil la da' ah la odhan jiray u soo bax oo la legdan, haddii la legdana, habeenkaas caano xaaraan ayay ka ahaayeen. Haddii ay ushu damaqdo oo uu ooyo, dibadda ayaa loo saari jiray.

Ciqaab kulul iyo waajibaad uu aqoon ka kasbo oo ragannimadiisa dhista ayaa lagu hawli jiray. Waa dhul oommane ah iyo nolol adag oo aan nasasho lahayn, nugayl iyo nacasnimana laga oggolayn.

Naxariista keli ah ee ubadka la barbaarinayaa u baahnaa waxa ay ahayd in loogu naxariisto sidii uu u gudan lahaa waajibaadka culus ee sugaya. Waxa loogu naxariisan jiray in aanu noqon cad bisil oo aan nolosha meel ka buuxin, oo ay dantu ku khasabto in macne la'aantiisa lagu naco. Xeerka noloshu ma oggolayn qof macne la'aan iskaga noolaada.

In ilmaha layli iyo tababar lagu dhibaa ma ahayn gumeysi, jahli, iyo naxariisdarro toona. Waxa loo gol lahaa in aanu isagu nolosha mashkilad ku noqon, noloshuna isaga mashkilad ku noqon. Waxa loo jeeday in aanu nolosha ku guuldarraysan oo macnadarro iyo gacmo madhan ku dhex joogin iyo in aanu waalidkii eersan oo odhannin, *'maxay ifka ii keeneen!'* Waxa looga dan lahaa in aan hadhow la xaman. Waxa la rabay in ragannimadiisa noloshu mahadiso oo aqoon, anshax iyo adduun uu ku soo kordhiyo. Marka uu waayo cid u calaacasha ayuu isyeelyeelka dhigi jiray oo uu runta iyo xaqiiqooyinka nolosha u hoggaansami jiray, naftiisana waafajin jiray sida laga rabo iyo waxa loo jeedo.

Macnuhu ma aha naxariisdarro ayaa keenaysay falalka noocaas ah, laakiin waxa arrimahaas looga gol lahaa sidii qofka looga dhigi lahaa qof macne leh oo xaalad kasta oo adag ka jawaaba. Naxariistu ma ahayn in aanu qofku dhib arkin, laakiin waxa naxariis ahayd in ilmaha la baro in uu dhibaatooyinka u adkaysto, waayo, adduunka ayaa dhib iyo dhabaradayg ku dhisan. Marka ilmaha la tababarayo, waxa loo jeeday in ilmuhu haddeer

iyo hadhowba uu nolosha sharcigaas leh kaalin ka qaato. Dulucda iyo halka loo gol lahaa waa in aanay noloshu ragannimo la'aan u dumin ee ma ahayn in aanu qofku dhibaatoon.

Shan jirka ilaa lix jirka hasha ayuu soo godli jiray, maraqa ayuu ka furi jiray, gabanta ayuu soo deyn jiray marka la lisayo, nirigta ayuu celcelin jiray. Hal badisa oo uu gaar u lahaa ayaa loo lisi jiray. Guntigaab ayuu la bixi jiray oo waxa uu lahaan jiray qeyd uu maalintiina guntado, habeenkiina huwado. Waxa lagu rari jiray gudimaha, hadhuubbada iyo maqaarka ugaadha.

Waxa uu halkaas uga gudbi jiray xaalad kalaguur ah. Kurey maraqa diira, maalintii geela irmaan u maraqroga, casarkii gayaxeeya, oo aan harraad, dhaxan iyo gaajaba damqin ayuu noqon jiray. Maraqdiir iyo marka geelu cabbayo horiddiisa ayaa hawlaha uu da'daas qabanayo ka mid ahaa. Qeydhab intaas ka waxtar roon oo hurinta ka waaweyn geela ku sima iyo geedfuul geela kor ka jeedaaliya oo orka iyo heesta wehel uga dhiga ayuu noqon jiray.

Shan iyo toban jirka ilaa labaatan jirka, waxa uu ka mid noqon jiray ragga geela haya. Marka uu barbaar buuxda noqdo ayuu rugaha ardaaga meel ku yeelan jiray. Mudanka barbaarta ayuu ka mid noqon jiray. Waxa uu qaadan jiray kaalin waafaqsan da'diisa. Waxa uu ku biiri jiray ragga talada haya ee u heegan waraabka, oodidda, lisidda iyo dhicinta. Intaas kadib ayuu noqon jiray doob hawooda oo haasaawaha googooyn jiray. Golayaasha ciyaaraha ee habeenkii ayuu ka muuqan jiray oo soddonka ilaa afartanka ku gaadhi jiray.

Marka uu doob noqdo ayuu hawoon jiray. Hagoog ayuu jiq isku siin jiray. Haasaawaha iyo sheekada hablaha ayaa hiyigiisa gali jiray. Socodka iyo doolaalada ayuu galaabixin jiray. Marka uu afartan jir ku dhow yahay ayuu odhan jiray:

*"Gu'ga gu'ga sidaan u lahaa,*
*Gu'ga xiga sidaan u lahaa,*
*Geela badi sidaan u lahaa,*
*Ayaa gadhku gomodda i habsaday."*

Gadiidkii ama maalintii, inta badan marba gabadh adhi la joogta ayuu geed ay dhinac ka taagan tahay, isaguna dhinaca kale iska soo taagi jiray. Waa marka wiilka iyo gabadhu noloshaas isugu dhow yihiin, marka laga reebo

goobaha habeenkii iyo madadaalada gu'ga. Waxa ay ku tidhaahdaa, "dhulka toosi." Waa erey ka mid ah ereyada haasaawaha ku godlo. Markaas ayaa wiilkuna ugu jawaabaa, "waa tahay ee ka dhaqaaq." Markaas ayaa la is gartaa oo hadal la godlaa, labada ruuxna midba wax u baxaa ama u iftiimaa. Hadalka laguma sii fogaado ee waa la kala dhaqaajiyaa. Hawlo ayaa lagu fooggan yahay oo hadal dheer waqti looma hayo, maantana intaas ayaa ku filan.

In gabadha gashaantida ahi erey ku tidhi ayaa wiilka cuslaysa, guushaas ayaanu la dhaqaaqaa. Weli hadalku guntii ma aha ee waa golakafuul.

Guurka, geeddi dheer, goobo badan, iyo gooro badan ayaa xeer u ahayd. Duurxul iyo weedho dadban ayuu lahaa. Kuurgal iyo baadidoon dheer ayuu lahaa. Miyir iyo hubsiino ayuu lahaa. Gaadasho iyo saamasho ayuu lahaa. Waxa uu lahaa dabagal loo jeedo taf ayeeyo ka day oo macnaheedu yahay shishe u baro; oo macnaheedu yahay hiddaraac iyo toyasho sugan. Intaas oo dhan iyo waddadaas dheer waxa loo marayaa yaan qoomammo danbe dhicin. Goobo badan, gole cayaareed iyo golakafuul ayaa xigi jiray.

Quruxda korka waxa laga doorbidaa quruxda kasha. Waxa la kala yidhaahdaa *qurux iyo qiimi*. Waxa nolosha waafaqsan qiimiga oo macnihiisu yahay ragannimada qofka ku qarsoon ee aan ahayn quruxda wejiga. Waxa xeel dheer, cimri dheer, oo nolosha waafaqsan qiimiga oo ka jawaabaya waajibaadka nolosha.

Quruxda jaahu laba wed ayay leedahay. Quruxda wejigu marka uu qofku muddo noolaado ayay guurtaa, geeridana mar labaad ayay dhimataa. Laakiin quruxda qiimiga ee xeeldheerida iyo ragannimada ku aroortaa mar qudha ayay dhimataa oo waa maalinta geerida.

In qofku, gaar ahaan haweenku, labada quruxoodba leeyahay way fiican tahay, laakiin lagama maarmaanku waa qiimiga, waayo, ujeeddooyin nolosha ayay waafaqsan tahay.

Sidaas darteed, wiilka qooqa ama hawooda ee guur haybiya inta hogatusaale kor ku xusan ayaa lagama maarmaan u ah. Gabadhu geel bay ku xidhan tahay; boqol halaad iyo konton halaad ka uu lahaadaba. Marka loo eego xilligaas iyo noloshii tacabka iyo ragannimada ku dhisnayd, yaa malayn karaya muddada wiilku boqol halaad oo uu tabcay isla heli karo? Sidaas ayuu guurku u ahaa mid wiilku u maro jid dheer oo kudhowaad afartan sannadood ah.

Meerisyadani waa markhaati astaan u ah xilligii tacabka iyo ragannimada. Waa afartan sanno kudhowaad saddex jirkii ka soo bilaabantay, oo ah carbin, tababar iyo toosin ay weheliso golongol, gaajo, harraad, ardaa boodh leh, oon, waraab, ceel, ceelalyo, dhicin, dhaawac, dhimasho iyo af libaax. Waayo, hashu waxa ay ka dhexaysay ninka leh iyo cadawgeeda, nin ku soo duulay iyo af libaax.

Nolol-ka-saahidka, u badheedhka geerida, ceelka iyo cawska iyo intaas oo dhan ninku waxa uu ugu jilib dhigayaa in uu maalin maalmaha ka mid ah ardaaga boodhka leh ka kaco oo tacabkiisii afartanka sannadood soo taxnaa suurtagal ka dhigo in uu heer kale oo nololeed u gudbo (dallacaad), uuna u hoydo guri dugsoon oo gaari dhex joogto.

Arrimahaa hunguri loogama jeedo. Waxa milge iyo maamuus ah in qofku tallaabooyinkaa is dabajoogga ah ee nolosha marba mid u gudbo. Qofka waxa faran in uu marba xilka uu hayo mid ka sii xeeldheer u gudbo. Waxa uu doonayaa in gudashada xilka uu ku helo ciidan, ubad iyo oori la suurtagaliya tacabka nolosha, garab iyo gaashaanna ugu noqda halganka nololeed ee uu ku hawlan yahay.

Waxa uu u baahan yahay in uu dhiso qoys nolosha ku faafa oo ku tarma oo si ballaadhan uga qaybgala. Magaciisa iyo derejadiisu waxa ay ku xidhan tahay oori hawsha dhinaceeda qabata iyo ubad marka uu ninku xilka hore uga maro dhaxla oo ka soo dhalaala.

Marka uu dhaqaalihiisa iyo dhurkiisa u helo hurin ku qaybta ayuu hananayaa derejo tii qoyskiisa ka xeeldheer – dan guud iyo geedka laga hoggaamiyo beesha. Halka guurtida beesha guddoonka u haysaa fadhido ayuu meel iyo malko ku yeelanayaa. Gudashada xilkiisa ayuu garab iyo gaashaan u doonayaa, samaha ayuu u ciidan badsanayaa, cadawgana wuu u col korodhsanayaa.

Wiilku marka uu gacanta ku dhigo shuruudihii guurka ama gabadhu ku xidhnayd ayuu galayaa baadidoon dheer oo loo marayo jidkii dheeraa ee aynnu ka soo warrannay. Maalinba geed waayeel iyo guurti fadhido ayuu ag fadhiisanayaa oo waxa uu wax u sii baranayay xilal sugaya oo guri, geed iyo god aakhiro ah. Dhegta ayuu maalayaa. Maalinba in ayuu guntanayaa. Maalmo badan la tashi guur ku saabsan ayuu ragga uga gedaha weyn kala arrinsanayaa.

Maalmo kale, gaafwareeg, goollibaadh iyo marba gabadh-islataag ayuu ku foognaanayaa. Habeennada gu'ga ayuu ka qaybgalayaa goobaha madadaalada. Sacabka iyo cayaarta ayuu raaba qaadayaa. Hibadiisa iyo waxa hiyigiisa ku jira ayuu soo bandhigayaa. Hugufka gabdhaha ayuu u hiloobayaa. Isaga oo aan war isku hayn habaaska uu liqayo iyo inta qodax ku jabaysa oo hawlo kale kaga jeeda ayuu marba odhanayaa:

*"Siddi qabax ha nagu odhan,*
*Sinta bidix ha naga marin,*
*Geelayaga ha naga saban."*

Isaga iyo wiil kale oo ay gabadhi dhex boodayso ayaa maradiisu maradeeda taabanaysaa. Markaas ayuu cirka u baxayaa oo dhulka sare uga kacayaa. Habeenkaas iyo habeenno kale oo la mid ah waxa ay u noqonayaan habeenno cimrigiisa ka suntan. Isaga oo halkii uu daal la kala dhici lahaa dardar cusub isku laba rogaya ayuu waaberigu soo dhowaanayaa. Gabadh baa odhanaysa:

*"Waagii ma daalacay?*
*Dayaxii ma soo baxay?*
*Deylo naysha maw ciday?*
*Hooyaday dagaal badan,*
*Baqaa may dilaysaa?"*

Halkaas ayaa iyada oo waaga la dhibsanayo la kala dhaqaaqayaa. Waa dad isu baahan oo danta guud iyo karaamada ummadda ilaalinteeda u kala xidhan. Waa fursad qaali ah oo sannadkii habeen ama habeenno ku kooban. Isaga oo maradiisii marada habluhu taabteen marba meel ka ursanaya ayuu ardaagii geela ku noqonayaa goor waaberi ah. Dardarta iyo dareenka shidan ee uu habeenkaas golaha kala tegay ayuu sannad danbe ku sii shaqaynayaa. Haloosiga iyo luuqdii hablaha ayaa sannadkaas oo dhan dhegihiisa marba ku soo dhacaya.

Marka uu dareemo in uu gabbaatigii, yaradkii iyo hadhadii reerkaba gacanta ku hayo ayuu hagoog jiq isku siin jiray. Dhiggiisa iyo nin guurka uga war roon ayuu hadba guur kala sheekaysan jiray. Marba gabadh ayuu isla taagi jiray. Waxa uu odhan jiray, "Allow gaaridii loo xishiyo, gololo loo reeyo."

Wuu talo badsan jiray. Waxa uu muddo dheer ku foognaan jiray, ma tan, mise tan! Isaga oo xeerka guurka cuskanaya ayuu reer tilmaan leh oo

magac iyo xishmad ku caan ah oo haddii loo xisho dhowr hablood oo la mahadiyay laga guursaday abbaari jiray. Gabadh sheeggan oo ragba wada haybinayo ayuu goor barqo ah oo xoolihii kala foofeen, iyada oo keligeed ah oo harrar qabyo ah farta ku haysa kadinka aqalkooda istaagi jiray.

Waxa yeedhi jirtay, "yaa jooga?" Way ka aamusi jirtay kol iyo laba oo horta way is ururin jirtay. Kol danbe ayay odhan jirtay, "waa la joogaa," oo daarran soo dhaaf ama soo soco. Waxa uu odhan jiray, "ma hal baa... ma halal?" Markaas ayay iyaduna ugu halcelin jirtay, "adba hubi!"

Intaas haddii la is dhaafsaday ayuu odhan jiray, "sadcaal meel fog ka yimid iyo socoto marti ah midna ma ihi, meel dhow baanan ka imid. Kuurgal iyo ku-talagal ayaan ku socdaa." Waa ay aamini jirtay.

Harrarkii qabyada ahaa ee ay farta ku haysay ayuu dacal kaga fadhiisan jiray. Aqalka daahiisu sidaas ayuu u laabnaan jiray inta wiilku guradiisa fadhiyo. Soddoh, hooyadii gabadha dhashay ah oo aqalka hortiisa haan qabo ah ku tolaysa oo ninka sheed ka halacsatay ayaa gurigeeda gali jirtay. Hunguri ma jiro oo wiilku han buu u socdaa, sidaas darteedna hadal kooban isaga iyo gabadhu islama dhaafi jirin. Hadal waafaqsan xeerka nolosha, sarbeeb guurka ku sal leh iyo kaftan googo'an ayuu tixi jiray.

Laba kol ayuu bowdyaha jeedal qarash leh kaga dhufan jiray si sheekadu u furanto. Iyaduna si deggen, dadban, oo kooban, ama erey ujeeddadu ku dhan tahay ayay ku celin jirtay. Hadalka ma qudhqudhiso ee way qabqabataa. Marka uu meel ku gororo ayay darro madaxa u marin jirtay.

Isaga oo amar la dheeldheelliyaya ayuu guriga ka bixi jiray. Intaas kadib ayuu haween muraaddada ku xeeldheer oo yoolbaadhka kala qaybgala diran jiray. Habeenkii cawayska marka ay xerada ku jirto ee hooyadeed hadal dhex marayo ayay isaga iyo hurin la socotaa kuurka u gali jireen. Marka bilkeedka iyo beeqaaqu dhammaado ee isaga hurin ilmaadeerradii ahi goobo iyo gooro arrinta marba dhan kaga yimaaddaan, ayuu maalin maalmaha ka mid ah go'aan qaadan jiray.

*Cir gadooday, dirir gaamur da'ay, galayax waalaystay*
*Onkodkoo gariirkii ka baxay, galowgu yaabyaabay,*
*Guulaamo sawsaba kortiyo, dhibic garaaraysay,*
*Guluuluco mareegaysay iyo, gabadhle miishmiishtay,*
*Waqal gaaftay, jarar soo gabraday, gebiyo soo ciiray,*
*Gibil bururtay, gale foos burburay, galangal leexastay,*

*Gurdan baxay xareed galal jabtiyo, godanno miilaystay,*
*Dadka oo intuu nabad gogladay, godob la'aan toosay,*
*Qorraxdoo garayskiyo martii, gees isaga xoortay,*
*Dayaxoo intuu gaadh ka degay, gacalo muunsooday,*
*Tigaaddoo ganbada uunsatoo, shidatay geedsaaqa,*
*Marka geela laantiisa dheer, gabantu soo reebto,*
*Guryahoo haleelada sidkani, gaabis kaga fooftay,*
*Marka gororka naasaha fatahay, gobo'da deyn weydo.*

*Galab uu kulaylkii ka jabay, gubayay jeedaalka,*
*Qorraxdoo gollaha kuulatood, gaari wacan mooddo,*
*Gaaraabidhaankiyo markay, taranto goobaantu,*
*Caweys ay gabdhuhu boodayaan, golaha saarreyda,*
*Dayaxoo galshada meersadood, geesi ba'an mooddo,*
*Xilligay gammaankiyo ifaan, quruxda gaarreydu,*
*Dhulka oo galaaluhu simeen, gun iyo baarkiisa,*
*Cosobkoo golxada fooraroo, laba gardhaalaystay,*
*Qorraxdoo gelgelimaysatoo, goroddu laallaaddo,*
*Dayaxoo go'yaal wada cas iyo, shaal galgala qaatay,*
*Gu' xasilay, gudgudayaal habsaday, adhaxda Gaaroodi,*
*Marka awrku goojada ka simo, gaasabaxa dhaartay,*
*Qorraxdoo guduud lagu boqroo, meel garba ah saaran,*
*Dayaxoo intuu garab la baxay, gooddi uga muuqda,*
*Gararkiyo taraaraha madow, kala geddoonkooda,*
*Gabbal ururay waa soo gurguray, labada goorood dheh.*[21]

Goor casardheere ah ayaa wiilkii oo hurin ilmaadeerradii ah oo jeedaldheer ah iyo hurin guurti ahi ka faana horraysaa beeshii gabadhu ka dhalatay soo abbaari jireen. Mudanka isa soo xushay ujeeddadoodu ma qarsoona. Hu'ga ay sitaan, sida ay u habaysan yihiin iyo hannaanka ay u socdaan ayaa waa ku dhan yahay. Ardaa gobeed ayaa dadab googgoos iyo indhadaalis ku taxan yahay lagu waaheeli jiray. Maalin ama laba, sooryada iyo is muujinta ayaa socon jirtay. Maalin saddexaadda ayaa la isu afbixi jiray. Afgobeed, sarbeebo iyo hadallo sal dheer oo dhoollatus, waayo, taariikho iyo dhacdooyin nololeed ah ayay martidu ku horrayn jirtay. Marka ay dhaabbadayso ayay sheekadu dhinaca kale u digarogan jirtay.

---

[21] Gudgude, 1990.

Meeẋaanaha ayaa waqti qaadan jiray. Hooyada iyo haween dhawr ah ayaa meel aan ka fogayn goobta wada hadalku ka dhacayo iyo ardaaga bilan isa soo taagi jiray. Inta gabadha warkeedu socdo haddii baanaha wax laga dhaafo iyaga ayaa ku dari jiray. Maalmo kadib ayaa gacanqaadku dhici jiray. Gabbaati hordhac ah ayaa guriga la keeni jiray, yarad konton ilaa siddeetan halaad ahina waa daba socon jiray. Aan yara hakiyo oo aan idhaahdo, wiilkii waa kaas ee wax yar ha i sugo.

## Gabadha

### Dun-ku-xidhasho ilaa Xilasho

Gabadhu hawsha nolosha laga hayo waxa ay lahayd qiyaastii boqolkiiba shan iyo toddobaatan (75%). Xilal dhawr ah oo culculus ayay huwan jirtay, iyada oo inanka kaga waajibaad badnayd nolosha. Sidaas darteed, waxa loo baahnaa in tarbiyaddeeda culayska la saaro.

Hooyadu waxa ay u xilsaarnayd barbaarinta ubadka iyo guud ahaan maamulka arrimaha qoyska. Hawlaha waxa ay gaar u lahayd inta ay hibada u leedahay, sida aqal iyo agab samaynta, raridda, furidda, dhisidda, lulidda, qalidda, quudinta iyo arrimo kale oo iyada u fudud ama ay ku habboon tahay qabashadooda. Hawsha ugu weyn ee ay qaban jirtay waxa ay ahayd barbaarinta iyo waxbaridda gabadha. Arrintani culayska ay lahayd iyo tooghaynteedu waxa ay ahayd xilka ugu culus ee nolosha. Maxaa yeelay, barbaarinta gabadhu waxa ay u dhigmaysay badbaadinta nolosha. Ninku waxa uu lahaa maamulka arrimaha guud, sida sahanka, oodda, waraabka, difaaca iyo guud ahaan hoggaaminta.

Waqti aan ka fogayn dhalashadii wiilka ayay dhalatay. Waxa dhaqan ahaa in gabadhu marka ay uurka hooyada soo dhaafto ay sacabsan jirtay hooyo miyirqab iyo miisaan leh. Waxa ballaysimi jirtay hooyo hunguri san oo gabadhu xagga hunguriga ka hiddaraacdo.

Gogol duur iyo dureemo ka hoosayso ayaa dhinaca bidixda loo jiifin jiray. Labada bowdo ayaa xadhig la isugu xidhi jiray, si tarbiyaddeeda looga bilaabo in ay cawradeeda ilaaliso. Waxa looga jeeday in ay dhiidhiibsiga iyo lugaha isku duwiddooda ku dhalato.

Tallaabada xigtay waxa ay ahayd marka ay dhalato judhaba laguma habi jirin caano. Waxa looga jeeday in ay yeelato sabir iyo sugid, waxaana lagala

cararayay hunguri iin iyo dhaliil bar madow ah ku noqda qoyska ay ka dhalatay. Marka xudduntu u qallasho ayaa la canqarin jiray. Canqarin waxa looga jeeday in ay sabirka iyo xishoodka ku dhalato. Magaceeda waxa laga soo diiri jiray xilligii ay dhalatay iyo xaaladdii jirtay.

Waxa la bari jiray afka hooyo iyo ereyada suubban. Hadaaqa ayaa lagu ilaalin jiray oo carrabka ayaa loo liilin jiray, si aanay weynaanta carrab jalaqo u yeelan. Waxa la odhan jiray, waxa aad tidhaahdaa, "shinbir baa kudhubaa kadhabaa tidhi oo, subag sumal oo kulul oo kadan oo kidi hoostii yaal ayay la sii kudhubaa kadhabaa tidhi oo... shinbir baas kululaa kadanaa; sidee bay subag sumal oo kulul oo kadan oo kidi hoostii yaal ula sii kudhubaa kadhabaa tidhi."

Intaas oo kedis iyo boobsiis ah ayaa dheh la odhan jiray. Waxa kale oo la odhan jiray, waxa aad tidhaahdaa, "waxba aniga hay dhudhun hore dhudhun danbe dhul ku gannafsane, orod oo qofkaad dhudhun hore dhudhun danbe u dhul ku gannafsanayso, u dhudhun hore dhudhun danbe u dhul gannafso."

Halahaas iyo halo kale ayaa carrabka loogu liilin jiray si aan carrabkeedu marka ay hadlayso dalab iyo turxaan u yeelan. Waxa loogu halqaban jiray ereyo nolosha salka ku haya ama dhaqanka iyo dhaqaalaha ku qotoma.

Saddex jirka ayaa lagu hawlgalin jiray. Halkaas ayay hayaanka nolosha kala jaanqaadi jirtay. Waxa la odhan jiray, "orod oo xaabo soo gur," iyada oo marka sidaas lagu leeyahay xaabo guriga ka buuxdo. Waxa looga jeeday in yaraanta tacabka lagu baro oo hawlsha lagu qaayibsiiyo. Marka ay xaabada keento ayaa lagu odhan jiray, "dabka soo shid."

Waxa la bari jiray sida dabka loo shido iyo hannaanka loo dhaqaaleeyo xaabada. Waxa lagu tababari jiray in ay xaabada si nidaamsan oo qoriqori ah u saarto, si loo baro waxtashiilka. Waxa la odhan jiray, "waxaas keen iyo waxaas qabo," oo looga jeeday in la baro waxqabadka iyo kartida. Waxa la odhan jiray, "ardaaga xaadh," si loo baro nadaafadda.

Afar jirka iyo shan jirka ayaa maqasha loo diri jiray, waxaana la bari jiray hawldhabeennimada iyo xoolaadinta. Waxa la bari jiray maqasha iyo magaca mid walba hooyadii dhashay. Ilmaha yar ayay xanbaari jirtay oo u heesi jirtay. Habeenkii idaha marka la lisayo ayay macasha qabqaban jirtay. Waxa ay kala baran jirtay midabbada iyo magacyada. Waxa caado ahayd in

aanay 'waxan hoo' mooyaane 'waxaas i siiya' barannin. Waxa lagu gardaadin jiray aamuska iyo is ilaalinta.

Lix jirka ayay adhiga raaci jirtay, iyada oo muddada hore lagu weheliyo, si ay hawsha marka danbe ugu xasisho. Muddo ayay hawshaas dibadda ku foognaan jirtay, si ay masuuliyaddan culus yaraantaba uga jawaab bixiso. Qabbaanka guriga ayaa la bari jiray.

Toddoba jirka waxa ay ahaan jirtay gabadh foodley ah, waxaanay ku sii tababaran jirtay hanashada raacista adhiga. Waxa la bari jiray feejignaanta, sida cadowga adhiga looga ilaaliyo iyo in ay caado ka dhigato in ay si joogto ah codkeeda adhiga u maqashiiso, si uu ugu xasilo ama u weheshado. Waxa ay baran jirtay neef walba magaciisa. Waxa caado looga dhigi jiray in ay adhiga tiro ku soo hoyso.

Toban jirka ilaa laba iyo toban jirka waxa ay baran jirtay lisidda iyo lulidda. Adhiga ayay lisi jirtay, caanahana way luli jirtay. Halkaas waxa ay uga gudbi jirtay guridda maadha, diirista maydhaxda iyo soohidda xadhigga. Waxa ay shaqadeedu noqon jirtay dhigbixin, maadhguris, farshaxannimada samaynta harrarka iyo inta baarka leh ee maydhax lagu bilo. Lama oggolayn in iyada oo fara madhan ay guriga soo gasho.

Afar iyo toban jirka, waxa ay ka qaybgali jirtay aroorka. Waxa la bari jiray raridda iyo dhisidda, dhaanka, aroorka iyo guud ahaan ka-qaybgalka maamulka qoyska iyo hawlaha bulshada.

Shan iyo toban jirka timaha ayaa loo dabi jiray. Waxa ay dhaqi jirtay oo dhisi jirtay guriga ay ka dhalatay. Iyada oo taas dhinac ka haysa ayay ku dhaqaaqi jirtay abaabulka guriga. Waxa ay samayn jirtay saableyda iyo sarabada; agabta iyo weelka. Awrka ayay rari jirtay oo furi jirtay, aqalka ayay dhisi jirtay. Iyada oo saddexqayd Abu Sarmaan ah, boqor iyo dhacle, tusbax jeenniqaar ah iyo subeeciyad xiddaysan ku jookhan ayay aroorka ceelka tagi jirtay.

Arrinta ugu culus ee barbaarinta inantu waxa ay ahayd: habeenkii marka ay seexato ayay hooyadeed laba ilaa saddex jeer u yeedhi jirtay oo dhan jirtay, "heblaay!" Haddii ay judhaba ku tiraabcelin weydo, "hee hooyo" oo sare fadhiisan weydo, ama ay hurdada sii macaansato, kabtu waa ay saarnaan jirtay.

Habeen habeen, iyada oo aan cidiba dhabanka dhulka ka qaadin oo ay inantuna huruddo, ayay hooyadu dhuxul madaw marin jirtay marada ay inantu xidhan tahay. Dabadeedna, inta aan waagu si fiican u beryin ayay hooyadu inanta kicin jirtay.

Caado ayay ahayd in ay inantu marka ay subaxdii soo toosto hawsha ka bilawdo in ay hubiso in korkeeda iyo hu'geeduba fayow yihiin. Marka ay toosto waxa waajib ahaa saddex shay: in ay kor iyo kal isbaadho oo marada ay sidato dhan walba u dhugato, in ay timaheeda aloosan saxar iyo siigaba ka eegto, iyo in ay caday kuusha ugu xidhan la soo baxdo.

Haddii ay qorraxda sugto ama inta ay toosto ay iska dhaqaaqdo oo maradii ay hooyadeed xalay dhuxusha marisay indhaha qac ku siin weydo, nabarro culculus ayaa ku dhici jiray. Waayo, magaca ayaa la wada lahaa oo ay ahayd in la wada ilaaliyo, naanays iyo dhegxumana lagala cararo. Bulshadu hanka ayay xeer ka dhigatay, qof kastaana waxa uu ku qiimaysnaa sida uu ceeb iyo quudhsi uga nabadgalo.

Waxa lagu tababari jiray hungurisamida, hayalsamida, xishoodka, miyirka, hubsiinada, hufnaanta, hannaanka wax loo qabto, nadaafadda, falsamida, feejignaanta, dulqaadka, hadal koobnaanta, jajabnaanta iyo in ay jaarriban haween noqoto, si ay ugu guulaysato hanashada xilka iyo waajibaadka berri sugaya.

Yaraantaba, dhexda ayay hooyadeed xadhig ugu goyn jirtay iyada oo uga gol leh in aanay inantu cirkeeda bogan. Markan waxa ay hooyadu xasuusan tahay halhayska yidhaahda:

*"Dumarkana cirkeed bogatiyo*

*Casarkii seexataw daran."*

In ay caanaha ka dheregto oo caloosha buuxiso looma oggolayn. Waxa looga jeeday inay laba qaar noqoto:

"*Dhexdu madag afkuna dhuxul*

*Inta kale dhinbilo roob.*"

Waxa looga jeeday hilibkeedu ha jeerraado oo yaanay jawaan iskusiidays ah noqon ama ha yeelato dhisme qurux badan oo lagu dhaygago. Iyada oo jabsan, jaraysan, hawl adduun aan hal ka moogayn, dhawr jaamacadood ka soo baxday, leegleegsanaysa, oo nolosheeda qaybtii hore iyo dhisidda

guriga ay ku dhalatay ku guulaysatay, ka dhaxdinta ee sugayana u laylyan oo isku kalsooni boqolkiiba boqol ah qabta ayaa geeddiga labaad iman jiray.

Dheraggu macno ma lahayn, cuntaduna wax lagu faano ma ahayn. Si taas la mid ah, cuntadu wax shaqo laga dhigto ma ahayn. Waxa mudnaa anshaxa, asluubta, aamuska, miyirka, hubsiinada, xishoodka, hanweynida, dhowrsoonaanta iyo xeerinta dhegta.

Waxa intaas oo sanno gabadha loo carbinayay oo loo laylinayay xilka culus ee berrito ee ubadka, ninka, tolkiisa iyo waajibaadka guud ee nolosha, ha gudato oo yaan lagu dhaliilin ama lagu nicin. Waxa looga jeeday yaan la xaman marka la guursado ee ay guri kale oo loo fiirsanayo tagto.

Waxa looga gol lahaa yaanay dhegxumo soo hoynin marka ay dhaxdin noqoto. Waxa loo jeeday in magaca qoyskii ay ka dhalatay bulshada dhexdeeda ku sii fido oo ku sii faafo, mar haddii waxa la kala riixanayaa yahay hanka iyo magaca qoyska.

Haddii gabadhu wax dhalliilo ah la timaaddo, cidda dhalliilahaas wax ku waayaysaa waa qoyska ay ka dhalatay, gaar ahaan, hooyada. Waayo, waxa caddaanaysa in aanay hooyadu gudan waajibaadkii hooyannimo. Sidoo kale, waxa ay dhegxumadaasi saamaynaysaa gabdhaha iyada ka yaryar oo geyaan seegaya ama qiimaha ay soo hoynayaan magac iyo maalba hoos u dhacayo. Sidaas darteed, waxa jirta odhaah arrintaas ku saabsan oo odhanaysa:

*"Hoosada magaalada,*
*Gabadh hooyo door ah leh,*
*Lama huro hadh galabeed."*

Gabadhu marka ay turxaan dhammaysato ee la hubiyo in ay si ragannimo leh nolosha dhaxdinta kaalinta ay ku leedahay uga jawaabayso ayay guur u feedhan jirtay. Iyada oo dhan la dayaba ka dheellitiran, dhalliil iyo bar madow ka madhan, oo ujeeddadii qoyska iyo ummadduba ka lahayd buuxinaysa; iyada oo gaari ah, marwo ah, dhabeel ah, oo qaryad ah; iyada oo jaarriban ah, wax goosanaysa, qoyska ay ka dhalatay iyo bulshadana wax u goynaysa; ayaa la isku sheegi jiray oo hadalhaynteedu badan jirtay.

Waxa la odhan jiray, 'inanta aabbaheed waa kuma? Waa maxay kaalinta uu nolosha ku leeyahay iyo magaca uu bulshada dhexdeeda ku haystaa? Waa

maxay guulaha uu nolosha ka soo hooyay?' Hooyada, ayeyada, ilaa awowga ayaa la socon jiray. Sida maanta degdeg ma jirin. Warkeeda waa la hayaa, iyaduna beesha barbaarta joogta iyo barbaar waliba derejada uu sito waa ay ka warhaysaa. Gaadashaa jirtay, calafna waa halkiisa.

Maalin maalmaha ka mid ah goor subax ah ama barqo ah oo xoolihii foofeen ayaa guurti reerka soo abbaari jirtay. Waxa ay sidan jireen astaamo ardaadhiggu leeyahay. Waxa ay wadan jireen fardo dhawr midab ka kooban oo heensaysan. Hooshaarka iyo higilka ayaa laga garan jiray ujeeddada.

Geed ku yaalla reerka agtiisa ayay rugadhigan jireen. Sabo wanaagsan ayaa la waaheeli jiray. Dadab bilan oo dalaysan oo hararro, iskujoog, indhadaalis iyo gogol wada hoobaani ah ka kooban ayaa la taxi jiray. Waa la isku arki jiray, waa la isku xiniinyo taaban jiray, boqol qaalmood oo maycas ah ama qoricas ah iyo baarqab dhinac socda ayaa la keeni jiray. Laba qabiil ayaa ku kulmi jiray. Gabbaati hordhac ah iyo guurti ardaadhig ah oo aloosan, hu' qurux badanna sita oo inanka iyo saf ilmaadeerradiis ahi hareero socdaan ayaa ardaa loo goyn jiray. Habeenno, maalmo iyo marti mudan ah oo maamuus lagu sooro ayay noqon jireen. Maalin ama maalmo sooryo iyo maamuus ah ayaa wadahadalka ka horrayn jiray.

Hawlahaas kadib ayaa hadalku furmi jiray. Salaan ayaa dhici jirtay, hadal sarbeeb ah oo ku saabsan ujeeddaduna waa xigi jiray. Hadalku abbaar iyo maahmaaho hordhac ah ayuu ku furmi jiray. Madadaalo, meexaane iyo dhoollatus ayaa in muddo ah socon jiray. Gabadha iyo wiilka ayaa la astayn jiray. Gabadha ayaa ka-hadalkeeda lagu raagi jiray. Hooyada iyo haween la socda ayaa meel golaha ka durugsan iman jiray. Hooyadu waxa ay dhegta u raaricin jirtay sida inanta astaynteeda loo taxayo.

Marinkii iyo hillinkii uu hadalku lahaa ayaa la qaadsiin jiray. Gacanqaad muddaysan ayaa lagu kala carraabi jiray. Hadallo dhaqanka guurka salka ku haya iyo ereyo murti ah oo maskaxda daaliya ayaa la is dhaafsan jiray.

Waqti muddaysan kadib ayaa yarad nin magtiis ah oo sooc ah guriga la keeni jiray, guddoonka iyo meherkuna waa xigi jiray. Intaas kadib ayaa gelbiska iyo arooska loo gudbi jiray, iyada oo ay inantuna ku jookhan tahay hu'gii iyo qalabkii ay habluhu gaarka u lahaayeen.

*Sar daruuran oo maas ah,*
*Maro abu Sarmaantii ah,*
*Dhacle baarka loo seesay,*

*Boqor wada siyaakhaysan,*
*Sindiyaal jiljila dhiibsan,*
*Tusbax dhawr sagaal laab ah,*
*Iyo qool sunaar dheehan,*
*Subeeciyad xiddiyo laaf leh;*

*Adigoo siddeeddaas hal,*
*Iyo timaha oo soohan,*
*Ku darsaday sifaa guudka,*
*Garashiyo sarriig sheegtay,*
*Sinta bidix ka laafyooday,*
*Ma qof kaa sitaa jooga!*[22]

Gabadha ama guudleyda gelbiska ahi iyada oo shaambinaysa oo inta aynnu kor ku soo xusnay ku jookhan oo tallaabada miyir iyo miisaan ku halqaadaysa, iyada oo indhaha cawsha leh oo ay indhuhu hore u rogan yihiin, iyada oo xishoodku hadheeyay oo isku-kalsoonida, hufnaanta, heemaalka, hubsiinadhaqaaqa, higilka hareera socda, haloosiga gadaasheeda ka baxaya, alalaaska iyo olologtu gelbinayso, iyada oo amarka iyo hanka saaran ee ka ifayaa dadka shaammareer ku ridayo, iyada oo faras qaaje ah oo shaal iyo shalmad dhabaqguduud ahi sudhan yihiin hor socdo, ama haddii ay goosato wegen fardo heensaysan oo rogaalka raabaqaadayaa hadba jiho kaga imanayo, oo saddex saf oo midi ka danbeeyo, labana hareer socotaa u heesayso, u halqabanayso, oo u abtirinayso; iyada oo mashxaradda, muunsoodka iyo meexaanaha dhacayaa maayad goobjoogaha maankiisa lulaysa tahay, oo wiilo xanbaarsan tahay wiil saadaal ah, dhiil caano ahna gacanta midig ku hayso, oo ujeeddada ka danbaysaa u dhacayso, wiil iyo caano noqo – labada shay ee bulshadu ugu jeceshahay – ayaa aqal labadaryaale ah oo sheed dheer oo googoosyo, iskujoogyo, waaxyaale iyo indhadaalisba lagu xidhay, kebdo maydhax galool ahina labada dheeg ka saaran tahay, ilaxidhka loo waabi jiray.

Inta aanay guriga galin ayay qabo biyo lagu shubay cagaha galin jirtay, iyada oo la rejaynayo in ay noqoto oori degel qabow. Dabadeedna, raarta ayay ka soo jeedsan jirtay iyada oo gabdho geelooyin ahi hareero fadhiyaan.

[22] Sirta Nolosha, 1986.

Waa goor casar ah, aqalka agagaarkiisa oo dhammi waa rushaysan tahay. Afarta jiho ee aqalka ayaa cayaar laga jebin jiray. Alalaaska iyo dananka hablaha ayaa dareenka goobjoogga shidi jiray. Aftahammada iyo dhoollatuska laba dhacaya iyo raabaraabaha soo hormanaya ayaa ashqaraar dhalin jiray. Goolal iyo xoolo gaammuray ayaa la sadqayn jiray. Awaashaasna, duco ayaa lagu gunaanadi jiray. Kadib, goobta waa laga guuri jiray si ay qoysku ujeeddadii iyo waajibaadkii ay isu guursadeen u fuliyaan.

Waxa caado ahaan la jeclaa in ilmaha curadka ahi gabadh noqdo, si ay u xanbaarto wiilka iyada ku xiga. Ubadka ay hadhow dhashaana, waxa ay noqon jireen laba tolle walaaleeya laba qabiil. Qoysku beelo iyo bulsho kala durugsan ayuu isku soo dhoweyn jiray oo walaalayn jiray. Ubad ayaa Alle siin jiray, dabadeedna ubadkaas ayay dhaqankooda nolosha waafajin jireen. Ciidan ay waajibaadka nolosha u kaashadaan ayay ka dhigan jireen oo waxa ay mahadin jireen waxtarka ay hadhow yeeshaan.

Tarankoodaasi dhulka ayuu cammiri jiray. Haddii Alle waafajiyo, waxa ay gudi jireen abaalkii waalidka, kii ummadda, kii nolosha iyo kii Ilaahay intaba. Heerarka nolosha ayay marba mid u tallaabi jireen. Waddo jeexan iyo tub sugan oo waafaqsan dhaqanka iyo dhaqaalaha ummadda ayay nolosha u adeegsan jireen. Waxa ay noqon jireen ubad jabsan oo jaraysan oo hiddaraaca beesha ku sugan. Gabadhaas iyo wiilkaas lammaanaha ah ee nolosha isku kaashaday ayay guud ahaan noloshu ahayd.

Ubadka nolosha ku soo biira, noloshu waa ay mahadin jirtay, iyaguna nolosha waa ay mahadin jireen. Waxa ay ahaayeen laba isku nool oo mid waliba ka kale xaqiisa gudo. Nolosha oo dhammi waxa ay ahayd lammaane ujeeddadooda iyo aragtidoodu midaysan tahay oo aan mashkiladi dhex iman iyo laba qof midba midka kale u hanweyn yahay.

Ninku waxa uu ku foognaan jiray qabyatirka qoyska soo kordhay. Ooriduna waxa ay hanan jirtay dhinicii nolosha ee isaga ku bannaanaa. Laba isku dhiganta oo is buuxisa ayay noqon jireen. Ubad ay nolosha u kaashadaan, wiil iyo gabadh, ayaa Ilaahay siin jiray. Waxa dhismi jiray dhaqanka iyo dhaqaalaha. Hunguri iyo gogol lammaan la isuma guursan jirin, laakiin ujeeddooyin nololeed oo intaas ka xeeldheer ayaa qabsoomi jiray. Ujeeddada ugu weyni waxa ay ahayd in qoysku helo ciidan uu nolosha u kaashado – dad iyo duunyo – iyo in ubadka iyo adduunka ay soo kordhiyaan noloshu adeegsato oo la manaafacaadsado. Qofka iyo bulshada

labadaba xeerka dhex yaallay waxa uu ahaa wadajir, is buuxin iyo barbarkay ka baxdaa waa bakaylo qaleen.

Sannado dheer kadib marka lammaanaha waxa ay dhaleen iyo waxa ay dhaqeen is celiyaan ee isku filnaadaan, ayay iyadu noqon jirtay raasweyn, dhinaceeda dad iyo duunyaba cammiran tahay, hadba guri cusub oo bulshadu leedahay dhista, gacalku ku soo hirto oo gurigeeda harraadka iyo gaajada lagu reebo. Waxa ay noqon jirtay marwo hareeraheeda la buuxiyo oo hayn iyo hooba leh.

Maalintaas ayuu ninku u kala tagi jiray ubadka hanaqaaday iyo hantida tarantay. Waxa uu u gudbi jiray geedka aqoonta iyo golaha guurtida – taliska guud ee beesha laga hoggaamiyo. Waxa uu ka mid noqon jiray xeerbeegtida u qaybsan samatalinta, hawraarta, hawaale warranka, hogatusaalaha iyo kala hagidda dadka. Ugu danbaynna, isaga oo magac leh, maamuus leh, oo mudnaan huwan, isaga oo ragannimadiisa caan ku ah, isaga oo marka uu maqan yahay la tebo, marka uu tegayana la celiyo, isaga oo inta xulka ah ka mid ah, aqoontiisa, taladiisa iyo tusmadiisana la mahadiyay, isaga oo aan isweyddiinayn waxa cimrigiisu ku baxay, isaga oo isku daawanaya muraayad weyn oo tusaysa guulihii uu nolosha ka soo hooyay iyo xusuusta uu dadka uga tagay, oo tusbax, weyso, iyo masallaha gacanta ku haya ayuu adduunyada ka xeroon jiray, camalkiisa iyo cibaadadiisuna sahay u noqon jireen.

Murti ayuu ka tagi jiray. Maahmaaho ayuu ka tagi jiray. Halhaysyo ayuu ka tagi jiray. Adduun, ubad iyo aqoon nolosha bila oo xoojiya ayuu ka tagi jiray. Baal cad oo nadiif ah iyo waddo toobiye ah oo uu jeexay, kudayasho leh oo la tixraaco ayuu ka tagi jiray.

Inantu qoyska ay u dhaxday taran iyo tayo ayay ku kordhin jirtay. Marka danbana waxa ay la bixi jirtay taash weyn. Beesha ayay magac iyo maamuus ku yeelan jirtay. Marka u danbaysa, talada qoyska ayay wax ku yeelan jirtay. Iyada oo aan nolosha ciil ka qabin oo waajibaadkii nolosha iyo geeddigii dheeraa dhinaceeda hanatay oo geed madaleed markhaati dhigatay ayay xaggii loo badnaa (Aakhiro) qaban jirtay.

Bulshadu ma goblami jirin ee geesiyaal sii anbaqaada geeddiga ayaa dhalan jiray. Bulshadu gun iyo baar labadaas qof iyo lammaanahaas aynnu marba mid ka sheekaynay ayay ahayd. Qofkii dhashaaba – wiil iyo gabadh – waxa uu ahaa kii shalay la aasay oo soo noqday!

## Inan iyo Hooyo

Noloshii asalka ahayd ee xooladhaqatada ka soo jeedday dadku iskuma dhex qubnayn oo ma ahayn geelba sibir godan. Qof waliba waxa uu ku qiimaysnaa kaalinta uu nolosha ku leeyahay iyo ragannimadiisa oo waa tii la yidhi, "lax waliba waa shillalka lagu qalo" ama "lax waliba waa halka ay is dhigto." Sidaas ayaa loo kala gurnaa. Sidaas ayaa qof waliba maqaam iyo meeqaam u lahaa.

Waayadaas waqti ka mid ah ayaa hooyo inan ay dhashay oo jaaribnaan iyo jookh isku darsatay, goor subax ah inta ay aqalka la gashay u soo jeedisay in ay u dhisto wiil qurux badan oo uu walaalkeed dhalay. Quruxdu waqtigaas tixraac ma lahayn ee waxa meelmar ahaa qiimaha iyo ragannimada uu qofku leeyahay.

Inantu waa guudadley mudhbaxday oo qurux iyo qiimi isku darsatay. Taa waxa u dheer hankeeda iyo kutalagalkeeda oo ahaa in ay guursato wiil u dhigma oo nolosha midba dhinaciisa ka xaslado.

Inantu wiilka inaabtigeed ah ee hooyadeed soo hor dhigtay warkiisa waa haysaa. Waxa ay u feedhanaysaa wiil u dhigma oo ay ragannimadiisa magac iyo maamuus ka heli doonto oo astaamihii ragannimadu ku dhan tahay. Waayo, nolosha tacabka iyo ragannimada ayaa dadka kala hufa.

Codsiga hooyadeed, inantu subaxdaas waa ay ka aamustay, waayo xaqdhawr ayay hooyadu ku leedahay. Laakiin aamusku muxuu macnaynayaa? Waa 'maya' dadban.

Mar kale ayay goor subax ah hooyadii u yeedhay inanteedii. Aqalka ayay la gashay oo waxa ay su'aashay weyddiintii inanka la xidhiidhay. Laakiin inantii hooyadii waxa ay markanna ugu jawaabtay aamusnaan.

Mar saddexaad ayay hooyadu su'aashii ku celisay iyada oo yara cadhaysan. Subaxdaas ayay inantu miirdillaacday. Si asluub iyo anshax ku jiro ayay hooyadeed u hogatusaalaysay, si hooyadeed dulucda ula garato. Waxa ay is tidhi bal hooyadaa si fiican u qanci. Waxa ay tidhi wiilo:

*"Ma qarmoona qeyraanta Cali mana qasaalnayne*
*Gaashaanku waa qolof warmuhu qaallabeel ma lahe*
*Gartoo lays qabsaday geedahoo laysku qalanaayo*
*Kuwa hadalka loo qaybiyee qaadha noqon maayo*

*Qayladu hadday soo dhacdoo geel la kala qaado*
*Inta uu sengaha soo qabsado qaash ka rogan maayo*
*Qab hadday martidu soo tidhaa neef u qali maayo*
*Qoton been ah qurux aan waxtarin qoobka hay galinnin."*

Gabayga ama badda gabayga waxa gaar u lahaa guudcaddaa aqoon iyo aftahammo gaar u leh. Marka koowaad tuducan gabayga ahi waxa uu ka markhaati kacayaa xeeldheerida gabdhuhu huwan yihiin. Waxa kale oo uu ka markhaati kacayaa ujeeddada macnaha leh ee nolosha iyo waayaheedu qofka u leedahay.

Inantu waxa ay hooyadeed ku qancisay ujeeddooyinka ay nolosha ka leedahay oo weliba tuducan waxa ay raacisay eraygan culus. Waxa ay tidhi, "hooyo, haddii aad inanka eeddo u tahay, hadda anigana adiga ayaa i dhalay."

Saddexda qodob ee ay gabadhu cuskatay waa saddexda ina-rag macnaha ku leeyahay: waa doodda, deeqda iyo dagaalka. Haddii tuducyadaa la sii lafaguro, waa ta koowaad e:

1. Waxa ay tidhi gabadhu "qeyraanta Cali sitaa wax in la xidho u qalanta ma aha." Berigaas maryo ma jirin. Waxa la xidhan jiray harag dhuug la odhan jiray oo harag riyaad ah. Waqti kadib waxa loo gudbay isla haraggii oo la magdiyay inta la xoqoy la aslay. Markaas waxa ay gabadhu leedahay hu'ga Cali sitaa waa mid aan qasaalnayn oo ka soo jeeda haraggii waayadii hore la xidhan jiray.
2. Waa ta labaad e, gaashaanka uu sitaa ma aha kii geesiga. Berigaas geesigu gaashaanka uu ku dagaallamayo waxa uu kala bixi jiray wiyil la dilay, wiyishana sida loo dilo ee haragga loogala baxaa waa ay adkayd. Waxa ay tidhi, "inaabtigay gaashaanka uu sitaa waa saan biciid oo waranka dhagaxa ka samaysan celin maayo." Waxa ay u jeeddaa inaabtigay hubkii geesiga ma sito.
3. Waa ta saddexaad e, inaabtigay aftahan ma aha oo haddii geed loo baxo isagu ka mid noqon maayo kuwa hadalka iyo aftahammada loo xusho.
4. Inantu waxa ay hadalka iyo baanaha ku soo gebagebaysay, "inaabtigay ku qaadan maayo qoton iyo qurux aan ka mid ahayn ujeeddooyinka ina-rag looga baahan yahay."

## Sababaha Guurka Badan

Fal iyo ficil kasta oo ay ku dhaqaaqday bulshadaas aynnu hadalhaynnaa, inteeda badan, waxa fasaxayay ujeeddooyinka nolosha ka jiray. Diidi maynno dhalliil iyo arrimo si fudud ama fiiro la'aan ah mararka qaarkood u dhacayay. Waayo, bini'aadamku ma laha kelmadda la yidhaahdo 'iskudhammo'.

Bal aynnu isku daynno in aynnu helno sababaha keeni jiray guurka badan ee bulshadan aynnu ka hadlaynno. Labada, saddexda iyo afartaba Ilaahay waa banneeyay. Ha banneeyo e, shuruudo ayuu raaciyay.

Guurka badan waxa keeni jiray:

- In qofka dumar ahi dhali weydo, waa haddii ay iyadu leedahay sababta madhalaysnimada oo ninka tiisu caddahay.
- In haweenaydu qabto cudur aan laga bogsan.
- In ay haweenaydu dhashay hablo sooc ah, waayo, ninku waxa uu u baahan yahay ciidan wiilal ah oo uu ka hor geeyo cadawgiisa: bahallo iyo ina-rag. Marnaba xagga dumarka mashkiladi kama jirin.
- In xoolaha ninku, gaar ahaan geelu, tirada ka bato, isaga oo aan haysan ciidan wiilal ah oo hanan kara waajibaadkaas.

Furriinku waxa uu ahaa dhalliil ay bulshadaasi ka caagganayd. Rag iyo dumarba, ka wax fura iyo ka la furo labaduba, guur danbe waa ay ka caagganaan jireen. Waxa la odhan jiray waxa ay qabtaa wixii lagu soo furay, isagana si la mid ah. Sidaas darteed, guurkani waxa uu iman jiray iyada oo laga taxaddarayo dhalliilaha uu furriinku keensan karo, lana tixgalinayo xoolihii uu gabadha hore ka bixiyay.

## Dumaasha

Dumaashu waxa ay ka iman jirtay labada dhinac mid ahaan. Waxa keeni jirtay ninka oo geeriyooda oo ay taasina sababto in haweenaydii ama haweenkii uu ka tegay la dumaalo. Dumaasha waxa lahaa ninka geeriyooda ninka ugu xiga ee ay suurtagal tahay in uu gabadha dumaalo.

Arrintani waxa ay maslaxad u ahayd in aan nin kale oo shisheeye ahi seexan gosha hooyada iyo ubadka uu ninkii xijaabtay ka tegay. Sidoo kale,

ninka ubadka u dhowi waxa uu xeerinayaa maslaxadda ubadka uu walaalkii ama inaadeerkii dhalay. Sidaas ayuu u jiray dhaqan jidaynaya in cidda ninkii baxay u xigtaa ay afada laga xijaabtay dumaasho.

Dhegxumo ayay ahayd in ciddii dumaasha lahayd oo nool ay cid kale dhaxasho dumaasha qofta dumarka ah. Haddii uu nin shishe gabadha dumaalo, ubadka uu dhalaa xoolihii qoyska ayay wax ku yeelanayeen. Taas oo macneheedu yahay xoolaha ayaa xero shishe u guuraya.

Dhinaca kale, haddii ninka afadu ka geeriyooto, waxa xeer ahayd in gabadha walaasheed, inaadeerteed ama kuwa la midka ah *xigsiisan* loo siiyo oo uu guursado. Waxa looga jeeday in xidhiidhkii labada qoys sidii u sii jiro, maadaama ay ka dhexeeyaan ubadka iyo adduunku (xooluhu).

## Dir iyo Daabaan

*Dir* waxa la yidhaahdaa gudinta inta birta ah, haddii aan daabku ladhinna waxba ma goyso. *Daabaan* waa daab, waa inta qoriga ah ee gudinta, haddii aan birtu ku jirin waxba ma goyso. Sidaas darteed, inta isku qabiilka ahi waa dir, inta xididka ahina waa daab. Dulucdu waa in dadka oo dhammi yeesho xeer iyo xadhig wax ka dhexaysiiya oo wax la isugu noqdo. Sidaas darteed, si nololwadaaggu u fududaado, waa in wax isu-ahaani jirto.

Waxa ay samaysteen gartallaw (bridge) suurtagaliya in qofku haddii uu beeshiisa ka dhex baxo oo beel kale dan ama muraad ka galo uu beeshaas ku yeesho cid ka sii horraysa iyo safaarad lagu hirto. Taasi waxa ay keentay in ay guurka fogeeyaan, waayo, waxa imanaya muraaddo keeni kara in uu ninku qabiilkiisa ka dhex baxo oo uu beel kale dano u yeesho. Mar haddii aanu wiil jirin, waa in gabadh dhaxdin ahi beesha uga tirsan tahay. Sharcigaas ayaa socotada lagu soorayay.

Waxa lagu meelmarinayay, "hebel waa nin ka tirsan qabiilkii heblaayo ka dhalatay." Gabadh beel ku jirta ayaa ku filnayd in ay beesha ay ka dhalatay danjire uga noqoto beesha ay u dhaxday oo qofka martida ama socotada ah lagu soo dhoweeyo, laguna sooryeeyo.

Xilligaas waxa bulshada dhexdeeda ka dhashay murti iyo halhaysyo arrimahaas ku saabsan iyo xeerar beelaha ka dhexeeya oo guud ahaan iyo gaar ahaan danaha guud lagu ilaaliyo. Sidaas ayay u baxeen halhaysyada ah, *"inani waa meelxunjoog"* iyo *"inani waa haan abaar taal."*

**Inani waa meelxunjoog** – waxa ay odhaahdani u jeeddaa in gabadhu qof baahan ama muraad leh ay u sii joogto meel uu ku jabi lahaa ama uu ku dhibaatoon lahaa.

**Inani waa haan abaar taal** – waxa ay odhaahdani u jeeddaa in gabadhaas la kala guursaday la mid tahay: adiga oo kob abaar ah ku daallan, surmi ku ah ama ku harraaddan; dabadeedna si lama filaan ah ula kulmay geed hadh qabow oo ay hoostiisa taallo haan biyo ah oo galaankii la darsanayayna dul saaran yahay, kadibna ka badbaaday geeridii, diiftii iyo raadkii xaaladdaasi ku geyaysiin lahayd.

Waxa loo jeeday nin beel aan beeshiisii ahayn u sadcaalay, meel uu ku dhibaatoon lahaa ama uu ku tabaaloobi lahaa, ayay gabadh dhaxdin ahi badbaado u noqotaa.

Inkasta oo dadku kala dhalasho yihiin, waxa mideeyay dhaqaalaha iyo dhaqanka ay xeerarka u samaysteen. Qofku in uu tol yahay ama xidid yahay waxa ay fududaysay wada noolaantii iyo isweheshigii. Waxa ay dadkii noqdeen gudin iyo daabkeed, waxaana jirrid adag yeeshay iskuxidhnaantii bulshada. Intaas oo xeer iyo dhaqan ahi waxa ay hubiyeen sugnaantii iyo sal-udhigiddii nolosha.

Mar haddii bulshadaasi danta ka midaysan tahay oo ay Ilaah keli ah wada leedahay, cadowgooda iyo cadowga xoolahoodu mid yahay – dugaag, dulin, abaar, iwm – si ay u fududaato in ay nolosha wadaagaan, waa in marka hore xadhigga isku xidhayaa noqdo: in dadku tol noqdo ama xidid noqdo. Sidaas darteed, waxa ay isla garteen in gabadh ay ka dhigtaan gartallow ama xadhigga isku xidha. Taasi waxa ay fududaysay in ay wadaagaan: xoolaha, xoogga, daaqa iyo biyaha roobka, ugu danbaynna ay ceelka ka wada cabbaan oo meerto iyo kaalin u samaystaan.

Halkaas waxa ka abuurmay in dhammaan dadku noqdaan dir iyo daabaan (gudin iyo daabkeed). Waxa abuurmay safaarado (gabdho) beelaha isku xidha, si muraaddada la isu yeeshaa u fududaadaan. Qofku mar walba tolkii dhex joogi maayo. Waxa imanaya sababo keena in ay lagama maarmaan noqoto in loo tallaabo beel kale. Sababahaas waxa ka mid ah:

- Safar iyo sadcaal.
- Baadi maqan oo la raacdaynayo.
- Roob beel beelaha ka mid ah dhinaceeda ka da'ay.

- Marti ama in qofku beel kale marti u noqdo.
- Magan, gaar ahaan ragga, oo beel kale magangala.
- Ceel ay khasab tahay in laga wada cabbo.
- Arrimo kale oo labada beelood kala gala ama isu geeya.

Kala guursiga iyo in gabdhaha la isdhaafsadaa waxa ay keentay in isu socodka iyo xidhiidhadu fududaadaan. Waxa kale oo ay suurtagal ka dhigtay in maganta ama baadida la isku hayo oo cadow iyo dugaag laga badbaadiyo. Waxa ay keentay in qofka martida ah si xushmad leh loo sooro iyo in la wada dego oo la is dugsado. Waxa ay sidoo kale dhalisay in si buuxda nolosha loo wadaago oo dadku noqdaan gacal aan dibad iyo duggaal ku kala maarmin.

## Heerin

Erayga *Heerin* waa eray haween oo u dhigma kudaal ama dhuyaal. Waxa uu ka soo jeedaa noloshii sharciga iyo shuruucda lahayd ee qof kasta loo shintirin jiray ee ku dhisnayd qof waliba waxa uu leeyahay waxa uu la soo baxo. Boqolkiiba sagaal iyo sagaashan ayaa tubta sugan ku arooray oo hufnaanta iyo ragannimadu hoy u ahayd.

Waxa se jiray in yar oo bulshada ka mid ah oo nolosha ku guuldarraysatay, quudhsina ku dhex joogay. Nolosha waxa dhex joogay qoysas aan magac iyo maamuus midina u soo hoyan. Hablaha waqtigaa boqol halaadna waa laga bixin jiray, kontonna waa laga bixin jiray. Taas waxa sabab u ahayd sumcadda qoyska.

Hablaha qoysaska astaantaa lihi dhaleen waxa ay la baxeen *Heerin*. Guur looma hawaysan jirin inanta ka dhalata qoys aan maamuus lahayn. Taasi waxa ay keeni jirtay quudhsi iyo qiimadhac. Waxa kale oo ay keeni jirtay in hablaha qoysaskaasi dhalaan ee inannimada ku weynaada ama shindhaafaa ay waqtiyada qaarkood is urursan jireen oo ay rag doonan jireen. Dhinaca kale, waxa iyana jiray barbaar nolosha ku guuldarraystay oo aan hidinayn ama aan gacanta ku hayn xoolaha gabadhu ku xidhan tahay oo hablaha heerinka ah ka dhursugi jiray.

Heerinka waxaa gali jiray inanta hablaweynta noqota ee cidi kaam odhan weydo iyo inanta ay inanta ka yari dhaafto ee guurka kaga horrayso. Marka

cidi baayici weydo ama hollin weydo, muddo dheerna la hareer marmaro ayay xaaladdani iman jirtay.

Waxa ay isku urursan jireen sida tahriibta maanta. Waa hablo. Hawo guur iyo hammo ayaa ku jirta. Waa hunguroon jireen, waxa ay se ka biqi jireen in hungurigu xaaraan u horseedo. Iyaga oo taas ka digtoon ayay iyagu rag doonan jireen. Laba laba, saddex saddex iyo afar afar ayay isku raaci jireen. Geyiga lagu yaqaanno inta ay ka dhuyaalaan ayay beel ka durugsan beesha ay ka dhasheen u gudbi jireen. Reer garangar ah ayay dul iman jireen, aqal baana la geyn jiray.

Waxa la sheegay in afar hablood oo hablaweyn ahi heerimeen oo rag doonteen. Waxa la sheegay in afartii hablood ay reer dul yimaaddeen, aqalka kanbalkiisana fadhiisteen. Waa la isla yaqiinnay oo reerka ay dul yimaaddaan waa bilkeedi jiray.

Gabdhihii waa la kaxeeyay oo aqal weyn baa la geeyay. Neef baa loo qalay oo hilibkii oo xeedho lagu sido oo qiiqaya ayaa loo geeyay, kadibna yacayga dabadiisa ayaa loo galay. Hilibku waa qiiqayaa oo dabka laga soo qaaday.

Mid baa in la boodday oo kulkiisii inta ay hayn weyday tuurtay oo deetana tidhi, “kululaa kama naallee, sugi kari maynee.” Mid kale ayaa yeedhay oo tidhi, “karan maynno ee kala goo,” yacnii, inta uu qaboobayo sugi maynno ee kulaylka inoogu kala jara. Tu kale ayaa yeedhay oo tidhi, “naa kumbi haanta biyood,” yacnii, haanta biyuhu ku jiraan ku rid si uu markiiba u qaboobo. Tii afaraad ayaa tidhi, “naa ha kanfoofee korka saar,” yacnii, yacayga saar ha qaboobo e.

Halbaha yacaygaa loogu jiraa oo mid waliba waxa ay tidhi waa la maqlayaa. Markii waagu beryay ee xoolihii dareereen ayaa afartii hablood meel bannaan ah lala tagay. Saddex baa la yidhi hore u sii socda. Gabadhii afaraad ee tidhi hilibka innaga qaboojiya ayaa lala hadhay.

Sababo caado ah awgeed, beelaha dhexdooda saboolnimo nolosha ka jirtaa way jiri jirtay. Isu dheellitiranka nolosha ayay ka mid tahay oo ladnaanta looma sinna had iyo jeer. Taas cidna laguma dhalliili jirin, qoyska xaaladdaas sababo la aqbali karo ugu suganna, waa loo xoolagoyn jiray. Waxa se la diiddanaa qoyska saboolnimadiisu danseeg iyo tacab la’aan ka soo jeeddo. Taasna waxa ka dhalan jirtay dhaqanxumo, doqonniimo iyo kalsoonidarro keenta in qoyska sumcadxumo lagu naco.

Qoyska aan kaalin muuqata ku lahayn nolosha, qiimaha hablahoodu hoos ayuu u dhici jiray. Waxa la tusi jiray sababaha ay wax ku waayeen si ay dhalliilahooda qoomammeeyaan. Inanta noocaas ah, hooyadeed ayaa marjo ah, baali ah, ama aan lahayn dhaqan, karti iyo tarbiyad ay hablaheeda ku barbaariso. Hooyada basarida ah iyo aabbaha aan bulshada dhexdeeda magaca ku lahayn cid ku hiisha ama gabadha ay dhaleen ku dhiirrataa ma jirin. Waayo, 'inani saddexdhalka ayay hooyadeed ugu tagtaa' oo gabadha laga guursadaa hooyadeed ayuun bay marka danbe noqonaysaa.

## Hinaase

Hinaasuhu waa cudur aan maaro lahayn. Waxa aan u jeedaa waa cudur aan dawo lahayn. Hinaasuhu waxa uu lumiyaa isku kalsoonida iyo xasilloonida qoyska. Waxa guurta xubinta iimaanka. Inta la wada joogo tuhun baa lagu wada joogaa. Waxa hubaal ah in aan xanuunkaas laga bogsan. Marka ugu danbaysana waxa uu keenaa qoys burbur. Mar walba ninka waxa haya jacayl aanu gabadha u furi karin ama aanu dhowrsoonaanteeda u aamini karin. Sheekadan soo socotaa waxa ay marag u tahay hinaasaha iyo babbisada ninka dul saaran.

Waa qoys mashkiladdaasi dhex taallo. Waa gabadh umul ah. Ninku waxa uu leeyahay bayr iyo babbiso cudurkaa salka ku haysa. Inta uu guriga ka maqan yahay waxa ku oogan dab iyo dhuxul werwer salka ku haysa. Suuqa ayuu ka soo ambabaxay.

Gurigu waa aqal soomaali. Ummul baa gudaha jiifta. Ninku waxa uu caado u leeyahay in marka uu guriga yimaaddo uu dibadda ku hakado oo uu waxa gudaha ka socda dhegaha u raariciyo. Guriga waxa yaalla ashuun ama jalxad biyaha lagu shubto. Ashuunku biyaha waa habayaa oo waxa hoos yaalla weel ay biyaha tif lihi ku dhacayaan, si guriga biyaha looga ilaaliyo.

Ninkii gurigu aqalka kadinkiisii ayuu ku hakaday. Sanqadh iyo dhaqdhaqaaq ayuu dhegaha u raariciyay. Biyahaas tif leh ayaa qalbigiisa lulay. Isma odhan guriga gal oo bal waxa socda is dul taag.

Biyahaas tif leh ayuu u qaatay in gudaha hawli ka socoto. Dib buu isu melmelay. Waxa uu daf yidhi saldhigga Booliska. Waxa uu dhiibay riboot (report) odhanaya in afadiisii nin ku mashquul yahay. Waxa uu ku dhaartay in arrintaasi jirto.

Dhawr nin oo askar ah oo nin madaxi wato ayaa la soo raaciyay. Gurigii ayaa la dul yimid. Ninkii madaxda ahaa askari ayuu amar ku siiyay in uu guriga galo oo uu ka war keeno. Daqiiqad kadib ayaa ninkii waxa hor yimid in askariga qudhiisu gudaha hawl ka hayo, kadibna waxa uu yidhi saw galaaba raagay.

# CUTUBKA IV

## XAALADDA MAANTA

*"Hu'gu qofka waxba uma taro haddii aanu huwanayn hu'ga anshaxa iyo hufnaanta."*

Aynnu wax yar soo hadalqaadno xaaladda maanta lagu sugan yahay iyo sababaha. Muddo dheer ayaa noloshu kala qalnayd oo dadkii waqtiyada qaarkood noolaa ay dhex fadhiyeen nolol deeq iyo mahad Alle ah oo lagu naalloodo. Noloshaasi dadka fudayd kuma dhaafin.

Waxa la dhex joogay nolol mudhbaxday oo dhiibsatay xididdo dhaadheer. Waxa lagu sugnaa nolol dhanka Allana ka dhawran dhanka ummadda ku noolna ka dhisan, dadkii ku dhaqnaa xasiliyeen oo gacanta ku hayaan. Labada waqti ee noloshu leedahay, ta la mahadiyo ee aan muraaddada meel fog laga doonin ayaa la dhex joogay. Waxa jirtay aqoon iyo abbaar nolosha loogu abtiriyo iyo isku kalsooni lagu dhex joogo.

Nimcada waa lagu mahadceliyaa, dhibaatooyinka waa lagu sabra, sabirkana waxa lagaga dhursugaa ta Alle. Haddii aanay noloshu labadaas waqti noqon oo mar walba mahad iyo barwaaqo ku sugnaato, waxa lumaya dhandhankii iyo macaansigii nimcada. Haddii aad abaar iyo oodo lul lul ku waartana in mashkilad ta hore ka soo hor jeeddaa dhacdo ayaa la filan karaa.

Bani'aadanku waa daciif oo dhibta waqti dheer ma xammilo. Nimcadu dhalliilaheeda ayay leedahay oo waxa dhacda in la kibro oo xadka laga baxo oo xaalado aan habboonayn lagaga jawaabo oo qofku wax is moodo sida marar badan dhacday. Tusaale ahaan, *"ciir baa na deyn weydee; gaajoy na daba carar,"* ama *"Aadame ka weynaannee, ma Ilaah yar baan nahay!"* Waxa dhici karta in fusuq iyo fasahaad dhaco, xadka laga baxo oo Ilaahay iyo xeerka islaamkaba oodda laga rogto.

Waa sidaas si ka duwan haddii abaaro ba'ani dhacaan, sida kuwii aynnu sheegnay ee caanka ahaa: *Baaha, Gaatama, Adhigaba, Maadhganbiya, Jiitama, Jaahwayn, Haarriya, Hawaara, Hargacuna iyo Dabadheer.* Waxa dhici karta in dadku bahaloobo tuugada iyo dhacu bato oo ay dadku xayada iyo xishoodka tuuraan, sida waagii *Xaaraamacune.* Waxa dhici

karta in adkaarta Ilaahay iyo waajibaadkii diiniga ah la illaabo oo xalaal iyo xaaraan kii uu noqdaba aan loo aabbayeelin.

-Waxa aan hordhacan uga socdaa baraarujin iyo weyddiin ah: labada waqti kee ayaynnu hadda ku sugan nahay? Waqtigan waxa la odhan karaa labada waqti ee aynnu sheegnay waxa aynnu jirnaa ka danbe. Waxa aan u jeedaa waqtigii fara madhnaanta. Bal horta aan xuso maanta ama xilligan lama wada fara madhna, laakiin inta faraha wax ku haysaa ma muuqato, waayo boqolkiiba sagaashan waa la faro madhan yahay.

Mar haddii ay sidaas tahay, inta yar ee wax haysa waxba u dhigmi maayaan, oo malaha ma jirto daqiiqad aan la hor taagnayn oo aan la lahayn 'wax keen.' Aynnu faaqidno sababaha arrinkaas ka danbeeya.

Waxa innagu furan albaabkii hunguriga. Sideedaba hungurigu waa cadawga: anshaxa iyo asluubta, tacabka iyo waxqabadka, miyirka iyo miisaanka, xayada iyo xishoodka, runta iyo raalligalinta dareenka, samaha iyo sabirka, dedaalka iyo daacadnimada, diinta iyo caqiidada.

Waxa ina luraya hungurigii quraacda, qadada, cashada, qaadka, sigaarka, khamriga, tuugada, dhaca iyo boobka. Waxa ina luraya hungurigii macsida iyo maratuurka, hungurigii marmaroorka iyo munaafaqnimada, hungurigii jiifka iyo hurdada, hungurigii beenta iyo balwadda, hungurigii fidnada iyo fara madhnaanta, hungurigii baryada iyo keenta iyo hungurigii fadhiga iyo fooxaalliga.

Waxa aynnu ku sugan nahay waqtigii qoriga iyo qacda, foolxumada iyo fawaaxishka, qolaqolada iyo qoqobka, quusta iyo qaylada, is qaawinta iyo qooqa, kuddaafadda iyo uus kulaalka. Waa waqtigii hunguriga bacaha iyo boodhka. Waqti kasta oo jiray, horrayso iyo danbayso, waa kii ugu macnaha darnaa.

Intaas oo dhammi waxa ay ka dhalatay baahida xad dhaafka ah ee boqol laab uga badatay tacabkeenna sharka iyo shidaadda ah. Intaas oo dhammi waxa ay naafaysay dadnimadeennii, karaamadeennii, tacabkeennii iyo tiirarkii nolosheenna. Qofka hu'gu wax ma taro haddii aanu huwanayn hu'ga anshaxa iyo hufnaanta. Looma noolaado aad wax uun liqdid, waxa loo noolaadaa aad wax soo kordhisid.

*Naftu inay maqnaatiyo*
*Inay mahad ku nooshahay*

*Labadaa mid weeyaan.*

Intaas oo dhan waxa u sabab ah qawadka intii Ilaahay inoo qoray ee xalaasha iyo buuniga ahayd. Intaas oo dhan waxa u sabab ah marinhabawga iyo isku hallaynta reer galbeedka. Intaas oo dhan waxa u sabab ah saluugga nafteenna iyo quudhsiga quwadda innagu jirta. Ayaandarrooyinka ina dhex yaal ee aynnu indhaha ka lalinaynaa waa kuwo isku keen biirsanaya oo innaga uun ina sugaya. Ayaandarrooyinka ina dhex yaallaa waa kuwo aynaan ifka wax kaga qaban karin, aakhirana la tagi karin.

Waxa laga yaabaa in iyada oo sidaas ah suurka la afuufo, waayo, waxa si cad u soo shaacbaxay ammaaradahii hordhaca u ahaa qiyaamaha. Haddii adiga oo aan warba haynnin ay dushaada ka yeedho, sidaas maan yeelo meel kuu buuxin mayso.

Belo gafuur la qabto ayay leedahay ee dabo la qabto ma laha. Ina-ragow imikaba laguu sheeg calaamadaha qiyaamaha waxa kow ka ah marka dadku macnabeelo ee karaamada lumiyo. Taasi waa astaantii ummadihii hore lagu rogi jiray.

Cimrigii nolosha wax badani kama hadhin marka laga dabqaato calaamaadka muuqda iyo cimridegdegga socda. Astaamihii la innagu yidhi ku garta iyo macnabeelka nolosha ka jiraa waa ammaarado ay indhaheennu hayaan. Waxa aynnu ka dabqaadanaynaa shuruudihii quruumihii hore lagu rogi jiray. Haddii warka la sii tixraaco, waxa la yidhi: nin aan waxa jooga garani waxa soo socda ma garto.

Quruun kasta waxa la rogi jiray marka ay xadka ka baxdo ee ay weydo indho ay ku aragto iyo caqli ay ku garato awaalaha jira. Quruun walba waxa la rogi jiray marka ay Ilaah kale oo baaddil ah samaystaan ama ay dardaarankii badbaadada ka jeestaan. Waxa la rogi jiray marka xumuhu hafiyo samaha iyo wanaagga.

Jidkii dheeraa ee soo taxnaa ee mar walba samuhu gacan sarreeyay ayaa ta aynnu maanta ku sugan nahay ka danbaysay. Haddii nolosha majaraheedu muddo kale sii socdo, waxa aynnu filaynaa in arrintu ka sii dari doonto. Haddii aanay waanwaani iman, geeddisocodku waxa uu ina geynayaa meel fig la yidhaahdo oo ay noloshu marka ay faraha ka baxdo dul istaagto.

Haddii innaga oo xanbaarsan ayaandarrooyinka uu hungurigu hoggaaminayo uu figtaas dusheeda gabbal inoogu dhaco, saacaddaas waxa aynnu ku qasban nahay in aynnu laba kala dooranno: in aynnu raacno raadkeennii aynnu sannadaha dheer ku foognayn ee mar walba aynnu xadka kaga sii baxaynay—waa jid dheer. Iyo in aynnu figta xumaha dib u soo raacno, wasakhdii ina fuushay iska daahirinno, jidkii anbadkana dib uga soo noqonno.

Dib u noqoshadaasi ma fududa oo xumihii ayaynnu halkii ugu sarraysay ka gaadhnay. Laakiin ujeeddadu waa in aynnu waddo daahir ah cagta saarno ilaa figta; ilaa saacadda qiyaamaha.

Waxa taa inoo garab taalla in aynnu innaga oo xanbaarsan anbadkii boqolka sannadood ku dhawaa fikta ka daadanno oo aynnu qiyaamaha iyo naarta ku dhacno. Ta aan tu saddexaad lahayn ee maanta ina hor taallaa waa labadaas mid.

Ummadyahay, waxa aad rumaysataa in maanta labada aad kala dooranaysaa yihiin: in aad jidkii ambadka ee figta xumaha ku saaray suurka la afuufayo ku sugto. Iyo in aad waddadaas dheer dib u soo raacdo kadibna aad mar labaad cagta saarto ilaa fikta oo aad halkaa qiyaamaha ku sugto adiga oo daahir ah.

Waxa aan ku talin lahaa in ragannimo la isku dayo oo jidkaa naarta laga soo noqdo oo dib la isku daahiriyo kahor qiyaamaha oo halkii samaha kuugu danbaysay aad nafta kula soo eerato inta aan suurku kugu yeedhin. Jidkaas dheer ee xumuhu yaanu ku siin talo odhanaysa jarka ka bood, rejo iyo awood aad dib ugu noqotaa ma jirtee. Kudhacii xumaha ku beddal kudhaca badbaadada.

## Soo Rogaalcelintii Gumeysiga

Kadib markii carrabka laga dhigi waayay ee baaq kalgacal si joogto ah dhegihiisa loo maqashiiyay iyo kadib markii falkiisu dadka jaanjaanshay ee dhan loo dhaqaaqo la garan waayay, ayuu mar kale gumeysigii soo rogaalceliyay. Muddaaharaadkii berigii uu carriga yimid lagala hor tagay ee odhanayay waa nala gaalaynayaa waxa ka danbaysay tu odhanaysa, 'gacaliye, gacalkaa hel ee noo kaalay.' Waxa uu dalka ku soo laabtay isaga oo muqaddas ah oo dadka gaaltabyo hayso.

Kal iyo laab waasac ah ayaa lagu soo dhoweeyay. Sidaas waxa khasab ka dhigay falkii iyo sixirkii uu ka tagay iyo shaxdii uu markii horaba sii dhigay. Waxa uu soo laabtay isaga oo qaali ah oo aan dhulka la dhigayn. Waxa uu gartay in uu maanta yahay sayid derajaysan oo ay indhaha dadku u basaaseen.

Sidii xoolo oomman ayaa lagu soo qamaamay, dhulka ayaana la dhigi waayay. Maanta ma aha shalay iyo waqtigii oodaha laga rogtay ee lagu nuuxnuuxsaday waad na gaalaynaysaan. Albaab waliba waa u furan yahay, muuqiisii iyo casharadiisii ayaana loo jeelqabaa. Kabaha ayuu la baxay. Waa lagu soo xoomay oo salaanta iyo kalgacalka ayaa xaggan iyo xaggaasba laga dhigay.

Maanta ma aha ninkii ku talaxtagay siyaasadaha iyo tabaha. Ma aha ninkii dawladda Ingiriisku soo xushay ee la soo cugay. Ingiriisku waxa uu ogaaday in maanta nin walba la aqbalayo. Shardiga qudha ee jiraa waa in uu nin cad oo reer galbeed ah yahay. Waayo, qiimaynta dadka ayaa heerkaas taagan.

Dalka waxa yimid hay'ado la siman heerka dalku joogo. Waa dadkii nolosha ka dhacay ee aan waxba ka ahayn dalkooda. Laakiin waa nin amran marka loo eego sida indhuhu ugu basaaseen. Degdeg ayay dalka ku soo galeen, dadkana degdeg ayay u dhex galeen. Degdeg ayay ugu dhaqaaqeen in ay gudbiyaan casharradii ay sideen. Habqan iyo habaqlaa ka dhacay. Harraadkii loo qabay iyo saxmadaha la isku gaadhi waayay ayaa derajadooda sare u dhigay.

Albaabka ay hay'adahaasi dalka ka soo galaan waxa uu noqday haweenka. Waxa ay buunbuuniyeen kaalinta haweenka, waxaanay ku celceliyeen haweenku waa dulman yahay.

Shaki ma laha in haweenku dulman yahay oo nolosha waxa ka jira isudheellitiran la'aan. Xilkii arrimaha gudaha (guriga) iyo xilkii arrimaha dibadda labadaba waqtigan sida qaalibka ah haweenka ayaa isku haya. Inta badan hawsha guriga iyo ubadka ilaalintooda ayay keli ku yihiin oo aanay cidina la wadaagin ama ku wehelinnin.

Qofka dumarka ahi suuq ayay fadhidaa, qaad ayay iibinaysaa, hilib ayay iibinaysaa, ama hawlo iyo muraaddo kale oo qoysku leeyahay ayay ku fooggan tahay. Xaaladahaas iyo xaalado kale oo aan la aragba haweenku waa ay qabaan, cid uga garaabaysaana badiba ma jirto. Laakiin ujeeddada gaalku taas waa ay ka xeeldheer tahay.

Masuuliyaddii isu dheellitirnayd ee ka dhexaysay ragga iyo dumarka ayay haweenku keli ku yihiin. Ubadka tasoobay ee waayay kaalintii aabbaha iyo hawshii lammaanaha ee uu midiba dhinac ka hayn jiray iyo xilka culus ee haweenka ku soo baxsaday waa tabaalo weyn iyo dhaawac karaamaguur ah. Haweenku markii ay dhinacooda midig jeedaaliyeen ee ay ina-rag iyo kaalintiisii waayeen ayaa indhabeel ku dhacay. Noloshu waa dheellisan tahay, haddii aan la dabaqabanna haweenku faraha ayay ka bixi doonaan.

Ina-ragow, haweenkeenna waxa ku gaafwareegaya wiilashii reer Yurub ee la soo faray in ay burburinta dadka, dhaqanka iyo anshaxa xagga haweenka ka soo galaan. Waa laga war hayaa in kooxihii ku yimid magaca hay'adahu durba in badan oo haweenka da'yarta ah ka mid ah gacanta ku dhigeen oo ay ku bilaabeen: haweenka waa la gumaystaa, waa la rartaa, waa la dilaa iyo gacanhaadisyo kale.

Intaas oo dhacdaba sababta keenaysaa waa guriga haweenka iyo carruurtu ku keli yihiin ee ninkii ka maqan yahay, waayo ninku waa albaabka guriga. Kol haddii guriga ninku ka maqan yahay Ibliis baa nin ka noqonaya oo waxa uu guriga ku dirayaa inta guriga ku nool ee baylahda ah –haween iyo carruur. Waad ka war haysaan in ubadkeennii badh ka mid ahi beri hore tasoobay.

Inta badan ninku kaalin kuma laha qoyska sida aanu badi guud ahaan nolosha kaalin ugu lahayn. Waxa uu u qaybsan yahay siyaasad indha la' oo aan jihaysnayn iyo mashruuc jaad la yidhaahdo. Hadal iyo haloosi madhan ayuu inta badan marfash kula maqan yahay.

Ninku wixii aafo iyo mushkilad guriga yimaadda isaga ayaa u nin ah. Xilkaas Ilaahay ninka ayuu saaray. Haddii uu guriga ka maqan yahay, guriga iyo wixii ku nooli waxa ay halis u yihiin in aafaad iyo Ibliis fursad u helaan oo ay dadka ku nool fidneeyaan ama hoos ula faqaan oo qalbigooda sahwi iyo salfudayd galiyaan. Waxa dhici karta in uu hooyada shaydaan weswaas galiyo oo uu hiyi kiciyo kuna abuuro walaahaw iyo salaw. Haweenku waa ka kalnugul yihiin raga oo sida wax loo galiyaa waa fududdahay, gaar ahaan marka ay wax tabanayaan.

Hay'adahu waxa ay fursad u heleen xaaladahaas nolosha ka jira. Waxa ay baadidooneen mashkilado haweenka lagu hiyi kicinayo. Waxa ay samaysteen marin ay haweenka turxaan ku galiyaan. Dabadeedna waxa ay dhegihii dumarka maqashiiyeen qodobbadan iyo in la halmaasha:

haweenku waa dulman yihiin, waa la dilaa, waa la rartaa, waa la addoonsadaa, waa la gudaa, waa la qodbaa (fircooni), waa lala guursadaa, iwm.

Gaaladan dalka timid miyay sidaas u jeedaan? Maya ee waa baroortu orgiga ka weyn. Waxa ay u jeedaan iyo halka ay abbaarayaan waxa ay daarran tahay in ay dab ka dhex shidaan qoyska iyo qoysaska oo ay helaan marin iyo waddo ay ugu duggaalaan haweenka. Ujeeddada weyni waa in ay haweenka la wareegaan kadibna qoys burbur yimaaddo.

Waxa ay u jeedaan sida aan sheegay in ay nolosha macna tiraan oo dumarku guriga ka saahidaan oo ay ku mashquuliyaan siminaarro iyo wax la mid ah. Waxa ay maanka ku hayaan in ay gacanta ku dhigaan haweenka ay noloshu ku dhisan tahay oo ay u adeegsadaan ladagaallanka ninka. Bal haddaba aynnu sheekadan iyo warkan anbadka ah hoos ugu sii dhaadhacno, halal madhaafaan ahna ka nidhaahno.

## Haweenkeenna

Gumeysiga cusubi ujeeddooyinka jahliga xanbaarsan ee uu jeebka ku sito u sahamin maayo. Waa astaan iyo calaamad iimaan la'aantu leedahay in aan loo meeldayin waxa indha la'aanta damacu kula faqayo. Waxa ay dedayaan ee ay la daalaadhacayaan wax kale ma aha ee waa in ay dhammaan ummadaha adduunka ku nool ka maydhaan dhaqanka iyo diinta, kana fara madhiyaan dhaqaalaha, si ay ugu fududaato in ay adduunka korkiisa Ilaahyo ka noqdaan, wixii iyaga ka soo hadhana ay addoommo ka dhigtaan.

Ujeeddooyinka gumeysiga cusub cid ku baraarugsani ma jirto, taasina waxa ay keentay in ay marba tallaabo hor leh soo qaadaan, soona dhiirradaan, marka ay dadka wax dhiillo iyo dhaqdhaqaaq leh ka waayaan.

Marka la doonayo in ummad lala wareego waxa laga abbaaraa dhinaca haweenka, waayo, waxa ay og yihiin in haddii haweenka lala wareego aanu raggu dagaal hollanayn oo uu ka lumayo qalabkii iyo qiiradii dagaalgalin lahayd. Waxa ay og yihiin in uu ina-rag xadka ka baxay oo aanu waxa socdaba ka war qabin. Waxa kale oo ay ogyihiin in ina-rag meherad ka dhigtay oo uu ku mashquulsan yahay qaad iyo quraarad.

*Kulammada sawaxanka leh*
*Suti muranka yaalliyo*
*Salowgooda baxayaa*

*Suruc buu dugsanayaa,*
*Derejaan la kala sidan*
*Kala soocda laba ruux*
*Haki, iyo sug baan jirin.*

*Sahan iyo baxnaaniyo*
*Noloshuba sansaan ma leh*
*Ma dhex yaal sureerkii.*[23]

Codka keli ah ee mafrishyada laga maqlaa waa hugun iyo haloosi madhan oo leh ujeeddo aan meel buuxinayn. Waxa uu isku dhuuqayaa caqaar iyo siyaasad, marka uu mafrishka ka kacana, mooyi meel uu ku danbeeyo.

Lama socdo waxa adduunka ka dhacaya. Lama socdo qorshaha iyo faragalinta soo dhiirranaysa ee guryaha iyo haweenka u dhaaftay, kadib markii la ogaaday in uu maqan yahay ninkii haweenka iyo carruurta isku gudbi lahaa ee albaabka u noqon lahaa. Ina-rag lama socdo in haddii ubadka iyo haweenka gacanta lagu dhigo ay fududdahay in dalka gacanta lagu dhigaa, mar haddii aanay jirin indhihii, afkii iyo addinkii ilaalada u noqon lahaa.

Hore ayaa loo yidhi, *tuugo kula taallaa kaama tab weydo.* Laguma baraarugsana in mar hore la sahansaday guryaha afka kala haya ee ubadka iyo ooryuhu ku keliyaysteen. Waxa fursad helay ninkii dhabbacan jiray ee ishaafalatada iyo warmaqabtada wax ku dili jiray. Gumeysiga cusub waxba kama baylahaan, waxba kama baaqdaan, waxna dib ugama dhacaan.

Xaggee ina-rag kaga maqan yahay maatada xadka laga saaray ee lala wareegay markii ay waayeen cid ay u qayshadaan iyo indhihii ilaalin jiray? Ina-rag ma ka war qabaa xaaladdaas nin kasta gurigiisu ku sugan yahay iyo in haweenkii iyo ubadkii muska looga soo dhacay oo aanay rag waxba ka noolayn?

Ina-rag ma og yahay in intii uu xilkooda siday gacanta lagu dhigay oo diintii iyo dhaqankii laga maydhay? Ma ku baraarugsan yahay tallaabadan ta xigta iyo qorshayaasha isdabajoogga ah ee soo socda? Waa guuldarro iyo gacmo madhan; waa wax aan afka laga sheegi karin, cid loo sheegaana aanay jirin.

---

[23] Rag siyaasi wada noqoy, 1998.

Gumeysiga cusubi waxa uu marayaa in uu marba cod dhiirran ku celceliyo si uu u dhegaysto bal wax dhawaaq ah oo damqada. Gumeysiga cusub ee aan naxariista iyo kasha xishoota lahayni waxa uu beryahan danbe ku celcelinayaa: haweenka waa la dilaa, haweenka waa la iibiyaa, haweenka waa la gumeystaa, hablaha gudniinka fircooniga ah ha laga daayo iyo arrimo la halmaala.

**Haweenka waa la dulmi jiray** – Haddii aad tidhaahdeen haweenka waa la dulmi jiray, waxa la idinku yidhi xaqaa'iqii nolosha ka jiray ayaa loo wada hoggaansanaa. Cid waliba, rag iyo dumar, waxa ay u hoggaansanayd xaaladaha nolosha ka jira.

Noloshu waxa ay ahayd nolol adag; xooladhaqato reerguuraa ah, haddii aad malayn karaysaan. Waa bulsho kaalinta ay leedahay xooluhu xukumaan; guure iyo galabcarrow, geeddi iyo guluf, aroor iyo saddexguul, rarid iyo furid, daaq iyo doog iyo dugaag iyo ladagaallan joogto ah oo aan nasasho iyo fadhi jirin; gu' iyo jiilaal. Xaqiiqooyinkaas nolosha ka jiray ayaa yeedhinayay xaaladihii jiray.

Rag iyo dumar, yar iyo weyn, cid waliba waxa ay lahayd kaalin ku biya shubanaysa badbaadada xoolaha, taas oo ku gororaysa badbaadada qofka. Haddii uu dulmi jiray waa la wada dulmanaa. Waxa loo dulmanaa waayihii nolosha ka jiray. Si kale kuma garatid e, wiil iyo gabadh ka uu yahayba, saddex jirka ayuu ku hawlgali jiray.

Laakiin aan ku weyddiiyo su'aal oo aan ku idhaahdo: ummaddan waayaheeda, xaaladaheeda iyo xeerarkeeda, xaggee ayaad adigu ka soo gashay? Ma dacwad baa kuu timid oo denbibaadhe ayaad tahay? Malaha waxa fiicnaan lahayd in aad ka hadasho xaaladaha ka jira reer galbeedka ee afdhabaandhabka iyo musaraarka salka ku haya: ragga is guursada iyo haweenka is guursada, ubadka yaryar ee la fuulo, aabbaha inantiisa naagta ka dhigta, ragga hooyadood naagaysta iyo tabaalooyinka dalka aad sheeganayso ka jira.

**Haweenka waa la dili jiray** – Qodobka labaad ee odhanaya haweenka waa la dili jiray ama waa la dilaa, aan hal kaa idhaahdo. Cid kasta oo xilkeeda iyo kaalinteeda lumisa, rag iyo dumar, yar iyo weyn, ciqaab ayaa la marin jiray. Haddii haweenka ul lala dhici jiray marka ay mutaystaan, raggana waran iyo billaawe ayaa la dardari jiray marka badbaadada nolosha la iskaga hor yimaaddo.

**Haweenka waa la Addoonsan jiray** – sida aan sheegay nolosha ayaa loo wada hoggaansanaa. Waayo, badbaadada xooluhu waxa ay ahayd badbaadada ummadda. Si kale iyo sabab kale oo haweenku u dulmanaayeen ma jirin.

**Haweenka waa la gumaysan jiray** – wax waliba sababo maslaxad u ah nolosha ayay ku salaysnaayeen. In haweenay lala guursado waxa loo cuskan jiray sababo iyo ujeeddooyin marin leh oo aan jahli iyo cadaawadi ku jirin. In qofka dumar ah lala guursado waxa marag looga dhigi jiray sababo miyir, miisaan iyo garasho salka ku haya. Waxa keeni jiray dhaqan iyo caadooyin ummaddu lahayd iyo sababo nolosha u dan ah.

Haddii qofka dumar ah dhal laga waayo waxa iman jirtay in lala guursado, waayo, ninku waxa uu u baahan yahay in uu kaalintiisa ciidan xoojiya u helo. Ujeeddada labaad waxa ay ahayd in uu cadawgiisa garab iyo gaashaan u helo oo ina-rag ayaa is hayay, muhiim ayaanay ahayd in uu u col samaystaa.

Ooridiisa ta uu ku labeeyaa waxa ay ahaan jirtay haweenay walaalkii ama inaadeerkii ka dhintay. Waayo xeerka ummadda ayaa qorayay in qofka dumar ah ee ninku ka dhinto aan la odhan orod reerahiinnii qabo ama fasax baad tahay. Xushmad ayay ahayd in qofka dumar ah ee ninku ka dhinto ninka walaalkii guursado.

## Qodbidda Gabdhaha

Ferenjiga yari waxa uu dhalliilaa arrimo muraaddo kaga xidhan yihiin oo aanu ka war hayn sababaha keenay. Qodobka ama Qodbidda haweenku ma ahayn cadaawad sida uu u dhigay ee jahliga iyo ujeeddooyinka hoose xanbaarsan.

Gabdhaha waa la qodbi jiray, gudi jiray ama la xalaalayn jiray. Gudniinku waxa uu daarranaa in gabadha dhiig faasid ah oo caarada hore ee makaanka fadhiya laga sii daayo.[24] Erayga la cuskan jiray ee *xalaalaynta* ayaa arrintaa ka marag kacaya. Gudniinka fircooniga ahi waxa uu salka ku hayaa been iyo ujeeddo la soo dhabdhabay.

[24] Sida bulshadu aaminsanayd.

Ummaddu ma ahayn ummad jaahil ah, indho la' oo dhego la' sida uu u arko inanka yar ee reer galbeed soo dirtay ee duullaanka ku ah ummadda iyo arrimaheeda u gaarka ah ee ay isaga uga war roon tahay.

Inanka iyo inanta yar ee reer galbeedka ah warkooda iyo abbaartooda ayaa caddaynaya jahliga haya. Qodobka gabdhuhu kuma uu iman cadaawad iyo ciqaab darteed. Waxa uu ku yimid sababo xanbaarsan caqli oo daarran badbaadada gabadha iyo guud ahaan mujtamaca.

Carriga waxa joogay geeljire dayro ah oo noloshiisu tahay in ay geela ku dagaallamaan libaax ama col kale. Noloshiisu waxa ay ku koobnayd daba joogga geela, waraabkiisa, daaqiisa, xeradiisa iyo dhaqaalayntiisa. Maadaama mustaqbalkiisu ku xidhan yahay afartan sannadood ayuu xaaladdaas iyo ardaaga boodhka leh ku sugnaan jiray.

Intaas oo raxanraad ah waxa uu u marayay in uu maalin uun ardaaga boodhka leh ka kaco oo uu gogol, guri dugsoon iyo gabadh dhabeel ah agteeda ka soo tooso. Afartankaa sannadoodba hammo iyo hunguri dumar waa ku jiray. Laakiin maalin ayuu muraaddada la sugayay.

Ninkaas aynnu ka sheekaynayno ee hammuun dumar ku gaamurtay haddii uu maalin maalmaha ka mid ah fursad u helo gabadh gashaanti ah oo halo la joogta ama maydhax diiranaysa, si kastaba ha ahaatee, haddii uu gabadhaas cidla ka helo, ta dhacdaa sow ma aha in uu inantaas ku haliilo oo wixii dhacayaaba hadhow ha dhacaane, fara xumeeyo? Saw taasi inannimadeeda iyo karaamadeeda dhaawaci mayso? Qoyskii ay ka dhalatay, gaar ahaan aabbaheed iyo hooyadeed sow dhegxumo u soo hoyan mayso?

Haddii inanta taasi ku dhacdo, sow walaalladeed wax dili maayaan oo dhagar iyo dhiig soo hoyn maayaan? Inantaas miyaa guur danbe loo hawaysanayaa? Ugu danbayn, saw inantaasi murugo u dhiman mayso? Sidaas darteed, nin moogow, sow inantu aayabeel noqon mayso? Sow hooyadeed karaamaguuri mayso?

Qodobku intaas oo mashkiladood oo aan laga soo kaban karin ayuu ku gudbanaa. Waxa loo qodbi jiray badbaadadeeda iyo badbaadada qoyska. Sida ay sheegeen jahli iyo indho la'aan ma ahayn ee waxa uu ahaa caqli, miyir iyo miisaan lagu ilaaliyo badbaadada gabadha ama gabdhaha. Waxa uu ahaa badbaadada dhiig daadan lahaa oo dhex mara labada qoys.

Ummadda aan ka sheekaynayo waxa dhibaa ma ahayn saboolnimo iyo sababo fudud. Laakiin arrinka ay u dhintaan waxa uu ahaa xeerinta iyo ilaalinta dhegta iyo magaca. Nin moogow laguu sheeg.

Maskaxda madhan ee reer galbeedka waxa aan u sheegayaa in inta ay gudo kale iyo guryo kale ku fooggan yihiin ay xal u raadiyaan boqollaalka dhegxumo ee dul gawdiida.

## Iibka Haweenka

Reer galbeedku waxa ay ku doodayaan in Soomaalidu gabdhaha iibiso. Tolow reer galbeedka sidaas yidhaahda cidi wax ma ka tidhi arrintan? Cidi se wax ma iska weyddiisay xaqiiqada dooddan iyo ujeeddada ka danbaysa? Tolow reer galbeedku ma dhaliilaha bini'aadamka ayuu saxaa? Tolow isagu dhalliilo ma leeyahay. Haddii ay jirto, ma inoo bannaan tahay in aynnu innagu kuwooda saxno? Faragalintiisu maxay daarran tahay? Tolow maxaa reer galbeedka kaga xidhan hablaha waad iibisaan, waad guddaan, waad dishaan, maryo dhaadheer ayaad u xidhaan, aqallada ayay fadhiyaan, ubadka ayay hayaan, iwm?

Tolow arrinta ay leeyihiin gabdhaha waa iibisaan cidi ma uga jawaabtaa, mise wixii ay yidhaahdaan waa duudduub ku qaado? Miyaanay faaqidaad lahayn? Miyaynaan isweyddiin karin su'aalo ku saabsan oo odhanaya, tolow ma ka lillaahi baa? Marka ay sidaas ina leeyihiin, iyaga wax waliba miyay u hagaagsan yihiin? Iyagu qaladaad ma leeyihiin? Tolow haddii aynnu qaladaadkooda ka war haynno oo aynnu u sheegno ma qaadanayaan? Kollayba waxa aynnu ognahay in arrintan iyo kuwo kale oo badanba ay wax kaga xidhan yihiin.

Tolow miyaanay ogayn in ummadaha adduunku kala diimo, kala dhaqanno iyo caadooyin yihiin, oo cid kasta danteeda iyo dhaqankeedu sababo salka ku hayaan? Miyaanay ogayn in aan la odhan karin aragtida iyo qaabka ay ummadi nolosha u samaysatay waa khalad? Tolow ma waxa ay doonayaan in bini'aadamka adduunka korkiisa joogaa ay dhammaantood bilaa diin, bilaa dhaqan, bilaa dhaqaale iyo bilaa anshax noqdaan? Tolow miyaanay inoo malaynayn in aynnu wax garan karno oo dhaqan kasta oo aynnu leennahay aanu jahli salka ku hayn?

Dhaqankeennii hore, noloshii aynnu samaysannay iyo xeerarkii ka dhashay waxa ay waafaqsanaayeen nolosheenna iyo diinteenna. Gabadha reer ayaa

dhali jiray, waa la korin jiray oo dhaqaale ayaa la galin jiray. Dhaqan iyo anshax ayaa la bari jiray. Aqoon aragtida noloshu ku dhisan tahay waafaqsan ayaa la bari jiray. Marka ay shinkeeda gaadho waa la soo dooni jiray. Dhalashada qoyska iyo gacantoodaba waxa ay ka bixi jirtay iyada oo lagu burburay oo si walba u dhammays ah. Waxa ay noqon jirtay dhaxdin.

Reerkii ay ka dhalatay dib uma manaafacaadsan jirin. Reer kale ayay dhisi jirtay oo dhiqi jirtay. Waxa waajib ahayd in qof waliba waxa uu doonayo uu dhaafsan jiray waxa uu tacabkiisu u soo saaro oo qudha. Gabadh shan iyo labaatan sannadood lagu hawshooday marka ay reerkii dhalay dhinac ku bannayso ee nin aan dhaliddeeda iyo dhismaheedaba waxba ku lahayni isaga oo aan waxba dhaafsan gacanta qabsado; dhaqankaasi ma ka reer galbeedkaa?

Markii la waabin waayay ee aqoon iyo aragti la isku hor taago la waayay ayay maalin walba tallaabo damac iyo ujeeddooyin leh soo qaadayaan. Reer galbeedka dhaqankooda kuma jirto in ay koob shaah ah oo bilaash ah quudhaan, markaas ayay cambaaraynayaan gabadh reer dhalay oo reer kale u dhalaysa, una dhaqaysa. Laakiin xaqiiqadu waa in dani kaga xidhan tahay.

*Wallee nimaan sirtii garanayow, kuuma sacabbeeyo.*

## Ubadka iyo Qurbaha

*"Ragow ubadkaaga leexday*
*Islaamnimadii ka baydhay,*
*Agoonnimadooda buuxda*
*Dhashiinna ku aabbo weyday;*
*Ammaanada boodhka taalla*
*Ragow ololaynta jaadka*
*Haddaad kaga ood fogaatay*
*Maxaa arrin kuu dambeeya."*[25]

Maxaa keenay hayaanka iyo geeddiga joogtada ah ee daarran in nafta loo huro jacaylka Yurub? Ubadka marinhabaabay halkee ayay ka daawadeen dhalanteedka iyo laaca ka hiraya dunida reer galbeedka? Miyaanay hurintii u horraysay ee reer galbeed caga dhigatay weli war soo celin? Miyaanay

[25] Awaaltiris, 2009.

weli qayrkood farriin iyo digniin u soo dirin oo aanay uga warramin xaqiiqooyinka reer galbeed ka jira? Mise tolow dhallintii dhulalka reer galbeed aadday ayaa marka ay dalka booqasho ku yimaaddaan dhallinta waddanka joogta ashqaraar ku rida, oo af Ingiriisiga ay tabtabinayaan ayaa qalbiga dhallinta dalka si fiican ugu gorora; markaasaa habeenkii hurdada Yurub loogu yeedhiyaa?

Quruunta ubadka dhashay miyaanay nolosha ku lahayn kaalin ay ubadka ku asturaan oo qurbe kaga baajiyaan? Mise tolow aabbayaashii iyo hooyooyinkii qudhoodu qurbaha ayay u sii jeedaan oo ragga maqan ayay fiise ka sugayaan? Oo haddii ay fiise waayaan ma waxa ay guntiga u adkaysteen in ay suudalaan ama aan idhaahdo in ay qudhoodu tahriibaan?

Ummaddu miyaanay lahayn caqiido iyo caado u gaar ah oo nolosha iyo waayaha loo cuskado, waxna qanciya? Ummaddu miyaanay lahayn xadhko adag oo marka Yurub la tago la isku ilaaliyo? Miyaanay Yurub joogi karin iyaga oo dhaqankooda iyo diintooda isku ilaalinaya, taas oo laga yaabo in ay xushmad iyo xaqdhawr ay weheshadaan ku heli lahaayeen? Mise arrintu waa cayaar ma taqaan iyo laabta igu qabo?

Miyaanay lahayn taariikh iyo dhaqan marba meesha la joogo lagu dhaato oo haddii ay dal shisheeye joogaan ay ummadaha ay wada joogaan u gudbiyaan? Ma sida ay lacag uga fara madhan yihiin ayay wax kasta uga fara madhan yihiin? Miyaan qurbaha ay joogaan su'aalo iyaga ku saabsan lagu weyddiin? Oo tolow maxay kaga jawaabaan?

Ummadda qurbaha joogtaa miyaanay ubadka la jooga ilaalin karin? Miyaanay u hayn casharro ay ku hantaan ama dhallinyaradu ku xasisho oo ay qayrkood ugu faanaan marka ficil la tuso. Waa maxay fikradda dadka ay martida u yihiin ay ka qabaan ummadda qurbajoogga ah?

Cilmiga iyo aqoontu ma inta reer galbeedku hayaa? Aqoontu ma inta wax lagu cuno oo keliyaa? Miyaan aqoontu ahayn ta hore loogu maro ee qofka hankiisa iyo hiyigiisa asturta? Anshaxa iyo asluubtu miyaanay ahayn hu'ga asalka ah ee laga dul gashado maryaha aad xidhan tahay? Sidee bay ubadku ugu faani karaan waalid aan astaan lagu faano lahayn? Xaaladda dalka ka jirtaa waa xaalado la taaban karo, ama maroora oo aan laga jawaabi karin. Laakiin afka ayaa laga nool yahay oo hadal la deyn maayo.

Aniga oo Landhan jooga waayo hore ayaa waxa aannu qado wada lahayn nin aannu saaxiib nahay. Qadada iyo ballanku gurigiisa ayuu ahaa. Isaga oo

jidka ku soo jira ayaan anigu gurigii uga horreeyay. Markii albaabka guriga la iga furay waxa aan fadhiistay qolka fadhiga. Qolka waxa fadhiya wiil yar oo aan malaha is idhi waa lix jir. Wiilku waxa uu daawanayaa talefishan barnaamij af Ingiriisi ahi ka baxayo.

Cabbaar markii aan fadhiyay ayaan is idhi bal wiilkan yar yoolbaadh. Waxa aan si fudud ugu idhi, "ma Soomaali baad tahay?" Wiilkii yaraa su'aashaasi way ka cadhaysiisay. Inta uu kor u dhawaaqay ayuu ku nuuxnuuxsaday, "no, no, no. I am not Somali." Yacnii, "maya, maya, maya. Soomaali ma ahi." Inanka yar jawaabtiisa mashkiladda ka keentay ayaan garanayaa. Waxa aan warkeeda hayaa sababta keentay in uu sheegan waayo Soomaali.

Inanku fasal ayuu fadhiistaa uu kelidii madow yahay. Carruurta uu fasalka la fadhiyaa waa carruur Ingiriis ah. Isagu waa tuke baal cad. Waxa uu la fadhiyaa carruur dhisan oo waddo u jeexan tahay oo loogu talagalay in ay qofka ajnebiga ah badawsadaan. Waa takooran yahay oo isaga cidi la sheekaysan mayso. Carruur da'diisa ah ayaa la kicinayaa, su'aalo ayaa la weyddiinayaa, si fududna way uga jawaabayaan. Isagu ma sito wax uu isaga celiyo carruurtaas qayrkiisa ah.

Aabbihii waxba kuma kordhiyo, waayo dedaal uu kaga jawaabo uma hayo. Ama wuu qayilayaa ama marka uu Yurub tago iskuma dayo in uu wax korodhsado oo hadal, muran iyo siyaasad aan meesha lagu hayn ayuu ii banneeya leeyahay. Hooyadiina waxa ay kari kartaa in ay afka wax u galiso. Sidaas darteed ayaa inanka reer Yurub uga faana horreeyaa.

Haa, ujeeddada laga leeyahay ayaa ah in inanka reer Yurub qabsado ama ku tunto inanka Afrika ka soo jeeda. Dhabbadaasi waa tii reer Yurub Afrika ku qabsaday ee ay ilaa maanta ku dhex faajafaajaynayaan. Afrika ma taqaanno, ragow rag iska raw iyo tub hayow lagaa tab hayee.

Waayadii hore iyo miyiga, ubadku marka uu dhasho waxa uu dhex iman jiray bulsho caafimaad qabta oo saxal oo dhan ka fayow. Waxa uu dhex iman jiray bulsho aad mooddo in ay qof keliya tahay oo dhammaanteed sawir iyo sawrac keliya leh. Waxa uu dhex iman jiray bulsho aqoonta, aftahammada, hufnaanta, hayalsamida, miyirka iyo miisaanka ka siman oo jiibta iyo jaanta; tacabka iyo tabaha, qof keliya ah. Bulsho wada aabbe iyo hooyo ah oo noloshu ka dhexayso; qof waliba kaalin ku leeyahay, ragga iyo dumarka mid waliba dhinaciisa hayo, marna aanu maanku ka dheelliyin, ubadka dhex yimaaddaa nasiib badan yahay, aabbaha iyo hooyada

barbaarinta ubadku u yahay mabda' iyo hiigsi lagu arooro, ubadka lagu habo anshaxa iyo aqoonta, oo ilmuhu isaga oo aan toban jir gaadhin ka halcelinayo halxidhaalayaasha iyo su'aalaha noloshiisa la xidhiidha.

Sidaas oo kale haddii aan ubadka xaqooda la siin oo inta caloosha loo buuxiyo la yidhaahdo orda oo soo ciyaara, ifka way ku dhibaatoonayaan, ciddii dhashayna way lurayaan; ifka cidi u aayi mayso, aakhirana ciqaab baa imanaysa. Taas ayaa keenaysa in ay xadka ka baxaan oo ay macno yeelan waayaan. Taas ayaa keenaysa in ay darjiidhaan oo aafooyin iyo balwooyin naafeeya ku dhaqaaqaan. Marka ay nolosha kaalin ka qaadan kari waayaan ayay nolosha iyo noolaha shar ku noqonayaan. Wixii dhalay ayay eersanayaan, ifka murugo ayay ku joogayaan, aakhirana labada dhinac – ubadka iyo waalidka – midina badbaadi maayo.

Ubadku waxa uu u baahan yahay tarbiyad, aqoon iyo anshax uu macno ku yeesho, waalidka iyo bulshada dhashayna ku xaqdhawro oo ugu dhaato. Ubadku waxa ay ifka u yimaaddeen in ay gutaan waajib ay if iyo aakhiro ku badbaadaan, xaqa umadda dhashayna ku gudaan. Miyaan ubadku ummadda dhashay waalid inkaar ku noqonayn haddii xaqiisa la siin waayo oo maskaxda iyo maanka laga dhisi waayo?

Sebankii hore, inantu hooyadeed ayay ag joogtay. Hooyadu inanta waxa ay ilaalin jirtay korkeeda iyo kaskeeda. Hadh iyo habeen isha ayay ku hayn jirtay. Waayo, inantu wixii ay dhaliil la timaaddo hooyada dhashay ayaa u qoolnayd. Inanta muraaddo waaweyn ayaa ku xidhnaa. Waa laba qoys dhisa, waa laba beelood walaalayso. Waxa ay huwan tahay magacii iyo sumcaddii qoyska.

Maxaa jira maanta? Meeday inantii? Ma la joogtaa hooyadeed mise hawadeeda ayay la joogtaa dhulka ay halisuhu yaalliin? Haddii ubadku xadka ka baxo oo ay nolosha indhasarcaadka ah dhex qaadaan miyaa surwaalka la isku giijinayaa ku filan yahay?

Sidee ubadku ugu faani karaa ama u sheegan karaa ummadda dhan haddii aanay waxba ku kordhin? Ma fara madhnaan iyo kutidhi-kuteen ayuu bulshada dhashay ugu hiloobayaa? Marka inanka reer galbeed wax sheegto, haddii uu inanka Soomaaliyeed waayo wax uu sheegto, miyaanu ummadda dhashay ku gadoodayn oo ka fallaagoobayn? Haddii uu fallaagoobo miyaanu cadaw u gacangalayn oo shaanshaan ku duulayn?

Ubadka cashar qabyaalad ahi ma ku filan yahay? Ubadka cashar magaciisa la yidhaahdo *wax ku cun* ma ku filan yahay? Caqiidada, cibaabada, Alle-kacabsiga, anshaxa, asluubta iyo edabta halkee ayay dhallinyarada maantu ka joogtaa? Mise ubadka waddadaas waa lagu weheshaa oo cidi ma fayooba? Sow odhaahi ma ahayn; geela duqdiisu durdurisay aarankiisana maxaad moodday.

Sidee ubadku cidda dhashay u sheeganayaa haddii aan tub sugan oo lagu badbaado loo jeexin? Weligii ma rugtaas cidhiidhiga ah ayuu fadhiyayaa? Ma kadinkaas oo qudha ayaa u furan? Miyaanu u baahnayn in uu ka war doono dhinacyo kale oo nolosha ah oo muraad ka gali karo? Miyaanu jeclayn in uu ogaado waxa jihooyinka ka xiga iyo in uu arrimo dahsoon daboolka ka qaado?

Ubadka haddii aan waddo loo jeexin sidee hadhow loogu canaanayaa haddii uu isagu waddadiisa jeexdo oo aanu cidba wax weyddiin? Haddii dalkiisa hooyo casharka lagu siiyay yahay cashar taabacsan ujeeddada iyo aragtida reer galbeedka, miyaanu noqonayn qof tasoobay?

Haddii uu iyaga (reer galbeed) noqdo maxaa reer galbeedku u hayaa? Miyaan reer galbeedku quudhsan qofka xaggooda u gudba? Ubadku muxuu Soomaali ku sheeganayaa haddii wax Alla wax uu ku sheegtaa guntiga ugu jirin? Miyaan ubadku noqon karin mid mucjisooyin ifka kaga taga, kadibna kuwa ka danbeeyaa raadraacaan oo kudayashadiisa lagu tartamo?

Shalay ninka weyni waxa uu ubadka u ahaa macallin dhan walba wax ka siin kara oo murti, maahmaah, hawaale warran iyo hogatusaale ku haba. Laakiin maanta ninka weyni waxa uu ubadka ku barbaariyaa cillado qabiilka iyo qaadku ugu horreeyo oo ilmaha ka dhiga maxbuus isaga u xidhan. Haddii ubadku uu xadka ka baxo oo uu nolosha indhasarcaadka ah qalab ka dhigto sidee baa waddankiisa iyo ummaddiisu u mahadinaysaa? Haddii su'aal da' weyn la isweyddiiyo oo la yidhaahdo ubadka maxaa loo dhalay, jawaabtu maxay noqonaysaa?

Ubadka waxa loo dhalay in uu nolosha kaalin ka qaato oo uu waliba kaalin muuqata oo macno leh ka qaato. Kaalinta uu nolosha ka qaadanayaa waxa ay asturaysaa ceebihiisa iyo tobanka baahiyood ee uu leeyahay. Waxa ay iskaga gudbaysaa in uu cid baryo oo uu gacmaha hoos dhigto. Waxa ay ka hor joogsanaysaa ayaandarrooyin waaweyn oo laga cawdibillaysto: baryada,

tuugada, dhaca, anshax xumada, dhacdhaca iyo foolxumooyinka jahligu leeyahay.

In uu ubadku nolosha kaalin ka qaataa waxa ay suurtagal ka dhigaysaa in uu ka mahadceliyo ixsaankii loo falay iyo tacabkii galay iyo in uu gudo xaqa lagu leeyahay; xaqa waalidkii ku hawshooday ee raaxadoodii iyo noloshoodii u huray, xooggoodii iyo xoolahoodiina ku asturay.

Haddii bulshada uu ilmuhu dhex yimid tahay bulsho ku bannaan erayga bulsho ama mujtamac midaysan, barbaarinta ubadka waa laga wada qaybqaadanayaa, si toos ah iyo si dadban labadaba. Haddii taasi dhacdo oo bulshadu barbaarintiisa kaalin ka qaadato waxa sugnaata in uu ubadku celiyo guud ahaan xaqii bulshadu ku lahayd.

Haddii ubadka jid toosan Alle haleelsiiyo, xaqa Ilaahay ku leeyahay mar walba waa mid culus oo ay waajib tahay in aanu fudaydsan. Xaqa aan la miisaami karin ee Ilaahii abuuray ee tubta toosan haleelsiiyay ku leeyahay waa mid ka soo jeeda ilaa maalintii uu caloolgalay. Taasi waxa ay suurtagal noqonaysaa marka ay bulshadu ubadka xaqiisa siiso.

Ubadka waxa loo dhalay in uu taranta iyo tusmada bulshada uu dhex yimid ka qayb qaato. Waxa loo dhalay in uu bulshada uu dhex yimid uu wax ku kordhiyo – arrin iyo aqoon. Waxa loo dhalay in uu intaas la xusay ka sii gudbo oo uu beesha caalamka wax ku soo kordhiyo. Waxa loo dhalay in uu magac iyo maamuus ku soo kordhiyo bulshada dhashay iyo gaar ahaan qoyska uu ka soo jeedo.

Waxa loo dhalay in ragannimadiisa iyo dedaalkiisa naftiisu mahadiso oo uu ku guulaysto kalgacalka ummaddiisa iyo in hankiisa iyo hilaaddiisa uu magaciisu ku dhex tago caalamka. Waxa loo dhalay in guud ahaan la mahadiyo kadibna uu is mahadiyo. Waxa loo dhalay in geeridiisa kadib taariikhdu xusto oo uu adduunka kaga tago raad uu ku caddaynayo in uu ifka yimid oo uu sababo waxku-ool ah u yimid, waajibaad cadcad oo fara badan gutay, kadibna uu ku laabtay halkii loo abuuray iyo guri-danbeedkiisii, Ilaahay raxmaddiisa iyo raallinimadiisana ku guulaysto.

Intaas oo dhan ubadku waxa uu gudan karaa marka mujtamaca uu dhex yimid suurtagaliyo in ubadku cagta saaro tubta badbaadada. Aan idhaahdo, waxa calooshu quudataa waxa uu ku danbeeyaa saxaro. Sidaas darteed, in caloosha wax la siiyo waxa ka mudan in maskaxda wax la siiyo oo ay anshax iyo aqoon quudato. Dhinaca kale waxa calooshu quudataa waxa ay ku

danbaysaa wax soo kordhin. Sidaas darteed waa in waxa calooshu quudataa wax ka soo celiyo tacabkii caloosha galay.

Ubadku waa iftiinka, ilayska iyo aayaha berrito. Yaan weedhaas la sahashan. Ubadku waa kuwa berrito xilka waddanka la wareegaya. Waxa uu xaq u leeyahay in bulshadu u midowdo oo la dhiso. Waxa uu xaq u leeyahay in loo diyaargareeyo waajibaadka culus iyo masuuliyadda ballaadhan ee berri sugaysa. Waa in aanu ubadku berrito fara madhnaan xilka waddanka kula wareegin, kadibna masuuliyadda la kacaakufin, ama aanu waddadii lala mari jiray la marin, marka uu waayo waddo toosan oo kuwii ka horreeyay mareen.

## Maxaa Cusub?

Sheekada haddeer waddanka ka caanka ahi waa shan kelmadood oo layaab leh, is daba yaal, sida ay u dhan yihiinna dhawaansoobax ah. Waxa la odhanayaa *xagga qadada,* marka la qadeeyo waxa la odhanayaa *xagga qaadka,* marka haloosiga qaadka laga kaco waxa la odhanayaa *xagga kulaylka* (khamriga), marka taas laga soo jeesto waxa la odhanayaa *xagga jebinta* (oo looga jeedo sinada iyo in hablaha habeenba qaar xadka laga saaro oo aayahooda la cunsiiyo), marka intaas oo dhan laga soo jeesto ayaa ina-rag nolol maalmeedda ku gebagebaynayaa *xagga hurdada.* Badiba xilka ina-rag maanta nolosha ka hayaa waa intaas.

Maalinba maalinta ka danbaysa waxa laga sii gurmayaa xeradii samaha, waxaana la sii cammirayaa xeryaha xumaha, hoogga iyo rogmashada. Maalinba maalinta ka danbaysa waxa sii daadegaya magacii iyo maamuuskii ay ummaddu lahayd.

Waa aynnu ka war haynnaa dhegxumada iyo ayaandarrooyinka adduunka inoogu faafay iyo sida aanay u jirin cid oodda innaga rogaysaa. Taasi waxa ay xadhig miiggan iyo labadiblayn u tahay wax Alle wixii muraad ah ee aynnu beesha caalamka ka lahayn iyo wax Alle wixii muraad ah ee aynnu adduun, aakhiro iyo Ilaahayba ka lahayn.

Ubadka tasoobay ee xabagta iyo xashiishka ka sinmay, aabbihii dhalay mee? Waddada ay jeexdeen, diinta cusub ee ay samaysteen iyo afka cusub ee ay ku hadlaan miyaanay wax inoo sheegayn? Ooryaha suuqa iyo bacadka fadhiya ee jaadka iibiniyaa yaa ay u dhaxeen? Raggii ay u dhaxeen miyay dhinteen? Ma dhoof ayay ku maqan yihiin? Mise waxa ay leeyihiin;

*dharaar hay wadin, waa dhalaalaa.* Waxa dhacaya ee dhan walba u baahay ma horumar iyo tallaabo casri ah oo loo gudbay baa?

Dhilashada qaadka, dhacadiidka ina-rag, dhiilka buuxsamay iyo dhegxumada is biirsatay ee nolosha dhammaysay qofka ka fayoobi dhankee uga baydhayaa? Mise waa hab ku soo dheh caashaqa? Ma ilbaxnimada madaxeennii minjo u rogtay ayaa ka dhadhan roon teennii dhabta ahayd?

Xeerka noloshu waxa weeye, guud ahaan ma jiro qof isku filani. Axad kasta ummuurihiisa waxa xoojiya ciidan fara badan oo laga yaabo in aanu qofku maanka ku hayn. Qof kastaa waxa uu u baahan yahay cid toostoosisa oo dhaliilihiisa iyo qabyadiisa asturta.

Qof waliba cududda uu ku tiirsan yahay waxa kow ka ah ciidda iyo goobta uu xabkiisu ku bururay ee aanay cid kale ka sheeganayn. Haddii uu ciidda miisto, haddii uu dhagaxa rarto iyo haddii uu dhirta goosto; haddii uu daaqsado iyo haddii uu ka dul oriyaba, dhulku waa dhaxal aabbe.

Qofka waxa xoojiya ehelka, deriska iyo inta uu garasho u leeyahay. Waxa xoojiya ragannimadiisa, daacadnimadiisa iyo dedaalladiisa. Waxa xoojiya xooggiisa, xoolihiisa, xawadiisa iyo xiniinyihiisa. Waxa xoojiya qiyamkiisa, anshixiisa iyo akhlaaqdiisa. Waxa waajibaadkiisa xoojiya aqoonta, iimaanka, sabirka, islaamnimada iyo Alle-kacabsiga. Qoyska suubbani waxa uu ka soo jeedaa bulsho suubban.

Qofku guulaha uu nolosha ka soo hooyo waxa la wadaagta, shuraako iyo wehelna ugu ah inta aynnu soo sheegnay iyo in ka badan. Qofku ummadda uu waayaha la wadaago ayaa talo iyo tusmaba ku xeeran.

Haddii talo keligii ku soo baxsato, waxa uu ka dhigan yahay geed keligii ban daleel ah ku yaal. Waxa la yidhi:

*"Tabantaabo waa laba gacmood, laysku tebiyaaye,*
*Tiska waxa la qaadaa hadday, tiirisaa bidixe,*
*Hadday midigtu keli taagan tahay tahar ma goyseen".*[26]

Baadi xoolaad marka gabbalku dhaco ee dunidu soo madoobaato ayaa dareen cabsi iyo werwer lihi galaa. Hareeraha ayay eegeegtaa. Waxa ku dhaca xanuun la yidhaa *yoolyool*. Dhulkii ballaadhnaa ayaa cidhiidhi ku noqda. Marka ay wehel iyo cid waalwaalashada la wadaagta hesho ayay

[26] Waxa curiyay AHN Gabayaagii Cabdillaahi Muuse.

xasishaa oo afka dhulka dhigtaa. Dadkii xaaladdaas ayaa ku dhacday. Markii qof walba laga fara madhiyay wixii uu dugsanayay ayuu noqday haad geed waayay oo uu hoos uga soo degay halkii uu joogay, hanweynidiisii iyo heybaddiisii intaba.

Ummaddii waxa ku dhacay furfuran maalinba maalinta ka danbaysa sii fogaanaya. Maalinba maalinta ka danbaysa, intii wehelka iyo waxtarka u ahayd ayay qofka sii kala durkayaan. Maalinba maalinta ka danbaysa waxa uu hareertiisa ka waayayaa quwad iyo xoog uu ku tiirsan yahay. Maalinba maalinta ka danbaysa ciidan ay isku kal furnaayeen oo ay nolosha wadaagi jireen ayay is waayayaan. Maalinba maalinta ka danbaysa intii culayska ka qaadi jirtay ee murugada uga laabqaboojin jirtay, rejada iyo yididiiladana galin jirtay ayuu muuqoodii waayayaa.

Qof kastaa marka uu keli noqdo ee uu wadartii xoojin jirtay hareertiisa ka waayo ayaa waalallow fuulayaa. Isku kalsoonidii ayaa ka lumaysa, kadibna wuu dabaylraacayaa oo waxa uu afka uga galayaa abeesooyin iyo bahallo aan nixin. Cid uu ka hanweynaa oo uu ka heer sarreeyay ayuu isku dhiibayaa. Hiyigiisa iyo hawadiisa ayaa burburaya. Waxa uu u liicayaa hunguri iyo habaarqabe manaxaan ah. Hankiisii ayaa burburaya. Waxa uu noqonayaa baadi hadaftay oo xeradii ay ka qaloon jirtay u hoyata.

Dacdii, diqdii iyo darkii wasakhda ayaa lagu xoonsan yahay. Lama sheekaysto, waxna la isma weyddiiyo. Arrin iyo aayo midna lagama wada hadlo. Xanuunka, uurguluuluca iyo murugada wadnaha dhiigga habaya, waxa la isku illawsiiyaa haloosiga qaadka, hunnuu hunnuu, hadaaq carruureed, iyo:

*Marka aad Duleedow*
*Sidaad doontay weydaad,*
*Sidaad diidday yeeshaa...*
*Cir da' furay habeenkii,*
*Dallad baa la qaataa.*[27]

Walbahaarka iyo waayaha jira, maalin walba inta maryaha tuurta, inta hoos u waalan ee nabarka ku taagan iyo boogta ku taal marada saaraysa, wiiwiida ubadka tasoobay, waalwaaladka haweenka talo ku caddaatay, xaaladahooda, cid baa ku samo qabta oo ay maslaxad u tahay.

---

[27] Dibadyaal, 1981.

Ubadka xabagta miisanaya iyo dhallaanka daadxoorta noqday waa kuwa talada dalka la wareegaya haddii la noolaado. Maxaa laga filayaa? Sow in ay aargutaan ma aha? Sow in ay ummadda jar ka xooraan ma aha? Shar mooyee miyaa aayatiin laga fili karaa? Sow ma aha qof aan la barin, laguna barbaarin cashar ku saabsan dammiir fayow, dareen caafimaadqaba iyo marin dadnimo oo lagu beeray nacayb, naxariisdarro iyo wax baabi'in? Masuuliyaddaas la sahashaday yaa la weyddiinayaa? Khasaaraha ay geysan doonaan yuu ku dhacayaa? Miyaanay dalka iyo dadka ahayn?

Xaqii ubadka iyo ooryaha tasoobay yaa aakhiro Ilaahay hortiisa ka jawaabaya? Sidee dembigaas qoolka iyo qudhgooyada ah ciqaabtiisa looga badbaadayaa? Ayaandarrada dalka iyo dadka ku soo socota ee ka iman doonta ubadka marinhabaabay, waa ayo cidda loo qisaasi doonaa? Miyaanay waalidka, gaar ahaan aabbaha iyo guud ahaan ummadda iyo masuulkeeda ahayn?

*Muxuu qalinku sheekiyo*
*Qubanaha dharaartiyo*
*Hadba qodob layaabliyo*
*Mahadhooyin qorayaa.*[28]

Intaas oo dhammi waxa ay guul kumeelgaadh ah u tahay dawladihii dalka ka taliyay ama ilaa hadda ka talinaya ee mabda'a ka dhigtay ku meelmaray *qaybi oo xukun*, dadka nuxurka iyo dareenka nool ka dil oo ka dhig qolfi soconaya oo aan dood iyo dagaal midna hollannayn oo ka kooban af iyo labadiisa daan oo qudha.

Kaabadaha waaweyn ee sibidhka malaasan ah iyo waddooyinka ay xidheen miyaanay markhaati ka ahayn ka dhuumashada godobta ay qabaan; iyo dhagarta iyo dhiigga ay faraha kula jiraan? Ciidamada hubka ku jeeran ee ay isku xeereen miyaanay iyaga laftooda halis lamafilaan ah ku ahayn? Wedka ay buuraha iskaga gudbeen miyaanay ogayn in uu gudaha kula jiro oo agtooda fadhiyo? Miyaanay ogayn in ay waqti leeyihiin oo goor aan fogayn ay xaqiiqadu hor iman doonto?

Waddo iska xidh mooyee, miyaanay waddo iyo marin ammaan ah samayso garanayn? Salabka iyo saanadda ay dhan walba iska dhigeen miyaanay markhaati ka ahayn baaxadda godobta ay qabaan? Maxay isku

---

[28] Quduro, 1980.

cabbudhiyeen? Maxay nolosha uga saahideen? Maxay xabsi aan naxariis lahayn oo habeen iyo maalin ah isugu xukumeen? Miyaanay ogayn in xorriyadda iyo godob la'aantu yihiin wax qaali ah?

May dayaxa, xiddigaha iyo daruuraha daawadaan oo laydha iyo wacdaraha deegaanta bilan qaybtooda ku yeeshaan? May cabsi la'aan waddooyinka ku maraan? May nafahooda karaameeyaan oo ay ragannimo iyo wax lagu xusuusto adduunka kaga tagaan? Miyaanay ogayn in dhimashada iyo geeridu waqti leedahay oo haddii dhiilkeedu buuxsamo aan si loo caabbiyo iyo xadhko lagu ceshaa jirin? Maxay ubadkooda iyo ehelkooda godobta ugu samaynayaan oo ay dhaxalxumada ugu dhitaynayaan? Maxay taariikh madow iyo mugdi magacooda dabool saara u doorbidayaan?

Maxay fursadda qaaliga ah ee Ilaahay siiyay u diideen? Maxay uga wayiigeen in ay adduunka magac san kaga tagaan, aakhirana wax iska sii horreysiiyaan? Maxay go'aannada lagu rogmanayo ee ay ku rogmanayaan u doorteen? Miyaanay maqal salsalka haweenku awrta ku raraan ee ay yidhaahdaan:

*"Gudcur kugu dharaaroobiyo*
*Dhirta oo ku qarin weydaa*
*Dhiig sokeeye leeyahay."*

Miyaanay maqal:

*"Sow nabadi sahaydaada ood sidato uun maaha*
*Sow godobi surinkaad martaba godob qarsoon maaha.*[29]"

Miyaanay maqal saddexdan halhays ee odhanaya:

*Nin hub la'aan dagaallama – aftahammada.*
*Nin hanti la'aan dherga – culimada.*
*Nin hoy la'aan seexda – godob la'aanta.*

Maxay nacasnimada u doorteen? May xabaalahooda daahirsadaan? May taariikh iyo taallooyin lagu xuso ifka kaga tagaan? May qaataan halhaysyadan:

[29] Waxa curiyay AHN Gabayaagii Xaaji Gabayxaddi.

*"Waari mayside,*
*War ha kaa hadho."*

*"Dadow weji,*
*Waa danbaw dhigo."*

*Wixii aad arkaysiyo*
*Xaqa lagama eexdoo,*
*Aakhiraa danbaysoo*
*Ifka laguma waaree.*[30]

*"Nin sabool ah iyo awrba way, sibiqdhaqaaqaane,*
*Labaduba haddaan seeto celin, socod ma daayaan."*[31]

Dhulku waxa uu ahaa hugaaga, hoygaaga, faankaaga, guulahaaga, dhaqankaaga, dhaqaalahaaga, aqoontaada, iftiinka iyo ilayska aad ku meelmarto iyo muraayadda aad isku daawatid. Maxaad huga uga diiratay? Maxaad u qaawisay? Maxaad isku qaawisay? Maxaad u arradisay? Maxaad quruxdeedii qaad u dhaafsatay? Maxaad isku faro madhisay? Maxaad canka ugu qadhiidhay? Maxaad u shidday? Maxaad dhuxul uga dhigtay? Maxaad caydh iyo qaxoonti u doorатay?

Miyaanad dareensanayn in waddanku wadnahaaga iyo wehelkaaga yahay? Miyaanu ahayn kii suurtagal ka dhigi lahaa in aad nolosha kaalin muuqata ka qaadato: kaalin lagugu jeclaado, lagugu xushmeeyo oo magac iyo maamuus kuu kordhisa.

Haddii aan noloshu nuur lahayn oo tartan lagu kala baxaa ka abaabulnayn ama ka dhex aloosnayn, miyaa la iska dhex tubnaanayaa? Ma *soo dhacyeey* ayuun baa lagu dhex joogayaa. Haddii aan dadka hawlo iyo himilo kala saartaa ka jirin (gaar ahaan ragga) ma caqaar baa lagu kala baxayaa? Miyaan qofku u baahnayn in uu soo hooyo lib iyo guulo uu ku naalloodo? Miyaanad u baahnayn ragannimo iyo laboonti lagugu hadalhayo oo laguugu hanweynaado?

---

[30] Mid ka mid ah midhaha heesihii ugu horreeyay ee aan curiyo.

[31] Waxa curiyay Gabayaagii Ducaale Dheere (AHN).

Nolosha in aad meel buuxiso, kadibna lagu majeertaa miyaanay kula fiicnayn? In mar walba lagu hadalhayo oo meel walba lagaaga gacanhaadiyaa miyaanay kuu bannaanayn? Miyaanay maslaxad kuu ahayn in ubadkaaga iyo ooridaaduba kugu faanaan, kugu dhaataan, hilow iyo kalgacalna kuu hayaan; intii ay afadaadu ku odhan lahayd *abaydin gadhlow ha ooyin.*

*Mintid noqo abaabulan*
*Iyo lagama maarmaan*
*Marwadiisu jeceshahay,*
*Ubadkiisu meel dheer*
*Uga soo mashxaradaan.*[32]

Nin gurigiisii toddobaad moogganaa oo mafrash caqaar ku aroostay miyaanu isaga oo qaad ku gaashaaman gurigiisii oo marwadiisii iyo ubadkiisii murugo gorodda iskula jiraan oo tacsi u fadhiyaan iskaga soo dhex dhicin. Miyaanu isaga oo mirqaan cirka maraya oo waxoogay qaad ah sita, waxoogay kalana soo cunay u yeedhyeedhin Ugaaso (curaddiisii) oo maalmo sii mootanayd. Miyaanu ku celcelin, "Ugaasoy... Ugaasoy." Markii uu sanqadh waayay miyaanu ku caardumin ama canaanan isaga oo ka cadhaysan guriga damta ah ee aan cid u heellan iyo cid u hanweyni joogin. Hal cabbaar ah dabadeed, miyaan Caashi (afadiisii) istaagin oo aanay hadalba ku bilaabin sidan:

*Ugaasadu meeday hee dheh;*
*Dorraato miyaan la aasin,*
*Miyaan kafan loo amaahan,*
*Miyaan axan loo yaboohin,*
*Markii araggaa la waayay,*
*Miyaan Jinku qaylo oogsan,*
*Miyaan insigii gadoodin,*
*Miyaan olloggeennu yaabin.*[33]

[32] Mayaldheer, 2006.

[33] Awaaltiris, 2009.

## Kudaal iyo Suudal

Kala daadintii iyo kala furfuristii ummaddu waxa ay keentay in dadku rumaystaan in aanay waxba suurtagalayn ilaa aqoonsi la helo. Taasi waxa ay dhalisay in dadku isku kalsoonidii lumiyo oo uu hugii iyo hankiiba xooro, isaga oo aaminaya in aanu qudhaanjo afuufi karin. Waxa ay keentay in nidaamkaas faasidka ah loo tartamo oo loo kala dheereeyo.

Nidaamku waxa uu madaxtooyada ka furay soddon albaab oo albaab kasta koox albaabka kale ku liddi ahi ka soo gasho. Soddonka kooxoodba waxa ay soddonka albaab ka soo baxaan iyaga oo soddon irbadood oo sun ah jeebadaha ku sita. Kadib markii iyaga irbadihii sunta ahaa lagu soo muday, waxa ay isku diyaarinayaan in ay inta weli sunta ka fayow u nacaseeyaan.

*Beeshu waa gawaanraac*
*Gogoshaa la jiifaa,*
*Gama' waa la maqan yahay,*
*La is waa go'doonkii,*
*Gudcurkiina sii baah.*[34]

Fadhigii dheeraa iyo nabarradii dadka gaadhay waxa ay keeneen; naftaanac, ismiidaamin, kudaal iyo geeddi aan sahan lahayn. Waxa abuurmay hiyikac jibbo ah. Waxa lagu dhaqaaqay ciil, calaacal iyo caloolyow jar-iskaxoor ah. Waxa loo dhaqaaqay jihooyin aan halisaha ka jira loo tooggahayn, haddii loo hayana aan qofka baajinayn, waayo, waxa la sitaa naf aan haddeer qofka waxba ugu fadhiyin, si fududna uga laallaada.

Sahay lama sito, surmi iyo harraadna yeelkood. Waxa lagu jiraa, "*waxba dhawrsan maynnee Allow, dhagaxyo soo daadi.*" Wixii dhici lahaa, way dhaceen.

*Gaadiidku waa naxash*
*Gadh hayuhuna waa mawd,*
*Waxa geeddi lagu yahay*
*Godadkiyo xabaalaha;*
*Dhulka hoose loo guur.*[35]

---

[34] Goljanno, 1983.

[35] Goljanno, 1983.

Mar qudha ayaa la oogsaday, rag iyo dumar, yar iyo weyn, lama kala hadhin ee raabe-raabe loo guur. Waxa dhacay habqan iyo habaqle iska daba tagay, si ay uga indha qarsadaan dalkoodii hooyo ee lagu noolaan kari waayay. Waddada ayaa cagta la saaray, waxaana loo dhaqaaqay:

*Duni aan tilmaannayn,*
*Duuggeedu male yahay,*
*Qof ku daaya mooyee*
*Qof ku doonayaa jirin.*[36]

Waxa aan filayaa in waxa la helayo, waxa la waayayaa ka culus yihiin. Yurub iyo caalamka wax bilaash ahi kama jiraan. Fartii aad taagtaba xubin baa ku go'an.

Caalamkii martida loo noqday waxba laguma kordhin, wax sidaas ah oo laga soo korodhsadayna ma jiraan. Waxa adduunka lala dhex tagay ficilkii, fallaadkii iyo macne darradii dalka hooyo lala joogay. Waxa lala dhex tagay shuxshux, sheeko baraley, qoqob, kala qaybsanaan, qaad, qoryo dhuxul ah oo la liqo iyo guri ii dhis. Dhinicii waxtarka lahaa ee tacabka iyo xirfadda xooggooda lagama war doonin. Dadkii martida loo ahaa waxa ay akhriyi kari waayeen sawirka iyo sawraca dadkan loola dhaqmo.

Mar walba in wanaagsani waa ay jirtay, laakiin waxa in ay muuqdaan beeniyay inta badan ee meelna buuxin weyday. Badiba ninku kaalintiisi wuu lumiyay oo qoyska uma buuxiyo doorkii uga bannaanaa. Way socon weyday in uu ka jawaabo dhinacii uu nolosha ka hayay iyo ahaanshihiisii sayidka nolosha iyo kan qoyska labadaba.

Waxa la joogaa caalam aanay labka iyo dheddiggu kala xil lahayn, ragga iyo dumarkuna gudboon yihiin. Ubadka ayaa la wada haynayaa, cuntada ayaa la wada karinayaa, weelka ayaa la wada xalayaa, aqalka ayaa la wada xaadhayaa; sidaas ayay weliba dumarku ragga ka fadallo cad yihiin.

Ninkii Soomaaliga ahaa xaqiiqadaas uu dhex tagay wuu aqbali waayay. Weli waa sayidkii iyo saygii qoyska, laakiin, ma uu gudan shuruudihii uu derejadaas ku sidan lahaa. Waxa kale oo uu gudan kari waayay xilkii ahaa wasiirka arrimaha dibadda ee u qaybsan masuuliyadda iyo daboolidda baahiyaha qoyska. Aqoontii iyo dedaalkii uu sidaa ku yeeli lahaa lama uu

[36] Isa-sudhan, 1986.

iman. Meel muuqata wuu buuxin kari waayay, Sayidnimadiina kama uu tanaasulin.

Weli waxa uu doonayaa in laga amar qaato, weli waxa uu doonayaa in loo heellanaado oo la ciseeyo, isaga oo aan ka soo bixi karin shuruudihii waajib gudashada. Waqti lumintii, siyaasad-kahadalkii iyo goorxun-socodkii weli waa sidii.

Ooridii iyo marwadii qoysku sidii hore ma aha. Iyada ayaa markan gacanta sare leh, kaalinteeduna waa mid muuqata. Iyada ayaa ninka ka cod dheer oo ka shacbiyad badan. In ay is muujiso ayay fursad u heshay. Waxa ay joogtaa meeshii ay doonaysay ee ay gacansarrayn lahayd. Haddii ninku is waalo, waxa jira askari inta uu qoorta qabto tukhuntukhinaya oo xad aanu ka soo gudbi karin u yeelaya.

Ninku ma aha ninkii laga heybadaysan jiray, ubadku ka soo hor yaaci jiray, ooriduna u diyaargaroobi jirtay. Badiba laba sababood oo isaga hoos u dhigaya ayaa carriga ka jira. Waa mid e, qoysku caydh ayuu qaataa oo waxa reerka si dadban ugu caleemasaaran ciddii nolosha qaabilsan ee shilinka gacanta ku haysa. Waa ta labaad e, ubadka gacan kama siin karo xagga waxbarashada oo aqoontaasba ma laha.

Ubadku hooyo waa yaqaanniin. Iyada ayaa korisa, gacanta qabata, iskuulka geysa, kana soo kaxaysa. Iyada ayaa had iyo jeer la joogta oo hawlahooda maamusha. Iyada ayay yaqaanniin oo xidhiidh joogto ah la leh.

Dabcan, aabbaha iyo macallinka cusub ee qoysku waa ninka la yidhaahdo telifishanka. Macallinka kale ee isaga sii xoojiyaana waa kombiyuutarka. Aabbuhu badiba waxa uu guriga ku yahay marti aan hawsha qoyska meel ku lahayn. Marka ay carruurtu dhan walba u yaacdo, ayuu ku yidhaahdaa “fadhiista,” markaas ayay ugu jawaabaan “shutup.” Waxa caalamkaas ka jira sharci dhigaya in aan carruurta la amrin, la maagin, lana dagaalin. In ay wixii ay doonaanba sameeyaan waa sharci.

Ujeeddada laga leeyahay sidan ayaa ah in qoysnimadu burburto oo aan xuquuqda la isku leeyahay la gudin. Hadafka weyn ee ay dadka qaxaya u aqbalaan waa kala furfuridda qoyska. Is qareensiga iyo is tabantaabinta ayaa dagaal qabow lagu hayaa. Waa dagaal abbaaraya in ubadka laga maydho guud ahaan samaha, diinta, dhaqanka wanaagsan, tarbiyadda iyo iskaashiga qoyska. Sidii ay u jabeen ayay u socdaan in loo jabo oo aanu qofna qof cawaansan, ciirsina moodin.

Aabbuhu marka uu gurigii ka waayo cid u heellan, cid u hanweyn, cid ixtiraamta iyo cid amarkiisa dhegaysata ayuu guriga ka fogaadaa oo uu baadidoonaa cid uu la sheekaysto oo afgaranaysa. Waxa laga yaabaa oo aan iyaduna meesha ka maqnayn in waxa burburka qoyska keenaa noqdo cunista qaadka.

Si kastaba ha noqoto e, waxa aan shaki ku jirin in aan hadh iyo habeen gurigaas gudihiisa la wada joogi karin. Haddii taas la waayana, la kala nasto oo in muddo ah la kala maqnaado, si la isugu soo xiisoodo.

*Aqallada ximraa sudhan*
*Sigashay ku beridaa,*
*Dadku solanka maantii*
*Sahwi buu ku joogaa,*
*Saqda dhexe habeenkii*
*Sardhaduu ku lulan yahay,*
*Ama ciil la kala socoy*
*Ama cadho la kala soof.*[37]

Waxa keli ah ee qurbahaas ka jiraa waa tii halkan lala joogay. In marka meel la dhalanrogo ee bac iyo kuddaafadi buuxiso, la janto in la helo dhul dihin oo nadiif ah oo lagu dul hobsheeyo, si isaguna maalmo kadib marka uu buuxsamo looga hayaamo.

Dalkan hooyo ee laga yaacayo, urtiisa iyo uftiisana laga dhuumanayaa, mar buu ahaa dal xalan oo aan wax la dhibsadaa dul oollin. Foolxumada iyo qashinka buuxiyay waxa ay ka timid dadka dalka leh oo aan dan ka lahayn ama xoojinaya in ay suurtagal noqon weydo in lagu noolaadaa. Shaqada ay ummadda oo dhammi dalka ka haysaa waa mid keenaysa in dalka la naco, kadibna laga yaaco.

Waa qof dalkiisii hooyo ku noolaan kari waayay oo isagu masuul ka ah sababaha uu ugu noolaan kari waayay. Waa qof dalkiisii kuddaafad iyo qashin ka dul buuxinaya oo deetana raba dal nadiif ah oo uu ku noolaado. Laakiin dalka uu qofku sida ugu fudud ugu noolaan karaa waa dalkiisa hooyo oo ah halka adduunka uga gaarka ah ee aan qalaynayn.

Xaaladda dalku maanta ku sugan yahay, dadow, adiga ayaa masuul ka ah, mar haddii aad oggolaatay in caalamka kuddaafaddiisa halkan loo soo raro.

---

[37] Rag siyaasi wada noqoy, 1997.

Ninka u soo rarayaa waa nin aan oggolayn in dalkiisa bar wasakh ahi ku duusho. Inta qurbajoogga ah ayaa taas ka markhaati ah, waayo waxa ay dalka u soo rareen faqri iyo fara madhnaan xumo oo dhan dabada ku wadata. Waxa ay afka u kala qaadeen hunguri aan baahidiisu xuduud lahayn oo waagii beryaba dhawr kun oo wax la liqo ah inta uu afka galiyo dabada ka tuuraya. Marka ay ugu yar tahay, hungurigaasi ma laha awooddii uu urtiisa iyo urtadiisa ku asturi lahaa.

Sidiisaba, hungurigu waxa uu karaa in uu afar iyo labaatanka saacadood wax liqo oo uu midba mid ka daba geeyo. Waynnu garanaynaa in waxa uu afka ku gurayo iyaga oo qadhmuun uu dabada ka sii daynayo. In uu waxaas basriyo oo uu iintiisa iyo saxaradiisa daboolo kuma daalo, umana hayo awood iyo waqti uu wax kaga qabto.

Qurbihii loo hiyikacay ee lagu qulqulay waxa uu keenay in intii dalka ku hadhay ruux waliba ka fikiro sidii uu uga daba tagi lahaa geeddigii dheeraa ee dibadda u hayaamay. Qofka dalka jooga, gaar ahaan dhallinyarada, waxa kashooda gashay in aanay muuqanayn oo aanay ciilbeelayn ilaa ay caalamka reer galbeedka cagaha dhigaan. Waxa beerqaaday qayrkood oo inta ay waddanka yimaaddaan guryo qurux badan dhista. Guryo dhiska waxa u raacdaa in ay guursadaan gabdho ay aroosyadooda ku baxdo lacag badan oo indhaha yaabban la tusayo. Taasi waxa ay keentaa in uu qofku aamino in aanu ciilbeelayn oo aanu qayrkii barbar joogsanayn ilaa uu mar soo dego oo uu yeelo wixii rag yeelay.

In badan oo ka mid ah gabdhaha dalka joogaa waa ay ka dhaarteen in ay guursadaan saboolka suuqyada dhex tuban ee aan hayntoodu ku filnayn dhagdhago iyo gelbis soddon gaadhi ah, korjad dhar ah oo xariir ah, laba ilaa saddex iskujoog oo dahab ah, soddon kun oo dollar oo meher ah ($30,000), xaflado iyo wacdaro kale oo hadalhayntoodu badato. Waxa caado noqotay in shardiga keli ah ee gabadhu ninka ku xidhaa noqday *dibadda ma ka yimid?'* haddii aanu xataa xis ahaan masuuliyad qoys u qaadi karin. Waayo, guurdoonka Yurub ka yimid waxa uu sitaa muraayad qurxoon oo ceebaha laga gashado (European Passport).

Waxa la sheegay in gabadh dalka joogtaa jamatay in ay mar indhaha saarto magaalo madaxda Ingiriiska ee Landhan. Habeenkii sida ay u huruddo ayay hurdada ka booddaa iyada oo ku hadraysa, "Landhan... Landhan." Waxa ay caadaysatay ereygaas iyo magacaas xaggeeda ku culus iyo riyadaas ay cid kun uga dhigta weyday. Waxa caado u ahayd in ay galabtii goor hore u

diyaargarawdo dhegaysiga idaacadda BBCda. War iyo faallo toona uma jeeddo. Miyaynnu rumaysan karnaa in muraadka keli ah ee ay dhegaysiga BBCda uga jeeddaa yahay maqalka magacan ay dhegaheedu ka daba dhaceen ee Landhan. Bal dhegayso wacdaraha ay Landhan gabadhan iyo dhiggeedaba ku hayso.

Codsiga keliya ee ay gabadhani leedahay ee ay waalidkeed ku daalisay waa 'Landhan ha la i geeyo.' Sida la sheegay, muddo aan yarayn ayay gashaantidu ku riyoonaysay Landhan iyo caalamka reer galbeedka. Goor aanay waxba ka noolayn oo kalgacalka Landhan nabarro badan u geystay ayay suurtagal noqotay in la helo marin gabadhii lagu geeyo Landhan. Nolosheedaba waxa uga tirsan maalintaas loo bushaareeyay tagista Landhan. Magaca ayaa hurdada u diiday. Landhan, ayay hadba si u sawirataa. Marba dhinac ayay kaga timaaddaa. Marba iyada oo bar quraarad ah fadhida oo quruxda Landhan la ashqaraarsan ayay hurdada ka soo booddaa.

Galab iyada oo raadyihii Landhan sheegi jiray hor fadhida oo dhegta ku haysa ayaa si kediso ah idaacaddu u sheegtay laba waalid oo laga tacsiyadaynayo gabadh ay dhaleen oo Landhan ku dhimatay. Markii tacsidii la sheegay ayaa inta ay soo boodday ay si kedis ah u tidhi, "cawadeeda, iyada ayaa ba Landhan ku dhimatay."

Maalmo kadib ayay gabadhii Landhan u ambabaxday. Landhan fogaa! Saacadaha dayuuraddu soconayso gabadhu salka kama fadhido. Xataa dadka hareeraheeda fadhiya ee sheekaysanaya hadalladooda ma maqlayso, mar haddii aan waxa ay ka hadlayaan Landhan ahayn.

Goor subax ah oo dhulku hiimsahiimse yahay – Landhan iyo waqtiga qaboobaha – ayay dayuuraddii caga dhigatay madaarka Hitrow oo ah garoonka dayuuradaha ee ugu weyn Ingiriiska. Baabuur ayaa albaabka danbe ee lagu raaxaysto loo furay, waxaanu u dhaqaaqay dhinaca caasimadda Landhan.

Madaarka Hitrow waa ka durugsan yahay Landhan. Muddo ayay qaadatay intii baabuurku jidka uun sii hayay. Muddadii baabuurku jidka sii hayay waqtigeedii waxa ay ku laasatay laba-gardaymood iyo in ay marba dhinac ka milicsato Landhan. Inkasta oo waddadii iyo socodkii ku dheeraaday, mar danbe ayuu baabuurkii isa soo hor taagay aqal ka mid ah guryaha

Landhan. Albaabkii ay ka fuushay ayaa laga furay, waxaana lagu yidhi, "soo deg."

Wax ku dhacayba inantii waxa ay ku jawaabtay. "soo deg aa!" Waxa loogu jawaab celiyay, "rugtii iyo raaskii aad u xiisaha qabtay guri ku yaalla ayaa la hor taagan yahay ee soo deg." Iyada oo yaabban ayay mar kale tidhi, "oo meeday Landhan?" "Waa tan aynnu dhex joogno ee soo deg," ayaa mar kale lagu yidhi.

Cagajiid ayay ku degtay iyada oo rumaysan la' in meeshan ay dhex joogtaa Landhanteedii tahay. Bil iyo laba ayay gabadhii ku celcelisay ha la i kaxeeyo oo dalkii ha la igu celiyo, kadib markii ay Landhan isha farta ka galisay ee ay gunteeda soo xaadhay. Waa laga dhega adaygay, waayo, markii hore ayay ehelkeeda ku dhibtay Landhan ha la i geeyo. Waxa la sheegay in muddo kadib gabadhii maryaha tuuratay, kadib markii Landhan dhex jooggeeda loogu naxariisan waayay.

Si kastaba ha ahaato e, inantaas ay Landhan beerqaadday waxa isku waafaqi waayay sawirkii quruxda badnaa ee qalbigeeda gilgilay iyo xaqiiqada ay dhex tagtay.

Odhaah jirta ayaa lagu sheegay in wiil fardo la raaciyay oo lagu yidhi ceel gee oo soo waraabi maalin ay guriga raqi taallo oo reerku xoolo qalqashay. Maalintii oo dhan intii wiilku fardaha waraabinayay waxa kashiisa ku soo noqnoqonayay xoolaha la qalay iyo bal halka isaga kaga soo beegmaysa ama qaybta loo dhigi doono mar haddiiba uu raqda ka maqan yahay.

Waxa uu is weyddiinayay, "tolow maxaa laguu sii dhigi doonaa; ma lug iyo jeenni, ma leg iyo awlal, mise... mise?" Markii uu fardihii soo hooyay habeennimadii ayaa la isku dul saaray laba tagoogo oo aan qayb ahaan isku raacin. Inta uu labadii tagoogo rogrogay oo dhinac walba isku saaray, ayuu yidhi hadalkan halhayska noqday, "laba walba isa saaray oo laba tagoogo isma saarin."

Gabadhaas waxa maanguurka degdegga ah ku riday keliya waxa isku waafaqi waayay sawirka ay qalbigeeda gashatay iyo xaqiiqadii Landhan. Sidaas darteed, guud ahaan dadka iyo gaar ahaan dhallinyarada, waxa luraya sawirka beenta ah ee ay ka haystaan dunida reer galbeedka.

Meel iyo bar inta badan lagu xasilay ma jirin, waayo, waxa aynnu ahaan jirnay xooladhaqato reerguuraa ah oo toddobaad kasta geeddi ku jirta. Sida

dalka loo joogo ayay soo yeedhaa baaq iyo bushaaro cusub oo la leeyahay meel heblaayo iyo dal hebel ayay ka hillaacday. Markaas ayaa si fudayd ku jiro iyada oo aan waxba la hubsan loo jabaa.

Taasi waxa ay keentay in la xasili waayo oo maalinba qormo iyo dal cusub la iskaga daba tago. Waxa kale oo ay keentay in marba dal cusub oo u baahan in inta muddo la dhex joogo, loo kuurgalo; caadooyinkiisa iyo dhaqannadiisa la iska xiiseeyo, la iskuna shubo. Iyada oo aad mooddo in dadku dalxiis yihiin ayaa marba dhinac loo jabaa. Duulduulkaasi waxa uu keenay in meelna lagu xasili waayo oo uu dadku geeddi uun ku jiro, ilaa male kaa galo in aan dadku wax ujeeddo ah ka lahayn nolosha.

Dhawr sannadood kahor ayay dadkii Soomaaliyeed ee dalka Holland deggenaa barakaceen oo ay Ingiriiska isku dhiibeen. Intooda badani muddo ayay dalkaas ku noolaayeen oo ay sharciga rasmiga ah haysteen. Markii dadka tiradaas lihi mar qudha tahriib galeen ayay dawladda Holland ka shirtay sababta ay dadkaasi u naceen dalka ee ay mar kale dal kale iskaga dhiibeen. Waxa la ii sheegay haddii ay run tahay in dadka Soomaaliyeed ee Ingiriiska deggani ay maqleen in Ingiriisku yahay gumeyste gaboobay oo yaqaanna geel la-daaqda umamka adduunka ku nool, musuqa iyo xeerjajabkana uu oggol yahay.

Waxa is weyddiin leh, muxuu Ingiriisku xeerjajabka dalkiisa ka baxsan u oggol yahay? Faa'iidada isaga arrintaasi u leedahay waa qorshe ka mid ah qorshayaasha gumeysiga oo ujeeddadiisu tahay in dadku bartaan, tuugada, musuqa iyo wax kasta oo dhaqanka suubban ee dadka baabi'inaya. Qofku marka samaha laga maydho waxa uu noqonayaa bahal si walba oggol oo sidii la doonaba laga heli karo.

# CUTUBKA V

## ABUURTA IYO IBLIISKA

*"Ibliis halna ma aha, laakiin wixii aan hal ahayn ee marinhabaaba ayuu hannahaybsan ku carraabiyaa."*

*Dhulkana bidixlaa ku nool*
*waxaa jira beenawaas*
*Ibleyskuna waa bakhayl*
*bahdiisuna waa yiciis,*
*balway ku hor qaadayaan*
*bustay kugu laabayaan*
*Wedkay balag saarayaan*
*Hadday buro kaa helaan*
*Waxay kugu badhi furaan*
*Dharaaraha baane jiro.*[38]

Ilaahay (SWT) markii uu adduunka dhisay waxa uu ku cammiray taranta nafley iyo noole tiro badan oo isirro iyo jinsiyo kala duwan isugu jira. Waa isirro mid waliba nolosha kaalin ku leeyahay isuna buuxiya si Ilaahay ugu talagalay. Ilaahay waxa uu ugu cammiray si khalqigaasi faaqidaadda iyo is dhexgalka macne ugu yeesho; iyo si baadidoonka makhluuqa ee baahidu horseedka ka tahay u yeesho raad taxane ah oo ku sargo'an qof walba maalinta dhimashadiisa, raadba raad ka dabqaato oo maalinba maalinta ka danbaysa nolosha loogu sii gonda dego. Sinjiyo fara badan markii dhulka la dhex dhigay, waxa Ilaahay raaciyay dallaayad sare oo mar dhulka u lammaane ah, mar u hagoog ah, mar kalana xoojisa waayaha nolosha.

Ilaahay waxa uu adduunka ku qabyatiray dhaqaaqii bani'aadamka iyo fulinta sababihii arrintaas dhex socday. Ugu horraynba, waxa la abuuray jamac malaa'ig ah oo u qaybsan tasbiix iyo tahliil iyo xuska Ilaahay oo aan arrintaas camal kale kaga mashquulsanayn. Jamacaas malaa'igta ah waxa lagu dhex daray makhluuqa la magac baxay Ibliis. Ujeeddooyin xeeldheer ayuu Ilaahay arrintaas ka lahaa.

---

[38] Adduunyadu waa besteed, 1997.

Nolosha waxa ku soo biiray khaliifkii Ilaahay arlada u magacaabay, Nebi Aadam iyo lammaanihiisii Xaawa, iyaga oo daba socda khalqigii ka soo horreeyay ee ay nolosha wadaagayeen. Dabadeedna waxa malaa'igta la faray in ay kulmaan oo ay Nebi Aadam u sujuudaan. Jamacii malaa'igta ahaa oo Ibliis weheliyo ayaa Nebi Aadam la hor keenay.

Malaa'igtu markiiba amarkaas way qaateen, laakiin ilbliis arrinkaas wuu ka gacantaagtay. Ilbiis waxa Ilaahay weyddiiyay sababaha uu amarka Alle ku diiday. Ibliis waxa uu sheegay in aanu makhluuq dhoobo ka abuuran u sujuudayn, iyada oo isaga dab laga abuuray. Taasi waxa ay ahayd tii la filayay. Waayo waxa Ilaahay sii ogaa qabka iyo islaweynida Ibliis ku jirta. Goobtaas ayaa ibliis lagu nacdalay, waxaanu dusha u ritay cadho Alle.

Aadam iyo Xaawa waxa loo dhaadhiciyay beer janno ah oo loogu talagalay in ay ku noolaadaan. Laakiin waxa digniin lagu siiyay in aanay geed ka mid ah dhirta jannada ku taalla midhihiisa quudan. Ibliis waxa uu soo daba galay lammaanihii Aadam iyo Xaawa. Waxa uu lammaanaha ku qanciyay in ay noqonayaan laba malag oo waara haddii ay geedkaas midhihiisa quutaan. Sabab ayaa daba socotay e, Ibliis waxa uu ku guulaystay in Aadam iyo Xaawa dabinkiisii ku dhacaan.

Ilaahay Aadam iyo Xaawa waxa uu ku canaantay amar-diiddada badheedhka ah, kadibna waxa loo soo dhaadhiciyay halkii ay ku danbaynayeen. Waxa ay soo abbaareen dhulka, Ibliisna waa ka soo daba galay. Waxa meel sii tiil in lammaanuhu talada seegaan. Waa lammaane karaamaysan oo ay Ilaahay raxmaddiisu wehel u tahay. Malaha qofku in loo garto waxa uu ka jecel yahay in uu isagu mashkaladdiisa iyo xalkeeda garanayo. Dhinaca kale waxa ay la murugaysan yihiin jannadii ay seegeen iyo amarkii Alle ay diideen. Waxa hor taal qoomammo aan waqtigan xal keenayn.

Maalintaas, maalin Xaawa iyo Aadam kaga adkayd ma soo marin. Waxa la dhex keenay adduun iyo arlo aanay haba yaraatee wax war ah ka hayn; sharkeeda, khayrkeeda iyo shay waliba kaalinta uu nolosha ku leeyahay. Waxa ay ahayd maalin wax ay quutaan iyo wax ay dhaxanta ka gashadaan ba u baahan tahay aqoon iyo waayo'aragnimo lagu hantiyo. Si ay u dhaqaaqaan, meel ay u dhaqaaqaan iyo weliba wax ay ku dhaqaaqaan ayay garan waayeen. Waa xaalad lammaanuhu aanay ugaadha iyo dugaagga kala sooci karin. Cid wax ku kordhisa – arrin iyo aqoon – nolosha kama muuqdaan.

Muraaddada ay leeyihiin waa badan yihiin, mana sitaan qalabkii ama garashadii ay muraaddadaas ku fushan lahaayeen. Waa ka gabargaalayaan in ay wax uun ku dhaqaaqaan. Waa mucsur faro madhan. Baahidoodu way badan tahay. Ma sitaan qalabkii badbaadada, mana hayaan isku kalsooni ay isku ilaaliyaan. Ma furfuran karaan sirta nolosha iyo xeeldheerideeda baaca dheer. Waqti ay wax ku malamaleeyaan ayay u baahan yihiin. Halkee ayay ka bilaabaan? Maxay ku dhaqaaqaan?

Waxa ay indhaha ku dhufteen makhluuq faro badan oo kala sinji ah oo aan u kala sokayn. Baahi nafsadeed ayaa haysa. Garan maayaan sida loo daboolo. Gaajo ayaa jirta, qabow baa jira, kulayl baa jira, gudcur maararowliyo habeen baa jira, nolosha ay martida u yihiin warkeeda ma hayaan. Cadawgoodu waa badan yahay. Ibliis sheed ayuu ka eeganayaa oo waa cadawgooda koowaad. Waa kii lahaa sababtii lammaanaha jannada ka soo saartay.

Aqoon la'aanta nolosha ka haysaa waxa ay Xaawa iyo Aadam ku keentay cabsi jahligu sabab u ahaa. Baahida haysaa waxa ay ku xidhnayd aqoon iyo waayo'aragnimo. Maalin iyo maalmo tijaabo iyo faaqidaad ah ma sugayso. Waxa ay dantu fartay in ay dhibka iyo baahida haysa ka jawaabaan. Waayo, Xaawa iyo Aadam waxa ay lahaayeen awoodo suurtagal ka dhigaya in ay baahiyahaas xal u helaan.

Dad bay ahaayeen! Waxa ay ahaayeen isir lagu abuuray kas, maan iyo tabo arrimaha xidhxidhan furfura oo wax malamalayn kara. Aadam Nebinnimadiisu wax bay macnaynaysaa. Ta Alle ayaa wehelisa. Waxa hoggaan u ahaa oo hagayay Ilaahay iyo raxmaddiisa. Marwo Xaawa qudheedu waxa ay magan u tahay Aadam. Isaga ayay faraqa haysataa. Waxa uu ku dhaqaaqo ayay ka war sugaysaa.

Si kastaba ha ahaatee, dhulka in baal leh iyo in baabaco leh ayaa ku nool. Ficilkooda iyo dhaqdhaqaaqooda ayay isha la raacayaan. Marba marka ka danbaysa talo cusub iyo xirrib ayaa u kordhaysa. Waxa isa soo taraysa isu kalsoonidoodii iyo xasilloonidoodii. Dhacdooyin is dabajoog ah ayaa ibafuranaya. Waqti dheer iyo waanwaan kadib ayaa waa cusubi beryayaa. Noloshii ayaa dhaqaaqaysa.

Marba tallaabo qaade, sii dhiirrade, sii socde, kaskoodii iyo tarantoodiina sii ballaadhatay. Noloshii way sii qorqorantay. Waddooyin ayaa la kala qaaday. Meelo ayaa la kala degay. Magacyo ayaa lala kala baxay. Midabbo,

marinno iyo mabaadii' ayaa la kala yeeshay. Hadba moosinno ayaa la dumiyay. Hadba tab iyo toog iyo tubtii saldhigga nolosha ayaa la raacraacay.

Waxa ay noqdeen kuwo karaamaysan iyo Sayidkii amranaa ee nolosha hantay. Arlada ayay ku faafeen. Iftiin iyo ilays ayay nolosha u noqdeen. Aqoon iyo adduun ayay dhulka ku cammireen. Hankii ladhayay ayaa buuxiyay ujeeddadii Ilaahay nolosha ka lahaa.

Maalinba maalinta ka danbaysa ayaa qofka hiigsigiisu sii durkayay. Maalinba maalinta ka danbaysa ayay noloshu qofka u soo dhawaanaysay oo dhabbadu u sii qorqormaysay. Waxa loo qalabqaatay geeddi aan xad iyo xuduud lahayn ilaa maalinta suurka la afuufo.

*Beri baa dadkuba qaawanaa, dibad ku noolaaye*
*Oy daaqayeen cawska iyo, darista geedaaye*
*Dareemada mar bay ugu koreen, duudka buuraha e*
*Dalanbaabi iyo guuldarriyo, doogga cuniddiisa*
*Dan baa galisay inay raadiyaan, nolol ka door roone*
*Dugsi iyo markii ay heleen, dab u iftiimaya*
*Ugaadhiyo markii ay dabteen, deeradiyo cawsha*
*Duunyada markii ay dhaqdeen, bahalihii duurka*
*Beeraha markii ay degeen, orodki may deyne*
*Damac baa hoggaanka u qabtoo, door labaad raray.*[39]

Hordhacaas kadib, dhulka waxa lagu xoojiyay buur iyo bannaan, bad iyo webi, in baal leh iyo in baabbaco leh, buruud iyo burji, dayax, cadceed iyo xiddigo bila, daruuro barakaysan oo carriga biyadhiga; baad, beyddi, macandi lagu baahibaxo iyo nolol sal iyo baar isku dheellitiran.

Intaas oo dhan waxa loo abuuray in aynnu adeegsanno oo aynnu waajibaadka la ina saaray ku gudanno. Intaas oo dhammi waa aayado, aayatiin iyo tusaalayaal Ilaahay lagu garto oo deeqdiisa iyo awoodihiisa lagu mahadiyo.

Intaas oo dhammi waa awaalo lagu amarqaato, si Ilaahnimadu xaqa ay leedahay loogu garto oo ficil, camal iyo cibaado xariir ah cagta loogu saaro waddada badbaadada. Intaas oo dhan waxa looga jeedaa in lagu mahadceliyo. Waxa loogaa jeedaa in aynnu anshax iyo asluub waajibaadka

[39] Durdur, 1973.

la ina saaray ku gudanno, in aynnu kaga fogaanno marinhabawga iyo in aynnu ka libkeenno cadowgeenna oo ah Ibliiska is dhigashadeenna awgeed inoogu soo hiranaya.

Anshaxa, asluubta iyo dhaqanka suubban waxa la inoo faray si aynnu nolosha kaalin macne leh uga qaadanno iyo si aynnu u garanno in aan cayaar iyo dheeldheel la inoo abuurin. Intaas oo derajo ah waxa la inoo siiyay in aynnu kaga fogaanno marinhabowga iyo asaroorinta Ibliiska. Intaas oo dhan waxa la isku daba dhigay si aynnu u gudno xaqa Ilaahnimada iyo si aynnu u fulinno waajibaadka ina faran.

Intaas oo dhan waxa looga jeedaa in ay aakhiro xujo innagu noqoto. Intaas oo dhan waxa looga jeedaa in Ilaahay ku soo bandhigo ama ku muujiyo waxa Ilaahnimadu tahay iyo ujeeddada abuurta laga leeyahay. Mar haddii Ilaahay adduunka in aynnu joogno indhaha inoo saaray, waxa inoo furan in aynnu Ilaahay ka daawanno abuurtiisa muraayadda quruxda badan iyo nolosha kor iyo hoos innagu xeeran ee iimaanka iyo xasilloonida kasheenna buuxinaysa.

In aynnu Alle ka baqannaa waa sharci, waxaana habboon in aynnu la yeelanno xidhiidh wanaagsan oo xambaarsan kalgacal, xishood, xidhiidh Allenimo iyo addoonnimo, si waajibaadka la ina faray aynnu werwer la'aan ugu gudanno.

*Hadduu qofku been dugsado*
*Baqaa lagu xeerayaa*
*Bahduu ka curyaamayaa*
*Wax baydadiyaa eryada*
*Cishaba babbisaa hor taal.*

*Waxaa ku bannaan runtii*
*Dhankeedana bayr ka qaad*
*Inay tahay baahi diid*
*Haddana yidhi baadidoon*
*Halkeeda wax buuxin kara.*
*Markuu isa sii barkado*
*Belaayo waxay tustaa*
*Inuu weli sii baxsado.*[40]

[40] Adduunyadu waa besteed, 1997.

Sagaal iyo sagaashanka magac ee ina soo gaadhay ee Ilaahay sifaadkiisa ku arooraa waxa ay daboolka inooga qaadayaan xeeldheerida magacyadani salka ku hayaan, haddii aynnu malayn karno macnaha magac waliba xambaarsan yahay ama halka uu magac waliba astaanta u yahay.

Magac waliba waxa uu salka ku hayaa ujeeddo gaar ah iyo astaan Ilaahnimadu leedahay. Magac waliba waxa uu ka hadlayaa weynida iyo wacdaraha Ilaahnimada. Magac waliba abuurta ayuu kaalin culus ku leeyahay. Magac waliba ujeeddo iyo duluc isaga u gaar ah ayuu sitaa.

Sagaal iyo sagaashanka magac waxa keenay xeeldheerida Ilaahnimadu leedahay. Awaalaha iyo ashqaraarka magac waliba ku gaar yahay ayaa khasab innagaga dhigaya in aynnu waqti fara badan qalinka iyo waraaqda kala dhigno oo aynnu fogaanta iyo awoodaha ay xambaarsan yihiin indhaha ku dul illowno oo bal isku daynno sidii uu hiyigu magacan u meeldhigi lahaa. Si kasta oo aynnu macnaha magacyada u fahamno ama u mala'awaalno, waa ay ka sii xeel fog yihiin. Aynnu ku gaabsanno *Subxaanaka yaa cadiim!*

Haddii aan aftahammadeenna iyo abbaarteennu magacyada astayn karin, waxa aynnu kaga hadhaynaa in kalgacal kasheenna buuxiyo, waayo, wax kasta oo ku cajabgaliyaa waxa ay kugu reebaan dareen marba kashaada ku soo noqnoqda oo aanad ka xiisadhicin. U danbayn, magacyadani waxa ay innagu reebayaan hiyikac iyo hilow boqol laaban. Bal hadda aynnu dheehanno tuducan suugaanta ah:

*Allow barashaan ogeyn*
*Intay tahay baaxaddaa,*
*Qofkuna badow buu ka yahay*
*Inuu kugu soo bandhigo*
*Bayaannada aan fogeyn.*

*Bishmaan u daraandarayn*
*Inuu boqolkaaga magac*
*Intuu Bisinkaagu yahay*
*Ka sheego wax aan badnayn.*

*Waxaad tahay gun iyo baar*
*Ballaadh iyo deeq mug weyn,*
*Waxaad tahay beer janna ah*

*Waxaad tahay baarri faxan*
*Intaad bixisaa raxmad ah*
*Intaad burisaa rejo ah*
*Intaad hanataa ka badan*
*Baxaalliga hawl adduun,*
*Wax beelka intaan hurayn*
*Bushaaro hayaad u tahay.*[41]

Bal mar kale aynnu is dul taagno tuduc ku arooraya Ilaahnimada oo aynnu nidhaahno:

*Sifaadkaaga deyr ma xidho*
*Dareenku ma gaadhi karo*
*Garaadku ma duubi karo*
*Dibnuhu ma macnayn karaan*
*Qof doonay inuu dhex galo*
*Ku daalay ma dhaafi karo.*

*Dunjiga khalqigaagu yahay*
*Haddii gelin laysu dumo*
*Raggiyo dumar laysu guro*
*Jinkiyo insi laysku daro*
*Hadday ku dedaal galaan*
*Intay dardartoodu tahay*
*Hadday orod dooddiyaan*
*Hadday fadal deeddamaan*
*Muggood darandoorriyaan*
*Haddii badda loo dardaro*
*Dawaad milan looga dhigo*
*Dureemada loo qorqoro*
*Waxay ku danbaynayaan*
*Inay dib u soo gurtaan.*[42]

Tuducyadani waxa ay ina barayaan in awoodaha Ilaahnimadu leedahay aanay xad iyo xuduud soo dabbaala lahayn. Waa sifaad ina gilgilaya oo

---

[41] Adduunyadu waa besteed, 1997.

[42] Daba huwan, 1995.

dareen addoonnimo innagu abuuraya, haddii aynnu kal fayow iyo indho caafimaad qaba ugu kuurgalno.

Haddii aynaan marinhabaabin oo hungurigu hallaasiga beenta ah innagu hodin ama aanu hawaawikac ina hor qaadin oo aynnu daliilka iyo xaqiiqooyinka kasheennu ina tusayso u fiirsanno, aayado iyo mucjisooyin lagu qancaa waa ina hor yaallaan.

Yaynaan karaamada iyo derejada aynnu gaarka u leennahay ee Alle inoogu deeqay saluugin ama indhaha ka lalin. Yaan jahligu ina indha tirin. Yaan hunguriga iyo damacu isku gudbin badbaadadeenna. Yaan arrintu innaga noqon 'hunguri wed ma arko.'

Aynnu hogatusaalahan ku xoojinno tuducan halabuurka ah ee sii xoojinaya ujeeddada:

*Dadku waa ab culus yahay*
*Ohli maaha weelkiyo*
*Lagu rido alaabtee,*
*Ha addoomin garashada.*

*Waxad tahay ugaaskii*
*Hanashada adduunkiyo*
*Ifka loogu hiishee,*
*Ha la biqin awoodaha*
*Lagu furo albaabbada*
*Xujadoodu adag tahay.*[43]

Haddii aynnu sii daba galno halka ay ku arooraan, warka taxanaha ah, yoolka iyo ujeeddadu, oo dulucda sii hogagalinno, waxa Ilaahay kuu abuuray ama adduunka u abuuray ee nolosha iyo noolaha loogu cusleeyay, in Ilaahnimada macne loo yeelo.

## Diinta iyo Culimada

Si badbaado loo helo, diinta Islaamku waa qalabka Ilaahay ugu talagalay in lagu dhaqmo. Ummaddu waxa ay jaahil ka yihiin diinta Islaamka ee ay sheegtaan. Qofku kuma dhasho waajibaadka uu gudanayo iyo waddada uu

---

[43] Afkusiran, 1997.

u raacayo. Si loogu dhaqmo waa in ay jirtaa cid aqoon u leh oo ka hadashaa. Waa in ay sidoo kale jirtaa cid dadka Islaam kaga dhigaysa diinta Islaamka.

Bulshada waa laga dhex helayaa cid waddada badbaadada farta ugu fiiqda. Waajibkaasi cid kasta oo aqoon xaq ah iyo cilmi u leh waa saaran yahay. Dalka waxa ku sugan culimo badan oo aqoon u leh diinta Islaamka. Waxa joogta culimo ay wax u kala cad yihiin oo ay tahay in ay buuxiyaan kaalintaas faran ee madhan.

Wadartaasi inta badan waa dhallinyaro aan ummadda dhaqankeeda iyo habka wax loo dhacsiiyo buxuur ku ahayn. Afar iyo labaatanka saacadood intooda badan casharku waa isdabajoog. Laakiin casharku kuma gororo kasha shacabka. Haddii la yidhaahdo waayo, jawaabtu way iska fududdahay.

Marka hore, ma jiro wax mabda' ah oo ay ummaddu ka midaysan tahay. Waxa aan u jeedaa waa sheegato. Sidaas darteed, kuma midaysna diinta Islaamka. Halkaas dhaawac culus ayaa ka imanaya oo ciddii aan diinta Islaamka ku dhaqmini waa cadow ka soo horjeeda diinta Islaamka. Laakiin diintu sheegato ma aha. Waa mabda' iyo mabaadii' arkaan iyo marinno loogu dhaqmo leh. Inta Islaamka sheegata iyaga qudhooda wax baa ka si ah oo ma laha aqoon Islaami ah oo ay ku daafacaan diinta Islaamka.

Dalka waxa joogta culimo fara badan laakiin sida culimadu u fara badan tahay uma tayo badna. Haddii ay aqoon diini ah leeyihiin, aqoon Soomaali ah oo dadka casharrada lagu dhacsiiyaa ma jirto. Culimada, gaar ahaan da'yarta ama dhallinyaradu waxa ay bixiyaan casharro jacbur ah oo Carabi-Soomaali ah.

Qofka inbiigga ah way adag tahay sida cashar loo siiyaa. Waxa uu u baahan yahay qof afka buxuur ku ah oo adeegsanaya luuqadda dadka lagu dhacsiiyo ee hawaale warranka iyo hogatusaalaha xambaarsan. Waxa uu u baahan yahay qof adeegsanaya luqad qofka casharka malab u marmarinaysa.

Dhallinta culimada ah ee dalka joogta farriimaha ay tebiyaan waxa ay u badan yihiin luqadda Carabida oo ay wax ku soo barteen. Iyada ayay ku ababeen ama ka dabqaateen. Aqoontii waa ay leeyihiin laakiin waxa ka maqan gudbintii. Haddii taas la waayana casharku waa barkumataal. Casharkaa jacburka ah waxa ka maqan maansada, maahmaahda iyo meexaanaha Soomaalida hogatuska loogu macneeyo.

Waxa aad mooddaa in dhallinyarada culimada ahi aanay ka warhaynnin xaqiiqooyinka dalka ku jira iyo sababaha: dhiigga daadanaya, dagaallada, colaadaha iyo balwooyinka dalka ku fidaya ee dadka naafeeyay sida qaadka, khamriga, sigaarka, tuugada, dhaca, boobka iyo macsida buux dhaaftay ee sinadu ugu culus tahay. Arrimahaas oo dhammi codka ugu faraha badan ee dawladda iyo culimada kama muuqdaan.

Culimada dalka joogta aragtidooda waxa aad mooddaa in aan belaayo dalka ka jirin. Waxa dhawaqoodu u badan yahay dhacdooyin iyo taariikho ku saabsan saxaabadii dhulka Carabta ka hanaqaadday. Casharrada culimada badanaa ka maqli maysid maxaa maanta jira.

Intaas oo dhammi maagis igama aha ee bal waa in ay gartaan sida ummadda ay ka dhasheen wax loo dhacsiiyo, halka laga abbaaro iyo dhaqanka loo adeegsado, si shacabkoodu aqoontooda iyo dedaalkooda u mahadiyaan. Waxa aan uga gol leeyahay in aanu casharkoodu noqon barkumataal iyo biyo col dhaanshay.

Ummaddu waa Soomaali e, waxa ay u baahan tahay cid afkooda kula hadasha oo waliba si xeeldheer ugu hadasha oo garanaysa habka iyo hannaanka dadka wax loo dhacsiiyo oo yuhuuntooda iyo werwerkoodu salka ku hayo xaqiiqooyinka dalka ka jira. Sidaas darteed, waa in ay ummaddooda af Soomaali sugan kula hadlaan, oo ay adeegsadaan suugaanta: gabayga, maahmaahaha, halhaysyada, sarbeebaha, sogordoha, hogatusaalaha iyo siyaabaha kale ee wax loo dhacsiiyo.

Annagu (halabuurrada) waxa aannu haynnaa marinka ummadda loo maro, culimaduna waxa ay haysaa cilmigii marinkan la marin lahaa. Ujeeddadaas waxa la yidhaahdaa *is buuxin.* Waa waxa aad hayso iyo waxa aan hayo aynnu isku lammaanaynno, si ujeeddada culus ee aynnu ummad ahaan leennahay u gudubto ama meelmar u noqoto.

Culimo Allaay waxa fiican in aynnu ka warhaynno xaqiiqooyinka dalka ka jira. Waxa ay ila tahay haddii aan la dabaqaban in mushkiladdu sii baahi doonto oo ay dalka ku dhammaan doonto. Waxa la yidhi belaayo weji la qabto ayay leedahay ee dabo la qabto ma laha.

Dhinaca kale, lafjabka ugu weyni waxa weeye dawladda ku Islaamka ah calanka ay ku qoran tahay *laa Ilaaha Illa llaah* ee aan dayactirnayn ee meel kasta oo aan munaasib ahayn lagu qoro. *Laa Ilaaha Illa llaah* laguma qorto

derbiyada banyaalka ah ee jaahilka iyo carruurtu wasakhayn karto, laakiin waxa lagu qoraa qalbiyo daahir ah.

Ma ahayn in *laa Ilaaha Illa llaah* lagu qoro maro aan dhawristeeda la ilaalin karin. Taasi waxa ay iman kartaa marka aan la garanayn kelmaddaas macnaheeda. Waa marka Islaamnimo run ah loo jeedo ee aanay ahayn cid ku soo jiidasho iyo muraaddo siyaasi ah.

Calanka astaantaa leh waa laga ganacsadaa, cid kastaana way iibsataa. Laakiin cid kasta oo iibsataa inta badan ma garanayaan erayada calanka ku qoran macnahooda. Erayga calanka ku qorani ma sahlana. Sidaas darteed, ma habboona in uu gacanta u galo cid aan ilaalin karin ama aan macnaha erayga garanayn. Intaasi waa iga digniin, waana iga dardaaran; haddii masuuliyadi jirto.

## Qodob ku saabsan Jalaabiibka

Waxa aan indhaha ummadda ku jeedin lahaa jalaabiibka haweenku xidho iyo warka ku jira. Waxa aan in badan u kuurgalay jalaabiibkaas, kadib waqti dheer oo aan is idhi arrintaas u daa culimada iyo ciddii kaaga aqoon roon. Ma aan degdegin ee waxa aan is idhi bal dadku ha kula arko.

Haweenka jalaabiibka xidhaa waxa ay gashan yihiin kabo sharabaaddo weheliyo. Fayga hore ee sharabaadka iyo shayga ay gashan yihiin – diric ha ahaado ama shay la halmaala e – kabta way isku sargo'an yihiin oo shayga hu'ga ah ee ay gashan yihiin ciidda gaadhi maayo. Waxa se layaab leh jalaabiibku xagga danbe, dhundhun ilaa taako ayuu dhulka xaabayaa.

Dhulka maradu xaabaysaa waa dhul aan daahir ahayn oo sida la wada og yahay belaayo oo dhammi daadsan tahay. Ma aha dhul laga shaqeeyo oo nadiif ah. Saxaro ayaa taal, qashin ayaa yaal, wasakh ayaa daadsan, xaako ayaa lagu tufaa oo waxyaabo aan kab mooyee shay kale loo quudhi karin oo jalaabiib lagu tukanayo la jiidi karin ayaa quban.

Marada inta dhulka jiitamaysa waa aad arkaysaa, way caddaatay oo boodh ayaa saaran oo qiyaastii mararka qaarkood maradaas waxa muuqata in aanay salaadi ku baxayn. Meel bannaan oo qofka jidhkiisa ka mid ah oo ay maradaas jiitamaysaa asturtaa ma jirto. Cid arrintaas igu beeninaysaa ma jirto oo waa laga warqabaa.

Waxa aan is idhi malaha culimadaa arrinkaas bixisa. Waayo qofka maradaas sitaa meel buu ka warqaatay oo waliba halka uu ka war qaatay ma aha cid aan culimo ahayn. Haddii ay arrintu ka timid cid aan culimada ahayn, waxa aan filayaa culimadu way ka warqabtaaye arrintaas wax bay ka qaban lahaayeen ama way ka hadli lahaayeen.

War kale oo arrintan barbar yaal ayaa jira. Waxa badan haween casri ah oo malaha aan diinta ku dhaqmin oo cid waliba ka war hayso oo dirica ay gashan yihiin sidaa si le'eg u jiitamayo. Bal haddaba haweenka indho shareeran ee astaanta Islaamnimada leh ee xijaaban iyo haweenkan danbe ee madaxa bannaan ee aan ka sheekeeyay maxaa walaaleeyay? Jawaabta culimada ayaynnu ka sugaynaa.

Maalin aan nin wadaaddada ka mid ah arrinkan kala hadlay waxa uu ku gaabsaday jalaabiibka ciidda ayaa daahirinaysa. Haddaba ummadyahay ciidda waddooyinka Muqdisho, Hargeysa ama Burco taallaa ma tahay mid hu'ga lagu tukado ee dhulka jiitama daahirinaysa? Waddooyinka magaalooyinkaas dhex maraa ma yihiin kuwa maro dhulka jiitamaysa daahirinaya? Jalaabiibka dhulka xaabaya ee xagga hoose ka cadaaday iyo dirica isna baac dhulka xaadhaya ma waxa walaalaysa jiitanka labaduba dhulka xaabayaan? Jawaabahaas waxa aynnu ka sugaynaa culimadeenna arrintan gaarka u leh.

## Maanta iyo Moogganaan

*"Noloshu way madawdahay*
*Marin seeggan baa yaal*
*Mahadhooyin baa yaal*
*Iyo maado faro badan.*[44]"

Ilaa maalintii waddadii toosnayd laga leexday, waagii beryaba hillinka hooggu wuu sii ballaadhanayay. Mar kasta oo uu hillinku cidhiidhi noqdo dadku way sii fidinayeen, sharka iyo shilkuna way sii kordhayeen. Ayaandarrooyinkaas dhacayay waa laga qalbi la'aa oo indhaha ayaa laga lalinayay.

Saymaha iyo saawasaawaha soo socda cidina ma saadaalin. Maalin walba waxa soo kordhayay mooyi iyo mooyi iyo marinhabow hor leh. Arrintani

[44] Mayaldheer, 2006.

waxa ay dhacdaa marka ay dadka kashooda ku beeranto arrin la yidhaahdo is dhigasho iyo dhegayso oo ka dhaqaaq. Taas oo kale waxa la yidhaahdaa qofka aan waxa jooga garani waxa soo socda ma garto.

Qofka badbaadada naftiisa isaga ayaa la raaciyay. Awoodihii, aragtidii, indhihii, dhegihii, maskaxdii iyo maankii uu isku ilaalinayayna Rabbi waa ku mannaystay. Digniino iyo samac iyo basar uu jidka habawga ah kaga baydho iyo caqli uu waxa soo socda ku gartana Alle waa ku galladay.

Qofka bani'aadamka ah waxa la siiyay miyir iyo miisaan uu nabadgalyadiisa ku ilaaliyo. Intaa kadib addoonku wixii gaadha isaga ayaa isku qaba, inta ifka la joogo iyo marka aakhiro la gaadhaba. Qofkii jar-kaduul ama jab u badheedhaa waa qof ka baxay Ilaahay ballankiisii iyo sharciga ka dhexeeya Ilaahay iyo addoonka.

Halistan oo kale waxa ay timaaddaa marka qofku hunguriga iyo Ibliis macallin hoggaamiya ka dhigto. Hungurigu qofka waa indhatiraa markaas ayuu Ibliisku hoggaanka iyo usha u qabtaa. Deetana qofku marka uu ogaado in uu marinka seegay ayuu mararka qaarkood ka wahsadaa qaadashada go'aanka badbaadada. Waxa uu cuskadaa ulo booc ah iyo aakhiro Allow sahal.

Maalin walba waxa sii kordhaya hoogga iyo halaagga iyo in awaashu gunta ku sii aroorto. Maalin walba waxa sii labanlaabmaya qofka baahidiisa iyo baylahdiisa. Maalinba walba noloshu gacanta ayay ka sii baxaysaa. Maalin walba waxa foolka keenaya toban belaayo oo in la barkado, in la goglado, inna la huwado. Taas waxa ka dhalanaya in uu qofku sii jilco, cadawgiisa u nuglaado, oo uu hanka iyo hiyigaba xooro. Marka uu qofku balwooyinkiisa iyo kunka baahiyood ee hor yaalla ku hafto ayuu Ilaahiisa iyo dhalashadiisa eersanayaa.

Maalin walba waxa suuqa ku soo kordhaya tobannaan qof oo waashay oo qaadka iyo balwaduhu maanqaadeen. Maalin walba dhiillo iyo dhaawac hor leh ayaa soo afyeelanaya. Maalin walba balwado lama'arag iyo lama maqal ah ayaa soo biiraya oo dadka xadka ka sii saaraya.

Maalin walba waxa soo biiraysa cadho Ilaahay iyo ciqaab qofka u soo korodha oo qofka cadaabta ifka u soo saarta. Deetana qofku kasha iyo korkaba wuu ka rifmayaa, waayo, waxa ag yaalla waajibaad awoodihiisa ka baxsaday oo dareenkiisa dhintay iyo dammiirkiisa canaananaya.

Qofku waxa uu ka faraxashay karaamadii ilaalinaysay ee badbaadadiisu if iyo aakhiro ku xidhnayd. Waxa uu ka gam'i la' yahay runta ku mudduciga ah ee aanu jawaab u haynnin. Waxa tasoobay intii uu qofku wax ku ahaa iyo xadhkihii ilaalinayay. Xaalkiisu waa, 'awr dabar la'aan dhacay, waxa cuna dugaagga.'

Waxa dadka ka maqan cid cabbiri karaysa awaalaha iyo xaaladaha jira, ujeeddada dhaadhicinaysa, oo qalbiga dadka toosinaysa. Waxa badiba jira *afkamuslin uurkagaal.* Waxa habboon in mar walba laga hadlo xaaladaha markaas taagan ee qalloocu ku jiro ee u baahan in la toosiyo inta aanay sii fogaan.

## Dib u Noqosho Mise Daadasho?

Nolosha samaheeda iyo xumaheeda, waqti dheer ayaa midiba kaalin leeyahay, laakiin macnuhu ma aha waligeed sidaas ayay ahaanaysaa. Waqti ayaa jira noloshu gebagebowdo, suurkeeda la afuufo, oo sidaas lagu gunaanado. Sida aynnu warka ku haynno, quruun kasta waxa la rogayay marka xumaheedu gaadho meel aan la dhaafi karin. Mar kale aan ku celiyo in waqtigu innaga buuxo oo aan arlada dib la inoogu cammirayn.

Moogganaanta maanta jirtaa war kama hayso halka wax marayaan iyo marka dhiilku buuxsamo wixii dhici jiray. Quruun waliba iyada oo moogganaan ku jirta ayaa lagu baraarujin jiray halaagga. Maanta innagu – dadka adduunka jooga– waxa aynnu filnaaba waa tii dhici jirtay marka ay noloshu macnabeesho ee laga waayo wax Ilaahay lagu xusuusto ama ay ka saboosho qurux iyo sureer indhaha iyo dhaayaha doojiya.

Dhammaan calaamadihii nolosha lagu rogi jiray waa muuqdaan oo warka idinba waad haysaan. Astaamaha lagu garto rogmashada waxa ka mid ah in Ibliis nolosha Ilaah ka noqdo oo uu bixiyo amarrada lagu dhaqmayo ee Islaamnimada lagaga maydhanayo. Si kale kuma garatid ee waa marka camalka qofku bar madow ka simo qalbiga ee sidii uu guri shaydaan yahay qalbigu madoobaado.

Nin aan waxa jooga garani waxa soo socda ma garto. Sida muuqata xaaladdu maalinba maalinta ka danbaysa waa ay ka sii daraysaa. Waxa jirta moogganaan, is dhigasho iyo jahli hunguri hoggaaminayo. Ma sidaas ayaynnu ku daynaa oo is dhigashadaas iyo ha fadhido farow ayaynnu

xaajada kaga hadhnaa oo waxa aynnu isku qancinnaa teennii iyo indha-kaqarsigii salka ku hayay laab la kacay luga se kuma joogo?

Waxa aynnu kaabiga u saaran nahay jarkii iyo figtii laga daadan jiray ama astaanta u ahaan jiray go'aanqaadashada iyo dib u noqoshada. Taasi waa haddii uu waqtigu innagu simo. Jawaabtu ma fududa haddii aynnu dooranno dib u soo noqshada. Waxa ina hor yaalla shuruudo adag oo u baahan in aynnu ka soo laabanno toddobaatankii sannadood ee aynnu waddadii khaladka ahayd cagaha ku haynnay, toddobaatan sannadood oo kalana dib u soo noqonno, si aynnu waddada sugan cagta u saarno oo u nidhaahno:

*Cagta saarnaye*
*Caalamiinkiyo*
*Caadilkow sahal.*

Mise waxa ka fudud in aynnu nidhaahno nin qoyani biyo iskama dhawro oo jarka ka daadanno?

Ha ka walaacin in aad labada ku hor yaal mid doorato: in aad toddobaatan sannadood oo isa sixid ah dib u soo noqoto; iyo in aad taadan ku daysato oo jawaabtu noqoto fayoobi hadmay lahayd? Waqtigu kugu simi maayo in aad jawaabta waqti dheer ku foognaato. Ummadyahay waxa lagaa rabaa jawaab degdeg ah oo waqtiga la jaanqaadda. Badbaadadu waxa ay ku jirtaa adiga oo yidhaahda rag waa kii kufa ee haddana kaca.

*Sidii durdurkaan socdaa*
*Si baan u durdurinayaa*
*Hortayduna waa derderan*
*Hareeruhu waa deldelan*
*Gadaashuna waa damdaman*
*Aboor iyo waa dundumo*
*Sidii qori daad la tegay*
*Wed baan dul sabbaynayaa.*[45]

Sida muuqata waxa aynnu ku jirnaa maalmihii u danbeeyay ee cimriga nolosha aynnu maanta dhex joogno. Fursado badan iyo waqti dheer oo ina soo maray ayaa moogganaan iyo macnadarro innagu dhaafay. Maalmaha sidan oo kale kugu dhaafaa mar danbe ayay qoomammo keenaan oo uu

[45] Daba huwan, 1995.

qofku isku haaraamaa ama isku canaantaa. Waa waqti aanay qoomammadu meel buuxinayn ama murugadu waqti ku dhaafay soo celinayn.

Qofka waxa hor imanaya maalmo iyo maalmo uu ku jiray meermeer iyo mardaadi uu dhaafsaday goobo iyo guulo uu ku nabadgali lahaa ama mahadin lahaa. Isaga oo xusuusan maalmaha iska daba tagay in aanay dib u soo noqonayn ayaa dhayalsigiisii jiif iyo joog u diidaa oo murugadu marba ladh ku soo kicisaa.

Waayo hore xilligii noloshu macnaha lahayd iyo miyigii asalka ahaa ayaa waxa la sheegay in nin kadin geel ah subax dareeriyay. Geela waxa ku jirta hal dalawo ah, afardeeq ah oo fool ah. Ninkii maalintii oo dhan hashaas ayuu isha ku hayay oo waxa uu ka baqayay in hashu foolbaxsato oo shil ku yimaaddo.

Wax uu hasha isha ku hayaba, goor casar ah ayuu geed hadh weyn is yidhi ku naso. Jeegadii uu u jiifsaday ee uu indhaha isku qabtayba sardho ayuu galay. Goor hiimamaw ah oo gabbal dhacay ayuu isla booday. Laba kuray oo isaga geela la jiray iyana waxa ay ku foognaayeen shax magaceeda la yidhaahdo layla goobalay. Hashu maankooda way ka maqnayd. *Nin garaadliyo, geelu kugu yuus.*

Xilligu waa xilliga la magacbaxay cawadaran. Ninkii hasha lahaa jaho kasta wuu u orday. Laakiin isaga iyo hashii habeen ayaa dhex qaaday. Labadii kuray geelii ayay carraabiyeen. Goor caways danbe ah ayaa ninkii isaga oo ay daal iyo murugo kashiisa ku loollamayaan uu golihii geela cagaha soo dhigay.

Habeenkaa waxa ay u ahayd bedanbed iyo baaxaadeg. Wax uu fadhiga ku soo jeedaba, iyada oo dhulku weli madow yahay ayuu kabaha illaday. Xaggaas ayuu u orday oo xaggaas kale ayuu u orday. Markii waagu si fiican u beryay ayuu indhaha ku dhuftay haad waaweyn oo marna hinqanaysa marna soo degaysa.

Guhaad uu qalbigiisu canaanta ka deyn waayay iyo gebidhac ayuu goobtii isla soo taagay. Hashu waa hashii geela foolaadka u ahayd. Raqdu waa iyadii. Hadhadii hilbaha iyo lafaheedii baa wadhan. Waxa ag yaal ilmihii caloosha ku jiray oo bakhti ah.

In muddo ah ayuu dul taagnaa. Mar danbe ayuu raqdii ag fadhiistay. Waxa uu isku canaananayaa tii dayaca kadib dhici jirtay. Haddii aad sidaas yeeli

lahayd iyo haddii aad sidaas yeeli lahayd iyo, '*hadhka galay hurdadu waa xuntee hohe maxay seexshay*'[46]. Hiyigiisu waxa uu aqbali waayay in hashu Qaayib tahay.

Ladhka shidaya iyo dabka ku oogani ma aha hasha dugaaggu ku ormeeyay. Karka iyo kulaylka kaarinayaa waa canaanta iyo haaraanka kaga iman doona tolkii iyo raggii geelu dheemmanta u ahaa. Cadceedda ayaa halkii ugu soo baxday. Waxa canaanaya qalbigiisa iyo dalawada raqdeedu ag taal.

Goor danbe oo cadceeddu tahan joogto ayuu ka ruqaansaday raqdii uu dul yuururay. Haddii uu isaga oo cagaha jiidaya goobtii waxoogay ka socday, ayaa nin isaguna baadidoon ahi ka hor yimid. Ninkii baadidoonka ahaa waxa uu weyddiiyay baadi geel. Waxa uu u sheegay in aanu arag geela ninku weyddiiyay.

Ninkii hashiisa haaddu ku ormeysay waxa uu ninkii baadidoonka ahaa ku yidhi, "adigu hal fool ah ma aragtay?" Waa hashii uu raqdeeda soo arkay. Ninkii waxa uu ugu warceliyay in aanu arag hashaas foolhallawday. Ninkii waxa uu yidhi, "anigu hashayda aan ku weyddiiyay raqdeedii waan soo arkay laakiin *baadiyi candhaban* ayaan kuu weyddiinayaa." Waxa uu u jeeday in waxa dayac kaaga luma ay murugadiisu weligaa ku hor taallo.

*Ninka dalawadiisii*
*Duhur geed ka seexdee*
*Dibjirtee habeenkii*
*Bahaluhu durduurteen,*
*Dildillaaca waaberi*
*Markuu daydaygeedii*
*Dalagdalagta raacdada*
*Ka dul dhacay raqdeedii,*
*Runta Magan is diidsii*
*Indhahana dib ula noqoy*
*Ruuxeeda doondoon*
*Dad kaleeto weyddii*[47].

[46] Waxa curiyay AHN Gabayaagii Cilmi Ismaaciil Liibaan "Boodhari"

[47] Dibadyaal, 1981.

Waxa aan uga socdaa, waajibaadka iyo danta ku seegta inta aanad aakhiraba tagin, ifka inta aad joogto ayay kugu laba kacdaa oo ay marba ku hor timaaddaa.

Inta talo ina seegtay tiro ma leh laakiin marna ma aynnu dareemin in ay jirto maalin ay runtu mudduci innagu noqonayso oo ay innagu soo celinayso haddii aan sidaas yeeli lahaa iyo haddii aan sidaas yeeli lahaa. Dayac ku hor yimaadda waxa ugu culus ka maalinta xisaabta aad marin iyo sabab u weydo ee marba naarta sheed kaa tusa.

## Go'aanqaadasho

Ilaahay (SWT) addoonka waxa uu u banneeyay fursado badbaadadiisa la xidhiidha. Waxa furan in addoonka kashiisa dhiillo iyo werwer galo oo uu waxa luraya is weyddiiyo iyo in uu wax malamaleeyo oo uu isa su'aalo halka looga yimid iyo sababaha. Waxa dhab ah in uu leeyahay cadow ku lammaan oo haddii aanu ku baraarugin ku xoogaysanaya, haddii uu ka didana ku soo dhiirranaya, kuna ridaya abataqan iyo meel aanu ka soo noqon karin.

Ibliisku marka uu qofka gacanta ku dhigo, marka danbe si badheedh ah ayuu ula hadlayaa. Waxa uu ku amrayaa in uu isaga Ilaah ka dhigto, kadib marka uu kala fogaado Ilaahay iyo raxmaddiisa. Shardiga ugu danbeeya ee uu ku xidhayaa waa in uu isaga caabudo oo uu si buuxda ugu hoggaansamo.

Wixii intaas ka danbeeya, addoonku si aan walaac lahayn ayuu shardi kasta oo uu ku xidho u aqbalayaa. Cabsida uu galiyay kasha ruuxa iyo lurka uu ku hayo ayaa hadhaynaya bal in uu ka fekero talo ku saabsan dib u noqosho. Sidaas ayuu Ibliisku macallin ugu noqonayaa. Ta uu fal ku yidhaahdo marka uu aqbalo ayuu tu ka sii daran ku amrayaa.

Waxa la joogaa xilli uu Ibliisku dadka la fogaaday oo uu bahdii, isku kalsoonidii iyo rejo oo dhan ka xidhay. Waqti kooban ayuu ka debcinayaa, deetana iyada oo uu qofkii isdhigtay ayuu ku soo rogaalcelinayaa oo uu lurka iyo cabsigalinta ku sii labanlaabayaa.

Marka uu qofku falayo waxa uu Ibliis fal ku yidhaahdo, waxa uu rejaynayaa bal in uu helo fursad iyo daqiiqado uu sharka Ibliiska ka nasto. Wuu diidi karayaa, wuuna la dagaallami karayaa, haddii uu goosto in uu Ilaahay dib ugu soo noqdo, laakiin wuu dilan yahay oo kudhacii iyo isku kalsoonidii ayaa ka luntay. Sidaas ayuu uga baqayaa waddada dheer ee dib u noqoshada.

Ibliis waad og tihiin. Diin ma leh, dammiir ma leh oo naxariis ma leh; Ilaahay ayaaba naxariistiisa ka fogeeyay. Waxa uu Ilaahay uga go'ay aad maalin uun Ilaah sheegatid, cid ku caabuddana yeelatid. Haddii uu addoonku go'aan adag qaato, kudhac la yimaaddo, xagga Ilaahay u cararo, cibaado iyo camalsan yeesho; Alle toobaddiisu meelna kama jirto.

Ibliis waa diciif aan gacmo, lugo iyo awood uu wax kugu yeelo midna lahayn. Waa ay fududdahay sida Ibliis looga adkaadaa. Waxa uu kugu didsanayaa daasado iyo qabqabo madhan. Laakiin haddii intaasi ku didiso, *yaaweylak!*

Inta goori goor tahay ayaa lagu baraarugaa in uu hoos kuula hadlayo. Codkiisa maqli maysid muddo dheer, laakiin in uu kugu lammaan yahay oo uu hoos wax kuugu sheegayo waxa ku tusinaya: waxa ku dhibaya samaynta camallada wanwanaagsan, waxaana kugu cuslaanaysa cibaadada. Inta badan, waxa uu ku soo gabbadaa balwooyinka iyo baraadli'ida.

Ibliis sharkiisa iska moos inta aanu qalbigaaga meel ku yeelan. Laakiin haddii uu kashaada daar konton dabaq ah ku yeesho, way kugu adkaanaysaa dib u noqoshadu. Talada jilicsan iyo nuglaanta ayaa keenta in aad ku dhiirran weydo go'aanka badbaadada.

## Beenta iska moos

*Markay naftu baadi tahay,*
*Haddaan bahal kuu sanqadhin,*
*Cabsida bixisaa ka weyn.*[48]

Ibliisku Ilaahay ayuu kaa goynayaa, Allahna waxa uu kaaga dhigayaa cadowga ka danbeeya nabarrada kugu dhacaya. Marka uu kashaada Ilaahay ka saaro ee uu wada bar madow ka dhigo ayuu degayaa, kadibna isaga ayaa kuu talinaya oo Ilaah kuu noqonaya.

Haddii uu qofku jidka badbaadada raaco, waxa uu ka kasbo isaga ayaa leh. Haddii uu jidka naarta raacana, waxa uu ka kasbo isaga ayaa leh. Labada waddo hadba ka uu qofku raaco ayaa xukuma ficilka qofka iyo abaalmarinta uu helayo.

[48] Adduunyadu waa besteed, 1997.

Addoonku, rag iyo dumar ka uu doono ha ahaado e, marka uu qaangaadho waxa uu Ilaahay faray in uu qabsado tubta badbaadada. Baadidoonka qofka waxa uu Ilaahay ku xoojiyaa iftiin iyo ilays uu qofku Ilaahay ku baadidoono.

Ilaahay waxa uu addoonka hadiyad u siiyay kitaab Qur'aan ah oo qeexan ama si cad u tilmaamaya waddada toosan. Haddii uu qofku diido in uu adeegsado kitaabkaas qumman ee hoggaanka u noqonaya oo uu dhalanteed daba galo ama uu samaysto jiheeye jeebkiisa ah, waxa aan shaki ku jirin in uu afka uga galayo Ibliis ku sugaya waddada halaqmareenka ah. In uu dib u noqdaa waa furan tahay, in uu sida uu u laafyoonayo ee uu xumaha u macaansanayo albaabka naarta garaacaana waa u furan tahay.

Qofka badbaadadiisa Ilaahay Anbiyo ayuu ku xoojiyay. Culimo iyo warhayeen ayuu ku xoojiyay. Kitaabka Qur'aanka ah ee qofka jiheeya ayuu ku xoojiyay. Haddii qofku maankiisa, maskaxdiisa iyo karaamada Ilaahay ugu yaboohay ka dul boodo, naftiisa ha eersado.

Ilaahay makhluuqaadka aan tirada lahayn ee uu abuuray; cirka iyo dhulka, habeenka iyo maalinta, cadceedda, dayaxa iyo xiddigaha cirjiidhaha leh; hugunka badda iyo hirka buurta; wacdaraha qofka dareenkiisu nool yahay maankiisa gilgila iyo guud ahaan abuurta kor iyo hoos; waxa uu ugu talagalay waxkuqaadasho. Intaas oo dhan haddii uu qofku indhaha ka laliyo oo camalkiisa iyo xumaha uu macaansanayaa runta tusi waayaan, naftiisa ha eersado.

Waa badan yihiin tusaalayaal iyo calaamado Ilaahay lagu gartaa, laakiin haddii uu sheydaan iskaga kaa gudbo, runtani dharaar aanad beenid karin ayay si badheedh ah indhahaaga u hor iman doontaa.

*Belaayana way guddaa*
*Bariisana way dhacdaa*
*Haddaan laga sii bedqabin,*
*Waxaad ku baraarugtaa*
*Beentaadu runtay necbayd.*[49]

Aadamaha Ilaahay cayaar uma abuurin. Inta la abuuray ayay ugu mudan yihiin. Waxa Ilaahay ugu talagalay in karaamada, quwadda, lexaadka layaabka leh, maskaxda, garashada iyo guud ahaan awoodaha aan tirada lahayn ay ku gutaan waajibaadka Ilaahay, si marka ay arkaan qiimaha ay

[49] Adduunyadu waa besteed, 1997.

leeyihiin ay u rumeeyaan qiimaha uu Ilaahay leeyahay, una qiraan in aan Ilaahay iyagana cayaar u abuurin.

Haddii bani'aadamku ay awoodaha cajiibka ah ee uu Ilaahay ugu yaboohay si khalad ah u isticmaalaan oo ay nuxurka iyo dulucda shishe dulleeyaan, waa u qaadan karaan in Ilaaha abuurayna bilaa macne yahay, waana taas ta Alle Aadam u canaananayaa. Laakiin haddii ay karaamada iyo deeqaha Ilaahay siiyay qiimahooda muujiyaan, waxa ay qiri karaan in Ilaaha abuurayna qiime leeyahay.

Mushkiladda qofka aadamaha ah haysataa meel kale ka iman mayso. Waxa uu iska dhegatirayaa in uu guto waajibaadka Ilaahay saaray ee naxariista, xurmada iyo maamuuska u ah. Waxa uu doonayaa in uu cimrigiisa ku dhammaysto ku-daalista ka jawaabidda baahiyo aan xad lahayn.

Waxa uu doorbidayaa in uu u adeego hunguriga iyo muraaddadiisa aan xuduudka lahayn oo uu maalin walba u taagnaado ceeb iyo caydh. Waxa uu dooranayaa in faraqa la haysto oo qof dumar ah oo qaadka iibisaa ay maalin walba hu'ga ka furato.

Qofka waxa luraya waxa uu doonayo iyo qalabka uu u adeegsanayo ayaan iswaafaqsanayn. Maalin oo dhan xumaan iyo shar ayuu ku fooggan yahay, in wanaag loogu abaalgudana wuu doonayaa.

*Xumaan qof ku daalayaa*
*Wanaag damaciis hayaa!*[50]

Qofku iskama abuurmin, in uu sida uu doono yeelana laga yeeli maayo. In uu xadhkaha goosto oo waxa uu doono falo laga yeeli maayo. Alle ayaa abuuray, ujeeddooyin culculus ayaana loo abuuray.

Qofku ha ogaado in haddii aanu Allaha xaqa ah caabudin uu kollayba mid aan xaq ahayn caabudi doono, cadho Alle ku soo maqan tahay, meel uu kaga dhuuntaana aanay jirin.

Gumeysiga waashay ee qorshihiisu yahay in lala waashaa yaanu ku seexan kuna soo toosin in tiisu meelmarto. Inta uu giriftamayaa waa inta quwadaha la dagaallamayaa ay qorshaha dagaalkooda saxayaan ee nabarkoodu yoolka abbaarayo. Reer galbeed ha ogaado in isagu uu mar walba halis ku jiro oo quwado aanu ku xisaabtamaynini dul joogaan.

[50] Daba huwan, 1995.

Islaamnimadu waxa ay qofka baraysaa in uu dulmiga iyo gumeysiga lala maaggan yahay ku baraarugo, kadibna go'aan meelmar ah ka qaato.

Tusaale dhab ahi waxa weeye; waxa jirta meelo lo'da lagu caabudo. Waxa dhacda in lo'daasi iska soo gasho dukaan uu leeyahay nin sabool ahi, deetana ay afka la gasho jawaanno bariis ama hadhuudh ah. Waxa la sheegay in ninkaasi indhaha isku qabto inta lo'daas kadabkiisa goynayso.

Waxa aanu karayn in uu hor joogsado lo'daas uu caabudayo ama uu ku yidhaahdo wax ii hambeeya. Waxa kale oo la sheegay in lo'daasi mararka qaarkood waddooyinka waaweyn ee gaadiidku maro fadhiisato oo illaa ay iskeed u kacdo aanay jirin cid in ay kiciso ku dhacaysaa. Bal ka warran Ilaah adiga intaada yar kaa martiya oo aan meel uu kuu buuxiyaa jirin?

Aan mar kale ku xusuusiyo in haddii aanad Ilaaha xaqa ah run ku caabudin oo aanad fulin waxa uu ku faro aad Ilaah aan xaq ahayn caabudayso. Waayo, Ilaah-caabudiddu waxa ay ku jirtaa qalbigaaga; ama sanam ha noqdo, ama saaxir ha noqdo, ama gaal ha noqdo, ama qaad iyo khamri ha noqdo, ama ha noqdo mid kasta oo kale oo ka mid ah aafooyinka adduunka ka jira.

## Ibliis iyo Qalbiga

Kasha ama qalbigu waa xubinta ugu mudan ee qofku leeyahay. Waa weel Ilaahay u gaar ah oo ay sharci tahay in Ibliiska iyo wadartiisu meel ka soo galaan haddii aan qofka qalbigiisu daahir ahayn. Shaydaanku haddii uu fursaddaas helo waxa uu gacanta ku dhigay weel Ilaahay gaar u leeyahay oo uu qofka camalkiisa ka daalacdo.

Qalbiga waxa ka reebban in Ibliisku meel ku yeesho. Haddii ay dhacdo in uu Ibliisku meel ku yeesho, qalbigaas Ilaahay ma oggola. Waayo, cidda qofka Ilaah u noqonaysa ee amraysaa waa shaydaan iyo dhal shaydaan, waxaanu nolosha ka galayaa mugdi iyo meel madaw. Fahamkiisa ayaa lumaya, xasilloonida ayaa ka guuraysa, wahsi ayaa ku dhacaya, xumaha ayuu u qurxinayaa, marba tallaabo ayuu soo qaadayaa, jarar iyo buuro ayuu kala dhacayaa, dareenka dadnimo ayuu ka dilayaa, marka ugu danbaysana si toos ah ayuu ula hadlayaa.

Marka hore waxa uu ka amrayaa qalbiga, isaga oo adeegsanaya hab iyo hannaan aanu qofku ka warhayn. Deetana, amarrada uu hoos u siinayo